# A RASMIGA AH

# الر الجريدة

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

5aad | Muqdisho 1 Agosto 1977—L 8

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

BIL SOO BAXA | جريدة شهرية

s 100 Soomaaliya

Shs. la

weydiistaa

Lacagta aa Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta


# KOOBNIIN


BOGGA KOOWAAD

SHARCIYO

SHARCI LAMB. 37 EE 2 JUUNYO 1973 Xeerka Madaniga Soomaaliyeed* (Nuqulka asliga ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed waxaa lagu soo qoray Faafinta Rasmiga lamb. 6 ee 2 Juunyo 1973 * Boll. Uff. N. 6 del 2 Juunyo 1973*).

BOGGA LABAAD

XEERAR

W.M.

BOGGA SEDEXAAD

OGEYSIIN.........

W.M.



WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA — MUQDISHO

Sharci Lamb. 37 ee 2 Juun 1973

# *XEERKA MADANIGA SOOMAALIYEED*

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY: Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka;

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaashaha Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xogheyeyaasha Dawladda;

ISAGOO TIXGELINAYA: Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday Xeerka Madaniga Soomaaliyeed ee ku lifaaqan Sharcigan.

Qodobka 2aad

Nuqulka af-Talyaani ah oo uu saxiixay Madaxweynaha G.S.K. lana saxiixay Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta wuxuu noqon doonaa asalka waxaana lagu keydin doonaa Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda.

Qodobka 3aad

Xeerka Madaniga Soomaaliyeed wuxuu dhaqan geli doonaa 1da Luuliyo 1973, isla taariikhdaas waxaa la baabi'in doonaa ku dhaqanka dhammaan xeerarka Madaniga ah ee looga dhaqmi jirey Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 2 Juunyo 1973

*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

*GUDDOONSHAHA*

*GOLAHA SARE EE KACAANKA*

*Jaalle Dr. Cabdisalaam Sh. Xuseen*

*Xoghayaha Dawladda*

*Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta*



*XEERKA MADANIGA*

*BAABKA GOGOL DHIGGA AH*

*QODOBBO GUUD AH*

MADAXA I

*XEERARKA IYO KU DHAQANKOODA*

QEYBTA I

*XEERKA IYO XAQA*

Qodobka 1aad

1. Xeerku wuxuu nidaaminayaa dhammaan arrimaha ay saameynayaan qodobadiisa xaraf ahaan iyo ruux ahaan.

2. Haddii la waayo qodob degsan ee la dabaqi karo Garsooruhu wuxuu go'aan ku gaarayaa si waafaqsan Mabaadii'da Shareecadda Islaamka; haddii taas la waayana Garsooraha wuxuu ku dhaqmayaa si waafaqsan caddaaladda Ijtimaaciga ah ama caddaaladda (equita').

Qodobka 2aad

Xeerka waxaa baabi'in kara oo keli ah Xeer kale oo ka dambeeya oo caddeynaya baabi'intiisa, ama haddii la helo qodobbo ka soo horjeeda kii hore ama habeynaya mowduuc uu horey u nidaamin jiray Xeerkii hore.

Qodobka 3aad

Haddii ayna jirin qodob gaar ah, muddooyinka waxaa lagu xisaabaayaa Kallendaarka Gregoriyaano.

Qodobka 4aad

Qofka si bannaan ah xaqiisa u isticmaala mas'uul kama

aha dhibaatada isticmaalkaas ka dhalata.

Qodobka 5aad

Qofkii si xalaal ah xaqiisa u isticmaala mas'uul kama aha dhibaatadii ka dhalata isticmaalkaas.

Waxaa loo qaadanayaa xaqa isticmaalkiisa inuu yahay sharci darro xaaladaha soo socda :-

b. Haddii ay ujeeddadiisu keli ah ay tahay in dhibaato lagu gaarsiiyo dad kale;

t. Haddii ujeeddadiisu tahay in lagu gaaro dan ay faaiidadeedu aad u yar tahay marka loo eego dhibaatada ka gaareysa dadka kale.

j. Haddii loola jeedo in lagu gaaro dan aan bannaaneyn.

QAYBTA II

*DABIQADDA XEERKA ISKAHOR-IMAADKA*

*XEERKA XAGGA WAQTIGA*

Qodobka 6aad

1. Xeerarka ku saabsan awoodda waxaa lagu dabaqayaa dhammaan dadka leh shuruudaha uu xeerkaasi sheegay.

2. Haddii qof sharci horey loogu aqoonsaday awood sida waafaqsan qodobadda Xeerka horey uu ku waayo awoodda sida waafaqsan qodobadda xeerkii dambe, awood la'aantaas ma saameyneyso hawlahii horey uu u sameeyey.

Qodobka 7aad

1. Qodobadda cusub ee dhicidda xaqa waxaa lagu dabaqayaa dhammaan dhicidda xaqa ee weli socota.

2. Hase yeeshee Xeerka hore ayaa caddeynaya billaabashada taariikhda, joojinta iyo kala go'ida dhicidda inteeda dhammaatay ka hor inta uu dhaqan gelin qodobada cusub.



Qodobka 8aad

1. Haddii Xeerka cusub uu u goynayo dhicidda xaqa muddo ka gaaban muddada uu sheegay Xeerkii hore, kaddib marka uu dhaqan galo Xeerka cusub waxaa la tixgelinayaa mudada cusub xataa haddii muddadii horey ay bilaabatay.

2. Hase yeeshee, haddii mudada ku xisaabsan qodobada hore ay ka gaaban yihiin muddada ay goynayaan qodobadda cusub, dhicidda waxay ku ekaaneysaa dhammaadka muddadaas.

Qodobka 9aad

Sugidda hore u jirtey waxaa lagu dabaqayaa Xeerkii jirey markii sugiddaas la gooyey ama ay waajibka aheyd in la gooyo.

ISKA HOR IMAADKA XEERKA XAGGA DHULKA (Spazio)

Qodobka 10aad

Haddii la doonayo in la xaddado xiriir sharciyeed oo ku saabsan arrin ay isaga horimaanayaan xeerar kala duwan si loo aqoonsado Xeerka lagu dhaqmayo waxaa la raacayaa Xeerka Soomaaliyeed.

Qodobka 11aad

1. Xaaladda iyo awoodda qofka waxaa lagu nidaaminayaa xeerarka u degsan dalkooda. Hase yeeshee, haddii dhinacyada midkood heshiis ku saabsan lacag oo lagu kala dhammeystay ama wax ku dhalinayo Soomaaliya, uu yahay shisheeye aan awood laheyn, awood la'aantaasina ka dhalatay sabab qarsoon ee aan si sahlan, dhinaca kale u xaqiijin karin, sababtaas wax dhibaato uma keeneyso awooddiisa.

2. Xaaladda sharciyeed ee qofka leh shakhsiyad sharciyeed ee shisheeye ah, sida Shirkadaha, Ururrada, Hey'adaha sama-falka ah iyo Iwm, waxaa lagu dhaqayaa Xeerka qarameed ee Dalka ay ku leeyihiin fadhiga guud ee joogtada ah. Hase yeeshee haddii qofkaas, hawshiisa weyn ku qabanayo Soomaaliya waxaa lagu dhaqayaa Xeerka Soomaaliya.

Qodobka 12aad

Shuruudaha ku saabsan ansaxidda guurka waxaa nidaaminaya xeerka qarameed ee labada qof oo is qaba.

Qodobka 13aad

1. Waxyaabaha guurka ka dhasha oo ay ka mid yihiin hantida waxaa lagu dabbaqayaa Xeerka qarameed ee ka dhaxeeya labada qof ee is qaba, haddii kaas la waayo xeerka qarameed ee uu lahaa ninka waqtigii uu dhacay guurka.

2. Sidaasoo kale waxaa loo nidaaminayaa kala tagga iyo furiinka.

3. Furiinka waxaa lagu dhaqayaa Xeerka Qarameed ee ninka markii uu dhacayo furiinka.

Qodobka 14aad

Xaaladaha lagu xusay labada qodob ee hore, haddii labada qof ee is-qaba midkoodu yahay Soomaali markii la sameeyey guurka, xeerka keli ah ee lagu dhaqmayo waa kan Soomaaliga, ayadoo laga reebayo waxyaabaha ku saabsan awoodda guur-gelidda.

Qodobka 15aad

1. Waajibka ku saabsan masruufka dadka qaraabada ah waxaa lagu dhaqayaa xeerka ninka masruufku waajib ku yahay.

2. Haddii qofka masruufka xaq u leh uu yahay Soomaali, waajibkaasi waxaa nidaaminaya Xeerka Soomaaliyeed

Qodobka 16aad

Xeerarka ku saabsan maamul sharciyeed, ilaalinta, xannaanada iyo wixii kale oo lagu daafacaayo dadka aan awoodda laheyn iyo kuwa maqan waxaa loo raacayaa sharciga qarameed ee qofka la daafacaayo.



Qodobka 17aad

1. Dhaxalka xaqa loo leeyahay iyo kan dardaaranka iyo waxyaabihii kale ee loo gooyo geerida awgeed, waxaa nidaaminaaya Xeerka Qarameed ee qofka dhintay, kan dardaarmay ama kan Dhimashada awgeed wax u gooyey.

2. Hase yeeshee, qaabka dardaaranka waxaa nidaaminayaa Xeerka qofka dardaarmay markii dardaaranku la sameeyey ama Xeerka u degsan meesha lagu sameeyey. Sidaasoo kale ayaa loo nidaaminayaa wax yaabaha loo gooyey geeri awgeed (Atti di disposizione).

Qodobka 18aad

Haysashada, lahaanshada iyo xuquuqda kale ee ceynta ah (diritti reali) ee ku saabsan xoolaha guurtada iyo maguurtaduba, waxaa nidaaminaya xeerka u degsan meesha xoolahaas laga helo.

Qodobka 19aad

1. Waajibaadka ka dhasha heshiisyada waxaa nidaaminaya xeerka meesha degmada, haddii dhinacyaddu ay leeyihiin degmo ka dhaxeysa, haddii la waayana degmo ka dhaxeyso dhinacyadda waxaa lagu dabaqayaa xeerka meesha heshiisku ku dhacay, ayadoo laga reebayo mar kastaba mararkii uu ka dhasho heshiis dhex maray dhinacyada ama duruuf kale, in dhinacyadu doonayeen in lagu dabaqo xeer ka geddisan.

2. Hase yeeshee, heshiisyada ku saabsan maguurto waxaa lagu dabaqayaa xeerka meesha laga helo maguurtadaas.

Qodobka 20aad

Qaabka qoraaladda ee dhexmara dad nool waxaa nidaaminaya xeerka u degsan meesha qoraaladdaas lagu sameeyey ama xeerka nidaaminaya dulucdooda ama xeerka degmada dhinacyada ama xeerkooda qarameed ee ka dhaxeeya.

Qodobka 21aad

1. Waajibaadka aan ahayn heshiisyo waxaa nidaaminaya xeerka Dawladda ee dalkeedu ku dhalanayaan falka uu ka dhalanaayo waajibkaas.

2. Hase yeeshee. haddii xilku ka dhasho fal xaaraan ahi, qodobka qaybtiisa hore laguma dabaqayo falalka ka dhacay dibedda kuwaasoo xataa haddii xaaraan ku yihiin xeerka shisheeyaha loo qaadanayo in ay xalaal ku yihiin Xeerka Soomaaliyeed.

Qodobka 22aad

Awoodda iyo qaababka ku saabsan hababka loo qaadayo dacwadda waxaa nidaaminaya xeerka meesha dacwadda laga oogay ama lagu dabaqayo habka.

Qodobka 23aad

Qodobadda hore lagu dhaqmi maayo haddii sidaas si khilaafsan uu sheegin xeer gaar ah ama heshiis duweli ah oo ka dhaqan galay Soomaaliya.

Qodobka 24aad

Marka ay iska hor yimaadaan xeerar aan lagu sheegin qodobada hore, waxaa lagu dabaqayaa mabaadi'da xeerka Dawliga gaarka ah ee Soomaaliyeed.

Qodobka 25aad

1. Xaaladda ku saabsan dad aan jinsiyad lahayn ama dad haysta isla markiiba jinsiyado badan, xeerka la dabaqayo waxaa goynayo Garsooraha.

2. Hase yeeshee, waxaa la dabaqayaa xeerka Soomaaliyeed haddii qofku haysto Jinsiyadda Soomaaiyeed uuna joogo Soomaaliya. haddiise arrintu ku saabsan tahay Dawlad ama Dawlado badan ee shisheeye ah, waxaa la dabaqayaa xeerka Dawladahaas.

Qodobka 26aad

Marka qodobada hore ay u celinayaan xeer dawlad kale ee gudaheeda looga dhaqmo habab badan ee qaanuuneed, halka lagu dhaqmayo waxaa caddeynaya xeerka gudaha ee Dawladdaas.



Qodobka 27aad

Haddii ay waajib noqoto in la raaco xeer shisheeye, ma lagu dhaqmaayo qodobbadiisa ku saabsan Xeerka Dawliga ah ee gaar ahaaneed.

Qodobka 28aad

Lama dabbaqayo xeerka shisheeyaha ah ee lagu xusay qodobbada hore mararka ay ka soo horjeedaan Nidaamka Guud ama anshaxa wanaagsan.

## MADAXA II

## QAYBTA I

### DADKA (Persone Fisiche)

Qodobka 29aad

1. Jiritaanka qofka waxay ka billaabantaa dhalashada qofka oo nool waxayna ku dhammaataa dhimashada.

2. Hase ahaatee xeerka ayaa goynaya xuquuqda ilmaha caloosha ku jiro.

Qodobka 30aad

1. Dhalashada iyo dhimashada waxaa lagu sugayaa diiwaanno rasmi ah oo loogu tala galay.

2. Haddii sugnaantaas la waayo ama haddii la caddeeyo ineysan sax ahayn tilmaamaha ku yaal diiwaannada, sugidda waxaa lagu sameyn karaa jid kasta oo kale.

Qodobka 31aad

Diiwaannada dhalashada iyo dhimashada iyo gaarsiintooda ku saabsan waxaa nidaaminaya xeer gaar ah.

Qodobka 32aad

Xaaladda qofka la waayey ama maqan waxaa lagu dhaqayaa qodobbo ku sugan xeerar gaar ahaaneed, haddii la waayana xeerarkaas waxaa la raacayaa Shareecadda Islaamka.

Qodobka 33aad

Jinsiyadda Soomaaliyeed waxaa nidaaminaya xeer gaar ah.

Qodobka 34aad

1. Qoyska wuxuu ka kooban yahay qofka ehelkiisa (Parenti).
2. Ehelka waxaa loola jeedaa dadka ka farcama hal asal.

Qodobka 35aad

1. Ehelnimada tooska ah waa midda ka dhaxeysa dadka isu ah asalka iyo faraca.
2. Ehelnimada dhinaceed (collaterale) waa mid ka dhaxeysa dad wada leh hal asal, laakiin midkoodna midka kale u ahayn farac.

Qodobka 36aad

Darajada ehelnimada tooska ah waxaa lagu xisaabayaa in farac kasta loo qaadanayo hal darajo markii loo tirinayo asalka iyadoo laga reebayo isla asalkaas. Ehelnimada dhinaceed waxaa laga tirinayaa farac ilaa asalka la wadaago, waxaana hoos looga soo degayaa ilaa faraca kale iyadoo laga reebayo asalka.

Qodobka 37aad

Qaraabada labada is-qabta midkood wuxuu xigto u yahay kan kale.

Qodobka 38aad

Qof kasta waxaa lagu aqoonsanayaa magac oo uu la xiriiro magaca aabbaha iyo kan awoowaha, ama magac iyo magaca qoyska.

Qodobka 39aad

Beddelaadda magacyada (generalita') waxaa nidaaminaya xeer gaar ah.

Qodobka 40aad

1. Degnaashada waa meesha qofku si caadi ahaan ah uu u deggan yahay.

2. Qofku wuxuu isla markiiba lahaan karaa hal degnaasho wax ka badan ama ma uu lahaan karo midna.



Qodobka 41aad

Meesha qofku uu ku ganacsado ama uu ku xirfadeysto waxaa loo qaadanayaa degnaasho gaar ah inta ku saabsan ganacsigaas ama xirfaddaas.

Qodobka 42aad

1. Degnaashaha qofka da'da yar, kan awoodda laga qaaday, kan la waayey iyo kan maqan waa degnaashaha wakiilkooda sharciyeed.

2. Hase yeeshee, qofka da'da yar ee gaaray 15 sano iyo kuwa isaga la mid ah, waxey leeyihiin degnaasho gaar ah oo ku saabsan hawlaha ee sharci ahaan awood u leeyihiin inay qabsadaan.

Qodobka 43aad

1. Waa la dooran karaa degnaasho gaar ah si loo fuliyo hawl sharciyeed oo xaddidan.

2. Doorashada degnaashaha waa in lagu sameeyaa caddaan ahaan si qoraal ah.

3. Degnaashada loo doortay fulinta hawl sharciyeed waxaa loo qaadanayaa inay degnaasho u tahay wax allaale wixii ku saabsan hawshaas, iyadoo ay ka mid tahay habka fulinta qasabka ah marka laga reebo in doorashada degnaashada ay si caddaan ah ugu koobneyn hawlaha qaarkood lagana reebay kuwa kale.

Qodobka 44aad

1. Dhammaan dadka qaan gaarka ah maskax fiyowna leh aanan awoodda laga qaadin, waxay awood u leeyihiin inay isticmaalaan xuquuqdooda buuxda ee madaniga.
2. Da'da qaan gaarka waxaa lagu xaddidayaa gaaridda 18 sano iyadoo la raacayo sannadka miilaadiga (kalendaarka Gregoriyaanka).

Qodobka 45aad

1. Ma laha awood uu ugu isticmaalo xuquuqda madani ga qofka aan wax kala sooci karin, da' yari ama nacasnimo ama waali darteed.

2. Waxaa loo qaadanayaa inay wax kala sooci karin carruurta aan gaarin 7 sano.

Qodobka 46aad

Dadka gaaray da'da wax lagu garto, ayagoo weli aan qaan gaarin iyo kuwa qaan gaarka laakinse xoolahooda u khasira micna darro waxay leeyihiin awood dhiman sida waafaqsan qodobbada xeerka.

Qodobka 47aad

Dadka aan awoodda lahayn ama kuwa awooddoodu dhiman tahay waxaa nidaaminaya xaaladdoodu, marba si ay u muuqato, maamulka sharciyeed ee dardaaranka ama ilaalinta, ayadoo la dhowrayo shuruudaha iyo sida waafaqsan qodobbada Xeerka.

Qodobka 48aad

Qofna kama tanaasuli karo awooddiisa mana beddeli karo shuruudaheeda.

Qodobka 49aad

Qofna kama tanasuli karo xoriyaddiisa shakhsiga ah.

Qodobka 50aad

Qofkii xquuqdiisa shakhsiga ah loo geysto fal sharci darro ah wuxuu weydiisan karaa in laga joojiyo falkaas loogana magdhabo dhibaatada ka soo gaartay.

Qodobka 51aad

Qofkii si sharci darro ah lagula doodo xaqa isticmaalka magaciisa ama ay dad kale xaq darro ugu isticmaalaan, wuxuu codsan karaa in laga joojiyo falkaas dhibaatada leh iyo in laga magdhabo.

Qodobka 52aad

Waxaa qof qaanuuneed ah :-

1. Dawladda, Gobollada Degmooyinkna, Dawladaha Hoose, sida waafaqsan shuruudaha Xeerka uu u gooyey, sidoo kale waxaa shakhsiyad qaanuuneed leh maamulka, qaybaha iyo hay'adaha madax bannaan ee kale ee xeerka siinayo qofnimo qaanuuneed.



2. Waqafka.
3. Shirkadaha dhaqaaleed.
4. Ururada iyo ururrada samafalka ee lagu dhisay sida waafaqsan qodobbada soo socda.
5. Kooxaha dadka iyo hantida ee loo qaadanayo iney leeyihiin qofnimo qaannuuneed sida waafaqsan Xeerka.

Qodobka 53aad

1. Qofka leh shakhsiyad qaanuuneed wuxuu leeyahay inta ku siman xadka xeerku u gooyey wixii xuquuq ah oo dhan oo laga reebo kuwa ku saabsan dabeecadda qofka Aadamiga ah.

2. Wuxuu leeyahay :

b. hanti u gaar ah ;

t. awood, inta ku siman xadka uu u gooyey dastuurkiisa ama uu u gooyey Sharciga;

j) xaqa dacwa oogidda;

x.) degnaansho u gaar ah. Degnaanshadaasu waa meesha laga helo xarunta maamulkiisa.

Sida uu qabo xeerka Soomaaliyeed waxaa loo qaadanayaa rugta maamuleed ee shirkadaha fadhigooda guud oo ku yaalla debedda Soomaaliya kuna leh hawlo dalka Soomaaliyeed meesha laga helo maamulkooda.

3. Wuxuu leeyahay wakiil danahiisa fuliya.

*URURRADA*

Qodobka 54aad

1. Ururku waa koox leh sifo joogta ah oo ka kooban dad badan oo aadami ah iyo qof shakhsiyad sharciyeed leh oo aan ahayn faa'iido doon.

2. Ururku wuxuu yeelanayaa qofnimo qaanuuneed markii ay aqoonsato Dawladda, oo uu bixiyo Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha lana faafiyo ka dib dastuurkiisa.

Qodobka 55aad

1. Ururku si uu u noqdo mid si rasmi ahaan u dhisan, waa inuu lahaado dastuur ay saxiixeen xubnaha aasaasayaasha ah.

2. Dastuurka waa in laga helaa waxyaabaha soo soc-da :-

b. Magaca. ujeeddada, rugta maamulka ay waajib tahay in laga helo soomaaliya;

t. Magaca qoyska, magaca jinsiyadda, xirfadda iyo degnaasha mid kasta ee xubnaha aasaaseyaasha.

j. Hantida ururka;

x. Xubnaha wakiilka u ah ururka, halahooda, habka magacaabiddooda iyo ; casilaadooda;

kh. Qaabka beddelaada dastuurka ururka.

Qodobka 56aad

1. Sida uu sheegayo Dastuurka, xoolaha ururka markii lagu kala tago, ma bannaana in loo qaybiyo xubnaha, dhaxaltooyadooda iyo xaaskooda.

2. Qodobkaas asaga ah laguma dabaqayo lacagta loogu tala galay keli ahaan khasnadda kaalmada iyo midda hawlgabka.

Qodobka 57aad

1. Ururka ma yeelan karo maguurto, kumana intifaaci karo xuquuq ku dhegsan maguurto, inta u ah lagama maarmaan in lagu fuliyo danaha loo dhisay mooyee.

2. Qodobkaan laguma dabaqayo ururrada ujeeddadoodu tahay samafalka. baridda ama baaris cilmiyeed.



Qodobka 58aad

1. Ururka waxaa loo aqoonsanayaa shakhsiyad sharciyeed isla markii la dhiso.

2. Ururku shakhsiyadiisa sharciyeed kulama doodi karo dhinac saddexaad ilaa inta laga faafinaayo dastuurkiisa oo ay ka dambeyso aqoonsigiisa mooyaane.

Qodobka 59aad

1. Faafinta waxaa lagu sameynayaa sida waafaqsan qodobada Xeerka.

2. Hase yeeshee haddii faafinta laga tago ama si kasta-ba looga leex-leexdo sheegidda qaanuuneed ee jiritaanka ururka dhinacyada saddexaad waxaa u bannaan iney is-hortaagaan Ururka waxyaalaha ka dhalanaya shakhsiyadiisa sharciyeed.

3. Dhammaan ururadda aan ku kicin tillaabooyinka ku saabsan faafinta, ama aan si sax ah loo dhisin, ama loo dhisay si qarsoodi ah, waxaa saaraan waajibaadkii ay qaadeen Maamuleyaasha ama kuwa ku shaqeeya magacooda. Arrimaha khuseeya fulintaas waxaa lagu sameynayaa hantida ururka iyo hantida Maamuleyaasha ama kuwa ku shaqeeya magacooda.

Qodobka 60aad

Dhammaan beddelaadda ku saabsan dastuurka ururka waa in lagu faafiyaa sida waafaqsan Qodobka 59. Beddelaadaas looguma doodi karo dhinacyada seddexaad laga billaabo taariikhda faafinteeda mooyaane.

Qodobka 61aad

Waa lagama maarmaan go'aanka Shirka Guud si loo oggolaado miisaaniyadda qiyaasta ah iyo tan dhabta ah si loo beddelo dastuurka iyo baabi'inta ikhtiyaariga ah ee Ururka.

Qodobka 62aad

1. Dhammaan xubanaha waa in la isugu yeeraa fadhiga shirka guud.

2. Go'aannada shirka guud waxaa loo qaadayaa aqlabiyad caadiga ah ee codka xubnaha jooga ama kuwa wakiilka looga yahay, haddii dastuurka si kale qabin.

3. Hase yeeshee go'aannada Shirka Guud ee ku saabsan beddelaadda dastuurka ama baabi'inta ikhtiyaariga ah ee Ururka ansiximayaan haddii arrimahaas laga hadlaayo aysan ku jirin Ajendada Shirka ee ku lifaaqan ogeysiiska isku-yeeridda. Si loo beddelo dastuurka go'aanka waa in lagu gaaraa aqlabiyadda dhan (maggioranza assoluto) ee xubnaha Ururka; si loo baabi'iyo ama loo beddelo ujeeddada Ururka waxaa oo baahan yahay aqlabiyad saddex meelood laba meel, haddii dastuurka uusan sheegeyn aqlabiyad intaas ka badan.

Qodobka 63aad

1. Dhammaan go'aannada uu gaaro Shirka Guud ee Ururka oo khilaafsan dastuurka ururka, waxaa lagu baabi'in karaa xukunka Maxkamadda Gobolka ee ku taal fadhiga Ururka. Dacwadda baabi'inta waxaa oogi kara qof ka mid ah xubnaha ururka, qof seddexaad ee dan ka leh, ama xeer ilaaliyaha, lix bilood gulahood laga billaabo taariikhda la soo saaray go'aanka.

2. Hase yeeshee, dacwadda baabi'inta laguma oogi karo dadka saddexaad oo si niyad sami ku yeeshay xuquuqda uu saldhig u yahay go'aankaas.

Qodobka 64aad

1. Warqadaha ay sameeyeen maamulayaasha ururka ee ka baxsan awooddooda, ama khilaafsan qodobbada dastuurka ama go'aannada Shirka Guud, waxaa lagu baabi'in karaa xukun ka soo baxay Maxkamadda Gobolka ee ku taal fadhiga ururka, markii uu soo weydiisto qof ka mid ah ururka ama Xeer-Ilaaliyaha.



2. Dacwadda baabi'inta waa in la oogaa hal sano dhex deed markii laga billaabo taariikhda warqadda la baabi'inayo.

3. Dacwadda baabi'inta ma bannaana in lagu oogo dad seddedxaad oo si niyadsami ah ku yeeshay xuquuq ay saldhig u tahay warqaddaas.

Qodobka 65aad

1. Dhammaan xubnaha waxaa u bannaan iney ka baxaan ururka goor kasta, haddii ay horey u ballan qaadin iney ku jiraan ururka muddo xaddidan.

2. Xubinta ka baxda ururka iyo tan laga saareyba xaq kuma laha hantida ururka, oo aan ku jirin lacagta la wadaaga ee lagu xusay qaybta 2aad ee qodobka 56aad, xaaladdaas dastuurka si kale ayuu u goyn karaa.

3. Haddii uu dhinto xubin ka mid ah ururka dhaxaltooyadiisa xaq uma laha iney galaan ururka qaanuun ahaan.

Qodobka 66aad

1. Waa banaan tahay in ururka lagu kala diro xukun ay soo saarto Maxkamadda Gobolka ee xaruntiisa ku taal, sidaa haddii uu weydiisto xubinta ka mid ah dhinac saddexaad ee dan kan ka leh ama Xeer-Ilaaliyaha, haddii ururku uu ka bixi waayo ballankiisa ama haddii hantidiisa iyo dakhligiisa joogtada ah loogu dhaqmo ujeeddo ka duwan tii loo dhisay, ama haddii si culus loogu xadgudbo dastuurka, xeerka ama nidaamka guud ama marka tirada xubnahiisa ay ka yaraadaan saddex.

2. Maxkamadda ayadoo diideyso dacwadda kala diridda way ku dhawaaqi kartaa, baabi'inta warqadda la duray.

Qodobka 67aad

Marka la kala diro ururka, Shirka Guud ayaa magacaabayaa hal ama ka badan ee khaarijiyeyaal haddii kala diridda ay tahay ikhtiyaari ama Maxkamadda ayaa magacaabeysa haddii kala diridda ay amarto Maxkamadda.

## Qodobka 68aad

1. Markii ay dhammaato khaarijinta, khaarijiyaha wuxuu horey ugu dhaqaaqayaa qaybinta hantida hartay sida waafaqsan dastuurka ururka.

2. Haddii dastuurka qodobbadiisa ayna wax ka sheegin arrintaas, amase haddii qaybinta uu sheegayo dastuurka la sameyn karin, shirka guud marka uu kala diridda tahay ikh tiyaari, ama Maxkamadda haddii kala diriddu ka timaado xaggeeda, Maxkamadda waxay siineysaa hantida ururka lagu kala tagay urur kale ama urur samafal ah ee ujeeddadiisu aad ugu dhawdahay ururka la kala diray.

## HAY'ADO SAMAFAL AH

## Qodobka 69aad

1. Hay'adda samafalka ah waxaa lagu dhisayaa qoraal yeed oo loo abuuray iyadoo loogu tala galay hanti muddo aan xaddidneyn si uu ugu kaco hawl naxariis aadannimo, diineed cilmiyeed, faniyeed, cayaareed ama hawl kasta oo kale oo samafal ah ama danta guud oo ujeeddadeedu aan ahayn faa'-do doon.

## Qodobka 70aad

1. Hay'adda samafalka ah waxaa lagu dhisayaa qoraal rasmi ah ama dardaaran.

2. Qoraalkaas ama dardaarankaas wuxuu noqonayaa dastuurka hay'adda waana in laga helaa tilmaamaha soo socda :-

b. Magaca, fadhigeeda, oo ay waajib tahay in laga helo Soomaaliya.

t. Ujeeddada loo abuuray hay'adda iney gaarto.

j. Tilmaan cad ee ku saabsan hantida loogu tala galay hawsha.

x. Nidaamka (regolamento) maamuka u gaarka ah.



## Qodobka 71aad

Dhismaha hay'adda samafalka ah wuxuu u ahaanayaa deynlayaasha qofka dhisay ama kuwa dhaxaltooyadiisa leh hibo ama dardaaran. Haddii hay'addu ay tahay mid loo dhisay iney dhibaato u keeneyso xuquuqdooda, waxaa u bannaan iney u dacwoodaan hibooyinkooda iyo dardaaranka sida uu qabo sharciga.

## Qodobka 72aad

Haddii hay'adda samafalka ah lagu dhisay qoraal rasmi ah. aasaasaha way u bannaan tahay in uu uga noqdo qoraal kale ee rasmi ah, ilaa iyo inta hay'addu ka hesho aqoonsiga, sida waafaqsan qodobka 54.

## Qodobka 73aad

1. Qaabka faafinta hay'adda waxaa lagu sameynayaa weydiisashada qofka dhisay, maamuleheeda koowaad ama madaxda loo xilsaaray ilaalinta hay'adahaas.

2. Madaxda loo xilsaaray ilaalinta waa iney ku dhaqaaqdaa hababka faafinta laga billaabo marka ay ogaatay Hay'adda dhisiddeeda.

3. Hay'adaha waxaa lagu dhaqayaa qodobbada 58, 59 iyo 60.

## Qodobka 74aad

Dawladda ayaa iska leh awoodda ilaalinta hay'adaha.

## Qodobka 75aad

Maamulayaasha Hay'adda waa in ay u diraan madaxda loo xilsaaray ilaalinta miisaaniyadda qiyaasta ah iyo tan dhabta ah ee hay'adda oo ay la socdaan qoraallada loo cuskaday. sidoo kale waa iney bixiyaan warbixin kasta ama tilmaan oo ay soo warsadaan madaxda loo xilsaaray.

Qodobka 76aad

Maxkamadda Gobolka ee fadhigeeda laga helo Hay'adaha, haddii madaxda loo xilsaaray ilaalinta hay'adda soo oogaan dacwo waxay awood u leedahay iney amarto tillaabooyinka soo sacda :-

b. Casilaadda maamuleyaasha mas'uulka ka ah taxaddir la'aan iyo karti la'aan awgeed ee aan dhowrin waajibaadka sharciga uu saaray ama dastuurka hay'adda kuna isticmaalay hantida hay'adda si ka duwan ujeeddada loo dhisay hay'adda, ama ujeeddada uu ka lahaa qofkii dhisay, ama ku kacay gafaf kale ee culus iyagoo gudanaayo hawsha maamulka.

t. Beddelaadda nidaamka (Regolamento) u gaarka ah maamulka; dhimidda; beddelaadda ama baabi'inta waajibaadka iyo shuruudaha lagu dhisay dastuurka hay'adda, haddii tillaabooyinkaas ay yihiin lagama maarmaan si loo dhowro ujeeddadii loo dhisay hay'addaas.

j. Baabi'inta hay'adda marka ay xaqiijin weydo ujeeddadii loo dhisay, ama ujeeddadu noqoto mid aan suuragal ahayn ama ay ka soo horjeeddo sharciga, anshaxa wanaagsan ama Nidaamka Guud.

x. Baabi'inta qoraallada ay sameeyeen maamulayaasha, oo ka baxsan hawlaha loo xilsaaray, ama khilaafsan qodobbada qaanuunka ama dastuurka hay'adda. Markaasoo kale dacwadda baabi'inta waa in la soo oogaa 2 sano dhexdood laga billaabo taariikhda warqadda la duraya, dhibaatana u geysan meyso dhinaca saddexaad ee niyadsami ku yeeshay xaq uu saldhig u yahay qoraalkaas.

Qodobka 77aad

1. Maxkamaddu marka ay ku dhawaaqdo xukunka burinta waxay magacaabeysaa hal khaarijiye (Liquidatore) waxaynaa goyneysaa sidii loo bixin lahaa hantida soo hartay kaddib khaarijinta, si waafaqsan sida ku cad dastuurka hay'adda.



2. Haddii ay noqon weydo suura gal in hantida loo wareejiyo meeshii la magacaabay, ama meeshu tahay mid aan lagu caddeyn Dastuurka, Maxkamadda ayaa goyneysa meesha lagu bixin lahaa hantida, ayadoo tixgelineysa ujeeddada u dhow inta suura gal ah ujeeddadii loo dhisay hay'adda.

Qodobka 78aad

Qodobbada xeerkaan ee ku saabsan hay'adda laguma dabaqayo kuwa lagu dhisay qaabka waqafka.

## QODOBBO KA DHEXEEYA URURRADA IYO HA'YADAHA

Qdobka 79aad

1. Ururrada iyo Hay'adaha ujeeddadoodu tahay dan guud, waxaa u bannaan haddii ay soo warsadaan in loo aqoonsado iney leeyihiin waxtar guud (Utilità Pubblica) taasoo lagu soo saaro Dekreeto lagu oggolaanayo Dastuurka.

2. Dekreetada waxay caddeyn kartaa in Ururka uusan u hoggaansamin dhimidda awoodda ee lagu sheegay qodobka 57.

3. Waa bannaan tahay in Dekreetada lagu amro tillaabooyin gaar ahaaneed ee kormeer, oo ay ka mid yihiin magacaabidda xagga Dawladda, hal ama ka badan maamulayaal, ama in la qaado tillaabo kasta oo ah lagama maarmaan.

Qodobka 80aad

Ururrada samafalka ah, iskaashatooyinka, hay'adaha ijtimaaciga ah iyo ururrada shaqaalaha waxaa nidaaminaya sharciga.

## MADAXA III

## QAYBINTA MOOTKA IYO HANTIDA

### Qodobka 81aad

1. Shey kasta oo aan ka baxsaneyn dabiica ahaan ama sharci ahaan ganacsiga waa bannaan tahay in uu noqdo xaq hanti ah oo lagu dhaqmi karo.

2. Waxyaabaha dabeeca ahaan ka baxsan ganacsiga waxaa weeye kuwa uusan qofna kali ahaan u lahaan karin, kuwa iyagu qaanuun ahaan ka baxsan ganacsiga waxaa weeye kuwa uusan sharcigu banneyneyn in ay noqdaan xuquuq hanti ah oo lagu dhaqmo.

### Qodobka 82aad

1. Shey kasta oo ku sugan meel u go'an oo eyna suurtoobi karin in laga raro iyadoo wax talaf ah eyna gaarin waa maguurto, wax kasta oo ka soo hara kaas waa guurto, xoogga leh qiimo dhaqaaleed waxaa loo qaadanayaa guurto.

2. Hase yeeshee waa maguurto ka dhigid sheyga guurtada ah ee ninka lihi uu dhigo maguurto uu leeyahay uguna talagalo adeegga maguurtada (fondo) ama ku isticmaalkeeda.

### Qodobka 83aad

1. Waxaa ah hanti maguurta ah xaq kasta oo ceyn ah ee ka mid ah maguurto, waxaana taas ku jira xaqa lahaanshaha, sidoo kale dacwad kasta oo ku saabsan xaq ceyn ah ee ku xiran maguurto.

2. Wax alla wixii kale ee ah xuquuq hanti ah waa guurto.

### Qodobka 84aad

1. Waxyaabaha u-suubadda in la lunsado waxaa weeye kuwa isticmaalkoodu ku kooban yahay sida loogu talagalay oo ah in la lunsado ama la nafaqeysto.

2. Waxaa kale oo u-suubadda in la lunsado wax kasta oo la dhigo Dukaammada looguna talagalay gadid.



### Qodobka 85aad

Waxyaabaha isku midka ah waa kuwa mid ka mid ihi istaagi karo meesha mid kale markii la bixinayo, waana kuwa lagu qaddaro caada ahaan markii dadku mucaamilitamayo tiro, qiyaas, kiilo ama miisaan.

### Qodobka 86aad

Xuquuqda ku saabsan shey aan maadi ahayn waxaa habeynaya qawaaniin gaar ahaaneed.

### Qodobka 87aad

Xoolaha caamka ah waa waayayaan astaantooda markii ay dhammaato wixii loogu talagalay oo ah danaha guud. Dhammaanshahaasi wuxuu ku imaanayaa fal, sharci, Dekreeto ama dhammaashaha hawsha danta guud ee daraadeed loogu talagalay xoolahaas.

Xoolaha caamka ah ma bannaana in lagu takrifalo, la qabto, lagu hantiyo gubasho (prescrizione).

## QAYBTA I
## WAAJIBAADKA IYO XUQUUQDA SHAKHSIGA AH

## BUUGGA I

## WAAJIBAADKA GUUD AHAAN

## BAABKA I
## ILAHA WAAJIBAADKA

## MADAXA I
## HESHIISKA

## QAYBTA I
## TIIRARKA HESHIISKA

## OGGOLAANSHAHA DHINACYADA

### Qodobka 88aad

Heshiisku wuxuu ku guntamayaa isla marka labada dhinac isdhaafsadaan rabidda ay ku caddeynayaan oggolaanshahooda iswaafaqsan iyadoo la ilaalinayo isla markaas wixii qaab ah ee sharcigu uu farayo, si loo gaaro heshiiskaas.

## Qodobka 89aad

1. Rabidda waxaa lagu sheegi karaa af, qorid ama tilmaamaha caada ahaan la isla yaqaan, ama waxaa lagu muujin karaa in la qaato mowqif aan shaki ku jirin ee caddeynaya ula jeeddada dhinacyada sida laga garan karo duruufta gaar ahaaneed.

2. Caddeynta rabidda wey noqon kartaa mid ku timaa-da aamusnaan haddii uusan Xeerka sheegin ama eyna dhinacyadu isku waafaqin in uu noqdo si qayaxan.

## Qodobka 90aad

Waxay caddeynta rabiddu istaageysaa markii uu ogaado qofka loo jeediyey, waxaana loo qaadanayaa in qofka loo jeediyey caddeynta rabiddu uu ogaaday rabiddaas isla markii ay soo gaartey haddii aan si kale la sugin.

## Qodobka 91aad

Hadii uu geeriyoodo qofka caddeeyey rabidda ama uu waayo awoodda ka hor intii ayna caddeyntu dhalin raadkeeda, si kastaba ha ahaatee raadka rabiddu waa istaagaya markii uu gaaro qofkii loo jeedshay uuna ogaaday, haddii caddeynta rabidda ama dabiicadda macaamalaadka eyna ka muuqan si kale.

## Qodobka 92aad

1. Haddii oggolaanshaha wakhti loo qabto waxaa waajib ku ah qofka soo jeediyey inuu ballankiisa ku jiro ilaa wakhtigaasi dhammaado.

2. Waa dhici kartaa in muddada laga garto duruufta markaas jirta, ama dabiicadda mucaamalaadka.



## Qodobka 93aad

1. Haddii rabidda lagu soo jeediyo fadhiga heshiiska iyadoo aan oggolaanshaha dhinaca kale wakhti loo qaban, qofka rabidda soo jeediyey waa ka noqon karaa rabiddiisa haddii aan oggolaanshaha dhinaca kale isla markiiba aan la helin, waxaa sidaas oo kale la mid ah haddii rabidda looga jeediyo qof kale jidka telefoonka ama jid kale oo la mid ah.

2. Hase yeeshee heshiisku waa sameysmayaa xataa haddii aan oggolaanshaha haddiiba aan la helin, maadaama eyna jirin wax muujinaya in qofka soo jeediyey rabidda uu ka noqday rabiddiisa muddada u dhexeysa rabidda iyo oggolaanshaha, uuna oggolaanshuhu soo fulay intii uusan fadhiga heshiisku dhammaan.

## Qodobka 94aad

Haddii labada dhinac ku heshiiyaan arrimaha aasaasiga u ah heshiiska, eyna dib u dhigtaan arrimaha yar-yar iyagoo aan ku xirin dhammaanshaha heshiiska arrimahaas yar-yarka ah, markii eyna dhinacyadu si kale doonin heshiisku waa sameysmayaa.

Haddii khilaaf ka dhasho arrimahaas aan hore leysugu waafaqin ama eyna ka caddaan caadaadka cusub, Maxkamadda ayaa go'aan ka gaareysa iyadoo tixgelineysa danaha guud ee dhinacyada iyo dabiicadda heshiiska.

## Qodobka 95aad

Haddii oggolaanshuhu uusan waafiqin rabidda wuxuu noqonayaa diidid ey la jirto rabid cusub.

## Qodobka 96aad

1. Heshiiska labaad qof oo kala maqan wuxuu ku dhammaanayaa meesha iyo wakhtiga uu ku ogaanayo qofka soo jeediyey rabidda oggolaanshaha, haddii aan la helin wax heshiis ah ama qodob sharci ah oo sidaas wax ka duwan sheegaya.

2. Waxaa loo qaadanayaa in qofka soo jeediyey rabidda ku ogaaday oggolaanshaha meesha iyo wakhtiga oggolaanshahaasi ku soo gaaray.

Qodobka 97aad

1. Haddii ay ka caddahay rabidda ama duruufta mucaamalada ama caadada in rabuhu uusan sugayn caddeynta oggolaanshaha, heshiisku waa sameysmayaa, haddii aan rabidda lagu diidin wakhti habboon.

2. Waxaa loo qaadanayaa ka aamusidda oggolaansho, haddii horey ay uga socon jirtay labada dhinac dhexdooda mucaamalaad ama rabiddu ay faa'iido u keeneyso qofka loo jeediyey.

Qodobka 98aad

Heshiisyada ku saabsan naadooyinka, qandaraasyada waxey sameysmayaan markii lagu baariyo naadada ama qandaraaska qofka soo jeediyey qiimaha ugu badan sida waafaqsan shuruudda horey loo sheegay loona faafiyey ee uu ogyahay dhinaca heshiiska u soo bandhigay naadada ama qandaraaska ama haddii taas la waayo waxaa lagu xadadayaa si waafaqsan dabiicadda mucaamalada iyo caadaadka.

Qodobka 99aad

Oggolaanshaha ku saabsan heshiisyada loo hoggaansan yahay waxaa ku filan in la helo shuruudda uu horey u xaddiday rabuhu.

Qodobka 100aad

1. Heshiiska labada dhinac ku ballan qaadayaan ama midkoodba inuu la geli doono kan kale heshiis magacaaban, ma sameysmayo heshiiskaas haddii aan la caddeyn dhammaan arrimaha halbowlaha u ah heshiiskaas la doonayo in la sameeyo iyo muddada ay waajib tahay in la sameeyo.



2. Haddii sharcigu ku xirayo sameynta heshiiska qaab go'an oo la doonayo in laga helo waxaa waajib ah in la ilaaliyo qaabkaas iyo ballanqaadka (Patto) ku saabsan sameynta heshiiska.

Qodobka 101aad

Haddii qof ballanqaado inuu gelayo heshiis haddana uu diido dhinaca kalana ku dacweeyo fulinta ballanqaadka, eyna shuruudda waajibka u ah gunitaanka heshiiska jirto gaar ahaan inta ku saabsan habka, Maxkamaddu waxay soo saareysaa xukun leh xoogga fulinta sidii isagoo ah heshiis.

Qodobka 102

1. Carbuunta la dhiibo marka la sameynayo heshiiska waxay tilmaameysaa in mid kasta oo ka mid ah labada dhinac xaq u leeyahay in uu ka noqdo heshiiska, haddii aan heshiisku sheegin sidaas si ka duwan.

2. Haddii kan carbuunta dhiibay ka noqdo waa waayayaa carbuunta, haddiise uu ka noqdo kan qaatay wuxuu soo celinayaa laba-laabkiis, taas waa haddii aan dhibaato ka dhalan ka noqoshadda.

Qodobka 103aad

1. Haddii heshiiska lagu sameeyo wakiilnimo waxaa la tixgelinayaa mas'uuliyadda qofka wakiilka ka ah kan asalka ah markii la fiirinayo ceebaha ku saabsan rabidda ama waxyaabaha ka dhalanaya ogaanshaha duruufta qaarkeed ama in ay waajib tahay in la ogaado duruuftaas.

2. Hase yeeshee haddii wakiilku ku shaqeynayo amaro go'an oo uga soo fulay qofka wakiishay, uma bannaana kan wax wakiishay inuu ku doodo ogaansho la'aanta wakiilka arrima isagu uu ogaa, ama loo qaadan karo in ay waajib ahayd inuu isagu ogaado.

Qodobka 104aad

Heshiiska wakiilku uu ku dhammeeyo-isagoo aan ka bixin xadka wakiilnimada-magaca qofka wakiishay, wixii ka dhasha heshiiskaas oo xuquuq iyo waajibaad ah waxay toos ahaan u noqonayaan kan wax wakiishay ha ahaadeen dantiisa ama lidkiisa.

Qodobka 105aad

Haddii qofka heshiiska gelaya uusan sheegin waqtiga heshiiska inuu wakiil ka yahay qof kale raadka heshiiska u laaban maayo kan wax wakiishay si faa'iido ama lid ku ah, taas waa haddii aan loo qaadan kareyn si waajib ah in qofka wakiilka heshiiska la galay og yahay in uu wakiil yahay ama ay isugu mid tahay inuu la mucaamaloodo kan asalka ah ama wakiilka.

Qodobka 106aad

Haddii wakiilka iyo qofka uu heshiiska la galayba ayna ogeyn waqtiga heshiiska dhammaanshaha wakiilnimada, raadka heshiiska uu galahayo xaq ama xil mid kasto ha ahaade wuxuu u noqonayaa qofka asalka ah ama kuwa dhaxalkiisa leh.

Qodobka 107aad

Ma bannaana in qof heshiis la galo nafsadiisa isagoo isticmaalaya magaca qofka uu wakiilka u yahay, ha ahaado heshiis isagu ka faa'iideysanayo ama qof kale faa'iido ugu jirto haddii uusan idan ka haysan qofka asalka ah, hase yeeshee waxaa u bannaan kan wax wakiishay goortaasoo kale in uu oggolaado heshiiskaas, haddii taas wax khilaafsan aan lagu sheegin sharciga ama caadooyinka ganacsiga.

Qodobka 108aad

Qof kasta wuxuu karti u leeyahay inuu heshiis galo haddii aan sharciga looga qaadin awoodda dhammaan ama qaarkeed.



Qodobka 109aad

Qofka saqiirka ah ee aan wax kala sooci karin, ma laha awood uu ku maamulo wax allaale wixii uu galaana waa wax kama jiraan.

Qodobka 110aad

1. Qofka aan qaan-gaarin ee wax kala garan kara, wax allaale wixii uu sameeyo oo ah mucaamalaad ee la xiriira xoolihiisa waa ansaxayaan haddii ay isaga faa'diio ugu jirto si caddaan ah, waxse kama jiraan haddii khasaaro ugu jirto si caddaan ah.

2. Haddiise mucaamalaadkaas faa'iido ama khasaaro u yihiin qofka aan qaan-gaarin waxay noqonayaan kuwo la burin karo iyadoo la ilaalinayo danta qofka da'da yar, hase yeeshee lama weydiisan karo xaqa buritaanka haddii qofka da'da yar oggolaado mucaamaladaas kaddib markii uu qaan-gaaray, ama uu oggolaado waligiisa sharciga ah ee maamulaya hantidiisa ama si waafaqsan Sharciga.

Qodobka 111aad

Qofkii gaara sideed iyo toban sano, waa maamuli karaa hantidiisa si waafaqsan sharciga, haddii aan si sharci ah looga qaadin.

Qodobka 112aad

Waa ka qaadeysaa Maxkamaddu ismaamulidda qofka waalan, kan maskaxda wax ka qaba, kan nacaska ah iyo safiiha, waana u celineysaa si waafaqsan habka iyo tillaabooyinka ku go'an Sharciga.

Qodobka 113aad

1. Mucaamalaadka uu sameeyo qofka waalan iyo kan maskaxda wax ka qaba waxba kama jiraan haddii uu ka soo fulo kaddib markii la diiwaan geliyey xukunka ku saabsan ka qaadidda ismaamulidda.

2. Haddiise uu ka soo fuley ka hor intii aan la diiwaan gelin go'aanka ka qaadidda ismaamulidda waxba kama jiraan wixii uu sameeyey haddii xaaladda waaliddu ama maskaxda wax ka qabidda aan la ogeyn waqtiga heshiiska, ama uusan dhinaca kale la socon.

Qodobka 114aad

1. Mucaamaladda uu sameeyo qofka aan ismaamuli karin oo ku timaada nacasnimo ama safiihinimo awgeed, kaddib markii diiwaan gelinta xukunka ka qaadidda ismaamulidda, waxaa nidaaminaya Axkaamta qofka aan qaan-gaarin oo aan lahayn awood uu wax ku kala sooco.

2. Mucaamalaadka la sameeyo ka hor intii aan la diiwaan gelin go'aanka ka qaadidda, wax kama jiraan ama waa la burin karaa haddii eynan keenin ka faa'iideysi ama is qarsasho (collusione).

Qodobka 115aad

1. Waa ansaxayaa falka «waqfidda» ama dardaaranka ee uu sameeyo qofka safiiha ah ama nacaska ah, haddii Maxkamaddu oggolaato.

2. Qofka safiiha ah ee loo oggolaaday in uu xoolihiisa maamusho waa ansaxayaan wixii maamul ah ee ka soo fula haddii eyna ka baxsaneyn Sharciga.

Qodobka 116aad

1. Haddii qofku yahay dhagoole aan hadlikarin, ama indhoole ama dhagoole, ama indhoole aan hadlikarin, ay na suurtoobi weydo in uu muujiyo wuxuu qabo cudurkaas daraadiis waxaa u bannaan Maxkamadda in ay u qabato Kaaliye sharci ah oo ka caawiya xagga maamulka taasoo dantiisa lagu ilaalinayo.



2. Waa la burin karayaa wax allaale wixii maamul ah ee ka soo fula qofka loo qabtay Kaaliyaha sharciga ah, haddii maamulkaas la sameeyey iyadoo uusan kaalin kaaliyaha sharciga ah kaddib markii la diiwaangeliyey go'aanka kaalmeynta.

Qodobka 117aad

Falalka maamulka ah ee ay sameeyaan waaliyaashu sharciyeed iyo looga-dardaarmayaasha iyo daneeyayaasha waa ansaxayaan haddii ayna ka baxsaneyn sharciga.

Qodobka 118aad

Waxaa u bannaan qofka ayna awooddiisu dhammeyn in uu warsado in la buriyo heshiiska, iyadoo uusan ka baxsaneyn in lagu xukumo magdhaw haddii uu ku kaco wax khatal ah oo qarinaya awood la'aantiisa.

Qodobka 119aad

Haddii uu ku dhaco qofka sameeyey heshiiska gaf aasaasi ah waxaa u bannaan in uu warsado in la buriyo heshiiska haddii dhinaca kalana ku dhacay isla gafkaas oo kale ama uu ogaa ama ay sahal ahayd in uu la socdo.

Qodobka 120aad

1. Gafku waa aasaasi markii uu gaaro heer aad u culus, oo haddii uu ogaan lahaa dhinaca la khiyaameeyey markii uu sameynayey heshiiska ma uu sameeyeen heshiiskaas.

2. Gaar ahaan gafku waa aasaasi :-

b. Haddii uu saameeyo sifo uu leeyahay sheyga heshiisku ku saabsan yahay oo labada dhinac aasaasi u ah, ama ay waajib tahay in loo qaato sidaas si ka muuqata shuruudaha heshiiska iyo wixii ku-la-maansan niyasamida looga baahan yahay mucaamalaadka.

t. Haddii uu saameeyo dhinaca heshiiska galay laftiisa ama sifo ka mid ah sifaadkiisa, ayna iyadu tahay sababta aasaasiga u ah dhammeynta heshiiska.

Qodobka 121aad

Waa la burin karaa heshiiska haddii lagu dhaco gaf sharci ah, markii la helo shuruudda gafka runta ah ee waafaqsan labada qodob ee kan ka horeeya, taasi waa haddii uusan sharcigu si kale sheegin.

Qodobka 122aad

Waxba keeni mahayaan ansixidda heshiiska gafafka xisaabta ah ama kuwa qoraalka ah, hase yeeshee waxaa waajib ah in la saxo.

Qodobka 123aad

1. Uma bannaana qofka ku dhacay gaf in uu ugu doodo si kahor imaaneysa niyadsamidda.

2. Waxaana waajib ku ah in uu fuliyo heshiiskii uu sameeyey haddii dhinaca kale muujiyo in uu diyaar u yahay fulinta heshiiska.

Qodobka 124aad

1. Waa banaan tahay in heshiiska lagu buriyo khatalaad, haddii xeeladaha uu ku kacay dhinac ka mid ah heshiiska ama wakiilkiisa ay gaareen heer asaasi ah oo haddii uu ogyahay dhinaca kale uusan sameeyeen heshiiska.

2. Waxaana khatal loo qaadan karaa ka aamusidda loolakasay ee ku saabsan fal uu ku kacay dhinac ama duruuf, haddii ay sugnaato in qofka la dagay uusan galeen heshiiska haddii uu ogaan lahaa falkaas ama duruuftaas.



Qodobka 125aad

Haddii khatashu ka timid qof saddexaad uma bannaana kan la dagay in uu warsado buritaanka heshiiska haddii ayna sugnaan in dhinaca kale ogaa ama ay suurtoobi kartey si waajib ah in uu ogaado khatashaas.

Qodobka 126aad

1. Waa buri karaa heshiiska la isku khasbo haddii dhinacu ku sameeyo heshiiska cabsiin sal leh ee uu ku abuuro dhinaca kale si gardarro ah.

2. Cabsiintu waxay sal yeelaneysaa haddii dhinaca sheeganaya caddeeyo in khatar culusi ku dhaceyso iyadoo khatartaasi haddideyso isaga ama dad kale xagga noloosha ama korka ama sharafta ama maalka.

3. Marka la qaddarayo khasabka waxaa la tixgelinayaa Jinsiga qofka, da'diisa, xaaladdiisa ijtimaaciga ah, caafimaadkiisa iyo arrin kasta oo keeni karta in ay cusleyso khasabka.

Qodobka 127aal

1. Haddii waajibaadka uu qaaday labada dhinac midkood ayna u dhigmin faa'iidada uu ku helay heshiiska ama ayna u dhigmin waajibaadka dhinaca kale ama haddii ay caddaato in dhinaca lagu dagay heshiiska uu u galey si degid ah oo dhinac kale ka faa'iideystay fudeydka cad ama baahida xun ee ka muuqatay dhinaca laga faa'iideystay waxaa, u bannaan garsooraha markii uu dhinaca la dagay soo warsado in uu buriyo heshiiska ama uu dhimo iyo waajibaadka dhinacaas.

2. Waxaana waajib ah in dacwadda ku saabsan arrintaas la oogo sannad gudahiis laga billaabo taariikhda heshiiska haddii kale la aqbalimayo.

3. Heshiisyada wax isdhaafsiga ah dhinaca kale wuxuu ka hortagi karaa dacwadda buritaanka ah in uu bixiyo wixii dhammeystir ah ee Garsooraha ay la noqoto in ay ku filan tahay kabidda dhibaatada.

Qodobka 128aad

Wixii ku saabsan dhaqan gelinta qodobka kor lagu soo sheegay waxaa la ilaalinayaa in aan lagu xadgudbin qodobbada u gaarka ah isdagidda (Qabni) ee lug ku ieh heshiisyada qaarkood ama qiimaha faa'iidada.

MOWDUUCA

Qodobka 129aad

1. Waa bannaan tahay in mowduuca waajib ku ahaado wax mustaqbilka imaanaya.

2. Hase yeeshee waxba kama jiraan heshiisyada ku saabsan xoolo qof kale ee nool xataa haddii uu raalli ka yahay, taas waxaa ka baxsan xaaladaha sharcigu u sheegay sidaas si ka duwan.

Qodobka 130aad

Haddii mowduuca waajibku ku saabsan yahay gudasho wax aan suurtoobi karin waxba kama jiraan heshiiskaas.

Qodobka 131aad

1. Haddii mawduuca waajibku uu yahay shey aan la hubin, waxaa waajib ah in noociisa iyo inta uu yahay caddahay haddii kale oo ayna sidaas ahayn waxba kama jiraan heshiiska.

2. Waxaa ku filan oo keliya caddeynta nooca mowduuca in laga helo heshiiska wax caddeynaya inta uu la'eg yahay, haddii ayna labada dhinac ku heshiin sifada ama ayna suurtoobi karin in laga la' soo baxo taas caadooyinka ama duruuf kale, waxaa deynsanaha korkiisa noqonaya in uu dhiibo shey dhexdhexaad ah.



Qodobka 132aad

Haddii mowduuca waajibku yahay qaddar lacag, waxaa deynsanaha laasim ku ah in uu bixiyo inta ay la'eg tahay lacagtu ee ku xusan heshiiska iyadoo aan la tixgelineyn kor u kaca qiimaha lacagta ama hoos u dhaceeda waqtiga bixinta.

Qodobka 133aad

Haddii mowduuca waajibku khilaafsan yahay Nidaamka Guud ama anshaxa wanaagsan waxba kama jiraan heshiiska, sidoo kale waxaa la mid ah haddii uusan waajibka lahayn sabab, ama sababtiisa khilaafsan tahay Nidaamka Guud ama anshaxa

ULAJEEDDADA

Qodobka 134aad

1. Waajib kasta oo aan si cad lagu sheegin heshiiska sababtiisa waxaa loo qaadanayaa in uu leeyahay sabab xalaal ah haddii aan la caddeyn wax sidaas ka duwan.

2. Sababta lagu sheegay heshiiska ayaa ah sababta runta ah ilaa laga caddeeyo wax sidaas khilaafsan, haddiise lagu sugo in sababta runta ahi qarsoon tahay waxaa waajib ku ah qofka ku doodayo in waajibku leeyahay sabab kale oo sharci ah in uu isagu caddeeyo.

BURITAANKA

Qodobka 135aad

Haddii sharcigu siinayo labada dhinac midkood xaqa burinta heshiiska uma bannaana dhinaca kale in uu ku doodo xaqaas.

Qodobka 136aad

1. Xaqa buritaanka heshiiska wuxuu ku baaba'ayaa oggolaanshaha heshiiska si cad ama aamus ah ,

2. Oggolaanshuhu wuxuu u noqonayaa taariikhdii heshiiska la sameeyey iyadoo aan wax loo dhimeyn xuquuqda dadka saddexaad.

Qodobka 137aad

1. Waa dhacayaa xaqa buritaanka heshiisku haddii uusan qofka xaqa u lihi ku doodin saddex sano gudahood.

2. Waxey ka billaabaneysaa muddadaasi markii xaaladdu ay ku saabsan tahay qofka awoodda dhiman maalinta xaaladdaasi dhammaato, markii uu jiro gef ama khatal waxey ka billaabaneysaa maalintii la ogaado xaaladahaas markii qasab jirina maalinta uu joogsado, markastana ma bannaana in lagu doodo xaqa buritaanka gef ama khatal ama qasab awgeed haddii shan iyo toban sano ka soo wareegto waqtigii heshiiska la sameeyey.

Qodobka 138aad

1. Haddii heshiisku baadil yahay waxaa dhinac kasta oo dan ku leh u bannaan in uu ku doodo buritaanka, Maxkamadana waxaa lafteeda u bannaan in ay xukunto buritaanka iyadoo aan la warsan, buritaankaasna laguma ansixin karo oggolaansho.

2. Waxey ku dhacaysaa dacwadda buritaanku markii 15 sano ka soo wareegto waqtigii heshiiska la sameeyey.

Qodobka 139aad

1. Haddii heshiisku yahay baadil ama la buriyo waxaa labada dhinac u noqoneyaan xaaladdii ay ku sugnaayeen heshiiska ka hor, haddii taasi ayna suurtoobi karin waxaa bannaan Maxkamadda in ay xukunto magdhaw isu qalma.

2. Hase yeeshee, qofka awooddiisu dhimman tahay haddii heshiiska uu ku buriyo dhammaanshaha awooddiisa daraadeed laasim kuma aha inuu soo celiyo wax ka badan wixii manfaca ahaa ee ka soo gaaray fulitaanka heshiiska.



Qodobka 140aad

Haddii heshiiska qaarkiis baadil yahay ama la burin karo, qaarkaas keligiis ayaa la burinayaa haddii ayna caddaan in heshiisku uusan sameysmeen qaarka baadilka ah ama kan la burin karo la'aantiis, markaas heshiiska dhammaantiis waa baaba'.

Qodobka 141aad

Haddii heshiisku baadil yahay ama la burin karo lagana helo tiirar heshiis kale yeelan karo waa ansaxayaa heshiiskaasi isagoo loo qaadanayo kan tiirarkiisa la helay markii ay caddahay in niyadda labada dhinac u jeedday sameynta heshiiskaas.

## QAYBTA II

## *WAXYAABAHA KA DHASHA HESHIISKA*

Qodobka 142aad

Wixii ka dhasha heshiiska waxay u noqonayaan labada dhinac iyo dadka guud ahaan dhaxaltooyada leh iyadoo aan lagu xadgudbeyn qodobada ku saabsan dhaxalka, haddii ayna ka caddaan heshiiska ama dabiicadda macaamaladda ama sharciga in uusan u noqoneyn dadka guud ahaan dhaxaltooyada leh.

Qodobka 143aad

Waajibaadka iyo xuquuqda shakhsiga ah ee ka dhalata heshiisyo ku xiran shey u wareegay kaddib dadka gaar ahaan dhaxaltooyada leh, waxay u guurayaan dadkaas isla waqtiga uu sheygu u wareegayo haddii ay yihiin aasaasi ayna dadkaas gaar ahaaneed og yihiin arrintaas marka uu sheyggu u soo wareegayey.

Qodobka 144aad

1. Heshiisku waa u sharci dhinacyada heshiiska, mana bannaana in la buriyo iyo in laga noqdo haddii ayna dhinacyaddu isla oggolaan si waafaqsan asbaabaha sharcigu sheegayo.

2. Hase yeeshee haddii guud ahaan ay yimaadaan waxyaabo lama filaan ah oo aan la maleyneyn, ayna ka dhashaan waxyaabahaas in waajibka heshiiska, fulintiisu iyadoo aan noqon wax aan suurtoobi karin ayey noqotey mid aad ugu culus deynsanaha oo u keeneysa khasaaro culus, waxaa u bannaan Garsooraha isagoo ilaalinaya duruufta, isuna miisaamaya danta labada dhinac in uu ka dhigo waajibka cuslaaday mid macquul ah. Waxba kama jiraan wax allaale oo heshiis ah ee sidaas khilaafsan.

Qodobka 145aad

1. Waxaa waajib ah in loo fuliyo heshiiska sida uu u qoran yahay iyo si waafaqsan niyadsamidda.

2. Heshiisku ku koobi mahayo dhinaca in uu fuliyo waxa lagu caddeeyey oo keliya ee wuxuu kaloo saameyneyaa wax allaale wixii sharciga, caadada iyo caddaaladda ay keenayaan in ay la xiriiraan heshiiskaas oo waafaqsan dabiicadda waajibka.

Qodobka 146aad

Haddii heshiiska lagu sameeyo qaabka hoggaamiska ah, lagana helo shuruud qalafsan waxaa u bannaan Garsooraha in uu wax ka beddelo ama in uu ka cafiyo shuruudaas dhinaca iska hoggaansamay, isagoo waafajinaya sida caddaaladdu tahay. Waxbana kama jiraan wixii sidaas ka duwan ee lagu heshiiyo.

Qodobka 147aad

1. Haddii erayada heshiisku cad yihiin ma bannaana in looga leexdo jid fasiraad ah si loo garto ulajeedada labada dhinac.

2. Haddiise loo baahan yahay fasiraadda heshiiska, waxaa waajib ah in la baaro niyadda ka dhaxeysa labada dhinac iyadoo aan lagu ekaaneyn macna xarfeedka erayada, lana tixgelinayo dabiicadda macaamaladda iyo waxa loo baahan yahay in laga helo labada dhinac oo ah amaano iyo kalsooni si waafaqsan caadada mucaamalaadka.



Qodobka 148aad

1. Haddii shaki jiro waxaa loo fasirayaa si ah danta deynsanaha.

2. Hase yeeshee ma bannaana in loo fasiro shuruudaha mugdiga ku jira ee heshiisyada hoggaamiska ah si dhibeysa danta dhinaca hoggaansamay.

Qodobka 149aad

Heshiisku saarimaayo waajib dhinac saddexaad, waxaase dhici karta in uu u dhaliyo xaq dani ugu jirto.

Qodobka 150aad

1. Haddii qof ballanqaado xil dhinac saddexaad, waajib kuma aha dhinacaas in uu fuliyo ballankiisa. Haddii uu dhinaca saddexaad diido in uu isku laasimiyo xilkaas, waxaa waajib ku ah ballanqaadaha in uu wax u magdhabo dhinaca uu heshiiska la galay, waxaana u bannaan isla markaas si uu magdhaw isaga duwo in uu isagu laftiisu fuliyo xilka uu ballanqaaday.

2. Haddiise uu dhinaca saddexaad oggolaado ballanka, wuxuu oggolaanshihiisu raad yeelanayaa waqtigii uu ka soo fulay, haddii ayna u muuqan si cad ama aamusnaan ah in oggolaansha raadkiisu u noqonayo maalintii ballanqaadka soo fulay.

Qodobka 151aad

1. Waa bannaan tahay in qofku magaciisa ku galo heshiis ama mid faa'iido u keenaya dhinac saddexaad haddii fulinta waajibaadkaas uu ku haysto dan shakhsi ah. ha ahaato mid maadi ama macnawi ah.

2. Waxaa ka dhalanaya ballanqaadkaas in dhinac saddexaad ku yeesho xaq toos ah ballanqaadaha in uu fuliyo waajibka haddii aan si kale lagu heshiin, waxaana u bannaan deynsanaha in uu ka hor istaago ka faa'iideystaha ceebaha ka dhalan kara heshiiska.

3. Waxaa kaloo u bannaan dhinaca heshiiska galey in uu warsado fulinta waajibka ee loo sameeyey danta dhinaca saddexaad, haddii ayna ka caddeyn heshiiska in taasi u bannaan tahay ka faa'iideystaha oo kaliya.

### Qodobka 152aad

1. Waxaa u bannaan dhinaca heshiiska galay, haddii laga reebo deynlayaashiisa ama kuwa dhaxalkiisa leh-in uu ka noqdo heshiiska uu galay inta uusan kan ka faa'iideysanaya, ogeysiin deynsanaha ama ballanqaadaha in uu doonayo in uu ka faa'iideysanayo, taasi waa haddii ayna khilaafsaneyn murtida heshiiska.

2. Keeni meyso jebinta shardigu in uu deynsanuhu ka bari noqdo xagga ballanqaadaha haddii aan lagu heshiin si cad ama aamusnaan ah wax taas khilaafsan, waxaana u bannaan dhinaca ballanqaadaha ah in uu qofkii uu wax u ballanqaaday ku beddelo mid kale ama uu isaga laftiisu isu duwo faa'iidada.

### Qodobka 153aad

Waxaa bannaan in uu dhinaca saddexaad ee dantiisa loo gelayo ballanka noqdo qof ama Hey'ad mustaqbil ah, sidey u bannaan tahay in uu noqdo qof ama meel aan la xadidin waqtigii heshiiska la sameynayey, hase yeeshee la xididi karo waqtiga uu heshiisku dhalinayo raadkiisa si waafaqsan ballanka.

## QAYBTA III
## DHAMMAANSHAHA HESHIISKA

### Qodobka 154aad

1. Heshiisyada labada dhinacba laasinka ku ah, haddii mid ka mid ah dhinacyada uusan oofin waajibkiisa waxaa u bannaan dhinaca kale kaddib markii uu u digo deynsanaha in uu warsado in uu u fuliyo heshiiska ama in uu fasakho iyadoo magdhow la raacinayo mar kastaba haddii loo baahdo.

2. Waxaa u bannaan garsooraha in uu siiyo deynsanaha muddo, haddii duruuftu sidaas keento, sidoo kale waxaa u bannaan in uu diido fasakha haddii waxa uusan oofin deynsanuhu



yar yihiin markii loo eego waajibka intiisa kale ee la ballanqaaday.

### Qodobka 155aad

Waxaa bannaan dhinacyada in ay ku heshiiyaan in heshiisku, noqdo mid iskiisa u fasakhmaya iyadoo aan loo baahan go'aan Maxkamadeed markii la fulin waayo xilalka ka dhasha heshiiskaas, hase yeeshee heshiiskaasi waxba u dhimi maayo isu digidda haddii ayna laba dhinac si cad ugu heshiin in laga deeqtoonaado isu digidda.

### Qodobka 156aad

Heshiisyada laasimka ku ah labada dhinac haddii mid ka mid ah waajibaadka uu dhaco sababtoo ah in gudashadiisu noqotay mid aan suurtoobi karin way dhacayaan waajibaadka kale ee ka soo horjeeda, heshiiskuna waa fasakhmayaa sharci ahaan.

### Qodobka 157aad

Haddii heshiisku fasakhmo waxaa labada dhinac loo celinayaa sidii ay ahaayeen heshiiska ka hor, haddiise taasi suurtoobi weydo waxaa bannaan in la xukumo magdhaw.

### Qodobka 158aad

Heshiisyada laasimka ku ah labada dhinac haddii waajibaadka iska soo horjeeda gudashadoodu bislaato waxaa u bannaan dhinac kasta in uu diido gudashada waajibka saaran haddii dhinaca kale uusan gudan kiisa.

## MADAXA II

## *RABIDDA DHINACA KALIYEEDKA AH*

### Qodobka 159aad

1. Haddii qof ballanqaado in uu bixinayo abaalgud ku saabsan gudasho shaqo uu magacaabay waxaa waajib ku ah in uu siiyo abaalgudka qofka gutey shaqadaas xataa haddii uusan la socon ama ogeyn abaalgudkaas.

2. Haddii uusan ballanqaaduhu waqti u qaban shaqada bogiddeeda waxaa u bannaan in uu ka noqdo ballankiisa uu u soo bandhigay dadweynaha, hase yeeshee ka noqoshadu saameynmeyso xaqa qofka muteystay abaalgudka ee gutey shaqadii, waxay ku gubaneysaa dacwadda lagu warsanayo abaalgudka lix bilood gudahood markii aan lagu doodin iyadoo laga billaabayo taariikhdii loo jeediyey dadweynaha ka noqoshada ballanqaadka.

## *MADAXA III*
## *FALKA XAARAANTA AH*

## *QEYBTA I*
## *MAS'UULIYADDA FALKA QOF AHAANEED*

### Qodobka 160aad

Fal kasta oo dhibaato u keena dad kale wuxuu ku waajibinayaa qofkii la yimaado inuu bixiyo magdhaw.

### Qodobka 161aad

1. Qof kasta wuxuu mas'uul ka yahay falka xaaraanta ah ee uu la yimaado, waxaase shardi ah in falkaas uu ku sameeyey isagoo leh awood uu wax ku kala sooco.

2. Hase yeeshee haddii dhibaatadu ay ka timaado qof aan wax kala sooci karin iyo haddii qofkaasi uusan qabin qof ka mas'uul ah ama haddii dhibbanuhu uusan ka heli karin magdhaw qofka mas'uulka ka ah, Garsoorahu isagoo tixgelinaaya xaaladda dhinacyada, wuxuu awoodi karayaa inuu ku xukumo qofka dhibaatada keenay gunno ku dhisan caddaalad.

### Qodobka 162aad

Haddii uusan jirin xeer ama heshiis sidaas ka duwan, waajib kuma aha inuu bixiyo magdhaw qofkii caddeeyo in dhibaatada ay ka dhalatay sabab ka baxsan iraadadiisa, kuwaasoo noqon kara in dhibaatada ay ka timid gaf qof kale, gafka qofka dhibaatada gaartay ama amar aanan la celin karin (forza maggiore), ama xoog dabiici ah oo aanan la horjoogsan karin.



### Qodobka 163aad

Loo raacan maayo mas'uuliyad qofkii dhibaato u geysta qof kale haddii dhibaatadaasi ay ku timaado isagoo iska difaacayo gardarro isagoo qof ahaantiisa loo geystay ama xoolihiisa, ama qof saddexaad iyo xoolo uu leeyahay. Taasi waxaa shuruud u ah inaan lagu xadgudbin soohdinta isdifaacidda (leggittima difesa). Haddii taasi ayan dhicin qofkii dhibaatada la yimaada waxaa qasab ku ah inuu bixiyo magdhaw caddaaladeed.

### Qodobka 164aad

Sarkaalka Guud looma haysto ficilka uu sameeyo oo dhibaato u keeno cid kale haddii falkaasi uu ku dhaco isagoo fulinaaya amar nin ka sareeya uu bixiyey, waajibna ku ahayd ama uu filaayey in ay waajib ku ahayd raacidda amarkaas, haddii uu caddeeyo in ficilka uu sameeyey uu bannaanaa ama haddii malahiisu uu ku dhisnaa asbaab macquul ah iyo inuu ku sameeyey foojignaan.

### Qodobka 165aad

Qofkii dhibaato u geysto dad kale si uu uga hortago dhibaato weyn ee haddideysa isaga ama qof saddexaad, waxaa waajib ku ah inuu bixiyo magdhaw oo lagu qiimeeyo hadba sida Garsooraha ay la noqoto.

### Qodobka 166aad

Haddii dad badan ay mas'uul ka yihiin fal dhibaato keenay, si wadajir ah ayey uga mas'uul yihiin inay bixiyaan magdhaw. Mas'uuliyadda waxaa loogu qeybinayaa si siman haddii Garsooruhu uusan goynin qeybta qof waliba ku soo aadeysa ee magdhawga.

Qodobka 167aad

Garsooruhu wuxuu xadidayaa, isagoo tixgelinaayo qodobada 218 iyo 219 iyo isagoo fiirinaya duruufta inta uu la'eg yahay magdhawga dhibaatada gaartay dhibbanaha. Haddii ayan suurtoobin in waqtiga xukunka la soo saarayo aanan la xadidi karin si kama dambeys ah inta uu la'eg yahay magdhawga, Garsooraha waxaa u bannaan inuu siiyo dhibbanaha muddo uu ku weydiisan karo in xuquuqda ka maqan dib loo eego isagoo u qabanayo muddo.

Qodobka 168aad

Garsooruhu wuxuu xadidayaa habka magdhawga loo bixinayo isagoo tixgelinaaya duruufaha. Magta waxaa loo bixin karaayaa kis-kis ama waxaa loo bixin karayaa si joogta ah (forma di rendita). Xaaladahaas haddii ay dhacaan waxaa deynsanaha lagu qasbi karaa inuu bixiyo dammaannad.

2. Magdhawga waa inuu ahaadaa qaddar lacag ah. hase yeeshee haddii dhibbanuhu uu weydiisto wuxuu Garsooraha awoodi karayaa isagoo fiirinaya duruufta in bixinta magdhawga ay ahaato in xaaladda loo celiyo sidii hore ama in la fuliyo hawl xiriir la leh falka xaaraanta ah.

Qodobka 169aad

1. Dacwadda ku saabsan magdhawga ee lug ku leh fal xaaraan ah waxey ku gubaneysaa muddo seddax sannadood laga billaabo maalinta dhibbanahu uu ogaaday dhibka iyo qofkii sameeyey. Markastaba dacwadda magdhawga ah waxey ku gubaneysaa 10 sanno laga billaabo maalinta falka xaaraanta ah uu dhacay.

2. Hase yeeshee, haddii dacwadda magdhawga ah ay ku xiran tahay mid ciqaabeed tan dambena ayan wali gubanin, inkastoo ay dhammaatay muddada lagu xusay qeybta hore ee qodobkaan, dacwadda magdhawga ah gubanmeyso ilaa tan ciqaabtu ay ka gubato.



## *QEYBTA II*

## *MAS'UULIYADDA KA TIMAADA FAL QOF KALE*

Qodobka 170aad

1. Qofkii sharci ama heshiis awgiis ay waajib ku tahay inuu ilaaliyo qof da'diisu yar tahay ama xaaladdiisa jirka ama maskaxda u baahan yahay in la ilaaliyo, waxaa waajib ku ah inuu magdhabo dhibaatada uu gaarsiiyey dad kale ee ka timid falka xaaraanta ah ee qofkaasi uu sameeyey. Waajibkaasi waa mid aanan hareyn xataa haddii qofka falka dhibaatada keenay uu yahay mid aan wax kala sooci karin.

2. Qofka da'da yar waxaa loo qaadanayaa inuu u baahan yahay ilaalin ilaa inta uu ka dhammeysto 18 sano, ama isagoo da'daasi gaaray laakiinse uu weli ku sugan yahay ilaalinta qofka loo xilsaaray edbintiisa. Ilaalinta qofka yar waxey u gudbeysaa edbiyaha ama macallinka muddada yarka uu aktooda joogo. Ilaalinta gabadha arooska ah ee aan qaangaarin wuxuu xil ka saaran yahay ninkeeda ama aabaheeda hadba qofkii waqtigaas ay la nooshahay.

3. Qofka ilaalinta loo xilsaaray waa laga dhaafi karayaa mas'uuliyadda haddii uu caddeeyo inuu gutay waajibka ilaalinta ama dhibaataduna had iyo goor ay tahay mid iska dhici lahayd xataa haddii xilka ilaalinta loo guto si xilkasnimo ku jirta.

Qodobka 171aad

1. Shaqa-bixiyaha wuxuu mas'uul ka yahay dhibaata da uu la yimaado qofka u shaqeeya haddii falka xaaraanta ah uu dhacay isagoo shaqada gacanta ku haaya ama sabab shaqadaa la xiriirta.

2. Xiriirka shaqada waa mid jira xataa haddii loo shaqeeyaha uusan xur u lahayn doorashada qofka u shaqeeya haddiiba uu ku leeyahay awood buuxda xagga ilaalintiisa ama hoggaamintiisa.

Qodobka 172aad

Qofka mas'uulka ka ah falka qof kale uu sameeyey wuxuu u raacan karaa qofka dhibaatada keenay qeybta kaga soo aadeyso dhibaatadaas.

*QEYBTA III*

MAS'UULIYADDA XAGGA ASHIYAA'DA (*Responsabilita' per le cose*).

Qodobka 173aad

Qofka loo xilsaaray ilaalin xoolo, in kastoo uusan ahayn qofka leh xoolahaas wuxuu mas'uul ka yahay dhibaatada ka timaada xataa haddii uu yahay mid lumay ama mid cararay haddii uusan caddeynin in shilkaasi uu ku dhacay sabab ka baxsan iraadadiisa.

Qodobka 174aad

1. Qofka loo xilsaaray ilaalin daar, xataa haddii daartaasi uusan lahayn, wuxuu maas'uul ka yahay dhibaatada ka timaada kharaabidda daartaas ama qaarkeed. haddii uusan cad deyn in uu shilkaasi ku imaan ceeb xagga hagaajiska. duugnimada ama ceeb ku saabsan dhisidda.

2. Qofkii haddidaad dhibaato keeni karto uga imaaneyso daar, wuxuu xaq u leeyahay inuu weydiisto qofka guriga iska leh inuu sameeyo wax allaale wixii looga hortagi karo khatartaas; haddii qofka guriga leh uusan ogolaanin, Max kamadda waxaa u bannaan iney u rukhseyso qofka ka baqaaya dhibaatada inuu qaado tillaabooyinkaas iyadoo kharajka la dul saarayo qofka guriga iska leh.

Qodobka 175aad

Qofka loo xilsaaray inuu ilaaliyo wax u baahan ilaalin gaar ah ama qalab makaanik ah wuxuu mas'uul ka yahay dhibaatooyinka ka yimaada ashiyaa'daas, haddii uusan caddeynin in dhibaatadu ay ku timid sabab iraadadiisa ka baxsan iyo isagoo aanan u gafin xeerka u gaarka ah ee nidaaminaaya hawlaha mowduucaas.



MADAXA IV

*YEELASHO XOOLO EE KU TIMAADA SABAB LA'AAN*

Qodobka 176aad

Qof kastaa, xataa haddii uusan garasho lahayn maaleysta sabab la'aan isla markaasna dhibaato u soo jiida qof kale, waxaa qasab ku ah inuu siiyaa qofka dhibaatadda uu soo gaarsiiyey inta ay xoolihiisa iska dhimeyn. Qasabkaasi waa mid aanan hareynin xataa haddii xoolahaasi ay waqti dambe dhumaan.

Qodobka 177aad

Dacwadda ku saabsan xoolo yeelashada ku timaada sabab la'aan waxey ku dhammaaneysaa saddex sano laga billaabo maalinta dhibbanaha uu ogaado ama 15 sano maalinta xuquuqda ay dhalatay.

QEYBTA I

*BIXINTA AANAN LA MUTEYSAN*

Qodobka 178aad

1. Qofkii qaata lacag aanan la muteysan wuxuu qasab ku yahay inuu celiyo.

2. Ma bannaana celiskaas haddii qofka lacagta bixiyey uu ogaa inuusan ku qasbaneyn, mar haddii uusan ahayn qof garashadiisu ay dhiman tahay ama lacagta uu ku bixiyey haddidaad daraadeed.

Qodobka 179aad

Wey bannaan tahay in la celiyo bixinta aanan la mutey san haddii bixintaasu lagu fuliyey waajib sababtiisu aysan xaqiiqoobin, ama waajib jiritaanka sababtiisu dhammaato.

Qodobka 180aad

1. Sidoo kale wey bannaan tahay in la celiyo bixinta aan la muteysan, marka bixintaasu lagu sameeyey fulin waajib ah ayna muddadiisu bislaan, haddii qofka bixiyey uu moogaa jiritaanka muddadaas.

2. Hase yeeshee, deynluhu waxaa u bannaan inuu ku ekaado celinta maaleysiga ka dhashay bixinta la soo hormariyey inta ay la'eg tahay dhibaatala soo gaartay deynsanaha.

Marka waajibka aan muddadiisu bislaan uu ku saabsan yahay lacag caddaan ah, deynluhu waa inuu u celiyaa deynsanaha dulsaarka uu sharcigu qabo ama lagu heshiiyo xagga waqtiga ka haray bislaashada muddada.

Qodobka 181aad

Ma bannaana in la celiyo bixinta aan la muteysan marka bixintaas uu sameeyey qof ka duwan deynsanaha, haddii deynluhu bixintaas awgeed si niyadsami ah uu ka lumo qoraalka caddeynaya xaqiisa, ama ay ka lunto lammaanadda deyntiisa, ama uu iska dhaafo dacwadda uu ku oogi lahaa deynsanaha dhabta ah kaddibna uu waqtiga ka dhaco. Deynsanuhu waa inuu u magdhawaa kan saddexaad oo bixinta sameeyey.

Qodibka 182aad

1. Haddii qofka qaatay bixinta la muteysan uu qabey niyadsami, kuma qasbana inuu celiyo waxa uu qaatay.

2. Haddii uu niyaddiisu ay xumeyd, waxaa qasab ku ah inuu celiyo xataa dulsaarkii ka imaan lahaa wixii mira ah uu ka helay ama kuwa uu ka tegey oo ay dhaleen sheyga uu xaqdarada ku qaatay, laga billaabo maalinta bixinta ama maalinta ay billaabtaay niyadxumadiisa.

3. Markastaba, qofkii qaata wax uusan muteysan waxaa qasab ku ah inuu celiyaa dulsaarka iyo miraha laga billaabo maalinta dacwadda soo celinta la oogay.



Qodobka 183aad

Haddii qofka qaatay wax uusan muteysan uu yahay mid awooddiisu ay dhiman tahay, sameyn karina heshiis, waxaa qasab ku ah oo keliya inuu magdhawo inta uu ka maaleystay.

Qodobka 184aad

Oogidda dacwadda ku saabsan soo celinta waxa aanan la muteysan waxey muddadeeda ku egtahay saddex sannadood laga billaabo maalinta qofka waxaasi bixiyey uu ogaaday inuu xaq u leeyahay soo celintaasi, mararka kale waxey muddadu ku egtahay 15 sano laga billaabo maalinta xaqaasi uu dhashay.

## QEYBTA II

## MAAMULID MACAAMILEED

Qodobka 185aad

Maamul macaamilo wuxuu jiraa, markii qof uu xilsaarneyn uu u qabto asagoo og maamul macaamaleed oo degdeg ah qof kale iyo magaca qofkaas.

Qodobka 186aad

Maamulka macaamalka wuu jiraa xataa haddii uu maamulaha uu qabto hawsha qofka kale, asagoo ku dhex jiro mucaamalo asaga u gaar ah, sababtoo ah, labada mucaamal oo isku xiran, taas oo aan la qaban karin iyadoo aan la qaban tan kale.

Qodobka 187aad

Xeerka nidaaminaya wakaalashada ayaa la dabaqayaa, haddii qofka danta leh uu oggolaado shaqada uu u qabtay maamulaha.

Qodobka 188aad

Maamulaha waa inuu wadaa hawsha uu billaabay ilaa qofka danta ku lihi hawsha uu ka helo awood uu ku qabsado hawshiisa. Sidoo kale waxaa waajib ku ah inuu ogeysiiyaa isla marka ay u suurtowdo qofka hawsha loo qabtay.

Qodobka 189aad

1. Maamulaha waa in uu ku shaqeeyaa dadaalka aabaha wanaagsan ee qoyska ee xil kaska ah, wuxuuna mas'uul ka yahay gefkiisa, hase yeeshee garsooraha waa u bannaan tahay inuu dhimo qaddarka magdhawga ee lagu yeeshay maamulaha sabab ka timid falka dhibaata keenaya ee uu keenay gefkiisa, haddii ay jiraan duruuf la gareysan karo.

2. Haddii maamulaha uu wakiisho dad kale, qaar ama dhammaan hawshiisa, wuxuu mas'uul ka yahay tasarufka qofka uu wakiishay, taasoo aan waxba u dhimeynin xaqa qofka danta ku leh hawsha, isagoo khaas ahaan u dacweysan karo kan la wakiishay.

Qodobka 190aad

Maamulaha waxaa saaran isla waajibaadka wakiilka (mandatario) inta ku saabsan kharaj celinta wixii uu ku helay maamulka iyo bandhig xisaabeed.

Qodobka 191aad

1. Haddii uu dhinto maamulaha dhaxaltooyadiisa waxaa saaran waajibaadka dhaxaltooyadda wakiilka (mandatario) sida waafaqsan qodobka 625.



2. Haddii uu dhinto qofka hawsha danta ka leh, maamulaha waxaa ka saaran xagga dhaxaltooyadiisa isla waajibaadka ka saarnaa qofka dhintay.

Qodobka 192aad

1. Maamulaha waxaa loo xisaabayaa wakiilka qofka hawsha danta ka leh haddii uu la yimaado inta maamulka uu hayo dadaalka aabaha qoyska ee xilkaska ah, xataa haddii aan la gaarin natiijadii la rabay. Qofka danta ka leh hawsha waa inuu gutaa markaasi waajibaadka maamuluhu magaciisa ku galay, kana xoreeyaa ballanqaadyada uu galay, una celiyaa dhammaan kharajka lagama maarmaanka ah ama faa'iidada leh ee ay keeneyso duruufta, ee ay la socdaan dulsaarka laga billaabo maalinta kharajkaasi la galay, kana magdhabaa dhibaatada ku soo gaartay maamulka daraadiis. Maamulaha xaq uma laha abaalgud hawlaha uu gutay dartood, haddii kuwaasi ayna ka mid ahayn shaqadiisa.

Qodobka 193aad

1. Haddii maamulahu uusan lahayn awood uu heshiis ku galo, mas'uul kama aha maamulkaas, inta uu ka faa'iideystay mooyee, ayadoo laga reebayo marka uu mas'uuliyaddiisu eysan ka dhalaneyn fal aan bannaaneyn.
2. Qofka hawsha loo qabtay waxaa saaran mas'uuliyad buuxda, xataa haddii uusan lahayn awood heshiis lagu galo.

Qodobka 194aad

Dacwadda ka dhalata maamulka macaamileed waxay ku dhaceysaa 3 sano, laga billaabo maalinta mid kasta ee dhinacyadda ka mid ah uu ogaaday xaqiisa, markastaba 15 sano laga billaabo maalinta xaqa uu dhashay.

## MADAXA V
## *XEERKA*

Qodobka 195aad

Waajibaadka ka dhasha xeerka toos ahaan iyo keli ahaan waxaa lagu nidaaminayaa qodobada sharciga ee sal u ah dhalashadooda.

## BAABKA II

## *WAXYAABAHA KA DHASHA WAAJIBAADKA*

### Qodobka 196aad

1. Deynqabaha waa inuu gutaa waajibkiisa.
2. Hase yeeshee, lama warsan karo gudashada waajibaadka dabiiciga ah (obbligazioni naturale).

### Qodobka 197aad

Haddii ayna jirin axkaam sharciyeed, garsooraha ayaa goynayo haddii uu jiro waajib dabiici ah, marnaba waajibka dabiiciga ah ma noqon karo mid ka soo horjeedo nidaamka guud.

### Qodobka 198aad

Deynqabaha uma bannaana inuu weydiisto in loo soo celiyo wixii asagoo raalli ah uu bixiyey si uu u guto waajib dabiici ah (obbligazioni naturale).

### Qodobka 199aad

Waajibka dabiiciga ah (obbligazioni naturale) wuxuu sabab u noqon karaa waajib madani ah.

## MADAXA I

## *GUDASHO DABIICI AH (Adempimento in natura)*

### Qodobka 200aad

1. Deynqabaha la daahay gudashadda deynta sida ay qabaan qodobada 216 iyo 217, waxaa laasim ku ah in uu guto waajibka dabiiciga ah, haddii gudashadaas tahay mid suurtowdo.



2. Hase yeeshee, haddii gudashada dabiiciga ah ay tahay mid aad ugu culus deynqabaha, waxaa u bannaan in uu ku ekaado in uu bixiyo qadar lacag ah magdhaw ahaan, waxaase shardi ah in gudashada qaabkaas ah dhibaato weyn ayna u keenin deynlaha.

### Qodobka 201aad

Ayadoo ay sidooda u jiraan xeerarka ku saabsan diiwaangelinta, waajibka lagu wareejinaayo mulkiyadda ama xaqa kale ee ku saabsan ceynta, waxaa ka dhalanayo wareejin sharciyeed ee mulkiyadda ama xaqa ceynta ah, haddii mowduuca waajibka uu yahay shey la hubo oo uu leeyahay deynqabaha.

### Qodobka 202aad

1. Haddii waajibka wareejinta xaqa ceynta ah mowduuciisu yahay shey go'an xagga nooca (genere) xaqa ma wareegi karo haddii aan sheygaas la xadidin.

2. Haddii deynqabaha uusan gudanin waajibkiisa. deynlaha waxaa u bannaan asagoo ka haysta rukhsadda garsooraha, haddii degdeg jirtana garsooraha amar la'aantiisa in uu ku iibsado kharajka deynqabaha shey la mid ah noocaas. Waxaa kale uu warsan karaa qiimaha sheyga, ayadoo laba jeerba wax u dhimeyn xaqiisa magdhawga ah.

### Qodobka 203aad

Waajibka ku saabsan wareejinta xaqa ceynta ah waxaa la socda dhiibista sheyga iyo dhowritaankiisa ilaa laga dhiibo.

### Qodobka 204aad

1. Haddii ay waajib ku tahay deynsanaha in uu wareejiyo waajib ceyni ah ama uu ku saabsan yahay gudasho shaqo, ayna waajib ku tahay in uu dhiibo sheyga uusana dhiibin sheyga xataa kaddib markii loo digay (mora) wixii dhibaato ah oo

ka dhasha waxey noqonayaan korkiisa, xataa haddii taas uu qaadi lahaa deynluhu digniinta ka hor.

2. Hase yeeshee, dhibaatadu saarmi meyso deynqabaha xataa haddii loo digay, haddii la caddeeyo in sheyga mar walba ku baabi'i lahaa deynlaha agtiisa, haddii loo dhiibi lahaa. ayadoo laga reebayo marka deynqabuhu oggolaado inuu xambaarsado dhibaatooyinka yimaada si lama filaan ah.

3. Dhibaatada ka dhalata sheyga la xaday ee luma ama baaba'a, waxey saaran tahay tuuga.

Qodobka 205aad

Haddii heshiisyadda ama dabiicadda waajibka ay dhalinayaan in waajibka uu guto shakhsi ahaan deynqabaha, deynluhu wuu diidi karaa gudashadda waajibka uu sameeyo qof kale.

Qodobka 206aad

1. Haddii deynsanuhu uusan fulin waajibkiisa ku saabsan gudasho shaqo, waxaa u bannaan deynlaha in uu warsado Maxkamadda amar lagu fulinaayo waaibka haddii ay suuragal tahay ayadoo kharajka la saarayo deynsanaha.

2. Xaaladda degdegga ah deynluhu waa uu fushan karaa waajibka, asagoo aan haysan amar Maxkamadeed ayadoo kharajka la saarayo deynsanaha.

Qodobka 207aad

Haddii dabiicadda waajibka ay ogoshahay, xukunka garsooraha ayaa la raacayaa xagga fulinta.

Qodobka 208aad

1. Haddii waajibka gudashadda shaqadu ku laasimineyso deynsanaha in uu dhowro sheyga, maamulo ama fulinta waajibku uu u guto si foojignaan ah, deynsanuhu wuxuu noqonayaa qof gutay waajibkiisa markii uu la yimaado dadaalka laga doonayo qofka caadiga (Buon padre di famiglia), xataa haddii aan la gaarin dantii la doonayey, taas waa haddii xeerka ama heshiisku si kale sheegin.



2. Goor kastaba, deynqabaha wuxuu mas'uul ka yahay khiyaanadiisa ama gefkiisa culus.

Qodobka 209aad

Haddii waajibku ku saabsan yahay ka joogsasho shaqo laga doonayo deynsanaha lana khilaafo, waxaa u bannaan deynlaha in uu warsado baaba'inta wixii khilaafkaas keenay, wuxuuna warsan karaa Maxkamadda amar ku saabsan baaba'intaas, iyadoo kharajka la dulsaaraayo deynsanaha.

Qodobka 210aad

1. Haddii gudashada waajibka dabiiciga ah ay suurtowdo ama ay habboon tahay markii uu gudanaayo waajibka deynsanaha shakhsi ahaan, deynlaha waxaa u bannaan in uu ka helo Maxkamadda xukun ku laasiminaayo gudashada waajibka haddii kale in lagu xukumo ganaax.

2. Garsooraha haddii ay la noqoto in ganaaxa waxba ka tareyn madax adkaanta deynqabaha awgeed waxaa u bannaan in uu ganaaxa kordhiyo markastoo kordhinta ay wax tareyso.

Qodobka 211aad

Marka la helo gudashadda dabiiciga ah ee waajibka ama haddii deynqabaha uu ku adkeysto diidmadiisa ee ku saabsan gudashada waajibka, garsooraha wuxuu goynayaa qadarka magdhawga ah ee lagu waajibinaya deynqabaha, asagoo tixgelinayo dhibaatada gaartey deynlaha iyo tasarufka aan sababta lahayn ee deynqabuhu ku kacay.

## *MADAXA IIAAD*

## *GUDASHO ISU DHIGANTA*

### Qodobka 212aad

Haddii ay suuragal noqon weydo gudashadda dabiiciga ah, deynqabaha waxaa lagu xukumayaa magdhaw dhibaatada ka dhalatay gudasha la'aanta waajibka, taasi waa haddii aan la caddeyn suurtoobid la'aanta gudashadda ka baxsan iraadadiisa. Isla xukunkaas ayaa la dabaqayaa lala daahidda gudashada waajibka.

### Qodobka 213aad

Garsooraha waa u bannaan tahay inuu dhimo qadarka magdhawga, ama in uusan xukumin magdhawga, haddii gefka deynluhu u keenay dhibaatada ama uu siyaadiyey.

### Qodobka 214aad

1. Waa lagu heshiin karaa in deynqabaha xambaaro dhibaatooyinka ka dhasha waxyaabaha u dhaca si lama filaanka ah (caso fortuito) ama quwadda dabiiciga ah ee aan la celin karin (forza maggiore).

2. Waxaa kale oo lagu heshiin karaa in deynqabaha laga xoreeyo mas'uuliyad kasta ee ka timaada gudasho la'aan waajibka heshiiska ah, ayadoo laga reebayo mas'uuliyadda ka timaada khiyaanada ama gefkiisa culus. Hase yeeshee deynqabaha waxaa ka qaadi kara mas'uuliyadda khiyaano ama gef culus dadka uga shaqeeya waajibka gudashadiisa.

3. Wax kama jiraan shardi kasta ee lagu reebayo mas'uuliyadda ka dhalata falka aan bannaaneyn.

### Qodobka 215aad

Ayadoo laga reebayo marka sharcigu qabo si kale, magdhawga wuxuu waajib yahay oo keli ah, markii deynqabuhu la daaho bixinta.

Qodobka 244aad

1. Xaqa ceshasada u noqon meyso dammaan deynlaha

2. Waxaa waajib ku ah qofka ku isticmaalaya xaqa ceshasadda in uu dhowro sheygaas sida waafaqsan axkaanta nidaamineyso rahanka, waana in uu ka keenaa xisaab miraha.

3. Ceshadaha (ritentore) waxaa u bannaan in uu ka helo Garsooraha oggolaasho gadid, haddii arrintu ku saabsan tahay alaab hallaabeyso ama baaba'eyso sida waafaqsan Qodobka 908. Xaqa ceshasadda wuxuu u wareeggaa markaas qiimaha alaabta la gaday.

Qodobka 245aad

1. Xaqa ceshasada (ritenzione) wuxuu ku dhacaa lumidda haysashada mulkiyad ahaaneed ama haysashada (detenzione).

2. Hase yeeshee waxaa u bannaan haysadaha waayey haysashada asagoon ogeyn, ama asagoo ka soo horjeeda ama diidan, in uu soo ceshado sheygii, haddii uu sidaa ku warsado 30 maalmood dhexdood laga billaabo marka uu ogaado lumidda haysashada milkiyad ahaaneed (possessore) ama haysashada (detenzione) waxaana shardi ah in eysan ka soo wareegan hal sano taariikhda sheyga lumay.

## QEYBTA III

## *AWOOD LA'AANTA BIXINTA DEYNTA*

Qodobka 246aad

Waa la cadeyn karaa in deynqabaha ku jiro xaaladda awood la'aanta bixinta deynta, haddii xoolahiisa eyna ku filneyn bixinta deymahiisa gaaray waqtigii la weydiisan lahaa.

Qodobka 247aad

Awood la'aanta bixinta deynta waxaa lagu caddeynayaa xukun Maxkamadda Gobolka ee leh awoodda xagga dalka, lagana helo degnaashaha deynqabaha, taasoo ku imaan karta weydiisashada deynqabaha laftiisa ama mid ka mid ah deynleyaashiisa. Dacwadda ku saabsanna waxaa loo qaadayaa habka deg-degga ah.

Qodobka 248aad

Maxkamadda mar kasta, inta eyna caddeyn xaaladda awood la'aanta bixinta deynta ee deynqabaha, waa in ay tixgelisaa dhammaan duruufta ku saabsan deynqabaha ha ahaato mid guud iyo mid gaarba, waxaa waajib ku ah, sidoo kale in ay tixgeliso xoolaha uu yeelan karo mustaqbalka awooddiisa qof ahaan mas'uuliyadda sababaha dhaliyey awood la'aanta bixinta deynta danaha bannaan ee deynleyaashiisa iyo duruuf kasta ee sameyn karta xaaladiisa maadiga ah.

Qodobka 249aad

Muddada lagu sameyn karo ka hortagga xukunka ku saabsan arrimaha awood la'aanta bixinta deynta waa 8 beri, rafcaankeedana waa 15 beri oo ka billaabata taariikhda gaarsiinta (notifica) xukunka.

Qodobka 250aad

1. Kaaliyaha Maxkamadda maalinta weydiiska caddeynta awood la'aanta bixinta deynta lagu qoro diiwaanka waa in uu ku sii qoraa warqadda dacwadda diiwaan gaar ah ee ay iska leeyihiin deynma-gudeyaalka. Sidoo kale, waa in uu ku xusaa geeska qoraalkaas xukunka ka soo baxay weydiiska awood la'aanta bixinta deynta' dhammaan xukunadda si adkeeya ama baabi'iya, ama taariikhda xukunka lagu dhawaaqay.

2. Intaa Kaaliyaha waxaa u dheer, waa in uu u sii gudbiyaa Kaaliyaha Maxkamadda Rafcaanka nuqul ka mid ah qoraaladda ay la jiraan xusuusinta geeska ku qoran si loogu dhigo diiwaanka guud, kaasoo qabashadiisa lagu nidaaminayo Dekreeto oo uu soo saaro Wasiirka Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta.



Qodobka 251aad

Haddii deynqabuhu beddelo degnaashahiisa, waa in uu gaarsiiyaa Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka ee awooddeeda dhulka uu raacsanaa degnaashihiisi hore. Isla marka uu ogaado beddelka degnaashaha, Kaaliyaha waa in uu u diraa ha ku isticmaalo jidka deynqabaha laftiisa ama jid kala nuqulka xukunka caddeynaya awood la'aanta bixinta deynta iyo xusuusinta lagu sameeyey geeska qoraalka, Maxkamadda awooddeedu laga helo degnaashaha cusub, si loogu dhigo diiwaanka Maxkamaddaas, kharajkana wuxuu saaran yahay deynqabaha.

Qodobka 252aad

1. Xukunka cadeynaya awood la'aanta bixinta deynta waxey suuragal ka dhigeysaa weydiisashada dhammaan deymaha aan dhicin ee deynqabaha. Deymahaas waxaa laga jarayaa dulsaarka heshiiseed ama sharciyeed ee la muteystay waqtiga weli soconaya ilaa muddada ka dhacdo.

2. Hase yeeshee, Garsooraha waa u bannaan tahay, haddii uu warsado deynqabaha taasoo ka horjeeda deynleyaasha danta leh in uu sideeda u dhaafo muddada ama uu ballaariyo xagga deymaha mideysan, waxaa u bannaan, sidoo kale in uu siiyo deynqabaha muddo, marka arrintu ku saabsan tahay deyn la weydiisan karo, haddii ay la noqoto duruufta masaamaxeyso tillaabooyinkaas iyo haddii tillaabooyinkaasi yihiin jidka habboon ee lagu badbaadi karo danaha ka dhaxeeya deynqabaha iyo deynleyaasha.

Qodobka 253aad

1. Caddeynta awood la'aanta bixinta deynta ma reebeyso dacwooyinka keli keli ah ee deynleyaasha ku oogaan deynqabaha.

2. Hase yeeshee, caddeyntaas looguma is hortaagi karo deynleyaasha xuquuqdooda ay ka horreysay qoraalka warqadda dacwadda caddeynta awood la'aanta bixinta deynta, qaybinta lagu sameeyey hantida maguurtada ah ee deynqabaha kaddib qoraalka.

Qodobka 254aad

Laguma socod siin karo deynleyaasha, tasaruf kasta ee uu sameeyey deynqabaha ee keenaya yareynta hantidiisa ama badinta waajibaadkiisa laga billaabo maalinta la sameeyey qoraalka warqadda dacwadda awood la'aanta bixinta deynta, sidoo kale laguma socod siin karo deynleyaasha bixin kasta ee uu sameeyey deynqabaha markaas kaddib.

Qodobka 255aad

1. Deynqabaha wuu ku tasarufi karaa hantidiisa, xataa haddii ay raalli ka ahayn deynleyaasha, waxaase shardi ah in qiimaha tasarufka yahay mid caadi ah iyo in qiimahaasi la wareegaha uu dhigo khasnadda Maxkamadda, si loo qeybiyo, sida waafaqsan xeerarka nidaaminaya qeybinta.

2. Haddii qiimaha ka hooseeyo kan caadiga ah, tasarufkaasi laguma socod siin karo deynleyaasha haddii laga reebo marka la wareegaha uu dhigo farqiga u dhaxeeya qiimaha lagu heshiiyey iyo kan caadiga ah mooyee.

Qodobka 256aad

Haddii ay deynleyaasha qabtaan dhakhli uu leeyahay deynqabaha, Guddoomiyaha Maxkamadda ee awoodda leh wuu caddeen karaa awood la'aanta bixinta deynta wuxuu ka siin karaa deynqabaha haddii uu warsado masruuf in laga bixiyo dakhligaas la qabtay. Amarka laga soo saaray dalabkaasi waxaa lagu sameyn karaa ka hortag muddo 3 maalmood laga bilaabo taariikhda ku dhawaaqidda amarka, haddii ka hortagga uu sameeyo deynqabaha, amase saddex maalmood dhexdood laga billaabo maalinta gaarsiinta la siiyey deynleyaasha, haddii ka hortagga ay sameeyeen deynleyaasha.

Qodobka 257aad

Deynqabaha wuruu muteysanayaa ciqaabta lagu xusay qodobka 494aad ee Xeerka Ciqaabta labada xaaladood ee soo socda :



b. Haddii kaddib markii la furay dacwad lagu doonayo bixinta deyn uu iska dhigo qof aan deynta bixin karin, asagoo khiyaameynaya xuquuqda deynleyaasha, lana soo saaray xukun ku xukumaya in uu bixiyo deynta, caddeynayana inuu deynta bixin waayey.

t. Haddii, kaddib xukunka caddeynaya xaaladaha awood la'aanta bixinta deynta, deynqabuhu isagoo khiyaameynaya xuquuqda deynleyaashiisa uu qariyo qeyb ka mid ah hantidiisa si eyna ugu dacwoon deynleyaasha, ama uu sameeyo deyman daahsoon amaba badiyo deymahaas.

Qodobka 258aad

1. Xaaladda awood la'aanta bixinta deynta waxey ku dhammaaneysaa xukun ay soo saarto Maxkamadda Gobolka ee fadhigeeda laga helayo degnaashaha deynqabaha, xukunkaasoo lagu soo saarayo codsasho ka timid dhammaan dhinacyadda danta leh, labada xaaladood ee soo socda :

b. Haddii la caddeeyo in kharajka deynqabaha uu ka badan yahay dakhligiisa.

t. Haddii deynqabaha uu bixiyo deymaha waqtigoodu, dhacay, ayadoo taasi laga reebayo deymaha noqday kuwo waqtigooda dhacay kaddib marka la caddeeyey awood la'aanta bixinta deynta. Xaaladdaas, deymaha bislaaday waxey mar labaad noqonayaan deymo muddo leh, sida waafaqsan axkaamta qodobka 260.

2. Kaaliyaha Maxkamadda waa inuu xafiis ahaan ugu dhigaa xukunka dhammeynaya xaaladda awood la'aanta bixinta deynta geeska qoraalka lagu xusay qodobka 250. Xusuusintaas waa in la sameeyaa isla maalinta xukunka lagu dhawaaqay, nuqul xukunkaas ka mid ahna waa in loo diraa Kaaliyaha Maxkamadda Rafcaanka, si asagana u sameeyo xusuusin taa la mid ah.

Qodobka 259aad

Xaaladda awood la'aanta bixinta deynta waxey si buuxda ugu dhammaaneysaa 5 sano kaddib maalinta la sameeyey xusuusinta xukunka caddeynaya xaaladda awood la'aanta bixinta deynta.

Qodobka 260aad

Deynqabaha, marka ay dhammaato xaaladda awood la'aanta bixinta deynta wuxuu warsan karaa in deymaha bislaaday, kaddib marka la caddeeyey xaaladda awood la'aanta bixinta deynta aanan la bixin in ay noqdaan muddadoodii hore. waxaase shardi ah in uu bixiyey dhammaan deymaha waqtigoodu dhacay.

Qoobka 261aad

Dhammaadka xaaladda awood la'aanta bixinta deynta, ha lagu caddeeyo xukun ama sharci ahaan, ka reebi meyso deynleyaasha in ay duraan tasarufaadka deynqabaha ama isaga isu beddelaan ku isticmaalka xuquuqdiisa sida waafaqsan qodobbada 232 ilaa 240.

*BAABKA III*

*HABKA WAAJIBKA*

*MADAXA I*

*SHURUUDO IYO MUDDOOYIN*

*QEYBTA I*

*SHURUUDO*

Qodobka 262aad

Waajibka waa mid shardiyeeysan haddii jirritaankiisa ama dhammaadkiisa ku xeran yahay wax dhici doono oo aan la hubin.

Qodobka 263aad

1. Waajibka ma jiro, haddii shardiga jirritaankiisa lagu xeray uu yahay mid aan suurtoobeenin ka soo horjeedka anshaxa wanaagsan ama nidaamka guud, intaasi waa haddii shardigu yahay mid laalan (sospensiva). Haddii shardigu yahay mid saameynaya jiritaanka waajibka, waxaa loo qaadanayaa in shardiga keligiisa uu yahay mid aan jirin.



2. Hase yeeshee, waajibka lagu xiray shardi saameynaya dhammaadka waajibka, kana soo horjeeda anshaxa wanaagsan ama nidaamka guud, waa wax kama jiraan, haddii shardigu uu yahay sababta keentay waajibka.

Qodobka 264aad

Waajib waa wax kama jiraan haddii lagu xiro shardi joojinaaya ee ku xiraya jiritaanka waajibka keli ahaan rabidda waajibku saaran yahay.

Qodobka 265aad

Hadii waajibku ku xeran yahay shardi laalan, waajibkaas ma laha fulitaan ilaa iyo inta shadigaas laga helo. Shardiga inta aan la helin ka hor, waajibka noqonmaayo mid la fulin karo khasab ha ahaato ama mid la isla ogol yaay. Hase yeeshee deynlaha waa u bannaan tahay inuu ku kaco tillaabooyin dhowris ah si uu u ilaaliyo xaqiisa.

Qodobka 266aad

1. Waajibka wuu dhacayaa haddii shardiga saameynaya jirirtaakiisa uu xaqiiqoowo. Deynlaha waxaa waajib ku ah inuu celiyo wixii uu qaatay, iyo haddii celintu tahay mid aan suurta geleynin sabab aan la saari karin darteed, waxaa waajib ku ah magdhowga dhibaatooyinka.

2. Hase yeeshee, tassarufaadka ku saabsan maamulka ee uu qaatay deynlaha waxey lahaanayaan raadkooda, inkastoo uu shardiga xaqiiqoobay.

Qodobka 267aad

1. Xaqiiqoobidda shardiga waxey leedahay wax ka dhalasho dib u noqota kana billaabata maalintii uu waajibka dhashay haddii laga reebo mararka jiritaanka waajibka ama dhammaadkiisa. Ayna ka billaabmeyn waqtiga shardiga xaqiiqoobay iyadoo la tixgelinayo rabidda dhinacyada ama dabeecadda heshiiska.

2. Hase, yeeshee shardiga ma laha wax ka dhalasho dib u noqoneyso, haddii fulinta waajibka ay noqoto mid aan suurtagaleynin xaqiiqoobidda shardiga ka hor, kana timaada sabab ka baxsan rabidda deynqabaha.

QEYBTA II

*MUDDOOYIN*

Qodobka 268aad

1. Waajibka waa mid muddeysan, haddii bislaashadiisa ama dhiciddiisa ay ku xiran yihiin wax soo socda mustaqbalka ee la hubo.

2. Waxa soo socda waxaa loo qaadanayaa wax la hubo haddii ay tahay lagama maarmaan dhicidooda, xataa haddii aan la ogeyn waqtiga ay dhacayaan.

Qodobka 269aad

Haddii laga garanayo waajibka in deynqabuhu khasab ku tahay in uu waajibka guto marka ay u suurtowdo, awoodna u helo, Garsooraha ayaa goynaya ama qabanaya taariikhda dhicidda muddada, asagoo tixgelinaya dhaqaalahiisa markaas jira iyo kan mustaqbalka ee deynqabaha, kana dalbaya deynqabaha in uu la yimaado dadaalka qofka caadiga ah ee jecel in uu guto waajibkiisa si xilkasnnimo ku jirto.

Qodobka 270aad

Deynqabaha wey ka dhumeysaa ka faa'iideysiga muddada :

1. Haddii la caddeeyo in uu kacay ama uusan bixin karin deynta, sida waafaqsan axkaamta qeynuunka.

2. Haddii uu ku kaco fal aad u yareynaya lammaankii la siiyey deynleyaasha, xataa haddii lagu sameeyey tasaruf dambeeyey ama xeer ahaan ayadoo laga reebayo marka deynlaha uu doorto in uu warsado lammaan dhammeystir ah. Haddii is dhimidda lammaanka aan la dulsaari kari deynqabaha, way dhaceysaa muddada, ayadoo laga reebayo marka deynqabaha uusan keenin lammaan ku filan.

3. Haddii uusan siinin deynlaha lammaanadyadii uu ku ballan qaaday heeshiiska dhexdiisa.



Qodobka 271aad

1. Waajibka lagu xiray muddo laalan wuxuu bislaanayaa marka ay dhacdo muddadaas, waxaase deynlaha u bannaan xataa dhicidda muddada ka hor in uu qaado tillaabooyin uu ku dhawrayo xuquudiisa Gaar ahaan wuxuu warsan karaa lamaan haddii uu qabo cabsi sal leh in deynqabaha la caddeynkaro inuu masallafay ama uusan bixin karin deynta.

2. Dhicidda muddada waxay keeneysaa dhicidda waajibka, iyadoo dhiciddaas eyna lahaaneyn wax ka dhalasho dibu- noqota.

Qdobka 272aad

Waajibka waa mid la beddeli karo haddii sheyga la gudanayo uu badan yahay, deynqabahana wuxuu ku beri noqonayaa si buuxda marka uu bixiyo shey'aalkaasi midkood. Doorashada waxaa iska leh deynqabaha haddii uu jiro qaanuun ama heshiis sida khilaafsan mooyee.

Qodobk 273aad

1. Haddii doorashada uu iska leeyahay deynqabaha, kana reebtoomo isticmaalkeeda, ama addii deynqabayaalka badan yihiin kuna heshiinin doorashada, deynlaha waxaa u bannaan in uu ka dalbo garsooraha in uu qabto muddo taasoo gudaeeda deyn qabaha ku sameynayo doorashadiisa ama deynqabayaalka kala geddisan ay ku heshiinayaan; haddii sidaas la waayana, Garsooraha laftiisa ayaa goynaya sheyga uu ku saabsan yahay waajibka.

2. Haddii doorashada uu iska leeyahay deynlaha kana reebtoomo isticmaalkeeda, ama haddii deynleyaashu badan yihiin, kuna heshiin doorashada, Garsooraha asagoo cuskanayo dalabka deynqabaha ayuu qabanayaa muddo marka muddadaas dhammaatana, doorashada waxey u gudbeysaa deynqabaha.

Qodobka 274aad

Haddii doorashada uu leeyahay deynqabaha, wixii la gudan lahaa ee badnaa ee waajibka ku dhisnaa midkoodna aan la fulin karin, deynqabaha waxaa waajib ku ah inuu bixiyo qiimaha sheyga u dambeeya ee la gudan lahaa kaasoo fulintiisa noqotay mid aan suurta galeyn; waxaase shardi ah in asaga mas'uul ka yahay suura gelin la'aantaasi ugu yaraan gudashayaalka midkood.

QAYBTA III

*WAAJIBKA IKHTIYAARIGA AH*

Qodobka 275aad

1. Waajibka waa ikhtiyaari haddii sheyga la gudanayo uu yahay hal, laakinse deynqabaha uu u beri noqonayo haddii uu bixiyo shey geddisan.

2. Sheyga uu ku saabsan yahay waajibka oo ay xadideyso dabiicadda waa kan gudashadiisa la muteystay ee ma aha midka fulintiisa beri ka dhigayo deynqabaha.

*MADAXA III*

BADNAANTA DADKA UU

WAAJIBKA SAARAN YAHAY

*QAYBTA I*

ISBAHAYSIGA DEYNLEYAASHA

AMA DEYNQABAYAALKA

Qodobka 276aad

Isbaheysiga ka dhexeeya deynleyaasha ama deynqabayaalka ma ahan mid ku dhisan malo; ee waxaa goynayo sharciga ama heshiis gaar ah.

Qodobka 277aad

1. Haddii isbahaysigu ka dhexeeyo deynleyaalka, deynqabuhu wuxuu u gudan karaa deynta mid ak mid ah deynlayaasha, marka deynleyaalka midkood uu is-hortaago bixintaasi mooyee.



2. Hase yeeshee isbaheysigu ma reebayo in deynta loo qaybiyo dhaxaltooyada deynlaha isbahaystay haddii laga reebo marka deyntu tahay mid aan qaybsameyn.

Qodobka 278aad

1. Deynleyaasha isbahaystey waxaa u bannaan in ay isku mar ama keli keli dacwad ku oogaan deynqabaha. Hase yeeshee waxaa loo tixgelinayaa habka xiriirka mid mid ahaan.

2. Haddii dacwadda helitaanka bixinta deynta uu oogo mid ka mid ah deynleyaasha ee isbahaystay, deynqabaha isma hortaagi karo deynleyaashaas, waxyaabaha shakhsiga ah (eccezione personali) ee looga hor istaagi karo deynleyaasha kale, Waxaase u bannaan in uu ishortaago waxyaabaha shakhsiga ah deynlaha dacwadda oogay iyo waxyaabaha ay u dhan yihiin deynleyaasha oo dhan.

Qodobka 279aad

1. Haddii deynleyaasha isbaheystay midkood uu u dhaafay deynta deynqabaha sabab ka geddisan bixinta awgeed, waxaa laga dhaafayaa xagga deynleyaasha kale keli ahaan ilaa inta ay la egtahay qaybta uu ku leeyahay deynlaha wax dhaafay.

2. Uma bannaana mid ka mid ah deynleyaasha isbaheystay in uu ku kaco fal gaarsiinaya dhibaato deynleyaasha kale.

Qodobka 280aad

1. Qaybta deynta ee uu helo deynle ka mid ah deynleyaasha isbaheystay waxay ka dheyeysaa deynleyaasha oo dhan waana loo qaybinayaa.

2. Qaybinta waxay ku imaaneysaa qaybo isla eg, haddii uusan jirin heshiis ama xeer sidaa khilaafsan.

Qodobka 281aad

Bixinta uu sameeyo mid ka mid ah deynqabayaasha isbaheystey waxay inta kale ka xoreyneysaa bixinta.

Qodobka 282aad

1. Deynlaha wuu dacweyn karaa dhammaan deynqabayaasha is-lammaanay isku mar ama mid mid. Hase yeeshee waxaa la tixgelinayaa habka xiriirada ay u leeyihiin mid mid ahaan.

2. Deynqabaha lagu oogay dacwad si looga helo bixinta iskuma hortaagi karo deynlaha waxyaabaha (eccezioni) shakhsiga ah ee deynqabayaalka kale u gaarka ah laakiinse wuxuu uga hortagi karaa waxyaabaha shakhsiga ee asaga u gaarka ah ama kuwa ay wadaagaan deynqabayaalka oo dhan.

Qodobka 283aad

Cusbooneysiinta deynta (Novazione) ee dhexmarta deynlaha iyo mid ka mid ah deynqabeyaalka isbahaystay waxay keeneysaa xoreynta deynqabeyaalka kale, ayadoo laga reebayo marka deynluhu ceshado xaqa dacweynta deynqabeyaalka.

Qodobka 284aad

Deyunqabaha is hortaag wuxuu ku sameyn karaa isku gudid deyn uu deynluhu ku leeyahay deynqabe kale, kali ahaan ilaa iyo inta deyntiisa ay la egtahay.

Qodobka 285aad

Haddii isla qofka la helo sifadda deynle iyo deynqabe isbaheystay. Waajibka deynqabeyaalka kale wuu baa'ba' ayaa ilaa iyo inta ay la egtahay qaybta deynta deynqabaha (condebitore).

Qodobka 286aad

1. Kamasaabixidda deynta ee loo oggol yahay in deynluhu uu u sameeyo deynqabe ka mid ah deynqabeyaalka isbahaysatay xoreynmeyso deynqabeyaalka kale, haddii ay jirto



caddeyn oo uu sameeyey deynluhu mooyee.

2. Haddii eysan jirin caddeyntaasi deynluhu kuma dacweyn karo deynqabeyaalka kale haddii horta aan laga jarin qaybta deynqabaha la xoreeyey, ayado laga reebayo marka deynluhu ceshado xaqa ku dacweynta deynqabeyaalka deynta oo dhan. Xaaladdaasi, deynqabeyaalka waxaa u bannaan in ay ka soo ceshadaan deynqabaha la xoxeeyey qaybta deynta laga xoreeyey.

Qodobka 287aad

Haddii deynluhu oggolaado in uu ka masaamaxo ka wada ahaan mas'uul taasoo ugu ixsaan falayo mid ka mid ah deynqabeyaalka, xaqiisa ah in uu dacweeyo deynbeyaalka kale, si uu u helo bixinta oo dhan ee deynta, Wuu jiraa haddii heshiis sidaa khilaafsan jirin.

Qodobka 288aad

1. Dammaan xaaladaha ka dhaafidda, ha ahaato muddo ku saabsan deynta ama midda ku saabsan isbahaysiga. deynlayaasha kale waxaa u bannaan deynqabaha loo dhaafay deynta inay ka soo ceshadaan qaybta deynqabayaasha aan daynta bixin karin sida waafaqsan qodobka 295.

2. Hase yeeshee haddii deynluhu ka xoreeyo deynqabaha uu ka masaamaxay waajib kasta, qaybta deynqabaha ee dhinacyada deynta aan bixin karin waxaa bixinaya deynlaha.

Qodobka 289aad

1.) Haddii deynta uu qabo deynqabe ka mid ah deynqabayaal isbahaystay ay ku dhacdo gubasho darteed, gubashadaasi kama faa'iideysanayaan deynqabe yaalka kale ilaa qaybta deynqabahaas maahee.

2. Haddii gubashada kala go'do ama joogsato dhanka ku saabsn deynqabe ka mid ah deynqabeyaalka isbaheystay, deynlaha kuma doodi karo kala go'idda ama joojinta xagga deynqabeyaalka kale.

Qodobka 290aad

1. Deynqabaha Mas'uuliyad wadaagaha ah markuu gudanaayo waajibka wuxuu ka jawaabayaa falkiisa keli ahaan.

2. Digniinta la daahidda ee lagu sameeyay daynqabe ka mid ah deynqabayaasha isbahaystay ama dacwadda lagu oogay midkooda raad uma yeelanayso deynqabayaasha kale. Laalin haddii daynqabe ka mid ah deynqabayaasha uu u digo deynlaha, digniintaas oo la daahidda ah way ka faa'iidaysanaayaan deynqabayaasha kale.

Qodobka 291aad

Heshiika sulaxeed ee uu la sameeyo deynlaha deynqabe ka mid ah deynqabayaalka isbaheystay, waxaa ka faa'iideysanaya dhamaan deynqabeyaalka kale, haddii uu yahay ka masaamixidda deynta ama ka xoreynta deynta, si kastaba ha ahaatee, laakinse heshiiskaasi sulaxeed kama dhalan karo waajib lid ku ah deynqabeyaalka, mana cusleyn karo kii horey u saarnaa ayagoo raali ka noqdo mooyee.

Qodobka 292aad

1. Qiraalka deynta ee uu sameeyey deynqabe ka mid ah deynqabeyaalka isbaheystay wax u keeni maayo deynqabeyaalka kale.

2. Haddii dyeqnabe ka mid ah deynqabeyaalka isbaheystay uu diido in uu guto dharta loo celiyey, ama asaga uu u jeediyo dhaarta deynlaha kaasna uu dhaarto, dhaartii la diiday ama la gutay waxba u dhimi meysi deynqabeyaalka kale.

3. Haddii deynluhu uu u jeediyo dhaarta keli ahaan deynqabe ka mid ah deynqabeyaalka isbaheystay. kaasna uu dhaarto. Dhaartaas waxay waxtar u leedahay deynqabeyaalka kale.

Qodobka 293aad

1. Xukunka lagu soo saaray deynqabe ka mid ah deynqabeyaalka isbaheystay ma jiraan wax ka dhalanayo ee lid ku ah deynqabeyaalka kale.



2. Haddii xukunka lagu dhawaaqay uu u roon yahay mid ka mid ah ayaga, kuwa kalena wey ka faa'iideysanayaan, ayadoo laga reebayo mararka uu xukunku ku dhisan yahay sabab shakhsi ah ee u gaar ah deynqabaha maslaxadiisa loo soo saaray xukunkaas.

Qodobka 294aad

1. Haddii deynqabe ka mid ah deynqabeyaalka isbeheysatay uu bixiyo deyntii oo dhan wuxuu ka soo ceshan karaa mid kasta oo ayaga ka mid qeybtiisii oo keli ah, xataa marka uu ku isticmaalo xaqa oogidda dacwadda ee uu lahaa deynlaha.

2. Deynta la bixiyey waxaa loogu qeybinayaa si siman deynqebeyaalka, haddii ay jiraan heshiis ama sharci sidaas khilaafsan mooyee.

Qodobka 295aad

Haddii deynqabeyaalka isbaheystay midkood uusan bixin karin deynta, khasaarada waxaa loo qeybinayaa qeyb ahaan deynqabaha bixiyey deynta iyo deynqabeyaalka kale ee deynta iska bixin karo.

Qodobka 296aad

Haddii deynqabe keli ah ee ka mid ah deynqabeyaalka isbaheystay uu dan ku leeyahay deynta, deynqabahaas ayaa xambaaranaya bixinta deynta oo dhan xagga deynqabeyaalka kale.

QEYBTA II

*QEYBSAMI LA'AANTA*

Qodobka 297aad

1. Waajibka waa mid aan qeybsameyn :

b. Haddii dulucdiisa ku saabsan tahay shey dabeecadiisu aqbaleynin qeybin.

t. Haddii qasadka ay dhinacyada doonayaan in ay gaaraan ka caddahay in gudashada waajibka aan la qeybin, ama haddii dhinacaydu niyadoodu sidaa tahay.

Qodobka 298aad

1. Haddii waajibku uusan qeybsameyn deynqabe kasta waxaa waajib ku ah gudasahada waajibka oo dhan.

2. Deynqabaha sameeyey bixinta waxaa u bannaan in uu ka soo ceshado deynqabeyaalka mid kastaba qeybtiisa, sidaa si ka soo horjeedo in ay ka caddaato duruufta mooyee.

Qodobka 299aad

1. Haddii ay jiraan deynleyaal badan ama dhaxaltooyo badan ee deynlaha laftiisa, mid kasta ee deynleyaalka ka mid ah ama ka mid ah dhaxaltooyada wuxuu warsan karaa gudashada dhammaan waajibka aan qeybsameyn. Haddii mid ayaga ka mid ah uu ishortaago bixinta, deynqabaha waa in gudashada u sameeyaa si u roon dhammaan deynleyaasha oo uruursan ama uu dhiibo sheyga waajibka ku saabsan yahay.

2. Deynleyaasha waajibka aan qeybsameynin, waxay ka soo ceshan karaan mid kasta qeybtiisa deynlaha deynta loo guday.

BAABKA IV

*WAREEJINTA WAAJIBKA*

MADAXA I

*WAREEJINTA XAQA*

Qodobka 300aad

Waxaa u bannaan deynlaha inuu ku wareejiyo xaqiisa qof saddexaad haddii xaqaasi uusan aqbalin wareejin taasoo ka timid xeerka amaba heshiiska dhinacyadda amaba dabeecadda waajibka, wey dhan tahay wareejintu iyadoo aan loo baahneyn in deynqabuhu raalli yahay.

Qodobka 301aad

Ma ay bannaana wareejinta xaqa inta ogol qabasho mooyee.

Qodobka 302aad

Wareejinta looguma is hortaagi karo deynqabaha ama dadka saddexaad, haddii uusan oggolaan deynlaha ama aan la gaarsiin. Hase yeeshee oggolaashaha deynqabaha si uu ugu fulo qof saddexaad waa in oggolaashadaasi lahaataa taariikh sugan.

Qodobka 303aad

Waxaa bannaan inta aan la ogeysiinin wareejinta amaba aan la oggolaanin in deynlaha loo wareejiyey xaqa in uu qaato tillaabooyinka dhowra xaqa isaga u soo wareegay.

Qodobka 304aad

Wareejinta amaahda waxay kulmineysaa lamaanadiisa ee ah lammaanka iyo xaqa hor marinta iyo rahanka, sidoo kale waxaa ka mid ah dulsaaradda amaba qeybaha lacageed ee dhacay.

Qodobka 305aad

1. Haddii wareejintu mid wax isdhaafsi ah kan wareejiyaha wuxuu lammaan oo qur ah jiridda xaqa la wareejiyey waqtiga wareejinta haddii uusan jirin heshii sidaas ka duwan.

2. Haddiise wareejintu tahay siismo wareejiyaha lammaani maayo xataa jiridda waqa.

Qodobka 306aad

1. Wareejyuhu lammaani maayo awoodda bixinta ee deynqabaha haddii uusan jirin heshiis u gaar ah lammaanidiisa

2. Haddii wareejiyuhu uu lammaanto awoodda bixinta ee deynqabaha, lammaaniddaasi saameyn meyso awoodda bixinta ee deynqabaha waqtiga wareejinta xaqa haddii uusan jirin heshiis sidaas ka duwan.

Qodobka 307aad

Marka wareejiyuhu xambaarsado lammaanadda awoodda bixinta ee deynqabaha si waafaqsan labada qodob ee hore, deynlaha wuxuu mas'uul ka yahay oo keli ah wuxuu helay oo ay la jiraan dulsaaradda iyo kharajka, inkasta oo uu jiro heshiis sidaas khilaafsan.

Qodobka 308aad

Kan wareejiyey wuxuu mas'uul ka yahay falkiisa qof ahaaneed xataa marka wareejintu tahay siismo amaba la sameeyey lammaanad la'aan.

Qodobka 309aad

Deynqabaha la wareejiyey wuxuu leeyahay in uu ku isticmaalo xagga kan loo wareejiyey ishortaagyadii uu lahaa deynlaha asalka ah in uu ku isticmaalo xagga kan wareejiyey waqtiga wareejinta ay ku fushay xaqiisa, sidoo kale waxaa u bannaan in uu ku isticmaalo is hortaagyadda ka dhasha heshiiska wareejinta.

Qodobka 310aad

Xaaladaha ey jiraan wareejin badan ee iska horimaanaya kuna lug hel hal xaq waxaa la dooranayaa wareejinta ku fushay dad seddexaad ka hor kuwa kale.

Qodbka 311aad

1. Xaaladda qabashada ee lagu sameeyey deynqabaha la wareejiyey ka hor inta wareejinta eyna ku fulin dad seddexaad wareejinta waxaa loo qaadanayaa qabasho labaad xagga qofka wax loo qabtay.



2. Markani haddii uu dhaco qabasho kale marki ay noqotay wareejinta ku fusha qof saddexaad kaddib, deynka waxaa loo qeybinayaa si siman kan horta loo qabtay iyo kan loo wareejiyey iyo kan sameeyey qabashadda labaad. lacagta lagama maarmaanka ah si loo dhammeystiro lacagta la wareejiyey ee uu leeyahay loo wareejiyaha waxaa laga jarayaa qeybta qofka sameeyey qabashada labaad.

## MADAXA II

## WAREEJINTA DEYNTA

Qodobka 312aad

Wareejinta deyntu waxey ku dhantahay heshiis dhexmara deynqabaha iyo qof sexddexaad ee deynta xaqiisa ka xambaarsaddo.

Qodobka 313aad

1. Wareejinta deynta looguma is hortaaggi karo deynlaha, haddii uu igolaado kaddib mooyee.

2. Haddii xaaladda loo wareejiyaha amaba deynqabaha asalka ah ay gaarsiiyaan wareejinta deynlaha, iyagoo siinaya waqti suurtagal ah si uu u oggolaado, wareejintaasi waxaa looqaadanayaa mid la diiday haddii deynluhu uusan caddeyn oggolaashihiisa ka hor inta uusan dhicin waqtiga.

Qodobka 314aad

1. Ilaa iyo inta deynluhu uusan caddeynin oggolaanshihiisa amaba diidmadiisa, loo wareejiyaha waxaa khasab ku ah xagga deynqabaha asalka ah inuu u gudo deynta deynlaha waqtiga ku habboon, haddiise eysan jirin heshiis sidaas ka duwan.

2. Hase yeeshe uma ay bannaaa deynqabaha asalka ah in uu ka dalbo kan korkiisa lagu wareejiyey in uu deynlaha u gudo maadaama uusan gudanin waajibka ka saarnaa xagga loo wareejiyaha si waafaqsan heshiiska wareejinta.

Qodobka 315aad

1. Deynka la wareejiyey waxaa la wareegaya dhammaan dammaanaddeeda.

2. Hase yeeshe qofka bixiyey lammaanadda ha ahaato mid ku saabsan ceynta ama mid ah qof ahaaneed, wuu ku qasban yahay lammaanaddaas xagga deynlaha keli ahaan marka uu oggolaaday wareejinta.

Qodobka 316aad

Deynqabaha asalka ah wuxuu lamaanaa awoodda bixinta loo wareejiyaha waqtiga uu daynlaha ogolaaday wareejinta haddii aan lagu heshiin sidaas wax ka duwan.

Qodobka 317aad

Loo wareejiyaha wuxuu leeyahay in uu ku isticmaalo xagga deynlaha is hortaagyadda uu lahaa deynqabaha asalka ah iyo kuwa ka dhasha heshiiska wareejinta.

Qodobka 318aad

1. Wareejinta deynta waxey ku imaan kartaa heshiis dhexmara deynlaha iyo loo-wareejiyaha isagoo kan dambe beddelaaya xagga waajibaadka deynqabaha asalka ah.

2. Xaaladdaan waxaa lagu dabaqayaa axkaamta qodobadda 315 iyo 317.

Qdobka 319aad

1. Gadida maguurtadda rahman keeni mayso u wareejinta deynka rahman qofka iibsaday maguurtadaasi, haddii uusan jirin heshiis sidaas ka duwan.

2. Haddii ay ku heshiiyeen kan wax gatay iyo kan iibsadeyba wareejinta deynka ee heshiiska beecane la diiwaan geliyey, waxaa ku qasban kan deynlaha ah haddii si rasmi ah loo ogeysiiyey wareejinta in uu oggolaado amaba uu diido muddo aan dhaafsaneyn lix bilood. haddii mudadu dhammaato asagoo aan ra'yi goosanin, aamuskiisa waxaa lagu tirinayaa oggolaasho,



# BAABKA V

# DHICIDDA WAAJIBAADKA

## MADAXA I

## GUDASHADA

### QEYBTA I

### DHINACYADDA GUDASHADA

Qodobka 320aad

1. Waajibka waxaa gudan kara deynqabaha. wakiilkiisa ama qof kasta ee maslaxad ku leh gudida. iyadoo la dhowrayo axkaamta qodobka 205.

2. Iyadoo la dhowrayo isla axkaamtaas gudida waxey ka ansaxdaa qof aan maslaxad ku lahayn, gudidda xataa haddii uusan ogeyn deynqabaha amaba uusan dooneynin, hase yeeshee waxaa u bannaan deynlaha in uu diido gudid qof saddexaad haddii deynqabuhu is hortaagay gudidaas uuna gaarsiiyey deynlaha is hortaaggiisa.

Qodobka 321aad

1. Qof seddexaal haddii uu guddo waajibka, wuxuu xaq u leeyahay in uu ugu noqdo deynqabaha inta uu bixiyey.

2. Hase yeeshee waxaa u bannaan deynqabaha ee laga bixiyey deynta doonis la'aantiisa in uu diido u celinta qofka bixiyey wixii uu bixiyey oo dhan ama qaarkood haddii uu caddeeyo deynqabaha in maslaxad ugu sugan tahay is hortaagidda bixinta.

Qodobka 322aad

1. Gudidda ansixideeda waxaa shardi u ah in guduhu yahay mid leh sheyga uu ku guday iyo in uu leeyahay awood maamuleed.

2. Hase yeeshe bixinta sheyga la muteystay ee uu sameeyey qof aan lahayn awood maamuleed wey rideysaa waajibka, haddii gudidu eynaan gaarsiinin dhib qofka bixiyey.

Qodobka 323aad

Haddii bixintu ka timaado qof seddexaad, kani wuxuu gelayaa halkii deynlaha la raaligeliyey, xaaladaha soo socda:

b. Haddii guduhu iyo deynqabaha waajib ku ahayd gudida amaba guduhu uu saarnaa waajibka gudida.

t. haddii guduhu laftiisa yahay deynle ee u guduna deynle kale oo ka leh xaqa horumarinta lammaan ceyn ah awoodeed xataa marka kan guday uusan lahayn wax lammaan ah.

j. haddii guduhu iibsaday maguurto ee qiimahiisina dhiibay si uu ugu gudo deynlayaal xuquuqdooda ku lammaaneed maguurtadaasi.

x. Haddii uu jiro qodob gaar ah ee xeereed oo siinaya gudaha xaqa gelidda meesha deynlaha.

Qodobka 324aad

Deynlaha aqoonsada bixinta uu sammeeyey qof saddexaad heshiinta uu la sammeeyey kan dambe awgeed inuu galo meeshiisa xagga xuquuqdiisa xataa haddii uusan oggolaan deynqabaha. Heshiiskaas dhammayntiisa ma bannaana in ay ka dib marto waqtiga gudida.

Qodobka 325aad

Haddii deynqabaha amaahsado qadar lacag si uu u bixiyo deynta, waxaa u bannaan in uu geliyo amaahiyaha meeshii deynlaha helay bixinta, xataa haddii uusan oggoleyn, waxaase shardi ah in qoraalka amaahda lagu tilmaamo in lacagta amaahda loogu tala galay bixinta deynta iyo in rasiidka lagu xuso in bixinta lagu sameeyey lacagtii laga helay deynlaha cusub.

Qodobka 326aad

Qof saddexaad xeer ahaan amaba heshiis ahaan degay meeshii deynlaha wuxuu leeyahay xaqiisii ilaa iyo inta ay la egtahay lacagta uu bixiyey ay la socoto waxyaabihii la xiriiray lammaanadyadii iyo ishortaagyadii ku saabsanaa xaga deynta.



Qodobka 327aad

1. Qofka saddexaad haldii uu u gudo deynlaha qaar ka mid ah xaqiisa, isla markaasne uu galo meshiisa, bixintaasi wax u dhibimeyso deynlaha, kaas oo ku isticmaali karo xuquuqdiisa inta weli u hartay asagoo laga hormarinayo dadka saddexaad.

2. Haddii qof saddexaad oo kale galo meeshii deynlaha wixii u haray ee xaqiisa ah qofka labaad ee soo galay wuxuu la wadaagaa kii hore qeybo la'eg mid kastaba deyntiisa.

Qodobka 328aad

Qofka saddexaad ee haystaha ah ee bixiya dhammaan deynta rahman galana meesha deynlayaalka, uma bannaana gelitaankaas dartiisa in uu dacweeyo qof saddexaad ee haysta maguurto kale ee u rahman isla deynta inta ay la'eg tahay qeybta deynta marka loo eego qiimaha maguurtadda ee uu haysto mooyee.

Qodobka 329aad

Bixinta waxaa sameynaya deynlaha ama wakiilkiisa, waxaa xaq u leh helidda bixinta qofkii u keena deynqabaha rasiid ka soo baxay deynlaha. Haddii aan lagu heshiinin in gudidu loo sameeyo deynlaha qof ahaantiisa.

Qodobka 330aad

Bixinta loo sameeyey qof ka duwan deynlaha ama wakiilkiisa, kama xoreyneyso deynqabaha deynta, haddii deynluhu uusan oggolaanin amase uusan ka faa'iideysan ilaa iyo inta ay la'eg tahay ama haddii bixinta lagu sameeyey si niyad-sami, loona sameeyey qof haysta qoraal deyneyd (titolo di credito).

Qodobka 331aad

Haddii deynluhu diido sabab la'aan in uu aqbalo gudida loo bandhigay, si sax ah amaba uu diido in uu ku kaco hawlo gudidu eynan dhici karin la'aanteeda amaba uu caddeeyey in-uusan oggolaaneynin gudida, waxaa lagu tirinayaa mid loo di-gay laga billaabo waqtiga diididiisa uu gaarsiiyey deynqabaha si sharci ah.

Qodobka 332aad

Haddii deynlaha loo sameeyo digniinta aqbalidda deyn-ta, wuxuu xambaarsadaa sheygii halaabidiisa ama lumidiisa, weyna istaagtaa dulsaaradii ku socotay deynta, deynqabuhu wuxuu xaq u leeyahay in sheygii ku xafido deynlaha xisaab-tiisa iyo in uu weydiisto magdhabid wixii soo gaaray ee dhib ah.

Qodobka 333aad

Haddii waxa la gudaayo uu yahay shey la hubo, waajib-na uu yahay in lagu dhiibo meesha uu yaalo, waxaa u ban-naan deynqabaha marka deynluhu u digay sheyga kaddib in uu ka helo garsoorka ruqsad sheyga xafidiidiisa ah.

Haddii sheygu uu yahay maguurto amaba shey loogu tala-galay in uu yaal halka laga helo, waxaa u bannaan deyn-qabaha in uu weydiisto sheygaas in la xajiyo.

Qodobka 334aad

1. Garsoorka ruqsadiisa kaddib waxaa u bannaan deynqabaha in uu ku gado naado ahaan waxyaalaha si dhaq-sa ah u halaaba amaba xafididooda iyo ilaalintooda ay kee-neyso masaariif badan iyo in uu dhigo qiimahooda khasnad-da Maxkamadda.

2. Haddii alaabtu leedahay sicir suuqeed amaba sah-miyeyaal leh sicir; ma ay bannaana in lagu gado naado. had-dii ay suurtowdo in lagu gado sicir caadi ah mooyee.

Qodobka 335aad

Sidoo kale waa bannaan tahay in la xafido ama la qaado tillaabo la mid ah, haddii deynqabaha uu jaahil ka yahay qofka ama degnaanshaha deynlaha, haddii deynlaha uu waa-



yo awoodda dhammaan ama qaar ahaan, uusana lahayn wa-kiil u aqbala bixinta, haddii xaqa dad badan ay ku doodayaan ama haddii ay jiraan sababo dhab ah ee keenaya tillaabadaas.

Qodobka 336aad

Bandhigida dhabta ah waxey la mid tahay gudida, had-dii loo fiiriyo xagga deynqabaha ayna raacdo xafidid waafaq-san Xeerka Habka Madaniga amaba uu raaco tillaabo kale ee la mid ah, waxaase shardi ah in uu oggolaado deynlaha amaba lagu aqoonsado xukun dhammaad ah.

Qodobka 337aad

1. Haddii deynqabuhu bandhigo gudida deynka uuna raacsiiyo bandhigida xafidid iyo tillaabo la mid ah, waxaa u bannaan deynqabaha in uu ka noqdo bandhigidda maadaama deynluhu uusan aqbalin amaba maadaama uusan soo bixin xukun dhammaad ah ee caddeeyey ansixidiisa. Haddii uu ka noqdo ma xuroobaan kuwa deynka la wadaagsada qaantooda ama kuwa lammaanay qaantooda.

2. Deynqabaha sameeyey bandhig oo ay la socoto xa-fidaad ama tillaabo kale oo la mid ah, waxaa u bannaan inuu ka noqdo ilaa iyo inta deynluhu uusan oggolaan ama ilaa iyo inta uusan soo bixin xukun ansixiyey ee leh xoogagga fuli-taanka, xaaladdaasi deynqabayaalka kale iyo lammaanayaal-ka ma xuroobaayaan.

QEYBTA II

*SHEYGA LA GUDAAYO*

Qodobka 338aad

Gudida waxaa weeye fulinta sheyga la muteystay, lagu-ma qasbayo deynlaha in uu aqbalo xataa haddii uu yahay mid qiimahiisa la siman yahay ama ka sareeya.

Qodobka 339aad

1. Uma ay bannaana deynqabaha in uu ku qasbo dey-

nlaha in uu oggolaado gudid qaareed, haddii uusan jirin heshiis amaba qodob xeereed oo sidaa ka duwan.

2. Haddii deynku yahay mid lagu doodsan yahay qaarkiisa deynluhuna uu aqbalo in uu gudsado qaarka la oggol yahay uma ay bannaana deynqabaha in uu diido gudida qaarkaas.

Qodobka 340aad

Deynqabuhu haddii ay laasim ku tahay in uu la bixiyo deynta asalka ah masaariif iyo dulsaaro, wixii uu bixiyeyna ku filneyn deynta oo dhan iyo wixii raaca waxaa laga jaraa horta wuxuubixiyey masaariifta kaddibna dulsaarada kaddibna deynka asalka ah, intaas oo dhan waa haddii aan lagu heshiin wax ka duwan sidaas.

Qodobka 341aad

Haddii deynqabuhu isla deynlaha uu ka qabo deymo badan oo isku nooc ah wuxuu bixiyeyna ku filneyn deymaha oo dhan, waxaa u bannaan deynqabaha in uu magacaabo marka uu sameynaayo bixinta deynta uu ula jeedo bixintaas haddii magacaabiddaasi ka soo horjeedin xukun xeereed amaba heshiis gaar ahaaneed.

Qodobka 342aad

Haddii la waayo heshiis amaba xukunka lagu xusay qodobka hore bixinta waxaa loo qaadanayaa in ay ku saabsan tahay deynta dhacday amaba haddii ay badan yihiin deymaha dhacay waxaa loola jeedaa deynka u dhib badan deynqabaha ama ugu dembeystii deynta uu magacaabay deynlaha marka dhibkoodu siman yahay.

Qodobka 343aad

1. Waxaa waajib ah in gudiddu dhacdo degdeg maralla marka waajibku ku dhashay si dhammaad ah deynqabaha hantidiisa haddii uusan jirin heshiis amaba qodob xeereed oo sidaa ka duwan.



2. Hase yeeshee Garsooraha waxaa u bannaan marar gaar ah, haddii ayna jirin qodobo xeereed in uu siiyo deynqabaha. Haddii xaaladiisu keeneyso muddo macquul ah si uu u guto waajibkiisa waxaase shardi ah in ayna taasi u keenin dhibaato culus deynlaha.

Qodobka 344aad

1. Haddii sheyga waajibka ku saabsan yahay la hubo waxaa waajib ah in lagu dhiibo meesha uu yaal marka waajibka uu dhashay, haddii uusan jirin qodob xeereed ama heshiis sidaas ka duwan.

2. Waajibaadka kale gudidu waxey ku dhacdaa meesha uu degan yahay deynqabaha waqtiga gudida amaba meesha laga helo xarunta hawlaha deynqabaha haddii xilku ku lug leeyahay hawlahaasi.

Qodobka 345aad

Gudida masaariifteeda waxey saaran tahay deynqabaha, hadduusan jirin heshiis sidaas ka duwan.

Qodobka 346aad

1. Wuxuu leeyahay qofkii guday qaar ka mid ah deynta in uu weydiisto rasiid waxa uu guday iyadoo bixinta lagu tilmaamaayo qoraalka deynta, haddii uu gudo deynta dhammaanteed wuxuu leeyahay oo kale in uu weydiisto soo celinta qoraalka amaba baabi'intiisa, haddii qoraalku uu dhumay wuxuu leeyahay in uu ka weydiisto deynlaha caddeyn qoraal ah ee ka markhaati fureysa lumidda qoraalka.

2. Haddii deynluhu diido in uu ku kaco waxa ay ku waajibisey xubinta hore deynqabaha waxaa u bannaan in uu xifdiyo sheyga la mutey xifdin garsooreed.

MADAXA II

*HABABKA DHICIDDA WAAJIBKA EE LA MIDKA AH*

GUDIDDA

QEYBTA I

*BIXIN WAX U* **DHIGMA**

Qodobka 347aad

Haddii deynluhu oggolaado bixin ka duwan tii uu muteystay bixintaas waxey istaageysaa meesha gudida.

Qodobka 348aad

Axkaamta ku saabsan beeca gaar ahaan kuwa ku saabsan awoodda dhinacyadda, lammaanka lahaashadda iyo lammaanka ceybaha sheyga waxaa lagu dabaqayaa bixinta u dhiganta gudida inta ku saabsan wareejinta milkiyadda sheyga loo beddelka sheyga la muteystay axkaamta ku saabsan gudida gaar ahaan kuwa ku saabsan magacaabidda cidda loo dhiibaayo iyo dhicidda lammaanada waxa lagu dabaqayaa bixinta u dhiganta gudida inta tani ay rideyso deynta.

## QEYBTA II

## CUSBOONEYN IYO WAKIILASHADA

Qodobka 349aad

Cusbooneyntu waxey jirtaa :

1. Beddelaada deynta markii dhinacyadda ay ku heshiiyaan in waajibka asalka ah lagu beddelo mid cusub ee ka duwan xaga dulucda iyo sababta dhalisay (Oggetto o Titolo).

2. Marka deynlaha iyo qof saddexaad ay ku heshiin in qofka saddexaad uu galo meeshii deynqabaha asalka ah iyo in deynqabaha asalka ah laga xureeyo deynta xataa oggolaasho la'aantiisa amase marka deynqabaha uu oggoleysiiyo deynlaha qof saddexaad ee oggol deynqabe cusub ahaan.

3. Beddelaada deynlaha, haddii ay ku heshiiyaan deynlaha iyo deynqabaha iyo qof saddexaad in uu noqdo qofka saddexaad deynle cusub.

Qodobka 350aad

1. Cusbooneynta waxey raad leedahay oo keli ah, haddii waajibka asalka ah iyo kan cusub ayna lahayn sabab kasta ee keenta buritaan.

2. Haddii waajibka asalka uu ka dhasho heshiis la burin karo cusbooneyntu waxey raad leedahay oo keli ah, haddii waajib cusub loola qasdo in lagu oggolaado heshiiska iyo in lagu beddelo waajibka asalka ah.



Qodobka 351aad

1. Cusbooneyntu leys kama qadaro ee waxaa waajib ah in lagu heshiiyo cusbooneynta si cad amaba si cad loogala soo bixi karo duruufta.

2. Gaar ahaan haddii uusan jirin heshiis sidaas ka duwan cusbooneynta ama timaado sameynta qoraal deyneed ee hore u jirtay, kamana timaado beddelaada ku saabsan keli ahaan waqtiga, meesha amaba habka fulinta gudashada, kamana timaado beddelaada ku saabsan lammaanadyada ama sicirka dulsaarka.

Qodobka 352aad

1. Cusbooneyn ma aha keli ahaan ku dhigidda deynta xisaabta socota.

2. Wey jirtaa cusbooneyn haddii xisaabta la bixiyey, lana qiray, laakiin haddii deyntu tahay mid lammaan gaar ah leh, lammaanku waa taagnaadaa haddii aan lagu heshiin sida si ka duwan.

Qodobka 353aad

1. Cusbooneyta waxaa ka dhasha dhammaashada waajibka asalka ahi iyo wixii la xiriiray iyo in uu u ka dhasho halkiisii waajib cusub.

2. Waajibka cusub uma ay guurti lammaanada waajibka asalka ahi, haddii uu jiro qodob xeer ee sidaas si ka duwan goynaaya mooyee amaba doonista dhinacyada ayna ka caddeyn heshiis gaar ah ama duruufo.

Qodobka 354aad

Haddii deynqababaha uu bixiyo dammaanadyo ceyn ah ee ku saabsan waajibka asalka ah, dammaanad. yadaasi waxay u guurayaan waajibka cusub iyadoo la dhawrayo axkaamta soo socota:

b. Haddii cusbooneyntu tahay deynta beddelideeda waxaa u bannaan deynlaha iyo deynqabaha in ay ku heshiiyaan lammaanada u guurideeda waajibka cusub heerarka aan gaarrasiineyn dhib qof seddexaad.

t. Haddii cusbooneynta ay ku saabsan tahay beddelaada deynqabaha, deynlaha iyo deynqabaha cusub waxey ku heeshiin karaan in dammaanadyadii ceynta ahayd ay sidooda u jiraan. Xataa haddii uusan oggolaan deynqabaha asalka ah.

j. Haddii cusbooneynta ku saabsan tahay beddelaadda deynlaha, seddexda dhinac waxey ku heshiin karaan dammaanadda jiriddeeda.

2. Heshiiska ku saabsan guurinta lammaaada ceyniga ah ku fulimeyso qof seddexaad, haddii uu la dhacay cusbooneynta waqti keli ah mooyee. Waxaase shardi ah in la dhowro axkaamta diiwaangelinta.

Qodobka 355aad

Uma ay guurto waajibka cusub lammaanada ceynta ah amaba shaqsi ah sidoo kale uma uu guuro waajibka cusub isla lammaanidda in ey raalli ku yihiin sidaas lammaanayaasha iyo deynqabayaasha is-lammaantay mooyee.

Qodobka 356aad

1. Wakiilashadu waxey jirtaa markii uu deynqabaha oggolsiiyo deynlaha in qof saddexaad oo raalli ku ah uu bixiyo deynta beddelkiisa.

2. Waajibku keenimaayo in ay jirto had iyo jeerba deynqabaha iyo qofka saddexaad dhexdooda deyn hore.

Qodobka 357aad

1. Haddii dhinacyadda wakiilashada ku heshiiyaan in ay ku beddelaan waajibka asalka ah waajib cusub wakiilashaddu waxaa loo qaadanayaa cusbooneys xaga beddelaada deynqabaha waxaana ka dhalanaya in ka wakiishay ka xuroobo xag kan la wakiishay. Waxaase shardi ah in uu yahay waajib cusub ee uu aqbalay qofka seddexaad ee la wakiishay mid ansaxay iyo kan la wakiishay in uusan ahayn mid ay ka maqan tahay awoodda bixinta waqtiga wakiilashada.



2. Hase yeehe, cusbooneyntu leys kama qadari karo xaga wakaalashada. haddii uusan jirin heshiis cusbooneyn waajibka asalka ah waxaa is garab taagaya waajibka cusub dhiniciisa.

Qodobka 358aad

Kan la wakiishay waajibka ka saaran xagga kan loo wakiishay wuxuu noqdaa ansax haba ahaado waajibka u dhexeeyey kan la wakiishay iyo kan wakiishay mid baaba'a ah amaba ha ahaado waajibkaasi mid leh is-hortaag. Wuxuu leeyahay kan la wakiishay in uu ugu noqdo kan wakiishay. Intaasoo dhan waa hadduusan jirin heshiis sidaas ka duwan.

## QEYBTA III

## ISU TUURIDDA WAAJIBKA

Qodobka 359aad

1. Deynqabaha wuxuu xaq u leeyahay isu tuuridda asaga deynlaha ku leeyahay iyo waxa asaga ku muteystay deynlaha, xataa haddii ay kala duwanaato sababta labada deyn, waxaase shardi ah in labada deyn ay ku saabsanaadaan qadar lacageed ama alaab isku masal ah xaga nooca iyo sifada labada deyn ay yihiin kuwa la muteystay, bislaadayna, noqon karo kuwa la weydiisan karo garsoor ahaan.

2. Reebi maayo isu tuuridda dib u dhaca waqtiga gudista muddo uu bixiyey Garsooraha darteed amaba uu ogolaaday deynlaha.

Qodobka 360aad

Waxaa u bannaan deynqabaha in uu ku doodo isu tuuridda, xataa haddii deymaha halka lagu bixinaayo kala duwan yihiin, laakiinse xaaladaas waxaa waajib ku ah in uu ka magdhabo deynlaha dhibaatada ka soo gaartay isu tuuridda, taas oo sababteedu u heli waayey ama u sameyn waayey in gudashaddu ku dhacdo halkii loo gooyey.

Qodobka 361aad

Isu tuuriddu way jirtaa sabab kastaba ha ku yimaadeyn deymaha, wixii aan ahayn xaaladaha soo socdo:

b. haddii labada deyn midkood uu yahay shay laga siibay xaq la'aan qof lahaa gacantiisa ee la weydiinayo soo celintiisa.

t. haddii labada deynle midood uu yahay shey meel la dhigay amaba mid la cayriyeystay ee la weydiisanayo soo celintiisa.

j. haddii uu yahay labada deynle midkoodu xaq aan ogoleyn qabasho.

Qodobka 362aad

1. Isu tuurida ma dhacdo hadduusan ku doodin qofka maslaxada ku leh. Mana bannaana in laga tanaasulo ka hor inta ayna sugnaanin.

2. Waxaa ka dhasha isu tuuridda deymaha dhicidooda ilaa iyo inta ay la'eg tahay deynta yar. waxaana laga billaabaya waqtiga labada deyn ay u suubadeen isu tuuridda. Xagga isutuuridda magacaabidda cidda loo siinayo bixinta waxey ku imaaneysaa habka magacaabidda gudida.

Qodobka 363aad

Haddii muddada gubashada deynta ay dhacday waqtiga lagu dooday isu tuuridda, taasi keeni mayso in deyntu ku dhacdo isu tuuridda, xataa haddii lagu dooday gubashadaa, maadaama muddada gubashada ayna dhammaanin waqtiga isu tuurida ay noqotay mid suuragal ah.

Qodobka 364aad

1. Ma ay banaana in ay dhacdo isu tuuridda si dhibta xuquuq uu helay qol saddexaad.

2. Haddii qof saddexaad uu sameeyo qabasho xaga deynqabaha kaddibna uu noqday deynqabuhu, deynle xaq ku leh deynlihiisii ma ay u bannaana deynqabaha in uu ku doodo isu tuuridda sii dhibta kan wax loo qabtay.



Qodobka 365aad

1. Haddii deynlaha uu wareejiyo deynta qof saddexaad, deynqabaha aqbalay wareejinta si cad kuma doodi karo isu tuuridda xaga loo wareejiyaha taasoo u bannaaneyd inta uusan ogolaanin wareejinta ka hor, waxaa keli ah ee u bannaan in uu ugu noqdo xaqiisa wareejiyaha.

2. Haddiise deynqabuhu yahay mid aan aqbalin wareejinta ee la ogeysiiyey, ka reebi meyso wareejintaasi in uu qabsado isu tuuridda.

Qodobka 366aad

Deyqabuhu haddii uu gudo deyn uu xaq u lahaa in uuku weydiisto xaqa isu tuuridda uma ay bannaana in uu ku doodo xaqaas, isagoo dhibaayo qof saddexaad lammaanadyada xaqiisa. In uu ahaa ku ka jaahil ah jiridda xaqaasi mooyee.

QEYBTA IV

MIDOOBIDDA DEYNLAHA IYO DEYNQABAHA

Qodobka 367aad

1. Haddii qof keli ah isla noqdo deynle iyo deynqabe, deyntaasi waa dhaceysaa inta ay le'eg tahay midoobidda.

2. Haddii uu suulo sababtii keentay midoobidda suulidiisuna uu leeyahay raad dib u noqda, deynkii wuxuu u soo noqdaa jiritaan asaga iyo wixii raacsanaa xagga kuwa danta ku leh dhammaantood waxaana lagu tiriyaa mid aan weligeed dhicin.

MADAXA III

WAAJIBKA OO DHAMAADA GUDID LA'AAN

QEYBTA I

KA BERI YEELIDDA

Qodobka 368aad

Waajibku waa dhammaadaa haddii deynluhu ka dhaafo deynqabihiisa asagoo sidaas raalli ku ah, ka dhaafidu waa ansaxdaa laga billaabo marka deynqabaha ogaado, laakiinse ka dhaafidu wey qiima beeshaa haddii uu diido deynqabaha.

Qodobka 369aad

1. Ka dhaafida waajibka waxaa habeyneysa axkaamta guud ee nidaamineysa tasarufaadka siismada.

2. Ka dhaafida uma baahna qaab gaar ah xataa haddii ay ku saabsan tahay waajib dhalashadiisu shardi u tahay qaab gaar ah ee uu faray sharciga ama ay ku heshiiyeen dhinacyada.

QEYBTA II

*SUURAGALID LA'AANTA GUDIDA*

Qodobka 370aad

Waajibku wuu dhammaadaa haddii deynqabuhu sugo in gudidiisa noqotay mid aan suuragaleyn sabab ka baxsan iraadadiisa.

QEYBTA III

GUBASHADA RIDDA XAQA

Qodobka 371aad

Waajibku wuxuu ku gubtaa 5 sano, wixii ka soo hara xaaladaha uu qodob xeereed si cad u sheegayo iyo xaaladaha ishortaagyada ee soo socda.

Qodobka 372aad

1. Waxaa ku gubta 5 sano xuquuq kasta ee si xili-xili ah loo cusbooneysiin karo xataa haddii uu qirsan yahay deynqabaha sida kirada guryaha, beeraha, dulsaaradda iyo xuquuqda kis-kis loo bixiyo iyo mushaaharooyinka iyo hawlgabka.

2. Hase yeeshee wuxuu ku gubtaa 15 sano miraha lagu muteystay haayaha ee niyadaxun iyo miraha waajib ku ah maamulaha waqafka ee loogu waajibiyey kuwa mutey waqafka.



Qodobka 373aad

Saddex sano waxaa ku gubata xuquuqda takhaatiirta, farmashiye haayeyaalka, qareenadda, injineeradda, qubaraa'da, macalimiinta, dalaaliinta, wakiilada u gaarka ah qofka falisay iyo ilaaliyaasha shirkadaha. Waxaase shardi ah in ay tahay xuquuqdaasi mid ay ka heleen shaqada ay guteyn iyo kharajka ay galeyn.

Qodobka 374aad

1. Saddex sano waxaa ku gubata canshuuraadka iyo xuquuqda ay mudatay Dawladda, waxey ka billaabataa gubashada canshuuraadka iyo xuquuqda la bixiyo sannadkiiba mar dhammaashada sannadka lagu qoray, gubashada xuquuqda laga qaado qoraaladda garsooreed waxaa laga billaabaa taariikhda fadhiga dacwadda ee qoraaladda la xiriira, haddii fadhigii uusan jirin waxey ka billaabataa taariikhda qoraaladda la sameeyey.

2. Sidoo kale waxaa ku gubta 3 sano xaqa weydiinta soo celinta canshuuraadka amaba xuquuqda la dhiibay iyadoo aan la muteysan. Waxey ka billaabantaa gubashada maalinta la dhiibay.

3. Axkaamta kor lagu xusay waa la dabaqayaa haddii ayna jirin axkaam lagu xusay xeer gaar ah.

Qodobka 375aad

1. Waxaa hal sano ku gubata xuquuqda soo socota :

b. Xuquuqda ganacsatada iyo farsamoyaqaanka ay ka heleyn alaab ay siiyeen dad aan ka ganacsaneynin, alaabtaasi iyo xuquuqda ay muteysteyn kuwa leh hoteeladda iyo maqaayadaha ay ka heleyn degnaashada ujuurta cuntada iyo wax allaale wixii ay ku bixiyeen kuwa rukunkooda.

t. Shaqaalaha xuquuqdooda iyo adeegayaasha ey ka heleen ijaar maalmeed amaba mushahar shaqada ay qabteyn awgeed.

2. Qofka ku dacwoonayo gubashadaasi halka sano ah, waa in uu ku dhaartaa si dhab ah in uu bixiyey deynta, Garsooraha waa in uu ujeediyaa deynqabaha dhaartaas xafiis ahaan. Haddii deynqabaha uu dhintay dhaarta waxaa loo jeedinayaa dhaxaltooyadiisa ama haddii kuwaas eyna qaan-gaarin loo dardaarmiyaasha si ay u caddeeyaan ineyna ogeyn jiritaanka deynta ama bixinteeda.

## Qodobka 376aad

1. Gubashada ku saabsan xuquuqda lagu xusay qodobadda 373 iyo 375, waxey ka billaabataa maalinta ay sameeyeen deynleyaasha gudashada, xataa haddii ay weli sii wadaan gudashayaal kale.

2. Haddii xaq xuquuqdaas ka mid ah lagu sugo qoraal, xaqaasi guban maayo 15 sano.

## Qodobka 377aad

Gubashada muddadeeda waxaa lagu xisaabaa maalmo. ee laguma xisaabo saacado iyo maalinta horeba. Gubashaddu waxey ku dhan tahay dhammaashada maalinta ugu dambeyso.

## Qodobka 378 aad

1. Wixii uusan caddeynin qodob gaar ah gubashaddu waxey ka billaabantaa maalinta ay deyntu noqotay mid la muto gudideeda.

2. Si gaar ah gubashaddu waxey ka billaabantaa wixii ku saabsan deyn lagu xeray shardi taagan maalinta la helay shardigaas. Wixii ku saabsan lammaanada milkiyada wuxuu ka billaabmaa maalinta mudashada ku sugnaatay, wixii ku saabsan deyn mudeysan gubashaddu waxey ka billaabantaa dhicidda mudada.

3. Haddii taariikhda bislaashada xaqa uu ku xiran yahay doonista deynlaha, gubashada waxey ka billaabaneysaa maalinta uu helay awood uu ku muujiyo doonistiisa.



## Qodoobka 379aad

1. Gubadku ma billaawdo haddii uu jiro wax ka reebay deynlaha in xaqiisa uu weydiisto, xataa ha ahaado anshax, sidaa soo kale gubashaddu kama billaabanto waxa u dhaxeeya wakiilka iyo kan wakiishay.

2. Gubashada ay muddadeedu ka badan tahay shan sano kuma socoto dadka aan awood la hayn ama dadka maqan amaba dadka lagu xukumay ciqaab xabsiyeed, hadduusan lahayn qof si sharci ahaan uga wakiil ah.

## Qodobka 380aad

Gubashaddu waxey ku kala go'daa weydiisasho garsooreed, xataa haddii la horgeeyo Maxkamad aan awood u lahayn, waxaa kaloo ay ku kala go'daa digniin qabasho iyo weydiin uu keenay deynlaha si loo aqbalo xaqa uu ku leeyahay deynqabaha falismay ama qeybinta iyo shaqa kasta uu ku kaco deynlaha asagoo ku doodaya xaqiisa inta ay dacwaddu socoto.

## Qodobka 381aad

1. Gubashadu waxey ku kala go'daa, haddii deynqabuhu si caddaan ah amaba si aamusnaan ah uu u qirto xuquuqda deynlaha uu ku leeyahay.

2. Waxaa lagu tiriyaa qirasho aamuseed in deynqabuhu ugatago deynlaha gacantiisa rahan uu ku lammaanayo deynta.

## Qodobka 382aad

1. Haddii gubashada ku kala go'da waxaa billaabma gubasho kale laga billaabo waqtiga uu ku dhammaaday raadka ka dhashay go'ida sababteeda, muddadiisuna waxey noqotaa muddadii gubashadi hore.

2. Hase yeeshee haddii la xukumo deynka, xukunkana uu lahaado xoogga fulitaanka amaba haddii deynku yahay mid ku gubta hal sano, gubashaduna ku kala go'day qirashada deynqabaha, deynta waxey ku gubaneysaa 15 sano, haddii eysan ka mid ahayn deynta la xukumay waajibaad xili-xili loo cusbooneysiin karo bislaadeyna xukunka kaddib.

Qodobka 383aad

1. Waxaa ka dhasha gubashada waajibka dhicidiisa, sidaas ay tahayna waxaa ku hara deynqahaba waajibaadka dabiiciga ah.

2. Haddii xaqu ku dhaco gubasho, waxaa la dhacda dulsaarada iyo wixii kale ee raacsanaa, yeyna dhammaanin muddada gubashada u gaarka ah kuwa raacsan.

Qodobka 384aad

1. Maxkamadda lafteeda uma bannaana in ay xukmiso gubasho ee waxaa waajib ah in xukunka gubashadu uu ku dhisan yahay weydiinta deynqabaha, amaba mid ka mid ah deynleyaasha amaba qof kasta ee maslaxad ku leh gubashada, xataa haddii uusan ku doodin deynqabaha.

2. Waxaa bannaan in lagu doodo gubashada daraja kasta ay dacwaddu taagan tahay xataa Maxkamadda Rafcaanka horteeda

Qodobka 385aad

1. Ma ay bannaana in laga tanaasulo gubasho inta uusan sugnaanin xaqa gubashada ka hor, sidoo kale ma bannaana in lagu heshiiyo in gubashadu dhacdo muddo ka duwan muddada uu magacaabay xeerka.

2. Waxaase u bannaan qof kasta ee leh awood uu xaqiisa ku maamulo in uu ka tanaasulo si aamusnaan ah, xataa xaqa gubashada markii uu u sugnaaday xaqaasi kaddib, tanaasulkaani ku fuli mayo deynleyaasha, haddii ay dhibaato u keeneyso.

BAABKA VI

SUGIDDA WAAJIBKA

Qodobka 386aad

Deynlaha waxaa saaran sugiddeeda waajibka deynqabahana waxaa saaran in uu caddeeyo gudashada waajibka.



MADAXA I

SUGID QORAALEED

Qodobka 387aad

1. Qoraalka rasmiga ah waa kan uu sarkaalka Guud ama qofka loo xilsaaray shaqo guud uu ku caddeynaayo qaabka xeereed iyo xuduuda awoodiisa waxyaabaha hortiisa ka dhacay ama caddeynta ay hortiisa ku sameeyeen dadka qoraalkaasi danta ka leh.

2. Qoraalka haddii laga waayo astaamaha koraalka rasmiga ah waxaa lagu tiriyaa qoraal caadi ah, waxaase shardi ah in laga helo saxiixa, shabada ama suulka dadka danta leh.

Qodobka 388aad

Ilaa iyo inta laga caddeeyo been-abuuridda hababka xeerku u gooyey qoraalka rasmiga ah wuxuu xujo ku yahay dadka oo dhan waxa asaga ku cad laguna sameeyey xadka awoodda sarkaalka qoray ama isagoo jooga ay sameeyeen dadka danta leh.

Qodobka 389aad

1. Haddii qoraalka rasmiga ah asalkeedu yaalo, qoraalka nuqulkiisa ama sawirkiisa wuxuu noqdaa xujo inta ay kula mid tahay asalka.

2. Nuqulka waxaa lagu tiriyaa mid la mid ah asalka haddii uusan ku doodin labada dhinac midkood, haddii doodi jirto nuqulka waxaa loola noqdaa asalka.

Qodobka 390aad

Haddii uusan jirin qoraalka rasmiga ah. nuqulku wuxuu xujo noqdaa xaaladaha soo socda :

b. Nuquladda hore ha lahaadaan ama yeyna lahaanin qaabka fulinta waxey leeyihiin xujada kan asalka oo kale, haddii muuqaalkiisa uu shaki gelineynin in uu la mid yahay asalka.

t. Isla qiimaha nuquladda hore ee rasmiga ah ay leeyihiin ayey leeyihiin kuwa dambe, laakiinse xaaladaan dhinac kasta wuxuu weydiisan karaa in loola noqdo nuqulka nuqulkii hore.

j. Wixii ku saabsan nuquladda laga sameeyey nuquladda hore ee rasmiga ah waxey leeyihiin hadba xaaladdu sidey tahay qiimo tixgeleneyd.

Qodobka 391aad

Qoraalka gaarka ah waxaa lagu tiriyaa in uu sameeyey qofka saxiixay haddii si caddaan ah uusan u inkirin qoraalka, saxiixa, shabada ama saxiixa suul-saarka ah ee asaga loo nisbeeyey. Dadka xaqa dhaxalka u leh ama kuwa xaqa u wareegay qasab kuma aha in ay inkiraan, waxey ku ekaan karaan in ay caddeeyaan ayagoo dhaaranaya in aysan ogeyn qoraalka, saxiixa, shabada ama saxiixa suul-saarka in uu leeyahay qofka qoraalka loo nisbeeyey.

Qodobka 392aad

1. Kuma ay noqoto qoraalka gaarka ah qof saddexaad xujo xagga taariikhdiisa, ilaa iyo inta uu ka yeesho taariikh sugan, qoraalka taariikhdiisu waxey sugnaataa marka ay jiraan xaaladaha soo socda :

b. Laga billaabo maalinta lagu qoray diiwaanka loogu talagalay.

t. Laga billaabo maalinta lagu sugay murtideeda warqad kale ee taariikhdeedu sugan tahay.

j. Laga billaabo maalinta qoraalku arkay sarkaal guud ee awood u leh.

x. Laga billaabo maalinta uu geeriyooday qof ku lahaa warqadda dusheeda raad ee ah qoraal ah saxiix, shabad ama saxiix suul-saarka la aqoonsan yahay laga billaabo maalinta uusan suuragal u noqonin qof kuwaa ka mid ah in uu qoro amaba uu ku saxiixo suulkiisa awgeed, guud ahaan laga billaabo maalinta ay wax dhaceen ee goynaya si la hubo in qoraalku ka horeeyey.



2. Hase yeeshee, waxaa Garsooraha u bannaan asagoo tixgelinaaya duruufta in uu ka dhaafo rasiidyada isagoo ku dhabaqaaya axkaanta hore.

Qodobka 393aad

1. Xaashiyaha la saxiixay waxey leeyihiin isla qiimaha caddeynta qoraalada gaarka ah.

2. Taararka waxey leedahay isla qiimahaas oo kale, haddii asalkeedu lagu keydiyey xafiiska boostada, saxiixayna qofka diray, taarka la guuriyey waxaa lagu tiriyaa mid la mid ah asalkiisa ilaa iyo inta laga sugo sidaa si ka duwan.

3. Haddii la baabi'iyo taarka asalkiisa wuxuu leeyahay taarka la guuriyey qiimo la tixgeliyo.

Qodobka 394aad

1. Buugagta ganacsiga ah xujo kuma ay noqdaan kuwo aan ahayn ganacsatada, hase yeeshe haddii buugagtaasi ay leeyihiin xusuusin ku saabsan bixin ay sameeyeen ganacsatadu. Garsooraha waxaa u bannaan inta la ogol yahay in lagu sugo marqaati in uu ujeediyo dhaar dhameystir ah mid ama mid kasta oo ka mid ah dhinacyadda.

2. Buugagta ganacsatada ah xujo kuma noqoto isla iyaga. Haddiise buugagtaasi ay nidaamsan yihiin, qofka doonaayo inuu ugu isticmaalo sugitaan ahaan uma ay bannaana inuu kala qeybiyo dulucdooda iskana tuura wixii isaga ka soo horjeeda.

Qoodobka 395aad

Diiwaanada qoraaladda guryaha kuma ay noqdaan qofka qoray xujo, haddii eysan jirin labada xaaladood ee soo socda:

b. Haddii uu si cad u sheego in uu ulajeeday xusuusinta lagu qoray diiwaanadda ama waraaqaha guryaha in ay istaagaan meesha qoraalka, faa'idana ugu jirto qofka danta ku leh oo ay xusuusintaasi xaqiisa goyneyso.

t. Haddii si caddaan ah u xusay in uu ulajeeday waxa uu ku qoray waraaqadahaas in uu istaago meel qoraal ee uu leeyahay qofka ay sugtay warqaddaasi xaq uu leeyahay.

Qodobka 396aad

1. Haddii xusuusinta keento xuroobidda deynqabaha xataa haddii uusan deynluhu saxiixin waxa lagu qorayaa qoraalka deynta, qoraalka wuxuu xujo ku noqonayaa deynlaha haddii uusan weligiisa ka bixin haysashadiisa lana sugin sidaas i ka duwan.

2. Isla axkaamtaas ayaa lagu dabaqayaa xusuusinta keenta xuroobidda deynqabaha ee uu qoray deynluhu xataa haddii uusan saxiixin kuna qoray asal laba-jibaar ah ee qoraalka ama rasiidka, haddii asaladda laba-jibaar ah ama rasiidada uu haysto deynlaha.

## MADAXA II

## SUGITAANKA MARKHAATIYEED

Qodobka 397aad

1. Wixii ku saabsan arrimaha aan ahayn ganacsi, sugidda tasarufka xeereed ama dhammaashada waajibka ma bannaana in lagu caddeeyo markhaati. haddii qiimaha tasarufka ama waajibka uusan xadideyn ama uu ka badan yahay Sh. So. 500/= haddii uusan jirin heshiis ama qodobo sidaas ka duwan.

2. Waajibka waxaa lagu qeymeynayaa qiimahiisa salka ah marka uu dhaco taasarufka qaanuuneed. Waxaa bannaan in lagu sugo marag haddii qiimaha waajibka uu ka badan yahay sh. so. 500/ keli ahaan marka lagu daro dulsaaradda uruuray iyo wixii la xiriiira ra'suumaalka.

3. Haddii dacwaddu ay ka kooban tahay weydiisasho badan ee ka yimid meelal kala duwan weydiisasho kasta ee qiimaheedu aanu ka badneyn sh. so. 500/ waxaa lagu sugi karaa marqaatiyaal, xataa haddii isugeynta weydiisashayaalka ay ka badan tahay qiimahaas, inkastoo weydiisashayaalka ay



ka dhasheen xiraar dhex marey dhincayadda ama tasarufaad qaanuuneed ee leh isla dabeecadda. Isla axkaamtaas ayaa lagu dabaqayaa dhammaan bixinta qiimaheedu aanu ka badneyn. So. Sh. 500/=

Qodobka 398aad

Ma bannaana in markhaati lagu sugo qiimo aan ka badnayn Sh. 500/= marka ay jiraan xaaladaha soo socda :

b. Marka sugidda khilaafsan tahay amaba dhaafsan tahay dulucda kulmiyey qoraalka.

t. Haddii sheyga la weydiistay uu yahay wax haray ama qaar ka mid ah deynta ee lagu sugi karo qoraal.

j. Haddii labada dhinac ee dacwaddu ka dhaxeyso midkood uu ku weydiisto dacwadiisa qiimo ka badan sh. so. 500/= kaddibna weydiisashadiisa ka dhimo qiimo aan ka badneyn tirada kor ku qoran.

Qodobka 399aad

1. Waxaa bannaan in marag lagu sugo wixii uu waajib ahaa qoraal lagu sugo haddii la helo mabda' ku sugidda qoraaleed.

2. Mabda'a ku sugidda qoraalka waxaa loo qaadanayaa qoraal kasta ee ka yimaada dhinaca doodaha kana dhigaaya mala-u-waa (Verosimile) jiritaanka falka lagu dooday.

Qodobka 400aad

Sidoo kale waxaa bannaan in lagu sugo markhaati marka ay jirnaa xaaladaha soo socda :

b. haddii uu jiro wax maadi ah ama anshax ah oo reebaya helitaanka sugid qoraaleed.

t. Haddii deynluhu uu waayo qoraalka uu ku dhisaayey sugidda qoraaleed sabab ka baxsan iraadadiisa.

## MADAXA III

## U MALEYN

Qodobka 401aad

U maleynta xeereed waxey ka dhaafeysaa qofka ay maslaxadiisu tahay wax kasto ee sugid ah, waxaase bannaan sugidda taas ka soo horjeeda, hadduusan jirin qodob xeereed oo sidaas ka duwan.

Qodobka 402aad

1. Xukunadda yeeshay xoogga fulitaanka waxey xujo u yihiin xuquuqda ayaga lagu caddeeyey. Umaleynta laga helo xukunadaas ma ogola sugid lid ku ah, laakinse umaleynta axkaamta xujadeeda waxey ku kooban tahay dhinacyadda dooda ka dhaxeyso iyagoo leh isla tilmaantooda kuna saabsan xuquuq leh isla duluc iyo sabab.

2. Ma ay bannaana Maxkamadda in ay iskeeda u qaadato umaleyntaasi.

Qodobka 403aad

Kuma uu xirmo Garsooraha Madaniga xukunka ciqaabeed ilaa iyo inta ku saabsan falalka xukunka ciqaabeed uu gooyey ama u ahayd go'aanka lagama maarmaan mooyee.

Qodobka 404aad

Waxaa loo dhaafaa Garsooraha awoodiisa umaleyn kasta, haddii uusan xeerku gooyin, ma ay bannaana in maleyntaasi wax lagu sugo, xaaladaha xeerku uu baneeyey ku sugid marag mooyee.

## MADAXA IV

## QIRASHADA

Qodobka 405aad

Qirashadu waa aqoonsi uu dhinacu uu ka sameeyo Maxkamad horteed kuna saabsan fal leh ahmiyad qaanuuneed lidna ku ah qofka qirashada sameeyey inta ay dacwaddu socoto.

Qodobka 406aad

1. Qirashadu waxey xujo ku tahay qofkii sameeyey.
2. Qirashadda lama qeybi karo si aan dan ugu jirin qofka sameeyey haddii ay ku saabsan tahay falal kala duwan ee jiridda midkoodu uusan keeneyn si lagama maarmaan ah jiridda falalka kale.



## MADAXA V

## DHAAR

Qodobka 407aad

1. Waxaa u bannaan mid kasta ee labada doodeysa ah in uu u jeediyo kan kale dhaar go'aysa, waxaase u bannaan Garsooraha in uu reebo u jeedinta dhaarta haddii uu yahay doo daha jeediyey mid ku xaadgudba, jeedinteeda.

2. Kan dhaarta loo jeediyey wuxuu leeyahay in uu ku celiyo dhaarta dhinaca kale, mase bannaana celinta marka ay ku saabsan tahay fal ayna u sinneyn labada dhinac ee falku yahay mid shakhsi ah ee u gaar ah qofka loo jeediyey.

Qoodobka 408aad

1. Dhaarta wax gooysa ma bannaana in lagu jeediyo wax khilaafsan nidaamka guud. Falka dhaarta ay ku saabsan tahay waa inuu taabtaa arrimo shakhsi ah ee dhinacyadda dhaarta loo jeediyey, haddii falku ahayn shakhsi dhaartu waa in ay ku saabsanaataa keli ahaan ogaashada falka.

2. Dhaarta waa bannaan tahay in la jeediyo heer kasta iyo darajo kasto ee dacwaddu mareyso.

Qodoboka 409aad

Qofka loo jeediyey amaba celiyey dhaarta, uma ay bannaana in sidaasi ka laabto, haddii uu aqbalay dhinaca kale in uu dhaarto.

Qodobka 410aad

Uma ay bannaana in dooduhu sugo been ahaanta dhaarta kaddib markii uu dhaartay dhinaca loo jeediyey amaba loo celiyey dhaarta, haddiise uu ku sugnaado xukun ciqaabeed been ahaanta dhaartu wuxuu leeyahay dhibanuhu in uu weydiisto magdhaw iyadoo taasi wax u dhibeynin xaqa uu leeyahay ee ah duridda xukunka ku dhacay.

Qodobka 411aad

Qof kasta ee dhaar loo jeediyey ama loo celiyey ee diida dhaarta wuxuu waayaa dacwadiisa.

Qodoboka 412

1. Garsooruhu wuxuu leeyahay in uu iskiisa u jeediyo dhinacyada midkood dhaar si uu ugu dhiso duluoda xukunka ee dacwadda ama qiimaha sheyga uu xukumaayo.

2. Waxaase shardi u ah dhaartaani jeedinteeda in dacwadu ayna lahayn caddeyn buuxda iyo in dacwaddu ayna ka marneyn wax caddeyn ah.

Qodobka 413aad

Uma ay bannaana doodaha Garsooruhu ujeediyey dhaarta dhameystirka ah in uu ku celiyo dhaartaasi dhinaca kale

Qodobka 414 aad

1. Garsooraha uma ay bannaana in uu u jeediyo dacwoodaha dhaarta dhameystirka ah ee ku saabsan qiimaha sheyga uu ku dacwoonayo, haddii ayna suurtoobin in lagn xadido qii mahaas jidad kale mooyee.

2. Garsooruhu xataa markaani wuxuu goynayaa qaddarka ugu sareeyo ee dhaarta dacwooduhu loogu rumeyn karo.

BUUGGA II

HESHIISYADA MAGACAABAN

HESHIISYADA KU SAABSAN LAHAASHAHA

MADAXA I

GUDID

QAYBTA I

GUDIDDA GUUD AHAAN

Qodobka 415aad

Gadidu waa heshiis ku waajibsaday gadaha inuu u guuriyo iibsadaha lahaanshaha sheyga amaba xaq kale asagoo ku beddelanaaya qiimo lacgeed.

Qodobka 416aad

1. Waxaa waajib ah in iibsaduhu ogyahay sheyga la gadaayo ogaasho ku filan, ogaashadaasi waxaa lagu tiriyaa mid ku filan in ay tahay haddii heshiiska laga helo sheyga la gadaayo iyo tilmaamihiisa salka ah, si suuragelisa ogaashadiisa.



2. Haddii lagu xuso heshiiska gadida in iibsaduhu og yahay sheyga la gadaayo, waxaa dhaca xaqiisii ahaa in uu weydiiyo burinta heshiiska ogaasha la'aanta sheygaasi dartiis. Haddii uusan caddeynin dhagarta gadaha.

Qodobka 417aad

1. Haddii ay tahay gadidu sheyga namuunkiisa kala duwanaan kasta ee ka dhaxeysa waxa la gadaayo iyo namuunkiisa, wuxuu u banneynaayaa iibsadaha in uu weydiista fasakhidda, haddii eysan caddaanin in namuunka loogu talagalay keli ahaan in uu noqdo wax u dhaw tilmaamaha sheyga la gadaayo, markaasi heshiiska waa la fasakhi karaa keli ahaan haddii kala duwanaantu tahay mid weyn.

2. Haddii namuunku baaba'o ama ku halaabo Iibsadaha gacantiisa xataa haddii uusan gafin, waxaa la qadaraa in sheyga la gadaayo iyo namuunka is waafaqsan yihiin ilaa iyo inta laga sugaayo sidaas wax ka duwan. Haddii namuunku baaba'o ama uu ku halaabo gacanta gadaha ama qof saddexaad xataa gaf la'aantooda Iibsadaha wuxuu khiyaar u leeyahay in uu kala doorto fasakhidda iyo jiritaanka heshiiska.

Qodobka 418aad

Gadida lagu xeray raalinimadda Iibsadaha guntami maayo ilaa iyo inta iibsadaha uu ogeysiiyo raalinimadiisa. Haddii sheyga ku jiro gacanta Iibsadaha kan dambana uu aamuso ilaa iyo inta ay ka dhammaato muddada lagu heshiiyey amaba ka cad caadooyinka, ka aamusidaasai waxey istaageysaa meeshii raalinimadda, heshiiskuna wuu guntamayaa.

Gaduhu wuu xuroobayaa haddii sheyga uu ku jiro gacantiisa ama gacan qof saddexaad, Iibsaduhuna isagoo ay ka dhamaatay muddadii lagu heshiiyey ama ka cadeed caaddooyinka baarin sheyga amaba uu baaray laakinse uusan ogeysiin raalinimadiisa.

Qodobka 419aad

1. Waxaa lagu tiriyaa beeca tijaabada mid ku xcran shardi jooga oo ah in uu leeyahay waxa la gaday tilmaamaha lagu heshiiyey amaba uu yahay mid usuubada danta laga leeyahay.

2. Waxaa waajib ah in tijaabadu ku dhammaato muddada dhexdeeda iyo habka uu gooyey heshiiska amaba caaddooyinka.

Qodobka 420aad

1. Waxaa bannaan in uu ku koobmo qadarida qiimaha caddeynta salalka dib loogu xadidi doono qiimaha.

2. Haddii gudida lagu sameeyo sicirka suuqa marka uu shaki jiro waa in loo qaataa in sicirka lagu heshiiyey yahay sicirka suuqa ee jira meesha iyo waqtiga sheyga la gaday ay waajib tahay in loogu dhiibo Iibsadaha. Haddii taasi la waayo waxaa waajib ah in loo noqdo meesha sicir suuqeedku yahay mid la dabaqo si caada ahaan ah.

Qodobka 421aad

Haddii labada heshiisay aynan xadidin qiimaha beeca, la buri maayo. haddii duruufta ka cad yahay in labada heshiisay ay dooneyn in ay cuskadaan sicirka ganacsigu ku socdo amaba sicirka ayaga dhexdooda ku mucaamaltamaan.

Qodobka 422aad

1. Haddii maguurto uu leeyahay qof aan awood lahayn la gado laguna gado iyadoo ay ugu sugan tahay khasaaro shan meelood meel, iyadoo loo fiirinayo qiimaha maguurtada, gaduhu wuxuu oogi karaa dacwad dhameystir ah qiimaha si uu ugu khasbo iibsadaha inuu dhammeystiro shan meelood afar qiimaha caadiga ah.



2. Waxaa waajib ah si loo qadaro in khasaaraddu ka badan tahay shan meelood meel in lagu qiimeeyo maguurtada qiimaheeda waqtiga gadida.

Qoboka 423aad

1. Dacwadda dhammeystirida qiimaha khasaarada waxay ku gubataa seddex sano laga billaabo maalinta ay dhammaatay awood la'aan amaba maalinta uu ku dhintay kan lahaa maguurtada la gaday.

2. Dacwaddaani gaarsiin meyso dhib qof saddexaad ee niyad wanaagsan, haddii uu helo xaq ceyni ah ee saaran maguurtada la gaday.

Qodobka 424aad

Ma bannaana oogidda dacwad dhammeystir qiimeed haddii gadidu ku dhacdo naado guud si waafaqsan sharciga.

Qodobka 425aad

Gadaha waxaa laasim ku ah in uu ku kaco wixii laga maarmaan u ah wareejinta xaqa la gaday iibsadaha iyo in uu ka reebtoomo wax kasta oo ka dhiga xaqa wareejintiisa mid aan suuragelin amaba culeys ah.

Qodobka 426aad

Gadida jumladda ah milkiyadda waxey u wareegeysaa iibsadaha sida milkiyadda sheyga la hubo, wey jirtaa gadida jumladda ah xataa haddii qiimaha sicirka la goynaayo uu la xiriiro qadaridda sheyga la gadaayo.

Qodobka 427aad

1. Gadida deynta ah, gaduhu wuxuu u shardi karaa in wareejinta milkiyadda xagga iibsadaha lagu xiro shuruud laalan ee ah bixinta qiimaha oo dhan xataa haddii sheyga la gaday yahay mid la dhiibay.

2. Haddii qiimuhu yahay mid loo dhiibayo qeyb-qeyb, waxaa u bannaan labada heshiisay in ay isku waafaqaan in gaduhu haysto qeyb ka mid ah ee magdhow u noqda fasikhidda beeca haddii la gudi waayo qeybaha oo dhan, sidaas ay tahayne Garsooraha waxaa u bannaan sida duruuftu keeneyso in uu dhimo qadaridda magdhawga lagu heshiiyey si waafaqsan xubinta labaad ee qodobka 221.

3. Haddii qeybaha oo dhan iibsadaha uu bixiyo, milkiyada u guurideeda iibsadaha waxaa laga billaabayaa waqtiga beeca.

4. Seddexda xubin ee hore axkaamtooda waa la dabaqayaa xataa haddii dhinacyadu beeca ku magacaabaan ijaar.

Qodobka 428aad

Gadaha waxaa laasim ku ah in waxa la gaday u dhiibo iibsadaha sida uu ahaa waqtiga beeca.

Qodobka 429aad

Dhiibidda waxey ka koobantaa waxa la gaday wixii raaca iyo wax kasta ee joogta ah loogu diyaariyey isticmaalka sheyga siwaafaqsan sheyga dabeecadiisa caadaadka maxaliga iyo rabidda labada heshiiyey.

Qodobka 430aad

1. Haddii waxa la gaday lagu sifeeyo heshiiska dhexdiisa, gadaha wuxuu mas'uul ka yahay is-dhimidda (difetto) sifadaasi sida ay keeneyso caadadu, haddii aan lagu heshiinin sidaas wax ka duwan. Hase yeeshee, uma ay bannaana iibsaduhu in uu weydiisto fasakhida heshiiska maqnaashaha tirada awgeed. Hadduuna caddeynin maqnaashaha in weynaanteeda ay gaareyso in uusan geli lahayn heshiiska haddii uu ogaan lahaa.



2. Haddii caddaato in tirada sheyga la gaday ay ka badan tahay tan lagu xusay heshiiska, qiimuhuna lagu qadaray koox-koox, iibsadaha waxaa waajib ku ah in uu dhameystiro qiimaha haddii sheyga uusan aqbaleynin qeybin dhibaato la'aan haddii siyaadadu ay saas u weyneyn, markaas wuxuu warsan karaa fasakhidda heshiiska. Axkaamta kor lagu xusay waa la dabaqayaa haddii uusan jirin heshiis sidaas ka duwan.

Qodobka 431aad

Haddii laga helo waxa la gatay dhimid amaba siyaado iibsadaha xaqiisa ee ah weydiinta dhimdda qiimaha amaba fasakhidda heshiiska iyo xaqa gadaha ee ah weydiinta dhammeystiridda qiimaha mid kastaba waxey ku gaboobayaan hal sano laga billaabo marka la dhiibay waxaa la gatay dhiibid dhab ah.

Qodobka 432aad

1. Dhiibiddu waxaa weeye in sheyga la gaday iibsadaha tasarufkiisa la geliyo, si ay ugu suurtowdo haaysashadiisa iyo ku intifaacidiisa is-hortaag la'aan, xataa yuusan maadi ahaan u haaysanin, maadaama gaduhu ogeysiiyey in sheygii geliyey tasarufkiisa hoostiisa. Dhiibidaani waxey ku dhacdaa si waafaqsan sheyga la gaday dabeecaddiisa.

2. Waxaa bannaan in dhiibiddu ku dhacdo labada heshiisay raali ahaantooda oo qur ah, haddii sheyga la gaday uu haayey iibsadaha gadida ka hor, amaba gaduhu sii haystay sheyga la gaday sabab ka duwan milkiyada.

Qodobka 433aad

Haddii ay waajib tahay in iibsadaha loo soo diro sheyga la gaday, dhiibodu waxey ku timaadaa marka iibsaduhu helay sheyga la gaday, haddii uusan jirin heshiis keena sidaa wax ka duwan.

Qodobka 434aad

Haddii sheyga la gaday baaba'o ka hor inta aan la dhiibin sabab gaduhu gacan uusan ku lahayn awgeed, heshiiska wuu fasakhmayaa, qiimahana waa in loo celiyaa iibsadaha, haddii lumida ay dhacday ka hor intii aan loogu digin in iibsaduhu qaato sheyga la gaday.

Qodobka 435aad

Haddii qiimaha sheyga la gaday uu is dhimo oo ay wax gaadhaan ka hor intii aan la dhiibin, iibsadaha waxaa u bannaan in uu weydiisto fasakhidda gadida, haddii is dhimidda qiimaheedu uu yahay mid weyn kaasoo reebi lahaa heshiiska gadida, hadduu dhici lahaa heshiiska ka hor ama heshiiska uu u jiro sidiisa iyadoo la dhimaayo qiimaha.

Qodobka 436aad

Gadaha waxaa khasab ku ah in uu ka lammaanto in iibsadaha aan lagu dhibin ku isticmaalka sheyga la gaday dhammaantiisa ama qaarkiisa, ama dhibidaasi eyna ka dhalan falkiisa ama fal qof seddexaad oo markii la gadaayo oo xaq uu ku hor istaago ku yeeshay iibsadaha sheyga la gadaayo. Gadaha waxaa khasab ku ah lammaanidda xataa xaqa u sugnaaday dhinaca saddexaad uu yahay mid ka dambeeyey gadida, inkastoo xaqaasi uu ka dhashay gadaha naftiisa.

Qodobka 437aad

1. Haddii la dacweeyo iibsadaha lahaanshada sheyga la gaday, gadaha loogu yeeray dacwadda waxaa waajib ku ah si waafaqsan axkaamta Xeerka Habka Madaniga in uu soo dhexgalo dacwada, isagoo is barbartaagaya iibsadaha amaba beddelaya.

2. Haddii u yeeridda dacwadda la sameeyey waqti ku habboon, gaduhuna uusa soo dhexgelin dacwadda, waxaa waajib ku ah in uu ka lammaanto, haddii uusan caddeyn in xukunka lagu dhawaaqay sababtiisu tahay khiyaano ama gaf culus ee ka yimid iibsadaha.

3. Haddii iibsadaha uusan ugu yeerin dacwadda gadaha waqtiga ku habboon ee uu ku soo baxo xukun dhammaad ah, wuxuu waayayaa iibsadaha xaqii ugu noqosho lammaanka, haddii gadaha caddeeyo in uu soo dhexgeli lahaa dacwadda geliddiisu keeni lahayd diidmada dacwadda lahaanshadeeda.



Qodobka 438aad

Iibsaduhu wuxuu xaq u leeyahay lammaanada xataa ha u qiro isagoo niyadsami leh qof saddexaad xaqiisa ama ha kula heshiiyo qof saddexaad xaqaasi isagoo aan sugin go'aan Maxkamadeed, maadaama uu ugu yeeray gadaha dacwadda waqti habboon uguna yeero in halkiisii dacwadda ka galo, uusana yeelin waana marka gaduhu uusan caddeyn in dacwadda qofka saddexaad eyna lahayn sal.

Qodobka 439aad

Haddii iibsaduhu ka dhowrsado lahaashadda sheyga la gaday dhammaantiisa ama qaar ka mid ah isagoo bixinaayo qadar lacag ah ama fulinaayo gudasho kale, gaduhu wuxuu ka xuroobi karaa waxyaabaha ka imaanaya lammaanadda isagoo celinaaya lacagta la bixiyey ama qiimaha sheyga la fuliyey oo ay la jirto dulsaaradda sharciyeed iyo dhammaan kharashka.

Qodobka 440aad

Haddii sheyga la gaday dhammaantiisa lahaado iibsadaha wuxuu leeyahay in uu weydiisto gadaha :

1. Qiimaha sheyga la gaday waqtiga lahaashada iyo dulsaarka xeereed laga billaabo isla waqtigaas.

2. Qiimaha miraha ee iibsadaha ku qasbanaa in uu u celiyo qofka lahaaday sheyga la gaday.

3. Kharajyada waxtarka leh ee iibsaduhu uusan ku dacweyn karin qofka wax lahaaday iyo kharajyada laga maarmi karo, haddii gaduhu markaas uu niyad xumaa.

4. Dhammaan kharajyada dacwadda lammaanidda iyo dacwadda lahaashada laga reebo wixii iibsaduhu kari karay in uu ka dhowrsado asagoo dacwadda ugu yeerayo gadaha dacwadda lahaashaha si waafaqsan Qodobka 437.

5. Guud ahaan magdhawga khasaarada gaartay iyo faa'iidada ka baaqatay iibsadaha ee lahaashada awgeed (evizione). Axkaamta kor lagu soo sheegay waa la dabaqayaa haddii iibsaduhu uusan ku dhisin dacwaddiisa weydiisasho fasakheed ama baaba'inta gadida.

Qodobka 441aad

1. Xaalada lahaanshaha qaar ka mid ah ama lammaanada saaran waxa la gaday iibsadaha haddii khasaaradda ay gaarsiisan tahay heer aad muhim u ah, oo haddii uu ogaan lahaa uusan geli lahayn heshiiska, wuxuu ku dacweyn karaa gadaha lacagta lagu sheegay qodobka hore. Waxaase shardi ah in faa'iidada laga helay la celiyaa.

2. Haddii Iibsaduhu uu doorto haysashada sheyga la gaday amaba khasaaraddu tahay mid aan gaarin heerka lagu caddeeyey xubinta hore, ma uu laha in uu weydiisto magdhawidda wixii ka gaaray ee dhib ah lahaashada sababteeda.

Qodobka 442aad

1. Dhinacyada heshiiska waxaa u bannaan in heshiis gaar ah ay ku siyaadiyaan amaba ay dhimaan lammaanada lahaashada amaba ay iska dhaafaan lammaan.

2. waa la maleynaayaa in gaduhu ka dhaafay lammaanadda waxa ku saabsan xuquuqda adeegidda (servitu') ee muuqda ama isaga uu u caddeeyey iibsadaha.

3. Heshiis kasta ee dhaafa ama dhima lammaanida lahaanshada waa baaba'a haddii gaduhu si kas ah u qariyey xaqa qofka saddexaad.

Qodobka443aad

1. Haddii leysku waafaqo lammaanid la'aanta gadaha wuxuu ka mas'uul noqdaa lahaasha kasta ee ka dhasha falkiisa, waa baaba'aa heshiis kasta ee keena sidaa wax ka duwan.

2. Haddiise lahaashada ka dhalatay fal qof saddexaad gadahu wuxuu mas'uul ka yahay soo celinta qiimaha sheyga la gaday waqtiga lahaashada, haddii uusan caddeynin in iibsaduhu ogsoonaa waqtiga gadida sababta lahaashada amaba uu iibsaday asagoo khiyaarksiisa ku galay heshiiska.



Qodobka 444aad

1 Gadaha waxaa laasim ku ah lammaanidda haddii aan laga helin waqtiga dhiibidda sheyga la gaday tilmaamaha jiritaankooda uu u lammaanay iibsadaha amaba haddii laga helo sheyga la gaday ceeb dhimaaya qiimahiisa amaba nafciga iyadoo loo fiirinaayo ulajeedada lagu xusay heshiiska amaba dabeecada sheyga la gaday ama waxa loogu talagalay, gadaha waa ka mas'uul ceebha, xataa haddii uusan ogeyn jiritaankooda.

2. Hase yeeshee lammaani maayo gadaha ceebaha uu iibsaduhu ogaa waqtiga gadida amaba uu ogaa lahaa haddii uu baari lahaa sheyga la gaday, sida qof caadi ah haddii uusan iibsaduhu caddeynin in gaduhu u xaqiijiyey maqnaashaha ceebahaas amaba si khiyaano ku jirto u qariyey.

Qodobka 445aad

Gadaha ma uu lammaanayo ceebaha caadadu ku dureersatay in la masaamaxo.

Qodobka 446aad

1. Haddii iibsadaha qaato sheyga la gaday waxaa waajib ah in uu xaaladiisa hubsado marka ay u suurtowday sida waafaqsan caadooyinka ganacsiga, haddii uu helo ceeb uu lammaanayo gadaha waxaa waajib ku ah in uu ogeysiiyo muddo suuragal ah dhexdeeda, haddii uusan yeelin waxaa lagu tiriyaa iibsadaha mid oggolaaday sheyga la gaday.

2. Hase yeeshee, haddii ceebtu tahay mid aan baaritaan caadi ah lagu garan karin iibsadaha waxaa waajib ku ah in uu ogeysiiyo gadaha siddeed beri dhexdooda laga billaabo maalinta ceebtu uu ogaaday. Haddii taas la waayo waxaa loo maleynayaa in uu oggolaaday sheyga la gaday.

Qodobka 447aad

Haddii iibsadaha ogeysiiyo gadaha ceebta waqtiga ku habboon wuxuu leeyahay in uu ku dacweysto lammaan ahaan sida ku cad qodobka 441.

Qodobka 448aad

Dacwadda lammaanku wey taagan tahay, xataa haddii uu baaba'o sheyga la gaday sabab kastaba ha ahaadee.

Qodobka 449aad

1. Dacwadda lammaaniddu waxay ku gubataa marka ay dhammaato sannad laga billaabo waqtiga la dhiibay sheyga la gaday xataa hadii iibsaduhu ogaaday ceebta kaddib marka muddadaasi ay dhacday, iyadoo laga reebayo marka gaduhu aqbalay in uu lammaano muddo taas ka dheer.

2. Hase yeeshee, uma ay bannaana gadaha in uu dacwoodo gubashada sannadka ah, haddii ay caddaato in si khiyaano ku jirta u qariyey ceebta.

Qodobka 450aad

Dhinacyadda heshiiska waxaa u bannaan in heshiis gaar ah ku siyaadiyaan, ku dhimmaan ama ay ku dhaafaan lammaanka. Hase yeeshee heshiis kasta ee dhaafa ama dhimma waa baaba'aa haddii uu gaduhu si kas ah ee khiyaano ku jirto u qariyey ceebta sheyga la gaday.

Qodobka 451aad

Ceebta laguma lammaano gadida garsooreed iyo gadida maamuleed, haddii si naada ah gadidu ku dhacdo.

Qodobka 452aad

Haddii gaduhu u lammaano hagaagsannaanta sheyga la gaday in muddo ah oo xadidan, iibsaduhuna ogaado ceeb ku saabsan hagaagsanaanta waa in uu ogeysiiyaa gadaha hal bil dhexdeeda laga billaabo maalinta uu ceebta ogaaday, waxaana u bannaan in uu oogo dacwadda lammaanadda lix bil dhexdeeda haddii uu tillaabooyinkaasi qaadi waayo xaqiisa wuu dhacayaa.



## WAAJIBAADKA IIBSADAHA

Qodobka 453aad

1. Qiimaha waxaa lagu bixiyaa meesha lagu dhiibay sheyga, la gaday hadduusan jirin heshiis amaba caado sidaas ka duwan.

2. Haddii qiimaha aan lagu dhiibi karin waqtiga la dhiibay sheyga la gaday waxaa waajib ah in qiimaha lagu bixiyo meesha uu degan yahay iibsadaha markii bixintu ay bislaatay.

Qodoobka 454aad

1. Qiimuhu waa la bixin karaa waqtiga la dhiibay sheyga la gaday, haddii uusan jirin heshiis amaba caado sidaas ka duwan.

2. Haddii haysashadda Iibsadaha qof seddexaad dhibaato u geysta kaasoo sheeganaya xaq ka horreeyey gadidda ama ka dhashay xagga gadaha, ama ay jirto cabsi xaga lammaanadda, Iibsaduhu wuxuu awood u leeyahay in uu joojiyo bixinta qiimaha ilaa iyo inta ay ka dhammaato dhibaatada ama cabsida lammaanadda, haddii uusan jirin heshiis sidaas ka duwan. Hase yeeshe gadaha waxaa u bannaan markaasoo kale in uu weydiisto bixinta qiimaha isagoo soo hormarinaya lammaanad ku filan.

3. Axkaamta qeybta hore lagu sheegay waa la dabaqayaa xataa marka uu Iibsaduhu ogaado ceebta sheyga la gaday.

Qodobka 455aad

1. Gaduhu wuxuu xaq u leeyahay dulsaaradda sharciyeed ee qiimaha keli ah, haddii uu Iibsaduhu u digay ama haddii uu dhiibay sheyga la gaday, sheyguna yahay mid mira dhalin kara ama wax kale ee faa'iido leh keeni kara haddii uusan jirin heshiis ama caado sidaas ka duwan.

2. Iibsaduhu wuxuu leeyahay miraha sheyga la gaday ama siyaadadiisa laga billaabo marka la sameeyey gadida. Waxaana saaran culeyska sheyga la gaday waqtigaasi, haddii uusan jirin heshiis ama caado sidaas ka duwan.

Qodobka 456aad

1. Haddii qiimaha dhammaantiisa amaba barkiisa yahay mid isla markiiba la muteystay, gadaha waxaa u bannaan in uu haysto sheyga la gaday ilaa iyo inta uu ka helo bixiinta qiimaha, xataa haddii uu Iibsadaha uu keeno rahmid ama lammaanad, haddii uusan Iibsadaha u qaban muddo uu ku bixiyo qiimaha.

2. Sidoo kale gadaha waxaa u bannaan in uu haysta sheyga la gaday, xataa haddii eysan dhammaan muddadii lagu heshiiyey bixinta qiimaha, haddii iibsaduhu ka dhaco ka faa'iideysiga waqtiga si waafaqsan axkaamta 270.

Qodobka 457aad

Haddii sheyga la gaday uu ku baaba'o gadaha agtiisa isagoo ku isticmaalaya xaqiisa haysashada, lumiddu waxey dulsaaran tahay Iibsadaha haddii sheyga la gaday lumidiisu eysan ku dhalan falka gadaha.

Qodobka 458aad

Beeca maacuunka iyo wixii kale ee guurta ah haddii lagu heshiiyo wakhtiga bixinta qiimaha iyo gacan-saaridda sheyga la gaday, gadidu iyadoo ku xiran doorashada gadaha wey fasakhantaa sharci ahaan iyadoo aan loo baahneyn u digidda Iibsadaha, haddii qiimaha aan lagu dhiibin muddadii lagu heshiiyey, ama uusan jirinheshiis sidaas ka duwan.

Qoodobka 459aad

Kharajyada heshiiska beeca iyo xuquuqda tikidhada iyo diiwaangelinta iyo wixii kale ee kharaj ah waxey dulsaaran yihiin Iibsadaha haddii uusan jirin heshiis amaba caado sidaas ka duwan.

Qodobqa 460aad

Haddii uusan jirin heshiis ama caado tilmaameysa meesha iyo wakhtiga lagu kala wareegsanaayo sheyga la gaday, Iibsadaha waxaa waajib ku ah in uu ku wareegsado sheyga la gaday meesha laga helo wakhtiga gadida, uuna soo qaato daahid la'aan ilaa iyo wakhtiga looga baahan yahay qaadashadda.



Qodoobka 461aad

Kharajyada soo qaadida sheyga la gaday waxey dulsaaran yihiin Iibsadaha, haddii uusan jirin heshiis amaba caado sidaas ka duwan.

## QEYBTA II

## GADIDA QAARKEED

### GADIDA SOO CELINTA XAQEED

Qodobka 462aad

Haddii heshiiska gadida gaduhu uu reebto, awoodda soo cesashada sheyga la gaday muddo go'an gudaheeda, gadidu wey baaba'eysaa.

### GADIDA SHEYGA QOF KALE UU LEEYAHAY

Qodobka 463aad

1. Haddii uu qof gado shey la hubo ee uusan lahayn Iibsadaha waxaa u bannaan in uu weydiisto baaba'inta gadida. Isla axkaamtaas ayaa lagu dhaqmayaa xataa haddii gadidu ku saabsan tahay shey maguurto ah heshiiska gadida hala diiwaangeliyo ama yaan la diiwaangelin.

2. Markastaba gadidaasi ku fulimeyso qofka leh sheyga la gaday inkastoo Iibsadaha ogolaaday heshiiska.

Qodobka 464aad

1. Haddii qofka leh sheyga uu ogolaado gadida heshiiska wuu ku fulayaa xaqiisa, kan Iibsadeyne wuu u ansaxayaa.

2. Sidoo kale gadidu wey ka ansaxeysaa dhinaca Iibsadaha haddii gaduhu uu yeeshay lahaanshadda sheyga la gaday kaddib markii la sameeyey heshiiska.

Qodobka 465aad

Haddii gadashada lagu baaba'iyo go'aan Maxkamadeed ee u dan ah Iibsadaha, uusana ogeyn in sheyga la gaday uusan lahayn gadaha. Iibsaduhu wuxuu weydiisan karaa magdhaw dhibaateed xataa haddii gaduhu uu niyad wanaagsanaa.

## XUQUUQDA LAGU DOODSAN YAHAY GADIDEEDA

### Qodobka 466aad

1. Haddii uu yahay xaqa lagu doodsan yahay mid qofka leh uu u wareejiyey qof saddexaad isagoo shey kale ku beddelenaayo, qofka ay ka horjeedo wareejinta wuu ka xuroobayaa isagoo u celinaaya qofka loo wareejiyey qiimaha runta ah uu bixiyey oo ay wehliyaan kharajka iyo dulsaarada qiimaha laga billaabo maalinta bixinta la sameeyey.

2. Xaqa waxaa lagu tiriyaa mid lagu doodsan yahay haddii salkiisa dacwad laga oogay amaba ay ka taagan tahay xaqa, khilaaf dhab ah.

### Qodoboka 467aad

Qodobka hore lagu dabaqi maayo xaaladaha soo socda :

b) Haddii uu yahay xaqa lagu doodsan yahay mid ku jira maal leysku daray ee si jamla ah loogu gaday qiimaha keli ah.

t) Haddii xaqa lagu doodsan yahay uu yahay mid aan qeybsaneyn ee ka dhaxeeya dhaxaltooyo ama kuwo wax isla leh midkoodna uu ka gado qeybtiisa midka kale.

j) Haddii deynqabuhu ogaa, wareejiyey deynlaha xaq lagu doodsan yahay bixin deyn lagu mutay darteed.

x) Haddii uu yahay xaqa lagu doodsan yahay mid cusleeya maguurto ee xaqii loo wareejiyo qof seddexaad ee haysta maguurtada.

### Qodobka 468aad

Uma ay bannaana Garsoorayaasha iyo xubnaha xeer ilaalinta iyo qareenadda iyo kaaliyeyaasha Maxkamadaha iyo gaarsiiyeyaasha in ay ku iibsadaan magacooda amaba magac qof kale xaqa lagu doodsan yahay dhammaantiisa amaba barkiisa haddii doodaasi galeyso awoodda Maxkamadda ay ka haayaan shaqadooda; haddii sidaasi dhicin beecu waa baaba'aa.

### Qodobka 469aad

Qareenada uma bannaana si toos ahaan ama qof kale magaciisa in xaqa lagu doodsan yahay kula mucaamaltamaan kuwa wakiishay, haddii ayagu difaacayaan xuquuqdaasi; haddii ayna sidaasi dhicin beecu waa baaba'aa.



## GADIDDA DHAXALKA

### Qodobka 470aad

Qofkii gada dhaxal isagoo aan caddeynin si buuxda waxa uu ka kooban yahay, lammaani maayo in uu dhaxle yahay mooyee, haddii eysan jirin heshiis sidaas ka duwan.

### Qodoboka 471aad

Marka la gado dhaxal, wareejinta xuquuqda uu dhaxalka ka kooban yahay, saameynmeyso dad seddexaad; haddii aan la qaadin qaabka ay waajib tahay in la qaado si uu u wareego xaq kasta ee ka mid ah xuquuqdaasi. Haddii sharci caddeeyo qaabka uu xaqa labada heshiisay ugu wareego, waxaa waajib ah in la raaco qaabkaas.

### Qodoobka 472aad

Haddii gaduhu qaato amaah ama uu gado hanti ka mid ah dhaxalka waa inuu u celiyaa iibsadaha inta uu sidaas ku helay, haddii aan si cad lagu sheegin heshiiska wakhtiga gadida shardi ka reebaayo soo celinta.

### Qodobka 473aad

Iibsaduhu waa inuu u celiyaa gadaha wixii uu ka bixiyey deynta dhaxalka isagoo u xisaabaya wax allaale wixii amaah uu ku lahaa dhaxalka, haddii uusan jirin heshiis sidaas ka duwan.

## GADIDDA LA SAMEEYO JIRADA GEERIDA XIGTA

### Qodobka 474aad

1. Gadida lagu sameeyey jirada geeridda u dhaw waxaa is hortaagi kara dadka leh dhaxaltooyada oo keli ah, haddii farqiga u dhaxeeya qiimaha la baxshay iyo qiimaha sheyga la gaday waqtiga dhimmashada uusan ka badneyn saddex meelood meel dhaxalka.

2. Haddii farqigaas uu ka badan yahay seddex meelood meel dhaxalka, gadida ka badan seddex meelood meel waxaa is hortaagi kara dadka dhaxaltooyada leh oo keli ah, haddii kuwaasi oggolaadaan ama haddii iibsaduhu u soo celi-

yo dhaxalka qadar lacageed oo lagama maarmaanka in buuxinaya saddex meelood laba meel —

3. Gadidda uu sameeyey qofka qaba jirada geeridda u dhow waxaa lagu dabaqayaa axkaamta qodobka 727.

Qodobka 475aad

Axkaamta qodobka hore laguma dabaqaayo si dhibaato u keento dad saddexaad oo iyagoo niyadsan helay si kala beddelasho ah xaq ceyn ah (diritto reale).

GADIDA WAKIILKA UU ISU SAMEEYEY

Qodobka 476aad

Haddii shuruucdu eysan si kale u caddeyn qofka wakiilka ka ah qof kale heshiis awgeed ama axkaam sharci, ama go'aan ka soo fulay madaxda awoodda u leh, uma bannaana in uu gato, toos ahaan ama magac qof kale xataa haddii gadidu lagu sameeyey naado, waxa isaga loo xilsaaray in uu gado isagoo wakiil ka ah, haddii uusan iirin ogolaasho cuskan go'aan Maxkamadeed.

Qodobka 4. .ad

Uma bannaana dalaaliinta iyo khubaraadu in ay iibsadaan toos ahaan ama qof kale magaciisa maalka loogu dhiibay in ay gadaan amaba qiimahiisa ay qaddaraan.

Qodobka 478aad

Gadida lagu xusay labada qodob ee hore wuu ansixi karaa haddii uu u oggolaado qofka magaciisa lagu sameeyey.

MADAXA II

ISKU BEDDELASHO ALAABEED

Qodobka 479aad

Isku beddelashadu waa heshiis oo labada dhinac waajib uga dhigaayo in ay isu wareejiyaan lahaansho maaleed ee ka duwan lacagta.

Qodobka 480aad

Shey'yaalka leysku beddeshay haddii ay leeyihiin qiima kala duwan sida labada heshiisay qadareyn, waxaa bannaan in lagu magdhawo farqiga lacag la'eg.



Qodobka 481aad

Kharajyadda heshiiska shey'yada leysku beddeshay iyo kharajyadda kaleba waxey dulsaaran yihiin si siman dadka kala beddeshay haddii uusan jirin heshiis sidaas ka duwan.

Qodobka 482aal

Axkaamta ku saabsan gadida waxaa lagu dabaqayaa kala beddelashada inta ay ogoshahay dabeecadda heshiikaas. Mid kasta oo ka mid ah kala beddeleyaasha waxaa loo qaadanayaa gade sheyga uu ku bixiyey kala beddelashada iyo iibsade sheyga uu helay.

MADAXA III

SIISMO

QEYBTA I

TIIRARKA SIISMADA

Qodobka 483aad

1. Siismadu waa heshiis uu ku tasarufaayo siiyaha maal uu leeyahay, si bilaash ah (titolo gratuito).

2. Siiyaha waxaa u bannaan asagoo wax u dhimin samafalka in uu dulsaaro la-siiyaha, in uu guto waajib xadidan.

Qodobka 484aad

1. Siismadu ma dhacdo in kan la siiyey amaba wakiilkiisu aqbala mooyee.

2. Haddii siiyuhu yahay maamulaha sharciyeed ama loo dardaarmaha, la siiyaha asaga ayaa u aqbalaaya siismada una qaadaya sheyga lagu bixiyey siismada.

Qodobka 485aad

1. Siismadda waxaa lagu sameeyaa qoraal rasmi ah haddii eysan lahayn qaabka heshiis kale.

2. Hase yeeshee, siismadda ku saabsan hantida guurta-

da ah waxey ku dhacdaa dhiibidda keli ah iyadoo aan loo baahneyn qoraal rasmi ah.

Qodobka 486aad

Uma bannaana siiyaha iyo dhaxaltooyadiisa in ay soo ceshadaan wixii ay dhiibeyn iyagoo khiyaarkooda ku fuliyey siismo baaba'ah ceeb ku saabsan qaabka awgeed.

Qodobka 487aad

Ballanqaadka siismadda waxey guntameysaa keli ahaan haddii lagu sameeyo qoraal rasmi ah.

Qodobka 488aad

Haddii siismadu ku dhacdo shey la hubo ee siiyuhu laheyn. waxaa lagu dabaqayaa axkaamta labada qodob 463-464

Qodobka 489aad

Siismada sheyga la heli doono waa baaba'.

QEYBTA II

SIISMADA RAADKEEDA

Qodobka 490aad

Kan la siiyey hadduusan qaadanin sheyga la siiyey, siiyaha waxaa saaran in uu u dhiibo sheyga. Arrintaasne waxaa lagu dabaqayaa axkaamta la xiriirta dhiibidda sheyga la gaday.

Qodobka 491aad

1. Siiyaha wuxuu lammaanayaa lahaanshadda keli ahaan, haddii uu si kasmo ah u qariyo sababta lahaashadda ama haddii ay siismaddu dulsaaran tahay culeys. Xaaladda hore Garsooruhu wuxuu siinayaa la siiyaha maghaw si cadd-aalad ah wixii dhibaata ah ee soo gaaray, xaaladda labaad siiyaha khasab kuma aha ilaa iyo inta uu la'eg yahay qiimaha



culeyska ee uu bixiyey la-siiyaha. Axkaamta kor lagu sheegay waa la dabaqayaa haddii uusan jirin heshiis sidaas ka duwan.

2. Xaaladda lahaanshadda la-siiyaha wuxuu galaa xagga xuquuqda iyo dacwooyinka meesha siiyaha.

Qodobka 492aad

1. Siiyaha lammaanan maayo in sheyga uu baxshay uusan ceeb lahayn.

2. Hase yeeshee, haddii siiyuhu si kasmo ah u qariyo ceebta ama haddii uu lammaanto jiritaan la'aanta ceebta, waxaa waajib ku ah inuu u magdhabo la-siiyaha wixii dhibaato ah ee ka soo gaaray ceebta. Sidoo kale waxaa waajib ku ah inuu bixiyo magdhaw khasaareed haddii siismadu ay dulsaarneyd culeys. waxaase shardi ah in qadarka magdhawga ah uusan ka badnayn qiimaha culayska uu sameeyey la-siiyaha.

Qodobka 493aad

Siiyaha wuxuu mas'uul ka yahay oo keli ah falka uu si kasmo ah u sameeyey ama gafkiisa weyn.

Qodobka 494aad

La-siiyaha waxaa waajib ku ah in uu guto culeysyadda siismadda, ha ahaadeen culeysyadaasi kuwo lagu heshiiyey oo ay faa'iido ugu jirto siiyaha ama qof seddexaad ama danta guud.

Qoboka 495aad

Haddii ay sugnaato in qiimaha sheyga la hibeeyey uu ka yar yahay culeyska lagu heshiiyey, lasiiyaha waxaa khasab ku ah in uu guto culeysyadaasi ilaa iyo inta uu la'eg yahay qiimaha sheyga la hibeeyey.

Qodobka 496aad

1. Haddii siismada lagu sameeyo culays ah bixinta deymanka siiyaha, la-siiyaha wuxuu ku khasban yahay oo keli ah in uu bixiyo deymanka jirey waqtiga siismadda, haddii uusan jirin heshiis sidaas ka duwan.

2. Haddii sheyga la hibeeyey la saaro culeys ah xaq muuqda (diritto reale) ee lagu lammaanayo deynta siiyaha ama qof seddexaad deyntiisa. la-siiyaha waxaa waajib ku ah in uu bixiyo deyntaasi, haddii uusan jirin heshiis sidaas ka duwan.

## QEYBTA III

## KA NOQOSHADDA SIISMADDA

### Qodobka 497aad

1. Siiyuhu wuxuu ka noqon karaa siismada haddii la-siiyaha uu ogolaado.

2. Haddii la-siiyuhu uusan oggolaan ka noqoshadda, siiyaha waxaa u bannaan in uu weydiisto Maxkamadda si looga oggolaado ka noqoshada, haddii ay jirto sabab la gareysan karo, eysana jirin wax ka reebi kara ka noqoshadda.

### Qodobka 498aad

Gaar ahaan waxaa loo qaadan karaa in ay jirto sabab ka noqoshadda siismadda :

b. Markii la-siiyaha uu ka soo bixi waayo ixsaankii uu ku lahaa siiyaha ama qof xigtadiisa, taasoo gaarsiisan heer culus.

t. Haddii siiyaha uu ku sugan yahay xaalad aan u oggolaaneynin in uu helo wax uu ku noolaado sida ay tahay xaaladahiisa bulshadeed ama haddii eysan u suurtoobi karin in uu guto waajibaadka ku saabsan nafaqada ee sharcigu saaray xagga daryeelidda dad kale.

j. Siismadda kaddib inuu dhalo wiil oo weli nool waqtiga ka noqoshadda ama haddii siiyuhu uu lahaa wiil uu u maleynayey in uu dhintay waqtiga siismadda oo ay caddaatay in uu weli nool yahay.

### Qodobka 499aad

Weydiisashadda ka noqoshadda siismadda la oggolaan maayo haddii ay jirto xaalad ka mid ah xaaladaha reebitaanka ee soo socdo :

b. Haddii ay jirto in sheyga la hibeeyey uu kordhay taasoo keentay in qiimihiisa uu kordho haddii sababta keentay kordhinta la waayo xaqa ka noqoshadda wuu soo noqdaa.



t. Haddii dhinacyadda siismadda midkood uu dhinto.

j. Haddii la-siiyaha uu ku isticmaalo sheyga la siiyey si kama dambeys ah haddii isticmaalku uu ku kooban yahay sheyga la siiyey barkiisa, siiyaha waxaa u bannaan ka noqoshadda siismadda qeybta ka hartay.

x. Haddii siismaddu ay ku heshiiyeen mid ka mid ah laba qof ee is-qabta iyadoo uu ka faa'iideysan karo kan kale xataa haddii siiyuhu uu rabay ka noqoshadda siismadda kaddib markii xiriirka guurka uu go'ay.

kh. Haddii sheyga la hibeeyey uu ku lumay gacanta la-siiyaha isagana uu sababtiisa leeyahay ama sabab kale uusan gacan ku lahayn ama sabab ka timid ku isticmaalkiisa. haddii qeyb ka mid ah ay luntay, waxaa bannaan ka noqoshadda qeybta hartay.

d. Haddii la-siiyaha uu bixiyo shey u dhigma sheyga la hibeeyey.

r. Haddii siismaddu ay tahay sadaqo ama samafal.

### Qodobka 500aad

1. Waxaa ka dhasha ka noqoshadda siismadda ee la isugu raali yahay ama tan ka timid go'aan garsooreed in siismaddu lagu tiriyo wax aan jirin.

2. La-siiyaha waa in uu celiyaa oo keliya xagga miraha laga billaabo taariikhda lagu heshiiyey ka noqoshadda ama taariikhda la oogay dacwadda. Wuxuu leeyahay in uu ka soo ceshaddu dhammaan kharajyadda lagama maarmaanka ah ilaa iyo inta uu la'eg yahay qiimaha kordhay iyo kharajyadda waxtarka ah ee uu bixiyey.

### Qodobka 501aad

1. Haddii siiyuhu heysto sheyga uu siiyey, iyadoo aan leysugu raali ahayn ama uusan jirin go'aan garsooreed, wuxuu mas'uul ka yahay xagga la siiyaha in hallaabidda sheyga ku dhacdo falkiisa amaba sabab ka baxsan doonidiisa amaba ku isticmaalkiisa.

2. Haddii xukun ku soo baxo ka noqoshada siismadda ee sheygine ku halaabo kan la siiyey gacantiisa markii lagu digay dhiibid kaddib kan la siiyey wuxuu mas'uul ka yahay halaabidda oo dhan, xataa haddii ay ku dhacdo rabid la'aantiisa.

## MADAXA IV

## SHIRKADDA

### Qodobka 502aad

Shirkaddu waa heshiis dhex mara laba qof ama ka badan ee isku waajibinaaya in ay ku biiriyaan mashruuc dhaqaaleed hanti ama hawlo si ay u qeybsadaan faa'iidada iyo khasaaradda ka dhalata mashruucaasi.

### Qodobka 503aad

1. Shirkaddu waxaa lagu tiriyaa marka ay dhisantaba qof xeereed, hase yeeshee qofnimada xeereed loogu la ma doodi karo dad saddexaad, haddii ayna ku kicin qaabka faafinta ee sharcigu doonayo.

2. Haddii shirkaddu eyna ku kicin qaabka faafinta ee lagu waajibiyey dadka saddexaad, waxaa u bannaan in ay ku doodaan qofnimadda xeereed, inkastoo shirkadda eyna ku kicin qaabka faafinta.

### Qodobka 504aad

Tiirarka heshiiska shirkadda iyo dhismaha, maamulka, dhammaadka iyo kala-diridda shirkadda, waxaa lagu habeeyaa xeer gaar ah.

## MADAXA V

## AMAAH

### Qodobka 505aad

Amaahdu waa heshiis uu amaahiyuhu isku waajibinaaya in uu u wareejiyo milkiyadda ama shey kale ee matal ah, la-amaahiyaha, kan dambana uu isku waajibinaayo in uu u celiyo amaahiyaha marka ay dhammaato muddada amaahda in la'eg isla sheyga xagga nooca iyo tilmaanta.



### Qodobka 506aad

1. Amaahiyaha waxaa saaran in sheyga lagu heshiiyey u dhiibo amaahsadaha, uma ay bannaana in uu weydiisto soo celinta masalkiisa marka ay dhammaato muddada amaahda mooyee.

2. Haddii sheygii uu baaba'o inta aan loo dhiibin amaahsadaha wuxuu ka baaba'ay amaahiyaha.

### Qodobka 507aad

Xaaladda lahaashadda sheyga waxaa lagu dabaqayaa axkaamta ku saabsan gadida, haddii amaahdu lagu bixiyey abaalgud, haddii uusan jirin abaalgud waxaa la dabaqayaa axkaamta ku saabsan caariyadda.

### Qodobka 508aad

Haddii laga helo sheyga ceeb qarsoon amaahduna ay ahayd abaalgud la'aan, amaahsaduhune doortay in uu ceshado sheygii, waxaa laasim ku ah oo keli ah in uu celiyo qiimaha sheyga ceebeysan.

Hase yeeshee, haddii amaahdu la socoto abaalgud ama ay tahay abaalgud la'aan, laakiin amaahiyuhu uu u kasay qarinta ceebta, amaahsaduhu wuxuu leeyahay in uu weydiisto kabidda ceebta ama in loogu beddelo sheyga ceebta leh mid aan ceeb lahayn.

### Qodobka 509aad

Amaahsadaha waxaa saaran in uu bixiyo dulsaaradda lagu heshiiyey marka mudashadeeda la gaaro. Haddii uusan jirin heshiis ku saabsan dulsaaradda waxaa lagu tiriyaa amaahda abaalgud la'aan.

### Qodobka 510aad

Amaahdu waxey dhamaataa marka uu dhaco waqtiga lagu heshiiyey.

Qodobka 511aad

Haddii lagu heshiiyo canshuurta dulsaarka, deynqabaha waxaa u bannaan lix bilood kaddib laga billaabo taariikhda amaahda in uu ogeysiiyo niyadiisa oo ah in uu ka baxo heshiiska, celiyana sheyga ay ku saabsan tahay amaahda, waxaase shardi ah in celintu la helo muddo aan ka badnayn lix bilood laga billaabo taariikhda ogeysiinta.

Xaaladdaasi deynqabaha waxaa laasim ku ah in uu bixiyo dulsaaradda la muteystay lixda bilood ee ka dambeysa ogeysiinta. Uma bannaana markastaba in lagu laasimiyo in uu bixiyo dulsaaro ama uu bixiyo gudasho nooc kastaba ha ahaatee, bixinta la hormariyey, awgeed, ma bannaana in lagu heshiiyo in la dhaafo ama la xadido xaqa la-amaahiyaha xagga soo celinta.

MADAXA VI

SULUX

QAYBTA I

TIIRARKA SULUXA

Qodobka 512aad

Suluxa waa heshiis oo ay dhinacyadu wax isu dhaafaayaan, iyagoo ku dhammeynaayo dood billaabatay ama ka dhowrsanaayaan mid suurtowdo in ay ka dhex dhalato.

Qodobka 513aad

Si loo gaaro sulaxa dhinacyaddu waa in ay lahaadaan awood tasarufeed ee sababteedu tahay kala-beddelasho xuquuq ee ku dhisan sulaxaas.

Qodobka 514aad

Ma bannaana in lagu sulaxtamo arrimaha ku saabsan xaaladda qofka ama nidaamka guud, waase bannaan tahay in lagu sulaxtamo danno dhaqaaleed ee ka yimaada arrimo la xiriira xaaladda qofka ama ka dhalata ku xadgudubka xeereed.



Qodobka 515aad

Suluxa wuxuu ku sugnaadaa qoraal amaba qoraal rasmi ah.

QEYBTA II

RAADKA SULUXA

Qodoboka 516aad

1. Suluxu wuxuu dhammeeyaa doodaha uu ku saabsan yahay oo keli ah.

2. Waxaana ka dhasha dhammaadka xuquuqda iyo dacwooyinka ay labada dhinac si kama dambeys ah uga tanaasuleyn.

Qoodobka 517aad

Suluxu wuxuu leeyahay raad caddeyn ah ee ku saabsan xuquuqda uu taabanayo. Raadkaasi wuxuu ku eg yahay xuquuqda ku jirto dooda.

Qodobka 518aad

Ereyadda sulaxa ee keena ka tanaasulid waa in loo fasiraa si aan ka dheereyn macnaha ereyadda ereyaddaasi si kastaba ha ahaadeenee ka tanaasulidda raad kuma laha waxa aan ahayn xuquuqda salka u ah si cad iyo mowduuca suluxu dhammeeyey.

QEYBTA III

BAABI'INTA SULAXA

Qodobka 519aad

Ma bannaana in lagu duro sulaxa gaf xeereed dartiisa.

### Qodobka 520aad

1. Sulaxa ma qeybsamo, qeyb asaga ka mid ah burideedu waxay keentaa buridda sulaxa oo dhan.

2. Hase yeeshee xukunkaani la dabaqi maayo haddii ereyada heshiiska ama duruufta ka caddaato in dhinacyadu ku heshiiyeen in ay u qaataan in qeybaha sulaxa eyna xiriir laheyn.

## BAABKA II

## HESHIISYADA KU SAABSAN KU INTIFAACIDDA ALAABTA

### Qeybta 1

### KIRADA GUUD AHAAN

### Tiirarka Kirada

### Qodobka 521aad

Kirada waa heshiis ee uu kireeyaha isaga dhigayo waajib in uu siiyo kireystaha in muddo ah inuu ku intifaaco shey xadidan, isagoo dhaafsanayo lacag u dhiganta.

### Qodobka 522aad

Kirada uu sameeyo qof sameeyo qof doonfuul ah iyadoo uusan gadaal ka oggolaan qofkii milkiyadda lahaa, waxay ku idlaataa dhammaadka doonfuulka. Mar walbana waa in la dhowraa waqtiga ka bixidda heshiiska iyo kuwa looga baahan yahay raridda miraha sannadkaas.

### Qodobka 523aad

Waxa kirada la siisanayo waxey noqon kartaa lacag ama wax kale oo u dhigma.

### Qodoba 524aad

Haddii uusan jirin heshiis ay dhinacyada ku qaddireyn cadadka lacagta loo qaadanayo kirada, ama hababka lagu xadidayo ama haddii aan cadadka lacagta loo qaadanayo kirada la qadarin karin, waxaa loo qaadanayaa lacagta kirada alaabaha la mid ah.

### Qodobka 525aad

Haddii heshiiska kirada la sameeyey iyadoo aan la sheegin muddadiisa ama uu yahay mid muddadiisa aan xadidneyn ama haddii aan muddadiisa la goyn karin, waxaa loo qaadanayaa in heshiiska kirada loo galay muddada u dhiganta lacagta la bixiyey. Kiraddu waxey ku egtahay dhicidda waqtigaas, iyadoo dhinacyada midkood weydiisanayo, waxaase shardi ah in dhinaca wax weydiistay uu siiyo dhinaca kale digniin ka bixid ah ee u dhiganta muddada kirada lagu heshiiyey nuskeeda.

## RAADADKA KIRADA

### Qodobka 526aad

Kireeyaha waxaa waajib ku ah in uu ku wareejiyo kireystaha sheyga iyo wixii la xiriira, iyagoo ku sugan siyaabihii loogu tala galay, ku isticmlaakooda sida waafaqsan qasadka ay ka lahaayeen dhinacyada ama dabeecadiisaba tahay.

### Qodobka 527aad

1. Haddii sheyga lagu wareejiyo kireystaha isagoo leh sifo aan wax tar u lahayn ku isticmaalka dantii laga lahaa ama haddii uu ku isticmaalkiisa aad u nuqsaamo, qofka wax laga kireeyey wuxuu codsan karaa in heshiiska la jibiyo ama in lacagtii laga dhimo in u dhiganta nuqsaanka intifaaca iyo magdhawgii dhibaatada soo gaaray haddii uu xaq u leeyahay.

2. Haddii sheyga uu ku sugan yahay xaalad aad qatar ugu ah caafimaadka kireystaha (conduttore) ama ciddii kale oo la deggan ama dadka u shaqeeya, qofka wax kireystay wuxuu codsan karaa jebinta heshiiska xataa haddii uu markii hore ka tanaasulay xaqaas.

### Qodobka 528aad

Waajibka ah in la wareejiyo sheyga la kireystay, waxaa lagu dhaqayaa axkaamta ku saabsan waajibka ah in la wareejiyo sheyga la gatay, gaar ahaan wixii ku saabsan muddada iyo meesha lagu wareejinayo waxa sheyga ku jiro iyo xadidaada wixii la xiriira.

### Qodobka 529aad

Kireeyaha waxaa waajib ku ah in uu ku hayo sheyga uu kireeyey xaaladda uu ku sugnaa waqtigii uu wareejiyey, waana in uu muddada ay socoto kirada sameeyaa wixii hagaajin ah ee uu u baahdo.

### Qodobka 530aad

1. Haddii kireeyuhu uusan fulinin waajibaadka lagu xusay qodobka kore, kireystaha wuxuu codsan karaa, isagoo aan wax u dhimin xaqiisa in la jibiyo heshiiska kirada ama in wax laga dhimo lacagtii uu bixiyey wuxuuna ka heli karaa Maxkamadda oggolaasho in uu isaga sameeyo hagaajintaa, isagoo ka jarayo kharajka lacagta uu bixiyey.

2. Haddii ay tahay hagaajin degdeg ah ama mid yar oo laga rabo kireeyaha oo ay ka timid ceeb jirtay markii la oggolaaday ku intifaaca sheyga ama dhibaato gadaal ka timid, kireystaha wuxuu awood u leeyahay in uu hagaajinta ku dhaqaaqo isagoo aan amar ka haysanin Maxkamadda isla markaana wixii kharaj ee ku baxay ka jarayo lacagta uu bixiyey, haddii kireeyaha (locatore) dib uga dhaco bixinteeda waqtigii habboonaa.

### Qodobka 531aad

1. Haddii inta lagu guda jiro muddada kirada sheyga la kireeyey uu gabigiisaba baaba'o, heshiiska sharci ahaan buu u jabayaa.

2. Haddii iyadoo uusan sababteeda lahayn kireystaha uu sheyga la kireystay qaar ahaantiisa baaba'o ama ay xaaladdiisa noqoto mid aan waxba ka anfaceynin dantii laga lahaa



ama haddii uu intifaaciisa aad u nuqsaamo, kireystaha wuxuu codsan karaa, haddii kireeyuhu uusan hagaajinin sheyga la kireeyey muddo suura gal ah dhexdeeda, in lacagta uu bixiyo la dhimo, ama jebinta heshiiska iyadoo ayan waxyeeleyneynin xaqiisa ah in uu fulin karo waajibaadkii laga rabay kireeyaha (locatore), sida waafaqsan axkaamta qodobka kore.

3. Labada xaaladood ee hore, kireystaha kuma doodi karo magdhaw dhibaato, haddii dhumidda ama halaabidda ay ka yimaadaan sabab uusan lug ku laheyn kireeyaha.

### Qolobka 532aad

1. Kireystaha uma diidi karo kireeyaha in uu sameeyo hagaajinta degdegga ah ee looga baahan yahay xafidaada sheyga la kireeyey. Hase yeeshee. haddii fulinta hagaajintaasi ay gabi ahaan ama qaar ahaan reebayo ku intifaacidda sheyga la kireeyey, kireystaha wuxuu hadba codsan karaa jibinta heshiiska ama dhimidda lacagta uu bixiyey (corrispettivo).

2. Haddii marka ay idlaato hagaajinta, kireystaha uu sii wado ku jiritaanka meesha, xaq uma laha in uu codsado jibinta heshiiska.

### Qodobka 533aad

1. Kireeyuhu waa in uu ka istaagaa ficil kasta oo qalqalineysa ku intifaacidda sheyga uu kireystay dhinaca kale, kuma sameyn karo sheygaas iyo wixii la xiriiraba beddelaad wax u dhimeysa ku intifaaciisa.

2. Kuma waajib aha in uu ka dammaanad qaato kireystaha, ma aha ficilkiisa iyo kuwa dadka isaga u shaqeeya (dipendenti) oo keli ah, balse khasaaro kasta ama qalaaqal kasta oo loo geysto xaqiisa oo uga yimaada kireeye kale ama qof xaq ku leh kireeyahaas.

### Qodobka 534aad

1. Haddii qof saddexaad uu ku sheeganayo sheyga la kireeyey xaq aan la socon karin midda kireystaha, kani waa

in uu si dhaqsiyo ah arrintaan u soo gaarsiiyaa kireeyaha (locatore), wuxuuna codsan karaa in isaga arrintooda laga dhex saaro. Markaasi dacwaddaas waxaa lagu oogayaa kireeyaha oo keliya.

2. Haddii xaqaas awgiis, kireystaha (conduttore) laga mamnuucay ku intifaacidda sheygaas la kireeyey, wuxuu hadba codsan karaa jibinta heshiiska ama dhimidda lacagta uu bixiyo (corrispettivo) ay la jirto magdhawgii khasaaraha, haddii uu jiro.

Qodobka 535aad

1. Haddii kireystayaasha ay badan yihiin, waxaa hormarin leh midka aan khiyaano la'aan ku horeeyey haysashada sheyga la kireeyey. Haddii qof ka mid ah kireystayaasha (conduttori) hal maguurto uu si niyadsami ah u diiwaangeliyo «trascritto il suo atto» inta aan kireyste kale gacanta loo gelinin sheyga, ama inta aynan dhicin muddadii heshiiska la cusbooneysiiyey, horumarinta isaga ayaa leh.

2. Haddii aynan jirin sabab loo kala hormariyo kireystayaasha isla kireystay «piu' conduttori», waxay xaq u leeyihiin, haddii xuquuqdooda iska hor imaaneyso magdhaw khasaaro oo keliya.

Qodobka 536aad

Haddii, kaddib markii warqad ay sharci ahaan u sameeyo «atto legalmente compiuto» xafiis ay dawladda leedahay, uu intifaaco sheyga la kireystay uu aad u nuqsaamo, kireystaha «conduttore» wuxuu hadba codsan karaa jibinta heshiiska ama in wax laga dhimo lacagta uu bixiyo. Haddii warqadda dawladeed ay sababteeda tahay arrin lagu eedeyn karo kireeyahu (locatore), kireystaha wuxuu ku dacwoon karaa magdhaw khasaaro. Axkaanta hore lagu caddeeyey waa la dabaqayaa haddii aynan jirin heshiis sidaas ka duwan.

Qodobka 537aad

1. Kireeyaha waajib kuma aha in uu ka dammaanad qaado kireystaha dhibaatooyinka maadadeed ee kaga yimaado dhan qof saddexaad, hadduusan midka kan ku doodeynin in uu xaq ku leeyahay sheyga la kireeyey; kireystaha wuxuu mar kasta shaqsi ahaantiisa ku dacweysan karaa qofka dhibaatada u geystay; magdhaw khasaaro iyo dacwadaha ku saabsanaa haysashada «azioni possessorie».



2. Hase yeeshee' haddii dhibaatada maadadeed aan loo eedeyn karin kireystaha, isla markaana ay tahay mid culus ee ka reebeysa ku intifaacidda sheyga, kireystaha wuxuu hadba codsan karaa in la jebiyo heshiiska ama la dhimo lacagta uu bixiyo.

Qodobka 538aad

1. Kireeyaha waxaa ku waajib ah in uu ka dammaanad qaado kireystaha wixii ceebo iyo cillado ah (Vizi e difetti) ee reebaya ama si la garan karo u nuqsaaminaya ku intifaacidda sheyga, ee ma aha ceebaha aan caado ahaan loo dulqaato. Wuxuu mas'uul ka yahay haddii sheyga la waayo sifadaha uu ku ballanqaaday. ama looga baahan yahay sheyga dantii laga lahaa. Axkaanta kor lagu caddeeyey waa la dabaqayaa, haddii aynan jirin heshiis sidaas ka duwan.

2. Hase yeeshee, kireeyuhu kuma aha waajib in uu ka dammaanad qaado kireystaha ceebaha loo sheegay ama uu ogaaday waqtigii heshiiska la kala qoranayey.

Qodobka 539aad

1. Haddii sheyga la kireeyey uu leeyahay ceeb ay dabooshay dammaanaddu, kirestaha wuxuu hadba codsan karaa jibinta heshiiska ama dhimidda lacagta uu bixiyo. Wuxuu isla markaa codsan karaa in la hagaajiyo ceebta ama uu isaga ku hagaajiyo kharajka kireeyaha (a spesa del locatore) haddii kharajka hagaajinta aynan aad ugu badneyn kan dambe.

2. Haddii ceebahaas ay ugu timaado dhibaato kireystaha, kireeyaha waxaa waajib ku ah in uu u magdhawo, hadduusan muujinin in uusan ka warqabin jiritaanka ceebahaas.

## Qodobka 540aad

Waa baaba'a heshiis kasta ee reebaya ama xadidaya lammaanadda dhibka ama ceebaha ( la garanzia per le molestie o i vizi) haddii kireeyuhu uu ula kas u qariyey sababta.

## Qodobka 541aad

Kireystaha waxaa ku waajib ah in uu sheyga la kireeyey ugu isticmaalo sidii uu heshiiska ahaa. Haddii aynan jirinna heshiis, waa in uu ugu isticmaalaa si waafaqsan dantii loogu tala-galay.

## Qodobka 542 aad

1. Kireystaha kuma sameyn karo sheyga beddelaad. Hadduusan oggolaansho ka haysan kireeyaha, haddii wax dhibaato ah aynan uga immaaneynin kireeyaha.

2. Haddii isagoo gudbaya xadka waajibka kor ku xusan, uu kireystuhu beddelaad ku sameeyo sheyga. waa lagu khasbi karaa in uu sheyga ku soo celiyo sidiisii hore, iyo in uu bixiyo magdhaw khasaaro, haddii ay jirto.

## Qodobka 543aad

1. Kireystaha wuxuu sheyga uu kireystay gelin karaa, biyaha, nalka korontada, gaaska, telefoonka, raadiyaha telefishinka iyo alaabada kale oo la midka ah iyadoo shardiga ku xiran uu yahay in sifaha gelinta uusan ka soo horjeedin ku dhaqanka iyo in uu kireeyaha uusan caddeynin in alaabadaasi ay dhibayaan nabadgelyada ma-guurtada.

2. Haddii joogitaanka kireeyaha loo baahan yahay marka alaabta la gelinayo, kireystaha wuu codsan karaa joogitaankiisa, isagoo ballanqaadaya inuu bixiyo wixii kharaj ah oo ku baxa kireeyaha (locattore).



## Qodobka 544aad

1. Kireystaha waxaa ku waajib ah in uu ku isticmaalo sheyga uu kireystay, uuna ku xafido dadaalka qofka caadiga ah.

2. Wuxuu ka jawaabayaa halaabidda iyo dhumidda sheyga inta uu ku isticmaalayo oo aan ka imaanin ku isticmaalkiisa caadiga ah.

## Qodobka 545 aad

1. Kireystaha wuxuu mas'uul ka yahay gubashada sheyga uu kireystay, hadduusan caddeynin in shilku ka imaanin sabab isaga lagu eedeyn karo.

2. Haddii dadka hal maguurto isla kireystay ay badan yihiin, dhammaantood waxay ka jawaabayaan gubashadaa iyadoo uu ku jiro kireeyaha (locatore) haddii uu la deggan yahay waxeyna uga jawaabayaan si u dhiganta qof walba inta uu deggan yahay haddaanan la caddeynin in gubashada ay ka billaabantay qaybta u gaarka ah isticmaal midkooda, keligiis ayaa ka mas'uul ah.

## Qodobka 546aad

Kireystaha waa in uu si dhaqsi ah ula socodsiiyaa kireeyaha dhammaan arrimaha dhan oo u baahan soo dhexgeliddiisa, sidia hagaajinta degdegga ah, soo ban bixid ceebaha (vizi), xoog kula degid, rabsho (molestic) iyo dhibaatada uu qof saddexaad u geysto sheyga la kireeyey.

## Qodobka547aal

1. Kireystaha waa inuu bixiyaa lacagta (corrispettivo) markii ay dhacdo muddada lagu heshiiyey, haddii uusan jirinna, muddada dhaqanka maxalliga ah looga isticmaalo.

2. Haddii uusan jirin heshiis kale ama caado ka soo horjeeda, lacagta (correspettivo) waxaa lagu dhiibayaa meesha

uu deggan yahay kireystaha (Conduttore).

Qodobka 548aad

Bixinta hal qeyb (rata) ee lacagta kirada, waxey muujin u tahay in qeybihii ka horreeyey la bixiyey, haddii eynan jirin caddeyn ka soo horjeeda.

Qodobka 549aad

Haddii heshiis ka soo horjeeda uusan jirin, bixinta hormarinta ee lacagta kirada ama gudashadda lammaanado kale, qofka kireystay guri, maqaasiin, dukaan ama meel la mid ah ama mulkiyad miyiga ku taal, waa in uu geliyaa meesho alaabo guurto ah, badeeco, mira la goosto, xoolo, alaabta lagu dhaqmo ilaa qiimo kifaayo u ah in uu lammaaniyo bixinta lacagta kirada ilaa muddo 2 sano ah ama ilaa muddada kirada ay tahay oo dhan haddii ay muddadu labo sano ka yar tahay.

Qodobka 550aad

1. Kireeyaha «locatore» si uu u lammaanto deynta uu leeyahay ee ka timid kirada, wuxuu xaq u leeyhay in uu heysto «diritto di ritenzione» dhammaan alaabta guurtadda ah ee la xaraashi karo ee taal meelaha kirada loogu jiray «chi si trovano nei locali» haddii la dulsaaray xaqa hormarinta kireeyaha «privileggio del locatore» xataa haddii uusan lahayn kireystaha. Kireeyaha wuxuu is hortaagi karaa qaadidda alaabaha guurtada ah, haddii la qaadana xataa markii uu is hortaagay, ama isagoo aan ogeyn, wuxuu ka soo ceshan karaa haysadaha «puo rivendicarli al possessore» xataa haddii uu niyadsan yahay, iyagoo aan wax u dhimaynin xuquuqda haysadaha gacanta ku haayey.

2. Kireeyaha «locatore» ma isticmaali karo xaqa ceshasada ama haysashada «diritto di ritenzione o di rivendicazione» haddii alaabta guurtada ah loo qaaday baahidda xirfadda kireystaha ama sida waafaqsan caadada socota, ama markii alaabta lagu dhaafay meelaha «locale» la isku



qabtay ay ku filan yihiin in ay lammaaniyaan «garantivo» bixinta lacagta kirada oo idil.

Qodobka 551aad

Kireystaha waa in uu u celiyaa sheyga markii uu dhaco heshiiska kirada, haddii uu sii haysto si sharci darro ah, waa in uu siiyaa kireeyaha magdhaw lagu xisaabinayo qiimaha ijaarka sheyga, iyadoo loo fiirinayo khasaarada ka soo gaartay kireeyaha.

Qodobka 552aad

1. Kireystaha waa in uu sheyga ku soo celiyaa xaaladdii uu ku sugnaa markii loo dhiibayey, marka laga reebo dhumidda iyo halaabidda uusan mas'uul ka ahayn.

2. Haddii waqtigii loo dhiibayey aan la qorin minguuris ama sifeyn lagu caddeynaayey xaaladda sheyga la kireeyey, waxaa loo qaadanayaa ilaa laga helo caddeyn ka soo horjeeda, in uu kireystaha kula wareegay xaalad fiican.

Qodobka 553aad

1. Haddii kireystaha uu ku kordhiyey dhisid ama tilaal geedo ama wanaajin kale ee siyaadisay qiimaha maguurtada, kireeyaha, haddii heshiis ka soo horjeeda uusan jirin, waa in uu waqtiga muddadaa kirada ay idlaato, u celiyaa kireystaha qiimaha kharajka uu galay ama siyaadada ku korodhay qiimaha guriga.

2. Haddii wanaajintaa la sameeyey iyadoo uusan ka war qabin kireeyaha «locatore» ama isagoo ka soo horjeeda, wuxuu codsan karaa in laga fujiyo waxa lagu kordhiyey «rimozione» iyo, haddii ay jirto, wuxuu ku dacweysan karaa kireystaha in uu siiyo magdhaw ah khasaarihii maguurtada ka soo gaartay fujintaas awgeed.

3. Haddii kireeyuhu uu doonayo in uu haysto wanaajintaas, isagoo celinaya labadii kharaj ee kor lagu sheegay midkood, Maxkamaddu waxey u qaban kartaa muddo uu ku bixiyo.

## WAREEJINTA KIRADA IYO SII-KIREYNTA

### Qodobka 554aad

Haddii heshiis ka soo horjeeda uusan jirin, kireystaha wuxuu xaq u leeyahay in uu wareejiyo kirada «cedere la locazione» ama in uu sii-kireeyo sheyga uu kireystay dhammaantiis ama barkiis.

### Qodobka 555aad

1. Ka reebidda sii-kireynta sheyga la kireeyey wuxuu keenayaa in aan la wareejin karin kirada iyo sidaas si ka soo horjeeda «viceversa».

2. Hase yeeshee, haddii uu sheyga yahay maguurto ku taalo meel warshadeed ama ganacsiyeed isla markaana wareejinta meeshaas lagama maarmaan tahay, Maxkamadda, xataa haddii uu jiro shardi reebaya, waxey goyn kartaa wadidda kirada, haddii Iibsadaha uu dhiibo lammaanad kaafi ah, kireeyuhuna aynan gaareynin khasaaro dhab ah.

### Qodobka 556aad

Haddii la wareejiyo kirada kireystuhu wuxuu sii ahaanayaa lammaane, fulinta waajibaadka qofka lagu wareejiyey «Cessionario».

### Qodobka 557aad

1. Sii-kireystaha «subconduttore» waxaa si toos ah waajib ugu saaran yahay kireeyaha «locatore» ilaa qiimaha la rabo in uu siiyo kireystaha «conduttore» marka uu sidaa ugu digo kireeyaha.

2. Sii-kireystaha «subconduttore» kama hor istaagi karo kireeyaha «locatore» lacagta uu u hormariyey kireystaha «conduttore», haddii aan lacagtaas la bixin inta uusan u digin kireeyaha «locatore» sida waafaqsan dhaqanka ama heshiis la kala saxiixday markii sheyga la sii-kireynayey «momento della «sublocazione».



### Qodobka 558aad

Kireystaha waxaa ka haraya lammaanadii uu u qaaday kireeyaha, haddii la wareejiyo heshiiska kirada iyo waajibaadka ku xusan heshiiska asalka ee kirada haddii ay tahay sii-kireyn «sublocazione» :

1. Haddii kireeyuhu uu oggolaado wareejinta ama sii-kireynta.

2. Haddii uu isaga toos ahaan uga helayo, isagoon ka taxafudin «senza riserva» xuquuqda uu ku leeyahay kireystaha lacagta kirada «corrispettivo» qofka sheyga lagu wareejiyey ama laga sii-kireeyey.

## DHAMMAADKA KIRADA

### Qodobka 559aad

Kiraddu waxey dhammaaneysaa markii ay idlaato muddada ku xusan heshiiska iyadoo aan loo baahneyn digniin ka bixid.

### Qodobka 560aad

1. Haddii marka ay dhammaato muddada kirada uu kireystaha sii wado ku intifaaca sheyga la kireeyey, kireeyuhuna uu ogyahay is hortaagna ka keenin, waxaa loo qaadanayaa in kirada lagu cusbooneysiiyey shuruudahii hore, laakiinse mudda aan xadidneyn. Kirada sidatan lagu cusbooneysiiyey waxaa lagu dabaqayaa sida ku xusan axkaanta qodobka 525.

2. Cusbooneysiintaas aamusnaanta ah, waxaa loo qaadanayaa heshiis cusub ee ma aha sii wadidda heshiiskii asliga ahaa. Hase yeeshee iyadoo aan lagu xadgudbin xeerarka ku

saabsan faafinta maguurtada, lammaanadda ceyneed «granzie reali» ee uu bixiyey kireystaha «conduttore» si uu u lammaaniyo kiradii hore, waxey lammaanad u sii noqonayaan kirada cusub Wixii ku saabsan lammaanad shaqsiyeed ama ceyneed «fideussione personale o reale» ma saameyneyso kirada cusub hadduusan oggoleen qofka wax damiinay «fideusore».

Qodobka 561aad

Haddii qof dhinacyadda ka mid ahi uu ogeysiiyo ka bixidda dhinaca kale, iyo haddii kireystaha uu sii wato ku intifaaca sheyga kaddib markii ay idlaatay muddadii kirada, inkastoo la siiyey digniin, looma qaadanayo in ay jirto cusbooneysiin aamusnaan ku timid, haddii eynan jirin caddeyn ka soo horjeeda.

GEERIDA AMA AWOOD LA'AANTA

BIXINTA EE KIREYSTAHA

Qodobka 562aad

1. Kirada kuma idlaaneyso geerida kireeyaha iyo kireystaha toona.

2. Hase yeeshee, haddii uu geeriyoodo qofka wax kireystay, dadka dhaxaltooyadiisa leh waxey codsan karaan jibinta heshiiska haddii ay muujiyaan in kaddib geerida kireystaha, ay lacagta kirada aad ugu cuslaato' marka loo eego dakhligooda ama in ay kiradu dhaafsan tahay baahidooda. Markaas waa in la dhowraa ogeysiinta ka bixidda heshiiska ee lagu xusay qodobka 525, arjiga codsiga jibinta heshiis-kana waa in la keenaa muddo ay 6 bilood ugu badan tahay gudaheed marka laga billaabo waqtiga uu geeriyooday kireestaha.

Qodobka 563

Haddii heshiiska kiradu uusan saameyn kireystaha hawshiisa iyo arrimo kale ee isaga khuseeya mooyee, dhaxaltooyadiisa ama kireeyaha waxey geeridiisa kaddib codsan karaan jibinta heshiiska.



Qodobka 564aad

1. Awood la'aanta bixinta (insolvenza) ee kireystaha, kama dhigeysa mid bixiye lacagta (corrispettivo) aan weli go'in.

2. Hase yeeshe kireeyaha wuxuu codsan karaa jibinta heshiiska, haddii aan muddo kaafi ah dhexdeed la siinin lammaanad ah bixinta lacagta aan weli go'in. Sidaas oo kale, kireeyaha haddii uusan helin oggolaanshaha wareejinta kirada ama sii-kireynta, codsan karaa jibinta heshiiska isagoo bixinaya magdhaw habboon.

Qodobka 565aad

1. Haddii mulkiyadda sheyga la kireeyey ay si raali ah ama khasab ah u wareegto qof kale, heshiiska kirada laguma hor istaagi karo iibsadaha, haddii uu heshiiska ka horreeyey gadashada sheyga mooyaane.

2. Hase yeeshe, iibsadaha wuu ku doodi karaa heshiiska kirada xataa haddii lagu hor istaagi karin.

Qodobka 566aad

1. Iibsashada oo aan lagu hor istaagi karin kirada, kama saari karo qofka wax kireystay markii uu siiyo ka bixidda (disdetta) iyo ogeysiinta lagu xusay qodobka 525 mooyaane.

2. Marka aynan jirin caddeyn ka soo horjeedda, haddii ka bixidda heshiiska la dhiibay inta aynan idlaanin muddadii kirada, kireeyaha waa in uu u magdhabaa kireystaha. Laguma khasbi karo in uu ka baxo sheyga inta uusan u magdhabin kireeyaha ama iibsadaha isagoo xureynaayo kan dambe ama inta uu ka helayo lammaanad kaafi ah in la siinayo magdhawga.

Qodobka 567aad

Kireystaha kama hor istaagi karo iibsadaha hormarinta lacagta kirada, haddii iibsaduhu uu caddeeyo in waqtigii bi-

xinta kireystuhu uu ogaa ama uu ogaan karay iibka. Haddii caddeyntaas la waayo, wuxuu dacweysan karaa kireeyaha oo keliya.

Qodobka 568aad

Haddii heshiiska kirada lagu daro in kireeyuhu uu dhammeyn karo kirada marka uu shaqsi ahaan u baahdo sheyga la kireeyey, kireeyaha waa in uu si uu u fushado xaqaas, siiyaa kireystaha ka bixidda ay la socoto ogeysiinta lagu xusay qodobka 525, haddii uusan jirin heshiis ka soo horjeeda.

Qodobka 569aad

Hawlwadeenada iyo karaaniyaalka, haddii ay beddelaan fadhigood hawl darteed, haddii ay kiradu tahay mid guri la dego ah oo muddadeedu xadidan tahay, waxay codsan karaan jibinta heshiiska, iyadoo la dhowrayo ogeysiinta ku xusan qodobka 525. Waa baaba'a heshiis kasta ee ka soo horjeeda.

QEYBTA 2

IJAARKA DHULKA BEERAHA (affitto dei fondi rustici)

Qodobka 570aad

Haddii sheyga la kireeyey uu yahay dhul beereed, kireeyaha lagama rabo in uu ku wareejiyo kireystaha (affituario) alaabta shaqada ee yaalo dhulka, haddii aynan ku jirin heshiiska.

Qodoobka 571aad

Haddii alaabta kireeyaha lagu wareejiyey kireystaha kani waa in uu u xafidaa kuna isticmaalaa sida ay isticmaal caadi ah ay qabto.

Qodobka 572aad

1. Kireystaha waa in uu kaga faa'iideystaadhulka si waafaqsan baahinta caadiga ah, gaar ahaana waa in dulka ku hayaa xaalad wanaagsan ee uu wax ku dhali karo.

2. Haddii uusan ogolaansho ka haysanin kireeyaha kuma sameyn karo beddelaad dhab ah habka kaga faa'iideysiga dhulka oo jira ee uu raadkooda dhaafi karo muddada ijaarka.



Qodobka 573aad

Kireystaha ka baxaya, kuma kici karo arrimo nuqsaamin kara ama daahin kara ku intifaacidda dhulka ee dhanka kan isaga beddelay. Gaar ahaan waa in uu inta uusan dhaafin dhulka, iyadoo taa aynan dhibaato u keenin, u oggolaadaa kan beddelaya in uu diyaarsado dhulka uuna beerto.

MADAXA II

ERGASHADDA

Qodobka 574aad

Ergashada waa heshiis uu laga ergadaha (comodante) uu waajib isaga dhigayo in uu ku wareejiyo ergadaha (comodatario) hal shey aan dhammaaneynin (non consumabile) si uu muddo ugu isticmaalo lacag la'aan ama isticmaal go'an isagoo kan dambena khasab ku tahay in uu soo celiyo sheyga kaddib markii uu ku isticmaalo.

Qeybta 1

WAAJIBAADKA LAGA ERGADAHA

Qodobka 575aad

Laga ergadaha waa in uu ku wareejiyaa ergadaha sheyga isagoo leh xaaladda uu ku sugan yahay markii la kala qortay heshiiska iyo in uu sheyga ku dhaafo gacantiisa inta ay socoto muddada heshiiska.

Qolobka 576aad

1. Haddii inta ay socoto muddada ergada, ergadaha waa

jib looga dhigay in uu sameeyo kharajka lagama maarmaanka ah xafidaada sheyga, laga ergadaha (comodante) waa in uu u celiyaa kharajkaas.

2. Haddii uu kharajka yahay mid wax tar ah, waxaa la dabaqayaa xeerarka quseeya kharajka uu galo heysadaha niyadda-xun.

Qodobka 577aad

1. Laga ergadaha lagama rabo lammaanada ku saabsan soo sheegashada sheyga ee ka timaada dhan kale, haddii uusan jirin shardi lammaanadeed (clausola di granzia) ama uusan isagu ula kac u qarinin sababta keentay soo sheegashada sheyga (evizione).

2. Laga ergadaha waxaa ka reeban oo kale lammaanadda ceebaha qarsoon (vizi nascosti). Hase yeeshee, haddii uu isagu si ula kac ah u qariyey ceebaha sheyga ama haddii uu lammaanad qaaday in uu sheyga uusan lahayn ceebo, waxaa ku waajib ah in uu uga magdhabo ergadaha comodatario) khasaaro kasta ee ceebaha dartood ku soo gaartay.

QEYBTA II

WAAJIBAADKA ERGADAHA

Qodobka 578aad

1. Ergadaha sheyga uguma isticmaali karo, haddii uusan ahayn habka ama qiyaasta lagu gooyey heshiiska, dabiicadda sheyga ama caadooyinka mooyee. Ma siin karo qof saddexaad ku intifaacidda sheyga xataa lacag la'aan hadduusan oggolaanin laga ergadaha (comodante).

2. Ergadaha kama jawaabaya beddelaada ama halaabidda ku timid sheyga, isticmaalka loogu tala galay dartiis.



Qodobka 579aad

1. Ergadaha xaq uma laha in loo celiyo kharajka uga baxay ku isticmaalka sheyga, waana in uu galaa kharajka looga baahan yahay xafidaada caadiga ah ee isla sheyga.

2. Wuxuu ka qaadan karaa sheyga wixii qalab ah uu ku kordhiyey iyadoo shardi uu yahay in uu sheyga xaaladiisi asliga ahayd ku soo celiyaa.

Qodobka 580aad

1. Ergadaha waa in uu ku xafidaa sheyga dadaalka qofka caadiga ah.

2. Markasta wuxuu mas'uul ka yahay baabi'idda sheyga ee ka timaado amar aan la celi karin (caso fortuito) ama xoog aan la reebi karin (forza maggiore) haddii ay u suurtoobi lahayd inuu celiyo baabi'ida sheygaas, shey uu isaga leeyahay iyo haddii uu badbaadinwaayey labadaas shey uu doorto inuu badbaadiyo kiisa.

Qodobka 581aad

1. Ergadaha waa inuu markii ergashadda dhammaato ku soo celiyaa sheyga uu helay xaaladda uu ku sugnaa, iyadoo sidooda u jirayaan mas'uuliyaddiisa ee ku saabsan dhumidda iyo halaabidda.

2. Haddii uusan jirin shey sidaas ka duwan, soo celinta waa in lagu sameeyaa meesha uu ergadaha ku helay sheyga.

QEYBTA III

DHAMMAASHADA ERGASHADA

Qodobka 582aad

1. Ergashada waxey ku dhammaaneysaa dhicidda waqtiga lagu heshiiyey ama haddii aysan jirin muddo, marka sheyga loogu adeegto isticmaalka loo dhiibay.

2. Haddii muddada ergashada aan si kastaba loo xaddidi karin, laga ergadaha waxaa u bannaan markastaba inuu joojiyo ergashadda.

3. Mar kastaba ergadaha waxaa u bannaan inuu soo celiyo sheyga ka hor inteysan dhammaan ergashada, hase yeeshee haddii soo celinta ay u keeneyso dhibaato laga ergadaha, kani laguma qasbi karo inuu oggolaado.

Qodobka 583aad

Ergashada waxey dhammaan kartaa waqti kasta markii uu weydiisto laga ergadaha sida xaaladaha soo socda :

b. Haddii laga ergadaha ay ku timaado baahi degdeg ah oo aanan la fileyn ee sheyga.

t. Haddii ergadaha uu xadgudub ku sameeyo ku isticmaalka sheyga ama uusan ku dadaalin xafidaada lagama maarmaanka ah ee sheyga.

j. Haddii ergadaha uu waayo awoodda bixinta kaddib marka heshiiska uu dhammaado, ama awood la'aanta bixinta ay horeysay uusana ogeyn laga ergadaha.

Qodobka 584aad

Haddii heshiis ka duwan uusan jirin ergashada waxey ku dhammaaneysaa dhimashada ergadaha.

BAABKA III

HESHIISYADA KU SAABSAN GUDASHADA HAWLAHA

MADAXA I

HESHIISKA DHISMAHA IYO

SIISMADA HAWLAHA GUUD

QEYBTA I

HESHIISKA DHISMAHA

Qodobka 585aad

Heshiiska dhismaha mid ka mid ah dhinacyada wuxuu waajib isaga dhigayaa in uu qabto hawl ama fuliyo shaqo, isagoo qaadanaya lacag (corrispettivo) oo midka kale uu ballan ku qaadayo in uu siinayo.



WAAJIBAADKA DHISAHA

Qodobka 586aad

1. Dhisaha wuxuu ballan qaadi karaa oo keliya in uu la yimaado hawshiisa iyadoo loo dhisaha ay korkiisa tahay keenidda qalabka uu dhisaha ku qabanaayo ama ku kaalmeysanaayo hawshiisa.

2. Dhisaha wuxuu ballan qaadi karaa kasokow howsha xataa qalabka.

Qodobka 587aad

Haddii dhisaha uu ballan qaado in uu isaga keenayo qalabka howshiisa gebi ahaantiisa ama qaarkiisa wuxuu mas'uul ka noqonayaa wanaagga sifaha qalabkaas, waana in uu loo dhisaha uga lammaanad qaadaa.

Qodobka 588aad

1. Haddii qalabku uu keenay loo dhisaha, dhisaha waa in uu xafidaa qasadkiisana ugana isticmaalaa sida nidaamka shaqada uu yahay, waana in uu la socodsiiyaa loo dhisaha inta uu ku isticmaalay, isagoo u soo celinaya inta soo hartay. Haddii qaar ka mid ah qalabka ay waxtar noqon waayaan dadaal xumada dhisaha ama xirfad aqoon xumadiisa, kani waa in uu u celiyaa loo dhisaha qiimaha qaarkaas.

2. Haddii heshiis kale ama dhaqan xirfadeed oo ka soo horjeeda uusan jirin, dhisaha waa in uu bixiyaa qalabka dhismaha iyo wixii la xiriira oo looga baahan yahay fulinta shaqada.

Qodobka 589aad

1. Haddii inta ay hawshu socoto la caddeeyo in dhisahu uu u qabanayo si aan wanaagsaneyn ama heshiiska ka soo horjeedo, loo dhisaha wuxuu siin karaa muddo kaafi ah si uu

dhisaha ugu beddelo habka fulinta shaqada. Haddii muddadaasi dhaafto iyadoo uusan dhisahu isticmaalin habka caadiga ah ee fulinta hawsha, loo dhisaha wuxuu hadba codsan karaa jibinta heshiiska ama in uu hawsha u dhiibto dhise kale si uu ugu qabto shaqada kharajka kii hore sida waafaqsan Qodobka 206.

2. Hase yeeshee, jibinta heshiiska waxaa la codsan karaa dhaqsi, iyadoo aan loo qabanin muddo, haddii hagaajinta cilladaha fulinta ay tahay mid aan la sameyn karin.

Qodobka 590aad

1. Aarkiteetaha (architetto) iyo dhisaha «l'appaltatore» waxey wadajir ahaan mas'uul uga yihiin mudda 10 sano ah qaraabidda guud iyo midda gaar ahaaneed ee guryaha ama hawlaha kale ee joogtada ah, xataa haddii ay qaraabiddu ka timid ceebaha uu dhulka leeyahay iyo xataa haddii loo dhisaha uu amray dhisidda ceebaha leh, haddii markaa aan loola jeedin dhismo ay dhinacyada ugu tala galeyn in ay jiraan muddo 10 sano ka yar.

2. Lammaanada lagu xusay fakhrada hore waxey saameyneysaa ceebaha uu lahaa dhismaha iyo hawlaha oo wax yeeleynaya adkaanta iyo badbaadinta hawsha.

3. Muddada 10ka sano waxey ka billaabaneysaa waqtiga la wareejiyo hawsha la qabtay.

4. Qodobkan laguma dabaqayo dacwooyinka uu dhisaha kula isticmaali karo sii dhiseyaasha (sub-appaltatore).

Qodobka 591aad

Aarkiteetaha (architetto) oo howshiisu ku eg tahya in uu jeexo naqshada shaqada, isagoo aan laga rabin in uu kormeero fulintiisa, wuxuu ka jawaabayaa ceebaha ka yimaada naqshada oo keliya.

Qodobka 592aad

Waa baaba'aa shardi kasta oo reebaya ama xadidaya lammaanada laga doonayo aarkiteetaha (architetto) iyo dhisaha.



Qodobka 593aad

Dacwooyinka lammaanaddu ee kor lagu xusay waxey ku dhacayaan 3 sano gudeheeda laga billaabo qaraabidda (rovina) ama ogaanshaha ceebaha shaqada.

## WAAJIBAADKA LOO DHISAHA

Qodobka 594aad

Marka uu dhisahu dhammeeyo hawshiisa uuna u diyaariyo loo dhisaha, kani waa in uu marka ay suuragal tahay la soo wareegaa sida ay macaamilaadka tahay. Haddii, xataa markii si sharci ah laga codsado in uu la wareego hawsha la qabtay uusan ogolaan isagoo aan keenin sabab waafi ah, hawsha la qabtay waxaa loo qaadanayaa in lala wareegay.

Qodobka 595aad

Haddii heshiis ama dhaqan ka soo horjeeda uusan jirin, qiimaha hawsha la qabtay waxaa la bixinayaa waqtiga wareejinta.

Qodobka 596aad

Haddii qiimaha aan mar hore la goyn, waa in lagu qiimeeyaa ayadoo loo eegayo qiimaha hawsha iyo kharajka uu galay dhisaha.

Qodobka 597aad

1. Aarkiteetaha (architetto) wuxuu xaq u leeyahay abaalgud u qeybsan diyaarinta naqshada iyo qiimeynta kharajka iyo abaalgud kale oo ah agaasinka shaqada.

2. Haddii abaalgudyadaasi aan lagu goynin heshiiska, waxaa la qiimeynayaa iyadoo loo eegayo dhaqanka.

3. Hase yeeshee, haddii shaqada aan loo fulinin si waafaqsan naqshada uu jeexay aarkiteetaha, abaalgudka waa in lagu qiimeeyaa iyadoo loo eegayo waqtiga ay qaadatay diyaarinta naqshada iyadoo la tixgelinayo dabiicada shaqada.

## DHISMO HOOSEED

### Qodobka 598aad

1. Dhisaha wuxuu fulinta hawshaa uu guud ahaan ama gaar ahaan ku aamini karaa qof sii dhise ah (sub-appal latatore), haddii uusan jirin shardi ka soo horjeeda ama haddii dabiicadda shaqada eynan doonin kartida shaqsiyeed ee dhisaha.

2. Markaasoo kale dhisaha wuxuu mas'uul uga yahay loo dhisaha hawlaha sii dhisaha.

### Qodobka 599aad

1. Sii dhiseyaasha (sub-appallatori) iyo shaqaalaha oo u sha qeynaayo dhisaha (appaltatore) si loo fuliyo hawsha waxey ku leeyihiin dacwo toos loo dhisaha (committente) ilaa lacag u dhiganta inta uu ku leeyahay dhisaha asalka ah, laga billaabo marka dacwadda la oogay, dacwaddaasi waxaa leh oo kale shaqaalaha sii dhisaha, waxeyna ku leeyihiin dhisaha asalka ah iyo loo dhisahaba.

2. Haddii midkood uu xaraash sameeyo, loo dhisaha ama dhisaha asalka ah waxay ku leeyihiin hormarin (privelegio) u dhiganta xaqooda lacagta laga rabo dhisaha aslaka ah iyo sii dhisaha (sub-appaltatore) waqtiga xaraashka. Lacag taas iyagaa toos ahaan loo siin karaa.

3. Xuquuqda sii dhiseyaasha iyo shaqaalaha ee qodobka lagu xusay waxaa laga hormarinayaa marka loo eego dadka dhisaha asalka ah uu amaahdooda ugu wareejiyo loo dhisaha.

## DHAMMAADKA DHISAHA

### Qodobka 600aad

1. Loo dhisaha wuxuu mar kastoo inta aynan hawsha dhammaanin ka bixi karaa heshiiska, wuxuuna joojin karaa fulinta iyadoo shardiga uu yahay in uu uga magdhabo dhisaha dhammaan kharajkii uu galay iyo shaqooyinkii uu dhammeeyey iyo faa'iidadii uu heli lahaa, haddii uu hawsha dhammeyn lahaa.



2. Hase yeeshee Maxkamadda waxay dhimi kartaa magdhawga la siin lahaa dhisaha oo ka timid baaqashada faa'idadii uu heli lahaa, haddii duruufaha ay keento dhimiddaas. Waa in gaar ahaan laga jaraa intii uu dhisaha ka faa'iiday ka bixidda heshiiska uu uga baxay loo dhisaha, iyo inta uu faa'iday marka uu waqtigiisa si kale uga isticmaalay.

### Qodobka 601aad

Heshiiska dhismadda wuxuu dhammaanayaa marka fulinta hawsha ujeeddadiisa tahay ay noqoto mid aan suurtoobin.

### Qodobka 602aad

1. Haddii inta aan lagu wareejin loo dhisaha hawsha dhammaatay, ay hawsha si lama filaan ah u baaba'do, dhisaha uma dacwoon karo qiimaha shaqada iyo celinta kharajka toona. Dhumidda qalabka dhismaha waxaa ka mas'uul ah dhinaca keenay.

2. Hase yeeshee, haddii uu dhisaha ka daaho wareejinta hawsha ama haddii hawsha ay baaba'do ama halaawdo inta aan la wareejin iyadoo sababta uu leeyahay dhisaha, dhisaha waa in uu uga magdhawaa loo dhisaha qiimaha qalabka uu u keenay fulinta hawsha.

3. Haddii qofka wax loo dhisay uu ka soo daahay la wareegidda hawsha dhammaatay ama haddii hawsha ay dhunto ama halaawdo iyadoo sababta uu leeyahay loo dhisaha ama sababta ceebaha ay lahaayeen qalabka wax lagu dhisay uu isaga keenay loo dhisaha wuu khasaarayaa, waana in uu siiyaa dhisaha abaalgud iyo magdhaw khasaaro, haddii ay jirto.

### Qodobka 603aad

Heshiiska dhisidda waxey dhammaanayaan marka uu geeriyoodo dhisaha, haddii kartidiisa shaqsiyeed la tixgeliyey,

markkii heshiiska la dhameynaayey. Haddii kale, heshiiska si buuxda uma dhammaanayo, loo dhisaha marka aan lagu darin inta ku xusan Qodobka 601 wuu jibin karaa heshiiska oo keliya, haddii dhaxaltooyadii dhisaha eynan keenin lammaanad ku filan fulinta hawsha.

Qodobka 604aad

1. Marka uu heshiiska ku dhammaado geerida dhisaha dartiis, loo dhisaha waa in uu siiyaa dhaxaltooyadda qiimaha hawlaha uu qabtay iyo kharajka uu ku galay fulinta hawlaha haray in uu u dhiganta faa'idada uu ka helayo hawlahaas iyo kharajkaba.

2. Loo dhisaha wuxuu isaguna codsan karaa wareejinta qalabka la diyaariyey iyo naqshada fulinteeda la billaabay isagoo bixinaaya magdhaw u dhigma.

3. Qodbkan waa lagu dhaqmayaa xataa haddii dhisaha billaabay hawsha uusan dhammeyn karin sabab isaga iraadadiisa ka baxaan awgeed.

## MADAXA II

## HESHIISKA SHAQADA

Qodobka 605aad

Heshiiska shaqadu waa mid uu dhinacyadu midkood uu ballan qaaqdayo in uu u shaqeeyo dhinaca kale isagoo ku adeegayo hoostiisa iyo ilaalihtiisa iyadoo uu qaadanayo abaalgud oo dhinaca kale ballan qaadayo in uu bixiyo.

Qodobka 606aad

Heshiiska shaqada waxaa lagu nidaamiyey xeer u gaar ah.



## MADAXA III

## WAKAALADDA

## QEYBTA 1

## TIIRARKA WAKAALADDA

Qodobka 607aad

Wakaaladdu waa heshiis uu la wakiishaha ku ballan qaadayo in uu u qabto wakiishaha howl sharci ah (atto giuridico).

Qodobka 608aad

Haddii Xeer ka soo horjeeda uusan jirin, wakaaladdu waa in loogu sameeyaa qaabka arrimaha sharciga ah ee ujeeddadiisu tahay.

Qodobka 609aad

1. Wakaaladda si guud ahaaneed loo qoray ee aan xataa la caddeynin dabiicadda arrinta sharciga ah ee ujeeddadeedu tahay, ma siineyso la wakiishaha (mandatario) waxaan ahayn awoodda in uu dhammeeyo arrimaha maamulka.

2. Waxaa loo qaadanayaa arrimo maamuleed ijaarka, arrimaha xafidaada iyo dayactirka aruurinta amaahda iyo bixinta deynta. Waxaa kale ee loo qaadanayaa arrimo maamuleed, wixii arrimo ah oo u gooni ah maamulka, sida iibinta miraha la goostay iyo badeecadda ama alaabta guurtada (mobili) ee halaabaya iyo gadida, waxaa u baahan xafidaada iyo ka faa'ideysiga sheyga wakaaladda ujeedadiisu tahay.

Qodobka 610aad

1. Wixii ka baxsan arrimaha maamulka, waxaa loo baahan yahay wakaalad gaar ah, gooni ahaan dhameynta beeca, sameynta rahanka (ipoteca). Dhiibid deeqda (fare liberalita) sulaxa (transazione) qiraalka, heshiisyo isku xiran

(compromesso) dhaar celin ama ka difaacidda Maxkamadda.

2. Wakaaladda gaarka ah ee saameysa qeyb gooni ah ee hawlaha sharciyeysan (atti guridici) waa ansaxayaa, xataa haddii ujeeddada arrintu aan la caddeynin marka la saaro wixii quseeya hawlaha (atti) oo aan ku xirneyn wax kala beddelasho.

3. Wakaaladda gaarka ah ma siineysa la wakiishaha (mandatario) waxaan ahayn in uu qabto hawlaha ku cad wakaaladda iyo wixii lagama maarmaan u ah marka loo eego dabiicadda hawsha ama dhaqanka.

## QEYBTA II

## RAADADKA WAKAALADDA (Effetti)

### Qodobka 611aad

1. La wakiishaha (mandatario) waa in uu fuliyaa wakaaladda isagoo aan gudbin xadka loo gooyey.

2. Hase, yeeshee, la wakiishaha waa gudbi karaa xadka loo gooyey haddii uu ku sugnaado xaalad uusan mar hore ku soo wargelin karin wakiishaha (mandante) iyo haddii daruufaha ay muujinayaan in wakiishaha (mandante) uu ogolaan lahaa. Markaasna la wakiishaha waxaa ku waajib ah in uu ogeysiiyaa wakiishaha in uu gudbay xadkii wakaaladiisa.

### Qodobka 612aad

1. Haddii wakaaladdu ay tahay mid lacag la'aan ah (gratuite) la wakiishaha waa in uu ku fuliyaa dadaalka uu ku fuliyo hawlahiisa, isagoo laga dooneynin dadaal ka sareeya kan caadiga ah. Haddii wakaaladdu ay tahay mid lacageed (oneroso), la wakiishaha waa in uu had iyo jeer ku fuliyaa dadaalka aabaha qoyska ee wanaagsan (buon padre di famiglia).

### Qodobka 613aad

La wakiishaha waa in uu siiyaa wakiishaha wax allaale wixii wargelin ah ee lagama maarmaan u ah fulinta wakaaladiisa lana socodsiiyaa.



### Qodobka 614aad

1. La wakiishaha danihiisa uguma isticmaali karo hantida wakiishaha.

2. Waa in uu siiyaa wakiishaha dulsaar (interessi) lacagta uu ugu isticmaalay danahiisa laga billaabo maalintii uu ku dhaqmay iyo lacagta hartay ee uu deynteeda qabo laga billaabo waqtigii uu ka daahay bixinteeda (mora).

### Qodobka 615aad

1. Haddii dadka la wakiishay (mandatori) lagu magacaabay isku hal wakaalad iyadoo aan loo oggolaanin in ay gooni-gooni u shaqeeyaan, waa in ay wada jir ahaan u shaqeeyaan, haddii eyna arrimaha ahayn kuwo u baahan in wadajir loo dhammeeyo.

2. Haddii dadka la wakiishay lagu magacaabay isku hal wakaalad, ayadoo aan loo oggolaanin in ay gooni-gooni u shaqeeyaan waa in ay wadajir ahaan u shaqeeyaan, haddii aynan arrimaha ahayn kuwo u baahan is dhaafsi fikradeed sida uruurinta amaahda ama bixinta deynta.

### Qodobka 616aad

1. La wakiishaha isagoo aan loo oggolaanin dad kale isku beddelo si ay u fuliyaan wakaaladda, wuxuu mas'uul ka yahay wax allaale wixii ay ku kacaan dadka uu isku beddelay, markaas oo kale la wakiishaha iyo qofka uu isku beddeleyba wadajir bey u yihiin mas'uul.

2. Haddii la wakiishaha loo oggolaaday in uu dad isku beddelo, iyadoo aan la caddeynin qofka beddelaya, mas'uul kama aha waxaan ahayn foojig la'aantiisa xaga doorashada qofka ama tilmaamaha uu siiyey.

3. Labada xaaladood oo hore wakiishaha iyo qoofka beddelay la wakiishaha si toos ahaan bey labadoodaba isu dacweysan karaan.

### Qodobka 617aad

1. Wakaaladdu waa arrin lacag la'aan ah, haddii uusan jirin heshiis si caddaan ah ama aamusnaan ah lagu muujinin sharuudaha la wakiishaha.

2. Abaalgudka lagu heshiiyey waxaa qiimeynaya Garsooraha, haddii aan si raallinimo ka muuqato loo bixinin fulinta wakaaladda kaddib.

### Qodobka 618aad

Wakiishaha waa in uu u celiyaa la wakiishaha si kastaba ha ahaatee natiijada fulinta wakaaladda, kharajyadda uu galay oo la mid ah fulin caadi ah oo ay la jirto dulsaar laga billaabo maalinta kharajyadaas la galay. Haddii fulinta wakaaladdu ay u baahan tahay hormarin (anticipe), wakiishahu waa in uu siiyaa hormarintaasi la wakiishaha markii uu ka codsado.

### Qodobka 619aad

Wakiishuhu wuxuu mas'uul ka yahay dhibka gaaray la wakiishaha, sabab la'aantiisa, isagoo si caadi ah u fulinaaya wakaaladda.

### Qodobka 620aad

Haddii dad badan ay hal qof u wada wakiishaan hawl ka wada dhaxeeyso, gidigood waxey wadajir mas'uul uga yihiin qofka ay wakiisheen wixii ka soo gaara wakaaladda, haddii heshiis ka soo horjeeda uusan jirin.

### Qodobka 621aad

Qodobada laga billaabo 103 ilaa 106 ee khuseeyey matilaada (rappresentanza) waxaa lagu dabaqayaa wixii ka dhaxeeya wakiishaha iyo la wakiishaha iyo dadka saddexaad oo la wakiishuhu la macaamiltamay.



# QEYBTA III

## DHAMMAADKA WAKAALADDA

### Qodobka 622aad

Wakaaladdu waxey dhammaaneysaa markii la soo gabagabeeyo hawsha ama marka uu idlaado waqtiga loo gooyey, waxaa kale ay dhammyneysaa markii ay ku timaado geeri wakiishaha iyo la wakiishaha.

### Qodobka 623aad

1. Wakiishuhu wuxuu mar kasto, in kastoo uu jiro heshiis sidaas ka duwan, ka noqon karaa ama xadidi karaa wakaaladda. Hase yeeshee, haddii wakaaladda ay tahay mid lacageed, wakiishaha waa in uu uga magdhabaa la wakiishaha khasaarihii ka soo gaaray ka noqoshadda aan si degdeg ah aan loo gaarsiin ama midda aan lahayn sabab la gareysan karo.

2. Hase yeeshee, haddii wakaaladdu loo sameeyey danta la wakiishaha ama danta qof saddexaad, wakiishuhu kama noqon karo mana xadidi karo, iyadoo aan la helin oggolaanshaha qofka danihiisa wakaaladda loo sameeyey.

### Qodobka 624aad

1. La wakiishuhu wuxuu markasto, inkastoo uu jiro heshiis sidaas ka duwan, ka tanaasuli karaa wakaaladda. Ka tanaasulidda waa in la ogeysiiyaa wakiishaha. Haddii wakaaladdu ay tahay mid lacageed, la wakiishuhu waa in uu uga magdhabaa wakiishaha khasaarihii ka soo gaaray ka tanaasuliddaas oo aan si deg deg ah loo gaarsiin ama aan lahayn sabab la gareysan karo.

2. Hase yeeshee, la wakiishaha kama tanaasuli karo wakaaladda loo sameeyey danaha qof saddexaad haddii uusan qabin sababo dhab ah ee looga cudur daaran karo ka tanaasulidlaas, iyadoo weliba shardi looga dhigayo in uu wargeliyo qofka saddexaad isagoo siinaya muddo ku filan si uu

danihiisa u badbaadsado.

Qodobka 625aad

1. Si kastaba ha ku timaado sababta dhamaadka Wakaaladda, la wakiishaha waa in uu hagaajiyaa hawlaha uu billaabay si aynan si xun ugu dhammaanin.

2. Haddii ay wakaaladdu ku dhammaato, geeridda la wakiishaha, dadka dhaxalkiisa leh waa in ay haddii awood u leeyihiin, oo ay ogaayeen wakaalada si degdeg ah ku soo wargeliyaan wakiishaha dhimashada la wakiishaha, iyagoo u hagaajinaya danta wakiishaha wixii lagama maarmaan ah ee duruufuhu keeneen.

MADAXA IV

DHIGASHO (DEPOSITO)

Qodobka 626

Dhigashadda waa heshiis uu dhinacyada mid ka mid ah kan kale kaga guddoomaayo hal shay, isagoo ay waajib ku tahay in uu ilaaliyo kuna celiyo dabeecaddii uu sheyga lahaa.

QEYBTA I

WAAJIBAADKA QOF WAX LA AG DHIGANAAYO (Depositario)

Qodobka 627aad

1. Qofka wax la ag dhiganaayo (depositario) waxaa ku waajib ah in uu qabto sheyga la ag dhiganaayo.

2. Kuma isticmaali karo sheyga isagoo aan oggolaansho cad ama aamusnaanta (tacita) laga garan karo ka haysanin qofka wax dhigtay.

Qodobka 628aad

1. Haddii dhigashadu ay tahay mid lacag la'aan ah' qofka wax la ag dhigtay waa in uu sheyga u ilaaliyaa sidii uu u ilaali lahaa hawlahiisa, isagoo aan laga dooneynin in uu ilaalinta ku sameeyo garaad ka sareeya midka caadiga ah.



2. Haddii dhigashadu ay tahay mid kala beddelasho ah, qofka wax la ag dhigtay waa in uu sheyga ku ilaaliyaa garaadka caadiga ah.

Qodobka 629aad

Qofka wax la ag dhigtay iskuma beddeli karo cid kale, isagoo aan oggolaansho cad ka qabin qofka wax dhigtay, si uu u ilaaliyo sheyga, haddii aynan ku khasbin baahi deg-deg ah.

Qodobka 630aad

Qofka wax la ag dhigtay, waa in uu sheyga celiyaa marka uu sidaa codsado kan wax dhigtay, haddii eynan ka muuqanin heshiiska in muddada loo sameeyey danta qofka wax la ag dhigtay. Qofka wax la ag dhigtay wuxuu markasto ku khasbi karaa qofka wax dhigtay in uu sheygiisa qaato. Haddii eynan ka muuqanin heshiiska in muddada loo sameeyo danta qofka wax dhigtay.

Qodobka 631aad

Haddii qofka leh dhexaltooyada qofka wax la ag dhigtay uu gado si niyadsami ah sheyga la ag dhigtay, waxaa waajib ku ah oo keilya in uu siiyo qofka sheyga lahaa inat uu ka helay gadidda (corrispettivo) ama in uu xuquuqdiisa ku wareejiyo qof wax iibsaday. Haddii sheyga ku bixiyo lacag la'aan, waa in uu bixiyaa qiimaha sheyga uu lahaa markii uu bixinayey.

QEYBTA II

WAAJIBAAKA QOFKA WAX DHIGTAY (DEPOSITANTE

Qodobka 632aad

Dhigashada waxaa loo qaadanayaa in ay tahay lacag la'aan (gratuite). Haddii lagu heshiiyey in la bixiyo lacag (compenso), qofka wax dhigtay waa in uu bixiyaa lacagtaas waqtiga

dhigashada ay dhammaatay, haddii uusan jirin heshiie ka soo horjeeda.

Qodobka 633aad

Qofka wax dhigtay waa in uu u celiyaa qofka wax la ag dhigtay kharajkii uu galay si uu u xafido sheyga, isagoo uga magdhabaayo khasaaro kasto oo ka soo gaaray dhigashada awgeed.

MADAXA V

XARAASH

Qodobka 634aad

Xaraashku waa heshiis oo ay dhinacyadu ugu dhiibayaan qof seddexaad hal shey ee guurta ah ama ma-guurta ah ama sheyaal badan oo ay ka dhextaagan tahay dood ama la isku heysto ama uu jiro xiriir sharciyeed oo aan caddeyn, si uu u xaf ido uno maamulo isagoo u soo celinaya qofkii ku xaq yeesho iyadoo ay la jiraan wixii u sheyga ka dheshay.

Qodobka 635aad

Garsooraha wuxuu xaraashka amri karaa:

1. Mararka ay jiraan xaaladaha lagu xusay qodobka hore, haddii uusan jirin heshiis dhex maray dhinacyadda danta ku leh.

2. Haddii sheyga uu yahay guurto ama maguurto qofka danta ku lahna uu qabo baqid macquul ah in haddii sheyga ku sii jiro gacanta qofka haya (posessore) uu geli lahaa.

3. Xaalad kasta oo kale sharcigu dhigo.

Qodobka 636aad

Xaraashada (seguestrario) ay dhinacyaddu ku heshiiyeen ama kan garsooreed, waxaa wadajir u dooranayo dhinacyada danta ku leh, haddii heshiis uusan jirina, xaraashaha waxaa magacaabaya garsooraha.



Qodobka 637

Waajibaadka xaraaashaha, xuquudiisa iyo awoodihiisa waxaa lagu caddeynayaa heshiiska, ama xukunka amraya xashka, haddii kale waxaa la dabaqayaa xeerarka u dhigan dhigashada iyo wakaaladda, haddii eynan ka soo horjdin axkaante soo socota:

Qodobka 638aad

1. Xaraashka waa in uu xafidaa maamulka sheyga isaga lagu aaminay, isagoo ku isticmaalayo garaadka aabaha qoyska ee wanaagsan.

2. Iskuma beddeli karo si toos ah ama si aan toos ahayn dhinac ka mid ah kuwa danta ku leh fulinta howshiisa dhammaan ama qaar ahaan, haddii uusan dhinac kale oggolaanin.

Qodobka 639aad

Wixii ka baxsan maamulka, xarxaashaha ma qaban karo arrin eynan ogoleyn dhinacyada danaha ku leh oo idil ama uusan garsooraha ogolaanin.

Qodobka 640aad

Xaraashaha waa la siin karaa abaalgud, haddii uusan isaga ka tanaasulin abaalgud kasto.

Qodobka 641aad

1. Xaraashku wuxuu ku dhammaanayaa markii ay dhinacyaddu uu khuseeyo oo idil isla ogolaadaan, ama uu ku soo baxo go'aan Maxkamadeed.

2. Markii uu xaraashku dhammaado, xaraashaha waa in uu isagoo aan ka daahin u celiyaa sheyga la xaraashay qofka ay dhinacyada danta ka dhexeyso ay wada doortaan ama uu garsooraha magacaabo.

# BAABKA IV

## HESHIISYADA NASIIBKA

## MADAXA 1

## CIYAARTA IYO SHARADKA

### Qodobka 642aad

1. Waxba kama jiraan heshiis kastoo ku saabsan ciyaarta ama sharadka.

2. Qofkii lagaga adkaado ciyaarta ama sharadka wuxuu soo ceshan karaa, xataa haddii heshiis ka soo horjeeda uu jiro, inta uu bixiyey saddex sano gudaheed laga billaabo maalinta uu lacagta bixiyey. Bixinta waxaa lagu caddeyn karaa sifo kasto.

### Qodobka 643aad

1. Waxaa ka baxsan axkaamta qodobka hore lagu xusay sharadka dhexmara dad ka wada qeyb qaadanayo cayaar aha isboortiga. Hase yeeshee, Garsooraha waa dhimi karaa haddii abaalgudka la bixinaayo (premio) uu yahay xad dhaaf.

2. Waxaa kale oo ka baxsan baqtiyaanasiibyadda sharci ahaan la oggolaaday.

## MADAXA II

## HESHIISKA CEYMISKA

### Qolobka 644aad

Ceymiska waa heshiis uu çeymiyuhu (l'assicuratore) iyadoo la bixinayo abaalgud ama lacag kale, uu waajib isaga dhigayo in uu siiyo qofka la ceymiyey (assicurate) ama qofka saddexaad oo ka faaiideysanaayo oo dantiisa loo dhammeeyey ceymiska, lacag ama shey kale oo qiima lacageed leh, haddii ay dhacdo arrinta lagu xusay heshiiska.

### Qodobka 645aad

Inta aan lagu xusin xeerkan, heshiiska ceymiska waxaa nidaaminaya sharciyo u gaar ah.



### Qodobka 646aad

Waxaa ujeeddada ceyminta noqon kartaa, dan kastoo ee dhaqaaleed oo bannaan sharci ahaan ee qofka heli karo markii eynan dhicin dhibaato.

### Qodobka 647aad

Heshiiska ceyminta waxba kama jiraan haddii lagu xiro shuruudaha soo socda:

1. Shardiga ku saabsan dhicidda (decadenza) xaqa magdhawga ku saabsan ku xadgudubka sharciyada ama xeer nidaamiyaasha haddii ku xad gudubkaasi uusan ahayn dambi si ula kac loo galay.

2. Sharci caddeynaya ka dhicidda xaqa qofka la ceymiyey ee ku saabsan ka daahidda wargelinta shilka ee madaxda awoodda leh ama keenidda waraaqaha, haddii ay daruufaha ka muuqaneyso in daahiddu mid cudur daar leh.

3. Shardi kastoo ku qoran warqadaha daabacan oo si cad loo muujinin ee sheegaya xaalado ku saabsan baabi'in ama dhicid xaqa.

4. Shardiga isku xiran (clausola compromissoria) isku oggolaashaha ah oo ka mid ah shuruudaha ku daabacan Boliisaha oo aan ku imaanin hab heshiis gaar ah oo ka duwan shuruudaha guud.

5. Shardi (clausola) kastoo ee xadgudub ah (abusivo) haddii ku xadgudubkiisa uusan saameyneynin dhicidda shilka oo ah ujeeddada caymiska.

### Qodobka 648aad

Ceymiyaha waxaa ku waajib ah in uu u magdhabo qofka uu ceymiyey khasaaraha uga yimaado dhicidda arrinta la ceymiyey oo keli ah, ilaa iyo inta u dhiganta lacagta la ceymiyey.

### Qodobka 649aad

1. Dacwooyinka ka yimaada heshiiska ceyminta waxey ku dhacayaan 3 sanadood laga billaabo taariikhda ay arrinta asalkeeda uu yahay ay dhacday.

2. Hase yeeshee, waqtigaasi wuxuu ka billaabmayaa

b. Haddii ay jirto ka leex-leexasho ama caddeyn been ah ama aan sax ahayn ee dhibka la ceymiyey (rischio assicurato) maalinta qofka wax ceymiyey uu oggaaday.

t .Haddii uu dhaco shilka la ceymiyey, maalinta dadka ay khuseyso ay ogaadeen.

Qodobka 650aad

Waxba kama jiraan heshiis kastoo ka soo horjeeda axkaamta lagu xusay madaxaan, haddii aan heshiiska loo sameyn danta qofka la ceymiyey ama kan ka faa'iideysanaayo iyo haddii aan loo sameyn sida waafaqsan Qodobka 646.

## BAABKA V

## DAMMANADDA

## MADAXA I

## TIIRARKA DAMMAANADA

Qodobka 651aad

Dammaanaddu waa heshiis uu hal qof ku dammaanayo fulinta waajibaadka laga rabay qof kale isagoo u ballaanqaadayo qofka deynta leh in uu bixinayo wixii ku waajib ahaan in uu bixiyo qofka deynta laga rabo haddii uusan isagu bixinin.

Qodobka 652aad

Dammaanaddu waxaan qoraal ahayn laguma caddeyn karo, xataa haddii waajibaadka asalka loo oggolyahay caddeyn markhaatiyeed (prova testimoniale).

Qodobka 653aad

Haddii qofka deynta qabo uu balanqaado in uu keeno qof dammaanad ah, waa in uu keenaa qof wax dhiibi kara oo degan Soomaaliya wuxuuna meeshiisa keeni karaa dammaanad ceyneed oo kaafi ah (granzia reale sufficiente).

Qodobka 654aad

Dammaanadda waxaa la keeni karaa isagoo aan ogeyn deynqabaha iyo haddii uu hor taagan yahayba.



Qodobka 655aad

Dammaanaddu waa ansax marka uu ansax yahay oo keli ah waajibka la dammaanay.

Qdoobka 656aad

Dammaanad-qaadaha (fidensore) ballanqaaday waajibaadka qof aan awood lahayn (incapace) sababtaas awgeed, waxaa ku waajib ah in uu fuliyo waajibaadkaas, haddii deynqabaha ashalka ah uusan qudhiisa fulinin.

Qodobka 657aad

1. Dammaanadda waxaa loo qaadi karaa deyn mustaqbalka imaan doonta, haddii cadadkeedu mar hore la caymay waxaa kale oo loo qaadi karaa deyn shardi ku xiran.

2. Hase yeeshe, haddii qof wax dammaanaya oo ballaanqaaday deynta mustaqbalka ah uusan ku cayinin dammaanadda muddo, mar kastoo ayuu ka noqon karaa iyadoo shardiga ku xiran uu yahay in waajibka la dammaanad qaaday uusan wali dhalanin.

Qodobka 658aad

1. Dammaanadda ku saabsan deyn ganacsi ah, waxaa loo qaadanayaa in ay tahay arrin madani ah (atto civile). Xataa haddii qofka wax dammaantay uu yahay gancsade.

2. Hase yeeshe, waxaa markasta loo qaadanayaa arrin ganacsi ah dammaanadda ka timaada oggolaadka ama wereejinta arrimaha ganacsiga (girata degli effetti commerciali).

Qodobka 659aad

Dammaanaddu kama badnaan karto inta laga rabo deynqabaha, lagumana bixin karo shuruudo ka culeys badan kuwa waajibka la dammaanad qaaday.

Qodobka 660aad

Haddii heshiis ka soo horjeeda uusan jirin, dammaanaddu waxey saameyneysaa inta raacda daynta. kharajyada ku baxa arjiga hore iyo kharajyada dambe ee dacwadda lagu oogay qofka wax damaanay.

# MADAXA II

# RAADADKA DAMMAANADDA

## QEYBTA I

## XIRIIRKA U DHAXEEYA QOFKA WAX DAMMAANAY IYO DEYNLAHA

### Qodobka 661aad

1. Qofka wax dammaantay waxey isku mar xorroobayaan deynqabaha, wuxuu ku istaagi karaa deynlaha wax allaale wixii hor istaag ah ee uu leeyahay deynqabaha (eccezioni opponibili dal debitore).

2. Hase yeeshe, haddii is hortaaga deynqabaha uu ku dhisan yahay awood la'aantiisa, qofka wax dammaantayna ogaa awood la'aantaasi waqtigii heshiiska la sameeyey kuma hor istaagi karo.

### Qodobkaaad 662

Haddii deynluhu uu oggolaado shey ka dhigan bixinta, deynta qofka wax dammaanay waa xur, xataa haddii sheygaas cid kale gadaal ka soo sheegato.

### Qodobka 663aad

1. Qofka wax dammaantay wuxuu ka xoroobayaa ilaa iyo inta ay la'eg tahay qiimaha dammaanaddiisa, deynluhu uu sheegan taxadar la'aan awgeed.

2. Dammaanadaha (granzie) lagu xusay qodobkan, dhammaantood waa kuwo giddigood la siiyey deynlaha xataa haddii la sameeyey dammaanadda kaddib iyo kuwa ku xusan sharciga.

### Qodobka 664aad

1. Qofka wax dammaantay kama xuroobayo daahidda deynlaha soo jeedinta dacwadihiisa iyo inuu iska daayo, soo jeedintooda.

2. Hase yeeshe, wuu xuroobayaa haddii deynlaha uusan soo jeedin arjigiisa lidka ku ah deynqabaha ilaa 6 bilood gudaheeda laga billaabo marka uu qofka wax dammaanay uu xasuusinta siiyo (intimazione), haddii aan deynqabuhu uusan siinin qofka dammaanay dammaanad kaafi ah.



### Qodobka 665aad

Haddii deynqabuhu uu musallifo (fallisce), deynluhu waa in uu ka qaybgeliyaa musallifaadda deyntiisa. Hadduusan yeelin, wuxuu waayayaa xaqiisa ah in uu dacweysto qofka wax dammaanay ilaa inta u dhiganta khasaaraha ka yimid yeelid la'aantaas (missione).

### Qodobka 666aad

1. Deynqabaha waa in uu waqtiga bixinta (momento del pagamento) ku wareejiyaa qofka wax dammaanay waraaqaha (Titoli) muhiimka ah ee uu ku dacweysan lahaa deynqabaha.

2. Haddii deyntu ay ku damaanan tahay rahan guurto (ipoteca mobiliare) ama xaq haysasho (ritenzione) ee guurto ah, deynlaha waa in uu ugu tanaasulaa dammaanadda qofka wax dammaanay.

3. Haddii ay deyntu ku dammaanan tahay dammaanad maguurto (granzia immobiliare) deynluhu waa in uu sameeyaa hababka u dejisan wareejinteeda. Kharajka wareejinta wuxuu dul saaran yahay qofka wax dammaanay oo isna ugu noqon karo deynqabaha.

### Qodobka 667aad

1. Deynlaha gooni ahaantiisa ma dacweysan karo qofka dammaanay ilaa iyo inta uu ka dacweysanayo deynqabaha.

2. Ma gelin karo fulin xoolaha qofka wax dammiinay ilaa iyo inta lagu fulinayo deynta. Markaasna, qofka wax dammiinay waa inuu ku doodaa xaqaas.

### Qodobka 668aad

1. Haddii qofka wax dammiinay uu codsado fulinta, waa in uu kharajkiisa ugu tilmaamaa deynlaha xoolaha deynqabaha ee ku filan bixinta deynta.

2. Xoolaha uu tilmaamay qofka wax damiinay lama tixgelinayo haddii ay dibedda ka jiraan Soomaaliya ama haddii la isku haysto.

### Qodobka 669aad

Markasta ee qofka wax damiinay xoolo u tilmaamo, deynlaha wuxuu uga mas'uul yahay bixin la'aanta deynqabaha ee ku timid in aan dacwadda lagu oogin waqti habboon.

Qodobka 670aad

Haddii dammaanad ceyneed (granzie reale) si sharci ah loo bixiyo ama heshiis awgiis iyadoo la dammaanayo deyn (credito) iyo haddii dammaanaddii gadaal laga bixiyo ama isla marka la dhiso dammaanaddaas ayadoo aan la caddeynin in lala qabo deynlaha ku fulinta xoolaha qofka wax dammiinay, lama sameyn karo marka lagu fuliyo xoolaha dammaanadda loo bixiyey.

Qodobka 671aad

1. Haddii dadka wax dammiinay ay badan yihiin aynan wadaagin mas'uuliyadda, loona haysto isla deyntii ayagoo ku wada qoran isla hal warqad, deynta waa loo wada qaybinayaa, deynluhuna kuma dacweysan karo qof iyaga ka mid ah, intii qof waliba uu dammiinayey mooyaane.

2. Haddii dammaanad qaadayaasha ay isaga waajib dhigeen waraaqo is xiga «atti sucessivi» qof weliba wuxuu mas'uul ka yahay deynta oo idil, hadlii aan la taxfudsan ka faa'iideysiga qeybinta.

Qodobka 672aad

Dammaanad qaadaha la wadaaga mas'uuliyadda deynqabaha uma bannaana in uu ka faa'iideyso fulinta.

Qodobka 673aad

Qofka wax damiinaya oo ah la wadaage mas'uuliyad, wu xuu ku doodi karaa dhammaan is hortaagyadda loo ogol yahay qofka wax damiinay ee keliga ah (fidenssore semplice) wixii ku saabsan deynta.

Qodobka 674aad

Wax damiinayaasha Maxkamadeed ama sharciyeed, mar kasto wey wadaagaan mas'uuliyadda.

Qodobka 675aad

Haddii ay jiraan wax damiinayaal badan oo wadaaga mas'uuliyadda, midka deynta oo idil bixiya markii ay muddadu idlaato wuxuu mid kasto ka codsan karaa in uu qeybtiisa deynta u celiyaa iyo qeyb walba ee damiin-qaadayaasha wax bixin karin (quote dei fidenssori insolventi).

2. Dib uga noqoshaddaasi (regresso) waxey saameyneysaa raasu'maalka dulsaaradda iyo kharajka. hase yeeshee. wixii ku saabsan kharajaka. qofka wax dammiinay wuxuu ceshan karaa oo keliya kharajka uu galay kaddib markii uu u sheegay deynqabaha asalka ah tillaabooyinkii uu ka qaaday.

3. Qofka wax dammiinay wuxuu xaq u leeyahay dulsaaradda sharciga ah (interessi legali) ee inta uu bixiyey oo idil laga billaabo maalinta bixinta la sameeyey.

Qodobka 680aad

Haddii ay jiraan deynqabayaal badan ee wadaaga mas'uuliyadda hal deyn, qofka wax dammiinay oo u dammaanad qaaday dhammaantood. wuxuu xaq u leeyahay in uu dib uga soo ceshto mid walba inta uu ka bixiyey.

QEYBTA II

XUQUUQDA CEYNTA AH (diritti reali)

BUUGGA III

XUQUUQDA CEYNIGA EE ASALKA AH

BAABKA I

XAQA LAHAANSHAHA

MADAXA I

XAQA LAHAANSHADA GUUD AHAAN

QEYBTA I

UJEEDDADA XAQA

Qodobka 681aad

1. Xaqa lahaanshada wuxuu qofka leh siinayaa awoodda intifaaca iyo haynta hantida milkiyadeeda la leeyahay ilaa xadka. iyadoo la dhowrayo waajibaadka uu nidaamka xeereed lagu gooyey.



2. Marka lagu intifaacayo hantida wax dhalineysa, qofka milkiyadda leh waxaa ku waajib ah in uu ka faa'iideysto isagoo dhowraaya danaha guud ee dadweynaha iyo baahida dhaqaalaha qaranka. Haddii waajibkaas la dhowrin madaxda maamulka waxay amri karaan qofka milkiyadda leh tusaalooyinka habboon, xaaladaha cul-culusna waxay goyn karaan si ku meel gaar ah maamulidda qasabka ah ee hantida ama la wareegiddooda iyadoo la bixinaayo magdhaw ku dhisan caddaalad.

3. Wixii ka baxsan inta lagu sheegay xubinta hore madaxda maamulka waxay amri karaan la wareegidda dan guud ah ama la wareegaan ku lug leh baahi culus ee degdeg ah, iyagoo eegaya habka u dhigan xeerarka gaarka; isla markaana siinaya qofka milkiyadda leh magdhaw caddaalad ku dhisan.

Qodobka 682aad

1. Xaqa qofka milkiyadda sheyga leh waxaa ka mid ah dhammaan xubnaha muhimka ah ee sheygaas, kuwaasoo laga goyn karin, oo hadii kale sheyga baaba'aaya ama halaabaya ama beddelmaya.

2 Milkiyadda dhulka waxaa ka mid ah midda dhulka hoostiisa ah iyo korkiisaba ilaa xadka waxtarka u ah ku intifaacidda korka iyo hoosta.

3. Milkiyadda ballarka dhulka (superfice) waxay noqon kartaa, iyadoo sharci ama heshiis loo sameynaayo, waxaa laga sooci karaa milkiyadda dhulka hoostiisa iyo midda hawada, haddii uusan jirin xeer kale.

QEYBTA II

DHIMIDDA XAQA LAHAANSHADA

Qodobka 683aad

Qofka milkiyadda leh, marka uu ku isticmaalayo xaqiisa, waa in uu dhowraa sharciga, dekreetooyinka iyo xeer nidaamyada ku saabsan danta guud ama gaarka ah, waxaa kale ee laga rabaa in uu dhowraa axkaamta soo socota.

Qodobka 692aad

1. Qofka milkiyadda leh kuma qasbi karo qofka deriska ah inuu wareejiyo milkiyaddiisa ama in uu bixiyo qeyb ka mid ah derbiga ama dhulka uu derbiga ku dhisan yahay kolka laga reebo xaaladda ku xusan Qodobka 690.

2. Hase yeeshee, qofka milkiyadda derbiga leh si ula kac ah uma burburin karo derbiga, haddii eynan jirin sabab dhab ah, marka burburinta ay dhibaato u keeneyso qofka dariska ah oo milkiyaddiisa derbiga ku wareegsan tahay.

Qodobka 693aad

1. Qofna kama furan karo meel wax laga arko «veduta» oo ku aadan milkiyadda qofka deriska ah, ilaa meel u jirta hal meter. Cabirka waxaa laga soo qaadayaa dhulka derbiga dibedda ka ah oo aragtida loo furanayo ama leynka dibedda ka ah balkoonaha ama daaqadda.

2. Haddii qof uu u soo wareego gubasho awgeed meel laga arko «veduta» oo ku aadan dhulka qofka deriska ah ilaa cabir ka yar hal meter, qofka deriska ah wax kama dhisi karo ilaa cabir ka yar hal meter oo loo cabirayo sida lagu sheegay xubinta hore ilaa dhirarka dhismaha oo dhan oo laga helo aragtida «veduta».

Qodobka 694aad

Ma jiro qof ku lahaan kara deriskiisa aragti qaloocan ilaa meel u jirta in ka yar 50 shentimeter «cm» laga billaabo geeska furidda. Ka reebiddaasi ma jirto haddii aragtida qaloocan ee dhulka deriska ah ay isla waqtigaas tahay aragti ku taal waddada caamka ah.

Qodobka 695aad

Cabir uma dhigna furitaanka ku saabsan aftiinka oo dhinaciisa hooseeya uu dhiirirkiisa ka sareeyo jooga nin caadi ah ee looga dan leeyahay maridda dabeesha iyo iftiinka oo aan dooneyn aragti dhulka qofka deriska ah.



Qodobka 696aad

1. Haddii heshiiska iyo dardaaranka «testamento» laga helo shardi sheegaaya inaan lagu tasarufi karin hanti «inalienabilita' di un bene», shardigaas waa ansax haddii uu sal u yahay sabab la garwaaqsan karo, ama haddii uu ku eg yahay muddo caqliga gasha.

2. Sababta waxaa loo qaadanayaa in ay xaq tahay haddii tasarufka loo sameeyey si loo daafaco dan xaq ah ha ahaato qof sheyga haysta «disponente» ama kan gadanaya acquirente» ama qof saddexaad.

3. Muddada caqliga gasha waxey socon kartaa ilaa inta uu nool yahay qofka leh tasarufka (disponente) iyo kan gadanaaya ama kan seddexaad.

Qodobka 697aad

Haddii shardiga tasaruf la'aanta (inalienabilità) oo lagu daray heshiiska ama dardaaranka uu sax yahay sida waafaqsan qodobka hore, waa baaba'a tasaruf kasta oo la sameeyo oo ka soo horjeeda shardigaas (clausola).

## QEYBTA III

## ISLA WADAAG (Comunione)

## XEER NIDAAMIYEYAAL

Qodobka 698aad

Haddii laba qof ama ka badan ay isla wadaagaan milkiyadda hal shey. iyadoo qeybsaneyn qeybta qof walba, dadkaasi waxey ka qeyb galayaan lahaanshada sheyga, qeybahoodana waxaa loo qaadanayaa in ay la'eg yihiin, haddii eynan jirin caddeyn ka soo horjeeda.

Qodobka 699aad

1. Qof kasta oo ku jira wadaagga wuxuu leeyahay mulkiyadda qaybtiisa. Wuu haysan karaa, wuu ku intifaaci karaa miraheeda, waana ku isticmaali karaa iyadoo lagu xiray in intaas aynan dhibaato u geysan xuquuqda dadka kula jira.

Qodobka 702aad

1. Dadka ku jira wadaagga oo iska leh ugu yaraan Afar meelood saddex sheyga la wadaaggo waxey iyagoo u eegayo in intifaaci wanaagsan laga helayo sheyga, keeni karaan fikrado cusbooneysiin ah oo loo baahan yahay ama ku sameyn karaan beddelaad ujeeddada sheyga laga lahaa, oo dhaafsan maamulka caadiga ah iyadoo lagu xiray in go'aankaasi la gaarsiiyo dadka kale oo ka mid ah wadaagga. Dadka wadaagga ku jira oo go'aanka diiday waxey Maxkamadaha hortooda uga duri karaan ilaa muddo ku siman 2 bilood laga billaabo markii la gaarsiiyey.

2. Maxkamadda la hor geeyey duridda waxey ayidi kartaa go'aanka ay gaartay aqlabiyada iyadoo amreysa tillaabooyinka habboon. Gaar ahaan waxey amri kartaa in kan diidan la siiyo dammaanad ku saabsan inta isaga u lahaan karo magdhaw.

Qodobka 703aad

Inta ku wada jirta wadaagga waxey qaadi karaan tillaabooyinka lagama maarmaanka u ah xafidaada sheyga la wadaaggo, xataa raalli la'aanta dadka kale ee ku jira wadaagga.

Qodobka704aad

Kharajyadda maamulka sheyga la isla wadaaggo, kan xafidaadiisa, canshuurtiisa iyo wixii kale ee culeys ah oo saaran sheyga ama ka yimaada wadaagga waxaa qaadaya inta wadaagga ku jirta ee idil ilaa in u dhiganta qofka qebtiisa, haddii uusan jirin axkaam ka soo horjeeda.

Qodobka 705aad

Dadka ku jira wadaagga ee haysta ugu yaraan Afar meelood sadex ee sheyga la wadaaggo waxey goyn karaan tasarufkiisa iyadoo lagu xiray in go'aankooda uu saldhig u yahay sababo dhab ah lana ogeysiiyo dadka kale ee wadaagga kula jira. Dadka wadaagga ku jira ee diidsan, waxaa u bannaan inay ka hor duraan labo billood gudaheeda laga billaabo taariikhda gaarsiinta. Maxkamaddu, haddii qeybinta sheyga la wadaaggo ay dhibaato u keeneyso danaha dadka wadaagga ku jira, waxey gaareysaa go'aanka ay la noqoto, haddii iibinta la sameyn karo.

Qodobka 706aad

1. Qofka ku jira wadaagga shey guurta ah ama shey is wata, wuxuu inta aan la qeybinin soo ceshan karaa qeybta la isla wadaaggo oo qofka wadaagga ka mid ah ka gatay qof seddexaad. Xaqaas waa in la isticmaalaa hal bil gudaheeda laga billaabo maalinta qofka ka mid ah wadaagga uu ka war helay beeca ama maalinta la ogeysiiyo beeca. Soo ceshashedaas waxaa lagu sameynayaa ogeysiin la gaarsiiyo gadaha iyo iibsadaha. Wadaagaha doonaya soo celinta wuxuu isku beddelayaa (e' surrogato) xuquuqda iyo waajibaadka iibsadaha, haddii uu uga magdhabo kharajka uu galay oo idil.

2. Haddii dad badan oo ku wada jira wadaagga, ay codsadaan xaqa soo celinta (diritto di ripetizione), mid kasta o ayaga ka mid ah wuxuu ku isticmaali karaa xaqaas inta u dhiganta qeybtiisa.

## DHAMMAADKA WADAAGGA EE KA YIMAADA QEYBINTA

(Cessazione della comunione per effetto della divisione)

Qodobka 707aad

Qof kasta oo ka mid ah wadaagga wuxuu codsan karaa qeybinta sheyga la wadaaggo, haddii uusan ku khasboneyn in uu ku ijro wadaagga sharci ama heshiis jira awgeed. Lama ogola heshiiska reebaya qeybinta ilaa muddo ka badan 5 sano. Haddii muddada lagu heshiiyey eynan ka badneyn intaas, heshiiska wuxuu ansax ku yahay qofka ku jira wadaagga iyo kan wax ku leh (avente causa).

Qodobka 708aad

Dadka wadaagga ku jira waxay haddii raalli ku wada yihiin sidey rabaan u qaybsan karaan sheyga la wadaago. Haddii midkood uu yahay midaan awood lahayn (incapace) waa in la dhowraa hababka uu sharcigu qabo.



Qodobka 709aad

1. Haddii dadka ku jira wadaagga eynan raalli isugu ahayn qeybinta sheyga la wadaaggo, kan doonaya in la dhammeeyo xaaladda wadaagga waa in Maxkamadda hor geeyaa dadka wadaagga ku jira oo kale.

2. Maxkamaddu, haddii ay la noqoto, waxey wakiilaneysaa hal khabiir ama ka badan si ay u qiimeeyaan sheyga la wadaaggo una qeybiyaan qeyb-qeyb, haddii uu sheyga dabeecaddiisa ay oggoshahay inuu qeybsami karo isagoo aan qiimahiisa uusan si dhab ah u nuqsaamin.

Qodobka 710aad

Haddii qeybinta dabiiciga ah (in natura) eynan suurtoobeynin ama ay nuqsaameyso si dhab ah qiimaha sheyga, waxaa lagu dhaqaaqayaa iibinta sheyga iyadoo la raacayo sida waafaqsan Xeerka Habka Madaniga. Naadada waxey ku kooban tahay dadka wadaagga ku jira oo keliya, haddii ay u wada dhan yihiin weydiisashada gedidda oggol yihiinnà.

Qodobka 711aad

1. Deynleyaasha (creditori) qof walba oo ku jira wadaagga waxey is hor-taagi karaan in qeybinta dabiiciga ah iyo gedidda naadada ah la sameeyo iyagoo aan laga soo qayb gelinin. Is hortaagga waa in la ogeysiiyaa inta wadaaggaa ku jirto oo idil, waxaana waajib ku ah iney u yeeraan deynleyaasha si ay uga soo qeyb galaan hawlaha la xiriira qeybinta oo dhan, taasoo haddii ay dhici weydo aan qeybintu lagu hor-istaagi karin deynlayaasha.

2. Haddii qeybinta mar hore la sameeyey, deynleyaasha aan ka soo qayb gelin, ma duri karaan haddii eysan dhicin qiyaano mooyaane.

Qodobka 712aad

Qofka wadaagga ku jira oo qeybinta ka soo qeyb galay, waxaa loo qaadanayaa in uu ahaa hantiilaha qeybta uu lahaa laga billaabo maalintii uu ka qeyb galay wadaagga, iyo in uusan weligii noqon hantiilaha qeybaha kale.

Qodobka 713aad

1. Kuwa ka soo qeyb gala qeybinta wuxuu mid waliba kan kale u yahay dammaanad qaadayaalka dhibabka (molestie) iyo soo sheegashada sheyga (l'evizione) oo la xiriirta sabab ka horreysay qeybinta. Qof kasta oo iyaga ka mid ah waxaa laga rabaa in uu uga magdhabo dadka kale ilaa in u dhiganta qeybtiisa iyadoo la tixgelinaayo qiimaha sheyga waqtiga qeybinta. Haddii qof ka mid ah kuwa ku jira wadaagga uu yahay mid aan lahayn awood uu wax ku bixiyo qeybta uu ku leeyahay, waajibkaas wuxuu dulsaaran yahay la wadaagaha damiintay iyo dhammaan la wadaagayaasha kale ee leh awoodda bixinta.

2. Hase yeeshee, lama muteysanaayo wax dammaanad ah haddii uu jiro heshiis cad ee reebaya dammaanadda, xaaladdaan gaarka ah ee la xadiday. Dammaanadda la muteysanmaayo xataa marka soo sheegashadda sheyga lagu eedeyn kanayo lacag cad ama badeecad.

Qodobka 714aad

1. Qeybinta lagu heshiiyey (convenzionale) waa la baabi'in karaa haddii qof ka mid ah wadaagayaasha uu caddeeyo in ay ka soo gaartay khasaaro ka badan shan meelood meel iyadoo la tixgelinayo qiimaha sheyga laga billaabo maalinta qeybinta.

2. Dacwadda baaba'inta waa in la oogaa sannadka xiga kan qeybinta gudahiisa, dacweysanaha waa joojin karaa wuuna diidi karaa qeybin cusub, haddii uu siiyo dacwoodaha inta u baahan si loo dhammeystiro qeybtiisa isagoo ku bixinayo lacag cad ama badeecad

Qodobka 715aad

1. Marka qeybinta ku meel gaarka ah ay dhacdo, wadaagayaasha waxey ku heshiinayaan in ay siiyaan qof walba oo iyaga ka mid ah intifaaca qeybaha kale, iyagoo siinaya wadaagayaasha kale. Heshiiskaasi ma socon karo muddo ka badan 5 sano. Haddii aan la cayinin muddo ama haddii ay muddadu dhacday iyadoo aanan la sameyn heshiis cusub, qeybintu waxey ansax tahay ilaa hal sano, waana la cusbooneysiin karaa, haddii uusan durin qof ka mid ah wadaagayaasha 3 billood ka hor inta uusan dhammaanin sannadka socda.



2. Haddii qeybinta ku meel gaarka ah ay socoto ilaa 15 sano waxey isu beddeleysaa qeybin kama dambeys ah, haddii heshiis ka soo horjeeda uusan jirin. Haddii qof ka mid ah wadaagayaasha uu sii wato haysashada qeyb loo qeybiyo 15 sano, waxaa loo qaadanayaa in haysashadaas loo siiyey iyadoo loo eegay qaybin ku meel gaar ah.

Qodobka 716aad

Qeybinta ku meel gaarka ah inta ay quseysa hor istaagga dadka saddexaad, awoodda wadaagayaasha, xuquuqdooda iyo waajibaadkooda iyo hababka caddeynta, waxaa nidaaminaya xeerarka saameeya (ku saabsan) heshiiska ijaarka, haddii eynan ka soo hor jeedin dabeecadda qeybinta.

Qodobka 717aad

1. Inta la wado hawlaha qaybinta kama dambeysta ah, wadaagayaasha waxey isku raaci karaan in la sameeyo qeybinta ku meel gaarka ah. Qeybintaas waxey ansax tahay ilaa laga dhammeeyo qeybinta kama dambeysta ah.

2. Haddii eynan wadaagayaashu raalli ku ahayn qeybinta ku meel gaarka ah, qeybintaasi ma amri karo Garsooraha marka uu sidaa ka soo codsado qof ka mid ah wadaagayaasha kaddib markii uu dhageysto khabiir, haddii ay la noqoto.

WADAAGGA KHASABKA AH

Qodobka 718aad

Dadka ku jira wadaagga ma codsan karaan qeybinta sheyga la wadaago haddii danta sheyga loogu tala galay ay ka caddahay in sheyga uu yahay mid aan la qeybi karin.

# MADAXA II

## HABABKA LAGU YEESHO MILKIYADDA

## QEYBTA I

### QABASHADA SHEYAALKA GUURTO AH OO CIDNA MILKIYADOODA LAHAYN

### Qodobka 719aad

Qofkii qabsada shey guurto ah oo cidna milkiyaddiisa lahayn, isagoo qasadkiisu yahay in uu milkiyo, wuxuu leeyahay milkiyadiisa.

### Qodobka 720aad

1. Cidna milkiyaddooda ma laha sheyaalka guurtada ah ee qofkii milki u lahaa uu ka tago haysashadooda, isagoo qasadkiisu yahay in uu milkiyadooda ka tanaasulo.

2. Xoolaha aan rabaayadda ahayn waxaa loo qaadanayaa in milkiyaddooda cidna lahayn. inta ay xur yihiin. Haddii mid ka mid ah xoolahaas la xoreeyo, wuxuu noqonayaa waxaan cidna lahayn, haddii qofka milkiyadiisa leh uusan durbadiiba daba gelin ama uu ka joogsado daba galkiisa. Xoolaha rabaayadda ah ee bartay in ay ku soo noqdaan meesha loo sameeyey, waxey noqonayaan waxaan cidna lahayn haddii ay ka luntay dabeecaddaas (abitudine).

### Qodobka 721aad

1. Kansiga duugan (tesoro) ama qarsoon oo cidna caddeyn karin in uu milkiyadiisa leeyahay, waxaa iska leh hantiilaha ama hantiilaha leh dhulka (nudo proprietario) kansigaas laga helay.

2. Kansiga laga helay meel waqaf ah waxaa iska leh qofka waqafka sameeyey iyo dadka dhaxalkiisa leh, haddii uusan jirin xeer gaar ah.

### Qodobka 722aad

Xuquuqda kalluumeysiga, ugaarta, sheyaalka la helay iyo waxyabaha qadiimka ah, (Antichita') waxaa nidaaminaya xeerar gaar ah.



### QABASHADA MAGUURTADA AAN CIDNA MILKIYADOODA LAHAYN

### Qodobka 723aad

1. Dhulka aan la falin oo aan cidna lahayn waxaa milkiyadooda leh Dawladda.

2. Gacan ku dhigidda ama haysashada dhulkaasi waxay ku imaan kartaa oo keliya haddii oggolaansho laga haysto Dawladda sida waafaqsan Xeerarka nidaamiya maadada.

## QEYBTA II

### DHAXALKA IYO KHAARIJINTA (Liquidazione)

### Qodobka 724aad

Xadidaada dadka dhaxalka leh iyo qeybta dhaxalkooda iyo qeybinta xoolaha trakada ah, waxaa nidaaminaaya Xeerka Qoyska.

### Qodobka 725aad

Haddii qofka geeriyooday uusan magacaabin fuliye dardaaran, Maxkamadda haddii ay dadka ay quseyso oo idil codsadaan, ama haddii ay la noqotaba waxay u magacaabi kartaa ilaaliye dhaxalka qofka ay wadajir u doortaan dhaxaltooyada haddii dhaxaltooyada eynan isku waafaqsaneyn, Garsooraha wuxuu dooranayaa hal ilaaliye oo laga soo saarayo dhaxaltooyada kaddib markii uu dhegeysto.

## QEYBTA III

### DARDAARANKA

### Qodobka 726aad

Dardaaranka waxaa nidaaminaya Xeerka Qoyska.

### Qodobka 727aad

1. Tassaruf kasta ee qeynuuneed uu qof sameeyo si deeq ah, inta uu ku jiro jiradda ugu dambeysay, waxaa loo qaadanayaa amar dardaaraneed, waxaana lagu nidaamiyaa Xeerka dardaaranka, magac kasta oo la siiyo tasarufkaas.

2. Dhaxaltooyada dardaarmaha waa in ay hab kasto ku caddeeyaan in tassaurfka qeynuuneed uu sameeya qofka dhintay inta uu ku jiray jirradda ugu dambeysay. Haddii tassarufka uusan lahayn taariikh huban xujo ku noqon maayo dhaxaltooyada.

3. Haddii dhaxaltooyada ay caddeeyaan in tassarufka uu sameeyey qofka dhintay inta uu ku jiray jiradda ugu dambeysay, waxaa loo qaadanayaa in tassarufka loo sameeyey si hibo ah, haddii qofka intifaaceedu leh uusan muujinin wax ka soo horjeeda. Xeerarka kor lagu sheegay waa la dabaqayaa haddii xeer gaar ah oo ka soo horjeeda uusan jirin

Qodobka 728aad

Haddii caddeyn ka soo horjeeda, eysan jirin, haddii qof uu u sameeyo tassaruf dardaarmeed (atto di disposizione) qof ka mid ah dadka dhaxaltooyadiisa leh isagoo si kastaba ka taxafud sameeyo haysashadda iyo ku intifaaca sheyga la iibinayo, inta uu ku sugan yahay nolosha tassarufka. Waxaa loo qaadanayaa inuu yahay dardaaran (disposizione testamentaria) waxaana nidaaminaya xeerka u dhigan dardaaranka.

QEYBTA IV

KU DARSAMID MAGUURTO (Accessione di immobili).

Qodobka 729aad

Dhulka daadka ku dhacay dabadeedna uu webiga soo qaaday, waxaa leh dadka leh dhulka ku yaala webiga geeskiisa.

Qodobka 730aad

1. Dhulka ay Baddu soo saarto waxaa leh Dawladda

2. Lama oggola in la qabsado dhulka ay baddu soo saarto marka la calaameynayo xaduudka hantida ay biyaha ku soo fatahmeyn mooyaane.



Qodobka 731aad

Dadka leh milkiyadda dhulka la xadka ah biyaha fadhiya, sida balliyada (laghi) iyo waraha, ma lahaanayaan dhulka soo ban baxa marka ay biyahaas noqdaan, isla markaana ma beelayaan dhulka ay biyahaasi ku soo fatahmeen.

Qodobka 732aad

1. Dhisma kasta, ha ahaadeen geedo ama dhismo kale oo ku yaal dhulka korkiisa ama hoostiisa, waxaa loo qaadanayaa in kharajkiisa ku sameeyey qofka dhulka leh isaga ayaana iska leh.

2. Si kastaba ha ahaatee, waxaa la caddeyn karaa in dhismaha uu qof saddexaad kharjkiisa ku sameeyey sida xataa loo caddeyn karo in qofka leh milkiyadda dhulka uu siiyey qof saddexaad lahaanshada dhismaha horey u jiray ama xaq uu ku dhisto dhismahaas iyo in uu milkiyaddeeda yeesho.

Qodobka 733aad

1. Dhismaha geedaha ama dhismaha kale oo lagu sameeyey qalabka qof kale, waxay noqanayaan hantida qofka leh dhulka marka dhaqaajinta qalabkaasi uusan suuragal ahyn iyadoo aynan dhibaato weyn soo gaarin dhismaha marka ay suurtowdo laakiin dacwadda sheegashada (azione di rivendicazione) aan la soo oogin hal sano gudihiisa laga billaabo maalinta qofka leh milkiyadda qalabka uu oggolaaday in ay ku darsameyn dhismaha kor lagu sheegay.

2. Marka qofka leh milkiyadda dhulka uu lahaado milkiyadda qalabka, waxaa laga rabaa in uu bixiyo qiimaha oo la socdo magdhaw, haddii uu jiro. Marka ay sheegashada dhacdo, dhaqaajinta qalabka waxaa lagu sameynayaa kharajka qofka leh milkiyadda dhulka.

**Qodobka 734aad**

1. Marka qof saddexaad isagoo og uu qalabkiisa ku sameeyo dhismo, isagoo aan haysanın oggolaanshaha qofka leh milkiyadda dhulka, kani wuxuu haddiiba codsan karaa dhaqaajintooda hal sano gudeheeda laga billaabo maalinta uu ka war helay fulinta dhismahaas, iyadoo lagu sameynayo kharajka qofka saddexaad iyo in la siiyo magdhaw, haddii uu jiro ama dhowridooda, isagoo bixinaya qiimaha lagu dhaqaajin lahaa ama lacag u dhiganta qiimaha dheeraadka ah ee dhismaha ku kordhiyey dhulka

2. Qofka saddexaad ee dhisay dhismaha wuxuu codsan karaa dhaqaajintooda, haddii eynan dhibaato uga imaaneynin dhulka, haddii uusan qofka milkiyadda leh dooneynin in uu haysto dhismaha sida waafaqsan xubinta hore.

Qodobka 735aad

1. Haddii qofka saddexaad uu si niyadsami ah ku sameeyey dhismaha lagu xusay qobodbka kore, qofka leh milkiyadda dhulka ma lahaanayo xaqa ah in uu codsado dhaqaajinta, laakiin haddii uu rabo wuxuu kan saddexaad siin karaa hadduusan dhaqaajinta codsanin qiimaha qalabka iyo qiimaha shaqada ku kacday ama lacag u dhiganta qiimaha dheeraadka ah ee dhismuhu u keenay dhulka.

2. Hase yeeshe, haddii qiimaha dhismuhu uu yahay mid aad u badan ee bixintiisu ku adag tahay qofka leh milkiyadda dhulka, kani wuxuu codsan karaa in milkiyaddiisa la siiyo qofka saddexaad iyadoo la siinayo qiimo u qalma.

Qodobka 736aad

Haddii qof saddexaad uu qalabkiisa ku sameeyo dhismo kaddib marka uu helo oggolaanshaha qofka leh milkiyadda dhulka, kani haddii aanu heshiis ceenkaa ah uusan jirin, ma codsan karo dhaqaajinta waana inuu qof saddexaad siiyaa, haddii qofka saddexaad uusan dhaqaajinta codsanin, labada qiimo oo kor lagu xusay qeybta koowaad ee qodobka hore.

Qodobka 737aad

Inta ku xusan axkaamta qodobka 789, waxaa lagu dabaqayaa marka la qiimeynayo magdhawga ay dhigayaan labada qodob ee hore.



Qodobka 738aad

Marka qof dhul uu leeyahay ku dhiso derbi isagoo niyadsami ah, kuna xadgudbo qeyb ka mid ah dhulka qofka deriska ah. Garsooraha haddii loo baahdo wuxuu ku qasbi karaa qofka leh milkiyadda dhulka dambe inuu siiyo deriskiisa lahaanshaha qeybta uu ka dhisay derbiga, isagoo bixinayo qiimo u qalma.

Qodobka 739aad

Dhismaha yar yar, sida meelaha cabitaanka lagu gado iyo baraakayaal oo lagu dhisay dhul dad kale leeyihiin, iyadoo aan laga qasdi lahayn in ay weligood ku dhisnaadaan, waxaa iska leh qofka dhistay.

Qodobka 740aad

Haddii qof seddexaad dhismo ku dhiso alaab qof kale leeyahay, qofka alaabtaas lihi, ma codsan karo in loo soo celiyo, hase yeeshee waxaa u bannaan in uu magdhaw ugu noqdo qofkaas seddexaad amase inuu ugu noqdo qofka iska leh dhulka in aan ka badneyn intii uga hartay qiimaddii dhismadaas.

ISKU DHEGID SHEEYO GUURTO AH

Qodobka 741aad

Laba guurto oo laba qof kala leedahay haddii ay isku dhegaan, lana kala fujin karin in ay wax gaaraan mooyaane, heshiisna labada lihi u dhaxeyn Maxkamaddaa goyneysa xaalkaas, iyadoo iftiin sameysa saldhigyada caddaaladda ilaalineysana dhibaatadii dhacday iyo sida labada dhinac xaalkoodu yahay iyo mid walba niyad samiddiisa.

QEYBTA V

HESHIIS

Qodobka 742aad

Hantida iyo xuquuqda ceyneed oo kale oo ku saabsan guurto iyo maguurto waxey ku guuraan heshiiska haddiiba uu ku dhaco wax la leeyahay oo sidii la doono laga yeeli karo sida uu qorayo qodobka 201 iyadoo la dhowrayo axkaamaha soo socda.

Qodobka 743aad

Hantida sheyga la caddeeyo nooceeda mooye, hantideedu ma guureyso in la sooco mooyee sida uu qabo qodobka 202.

Qodobka 744aad

1. Hantida iyo xuquuqda ceyneed oo kale, oo ku saabsan maguurtada ma guuraan haddii loo eego dhinaca saddexaad, in la dhowro mooye qeynuunka habeynaya faafinta ma-guurtada.

2. Qeynuunkaas faafinta maguurtada isagaa caddeynaya tassarufaadka iyo xukumada iyo waxyaalaha la xuskado oo loo baahan yahay in la faafiyo, ha ahaadeen kuwo guurinaya hantida ama yeysan ahaanin. Isagaana goynaaya saldhigyada qeynuunka ah ee ku saabsan faafintaas.

## QEYBTA VI

## SHUFCA

## SHURUUDDA KU ISTICMAALKA XAQA SHUFCADA

Qodobka 745aad

Shufcaddu waa awood banneyneysa kolkii la iibinayo maguurto in la galo meeshii kii gadanayey iyadoo la raacayo shuruudda iyo siyaabaha ay sheegayaan qodobadda soo socda.

Qodobka 746aad

Xaqa shufcaddu wuxuu la wadaagaha wax u soocneyn u sugnaanayaa haddii hantida maguurtada la wadaagay qeyb ka mid ah laga iibiyey qof saddexaad.

Qodobka 747aad

Haddii dhowr shafeecado isku garbiyaan shufcada mid kastaba waa leeyahay xaqaas iyadoo loo fiirinayo inta qeybtiisu le'eg tahay.



Qodobka 748aad

Shufco ma jiri karto :

b. Haddii iibku dhaco naado si waafaqsan habka sharcigu dejiyey.

t. Haddii iibku ka dhaxeeyo dad is dhalay (asal iyo farac) ama laba is-qaba ama ah qaraabo ilaa derejadda afaraad ama xidid ilaa derejadda labaad.

j. Haddii maguurtada loo gaday iney noqoto meel wax lagu caabido amase la raaciyo meeshaas.

Qodobka 749aad

Qofkii doonaya shufco waa inuu ogeysiiyaa inuu rabo, kan iibinaya iyo kan gadanayaba 15 casho gudahood oo laga billaabo maalintii uu ogaaday iibka. Haddii kale xaqiisu waa dhacayaa.

Qodobka 750aad

1. Ogeysiinta rabidda shufcada waa iney ahaataa mid rasmi ah haddii kale waa baaba' sharci ahaan. Ogeysiiskaasuna xujo ku noqon maayo qofka saddexaad in la diiwaangeliyo mooyee.

2. Soddon maalmood gudahood oo laga billaabo taariikhda ogeysiiskaas, waa in la dhigaa khasnadda Maxkamadda maguurtadaasi oo ku taal fadhigeeda qiimihii runta ahaa ee iibku ku dhacay. Iyadoo la dhowrayo in dhigiddaasu ahaato intaan dacwadda shufcada la oogin. Haddiise dhigiddu ayan ku dhammaan waqtigaas iyo sidii horey lagu sheegay xaqa shufcaddu waa dhacayaa.

Qodobka 751aad

Soddon maalmood gudahood laga billaabo taariikhda ogeysiiska ee ku qoran qoobka hore, waa in lagu oogaa dacwadda shufcada kan iibsadaha iyo gataha, Maxkamadda maguurtada ku taal horteeda iyadoo lagu qoray jadwalka, haddii kale xaqaas shufcadu waa dhacayaa. Si deg deg ah ayaa loo xukumayaa dacwadda.

Qodobka 752aad

Iyadoo aan la dhaafin saldhigyada xeerka ee ku saabsan diiwaangelinta xukunka oggoolaanaya weydiisashada shufcada wuxuu la mid yahay kii uu u cuskanayey shafeecduhu lahaanshaha.

RAADADKA SHUFCADA

Qodobka 753aad

1. Shafeecsaduhu kolkii uu horjoogo iibsadaha wuxuu gelayaa meeshii gataha wuxuuna yeelanayaa xuquuqdiisii, xambaaranayaana waajibaadkiisii.

2. Haddii shufcaddii kaddib qof saddexaad yeesho maguurtaddii, shafeecsaduhu wuxuu wax uga noqon karaa oo qudh ah iibsadaha.

Qodobka 754aad

1. Intaan la sameyn ogeysiiska rabidda shufcada, haddii gatuhu dhir ku beero ama uu dhiso maguurtaddii waa in shafeecsaduhu bixiyaa hadba sidii uu doorto gatuhu, intii kaga baxday ama qiimihii ku kordhay maguurtada dhismaha ama beeridda darteed.

2. Haddiise dhismahu ama beeridu dhacaan ogeysiiska rabidda shufcada kaddib, shafeecsadaha, wuxuu awoodi karaa in uu weydiisto in la baabi'iyo. Haddiise uu doorto in uu deysto dhismaha ama beerta, waajib waxaa ku ah in uu bixiyo qiimadda alaabta dhismaha, ama inta ku baxday beerta.

Qodobka 755aad

Shafeecsadaha, saameynmeyso rahmad kasta oo rasmi ah ama xaq kasta oo gooni ahaaneed oo ka horjeeda gataha, ama iib kasta oo uu soo saaray gaduhu ama xaq kasta oo ceyneed oo uu sameeyey ama lagu sameeyey, haddiiba intaas oo dhami dhaceen taariikhda la diiwaan geliyey rabidda shufcada kaddib. Hase yeeshee deynleyaasha qorrani waxey leeyihiin xuquuqda hormarinta ay lahaayeen wixii gadaha uga yimid qiimihii maguurtadii.



DHICIDDA XAQA SHUFCADA

Qodobka 756aad

Xaqa qaadashada shufcaddu wuxuu ku dhacaa siyaalahan soo socota :

1. Haddii shafeecaduhu ka tanaasulo xaqaas, haba ahaado iibka ka hor;

2. Siyaalaha kale ee sharcigu qorayo.

QEYBTA VII

HEYSASHADA

YEELASHADA WAREEJINTA IYO LUMIDDA HAYSASHADA

Qodobka 757aad

1. Haysashaddu waa awood lagu yeesho guurto iyo maguurto oo ay ka muuqaneyso ku dhaqan hantiyeed iyo xaq kastoo kale oo ceyneed.

2. Kuma taagmeyso haysashaddu shaqo ruqso ahaan lagu oggolaaday oo qudh ah uuna la yimid qof ama shaqo qof kale u saamaxeen in uu la yimaado uguna dulqaadanayaan sidaas darteed.

3. Haddii haysashaddu lagu sameeyo xoog ama qarsoodi ama mugdi-mugdi ma saameyneyso qofka xoogaas la saaray ama laga qariyey haysashada ama mugdi-mugdi ay ka gashay ilaa iyo inta ceebahaasi ka baaba'aan.

Qodobka 758aad

Qofkii aan wax kala sooci karin, wuxuu ku yeelan karaa haysashada xagga wakiilkiisa sharciyeed.

Qodobka 759aad

1. Waa ansaxeysaa haysashaddu haddii uu dhex-dhexaadiyuhu magaca haystaha ku sameeyo, uuna ku xiriirsan yahay, xiriirkaasoo kaga amar qaadanayo wixii ku saabsan haysashadaas.

2. Markii shaki yimaado waxaa loo qaadanayaa in ninka sameynaya haysashada in uu naftiisa u haysanayo haddiise haysashada socodkeedu horreeyey, waxaa loo qaadanayaa in ay u socotay kii billaabay.

Qodobka 760aad

Waxey ka guureysaa haysashaddu haystaha una guureysa qof kale, haddii ay ku heshiiyaan ceynkaas haddiiba key ku soo wareegtay hanan karo xaqa ay ku soo aroortay haysahadaddu, yeysanba halkaas jirin u dhiibid dhab ah ee ku saabsan wixii ahaa dulucda xaqa.

Qodobka 761aad

Waxaa loo qaadanayaa in uu haystuhu yahay kii hanashadiisa dhabta ah ku sameynaya sheyga haddaan la helin wax khilaafsan ceynkaas.

Qodobka 762aad

1. Dhiibiddda qoraaladda la cuskado (titoli) oo laga bixiyo badeecadda uu hayo ammaanahayaha gaadiidka (vettore) amase tan taal maqsiinka waxay la mid tahay badeecadii oo la dhiibay qudheedii.

2. Hase yeeshe, haddii qof haysta waraaqahaas la cuskado, mid kalena haysto badeecaddii nafteedii, labaduna niyadsan yihiin, waxaa la hormarinayaa kan haysta badeecadda nafteeda.

Qodobka 763aad

1. Iyadoo sideedi ah ayey haysashaddu u guureysaa dhaxalka, hase yeeshe haddii kii la dhaxalay niyad-xumaa kan wax dhaxlina sugay haysashaddiisa in uu niyadsami ku haystay, wuxuu qabsan karaa niyad-samiddiisa.

2. Waxaa u bannaan dhaxlaha gaarka ah in uu u dumo haysashadiisa haysashadii kii la dhaxlay iyo wax kasta ee sharciyo ka ratibayo heysashadaas oo raad ah.



Qodobka 764aad

Haysashaddu waxey dhammaataa haddii haystuhu iska daayo hanashada dhabta ah ee xaqaas, ama uu waayo hanashadaas si kastaba ha ku waayee.

Qodobka 765aad

1. Haysashadu ku dhammaan meyso haddii wax ma joogta ahi is hortaagaan fara-ku heyntii iyo hanashadii xaqa haysashada.

2. Hase yeeshee, haysashadu waa dhammaaneysaa haddii waxaasi sidaas u socdaan laba sano kana dhalato haysasho cusub isagoo aanu dooneyn haystuhu ogeynna. waxaa laga billaabayaa laba sanno goortey billaabatay haysashada cusubi, haddey ku billaabatay qarsoodi la'aan ama goortuu tabo haystaha koowaad haddii haysashadu qarsooneyd.

## DHOWRIDDA HAYSASHADA

## SADDEXDA DACWADOOD EE HAYSASHADA

Qodobka 766aad

1. Haystaha maguurtada hadduu haysashada waayo, wuxuu codsan karaa, labada sano ee ku xigta waayitaankeeda in loo soo celiyo. Haddii waayitaanku ahaa qarsoodi, labada sano waxey ka billaabaneysaa goortii taasi cadaato.

2. Waxaa kaloo soo ceshan kara haysashada kii u haye qof kale isagoo ka wakiil ah.

Qodobka 767aad

1. Haddii qofka waayey haysashada ayan ka soo wareegin hal sano heysashadiisu markii la waayey, uma bannaana in uu ka soo ceshado haysashada qof aan cuskaneyn haysasho homarin mudan mooye.

Haysashada in la hormariyo mudani waa tii ku taagan cuskasho xeereed (tittolo legittimo), haddiise labada haysato midkoodna wuxuu cuskado haysan, ama waxay cuskanayaan isku xoog yihiin, waxaa la hormarniayaa haysashada taariikhdeedu horreysay.

2. Haddiise lagu waayey haysashada xoog, haystuhu waxaa u bannaan mar kasta inuu oogo dacwadda soo ceshasada haysashadiisa goortuu xooggu dhammaado hal sano gudaheeda.

Qodobka 768aad

Haystuhu wuxuu ku oogi karaa waqtiga sharcigu dhigayo, dacwadda soo cesashada, qofka ay u guurtay haysashada xooga lagu dhacay haba niyadsamaadee.

Qodobka 769aad

Qofkii haystay maguurto haysasho socotay hal sano kaddibna laga hor joogsaday, waxaa u bannaan sannada gudaheeda in uu oogo dacwad uu ku joojinayo is-hor-taagaas.

Qodobka 770aad

1. Qofkii haystay maguurto haysashadiisuna socotay hal sano ka badan, kana baqay isagoo cuskanaya asbaab caqliga gasha in leys hortaago, waxyaalo shaqo cusub ah oo loo sameeyey dartood oo hadideysa haysashadiisa, waxaa u bannaan inuu xaalkaas u bandhigo Garsooraha isagoo codsanaayo in la joojiyo shaqadaas.

Hase yeeshee, taasi waxey ku xeran tahay ineysan shaqadaasi dhammaan ama ayan ka soo wareegin hal sano, bilawga shaqadu ay ka imaan kareysay dhibaatadu.

2. Garsooruhu wuxuu yeeli karaa in uu diido in la wado shaqadaas, amase waxaa u bannaan in uu idmo iney soco-to, labada xaaladoodba waxaa u bannaan inuu gooyo in la hormariyo dammaanad habboon oo markii la xukumo in la joojiyo shaqada magdhaw u noqota in lagu hagaajiyo dhibaatada ka dhalatay joojintaas, haddii xukun dhammaadi ku soo baxo in is hortaaga shaqada socodkeedu ayan ku taagneyn sal. Haddiise la xukumo in la wado shaqada waxey curaartu u noqoneysaa dammaanad in la suuliyo shaqadaas dhammaanteed ama qaarkeed iyadoo lagu hagaajinayo dhibaatadii gaartay haystaha hadduu helo xukun dhammaad ah oo maslaxadiisa u dhacay.



Qodobka 771aad

Dad badani haddii ay isku qabsadaan haysasho xaq qudh ah, waxaa loo qaadanayaa ku meel gaar ahaan ah in haystuhu yahay qofka leh haysashada dhabta ah ee maadiga ah, iney soo baxdo mooyee in lagu helay heysashadaas si ceebeysan.

Qodobka 772aad

1. Waxaa loo qaadanayaa qof niyadsan, kii haysta xaq isagoo aan ka warqabin inuu ku xadgudbayo dad kale xaqooda haddii eysan ogaan la'aantaasi ka dhalan gef culus.

2. Haddii haystuhu yahay qof xeereed waxaa la eegayaa niyadsamida iyo niyadxumida qofka wakiilka ka ah.

3. Waxaa loo qaataa niyadsami iney jirto weligeed, haddaan wax ka duwani caddaanin.

Qodobka 773aad

1. Haystaha kama suusho niyadsamiddu ilaa iyo markuu ogaado mooyee in haysashadiisu tahay ku xadgudub xaq dad kale.

2. Niyadsamiddu waxey suushaa laga billaabo goortii lagu ogeysiiyo haystaha warqadda dacwadda, ceebaha ay leedahay haysashadiisu. Niyadxumena waxaa loo qaataa kii ka xooga haysashada qof kale.

Qodobka 774aad

Haddaan la sugin wax ka duwan ceynkaas haysashadu waxey lahaaneysaa sifooyinkii ay lahayd goortii la hantiyey.

## RAADADKA HAYSASHADDA GUBASHADA WAX LAGU HELO

### Qodobka 775aad

Qofkii haystay guurto ama ma-guurto isagoo aan ahayn kii hantideeda lahaa sida uu qorayo qodobka 757, ama haystay xaq ceyn ah oo ku saabsan ma-guurto isagoo xaqaasi uu lahayn, waxaa u bannaan inuu hantiyo sheygii ama xaqii ceynta ahaa haddii haysashadiisu socotay iyadoo aan kala go'in toban sanno.

### Qodobka 776aad

1. Haddii ay haysashddu ku dhaco ma-guurto ama xaq ceyn ah ee ma-guurto eyna wehliso niyadsami, cuskaneysana isla markaas sabab xaq ah, muddada gubashada wax lagu helo waa toban sanno.

2. Looma baahna niyadsamida goorta la helayo xaqa mooyee.

3. Sabab xaq ahi (giusto titolo) waa qoraal la cuskado oo ka soo baxaya qof aan lahayn sheyga, ama aan lahayn xaqa lagu helayo gubashada, waana in la diiwaangeliyaa sida qaanuunku qabo.

### Qodobka 777aad

Si kastaba ha noqotee marna laguma hantiyo gubashada xoolaha waqafka ah iyo dhaxalkaba iney haysashaddu socoto mooyee saddex iyo soddon sanno.

### Qodobka 778aad

Haddii ay sugnaato inay taagneyd (jirtay) haysasho waqti hore ee la yaqaan, haddana ay taagan tahay, taas waxaa loo qaadanayaa muddada labadaas waqti u dhexeysa iney taagneyd (jirtey), haddii aan la sugin wax ka duwan ceynkaas.



### Qodobka 779aad

1. Qofna kuma hantiyi karo gubasho wax ka duwan wixii uu cuskanayey, qofna naftiisa uma beddelan karo sababta haysashadiisa iyo salka ay ku taagan tahay haysashadiisa toona.

2. Hase yeeshee, wuxuu awoodi karaa inuu wax ku hantiyo gubasho, haddii sifada haysashadiisu ku beddelanto wax qof kale sameeyey, ama isagu sameeyey oo loo qaadan karo is hortaag xaqa kii lahaa, hase yeeshee markaasna gubashaddu waxey ka billaabaneysaa taariikhda beddelaada la sameeyey (momento della inversione).

### Qodobka 780aad

Waxa ku saabsan tirada muddada iyo joojinta, gubashada ama ka go'idiisa ama kolka Maxkamadda horteeda lagu qabsanayo, iyo ka tanaasulidda iyo heshiiska ku saabsan in la beddelo muddada, waxaa la dabaqayaa qodobka gubashada xaq-rididda ah haddii eyna ka hor imaaneyn dabeecadiisa iyo iyadoo la dhowrayo waxa soo socda :

### Qodobka 781aad

Inkasta ha noqotee muddada gubashada wax lagu yeesho waa joogsaneysaa haddii la helo sabab joojisa.

### Qodobka 782aad

1. Waa go'eysaa gubashada wax lagu yeesho, haddii haystuhu haysashada iska dhaafo ama uu waayo, dad kaleba ficilkooda haku waayee.

2. Hase yeeshee, gubashada ku go'imeyso, waayitaanka haysashada haddii haystuhu ku soo ceshado laba sanno gudahood ama dacwadda soo cesashada ku oogo muddadaas.

## HAYSASHADA LAGU HANTIYO GUURTO

### Qodobka 783aad

1. Qofkii haysta guurto ama xaq ceyn ah ee ku xiran guurto, ama waraaq kan watay waxaa ku qoran leeyahay (titolo al portatore) kuna haysta sabab xaq ah, isagaa noqonaya kii lahaa haddiiba uu niyadsamaa markuu gacan ku dhigay.

2. Haystaha haddii uu niyadsan yahay cuskanayana sabab xaq ah uuna qaadanayey in sheygu uu haystay dulsaarneyn wax culeys ah ama ayan wax ku xerneyn wuxuu yeelanayaa hantida iyadoo saafi ah.

3. Haysashada qudheedaa loo qaadanayaa iney jiraan sabab xaq ah iyo niyadsami, haddii aan la sugin wax weydaarsan ceynkaas.

### Qodobka 784aad

1. Qofka leh guurto ama waraaq kan watey waxa ku qoran leeyahay (titolo al portatore) hadduu waayo ama laga xado, waxaa u bannaan inuu ka soo ceshado kii ku haystay niyadsamidda saddex sano gudahood laga billaabo markuu dhumay ama la xaday.

2. Haddiise, qofka haystay waxaas la xaday ama dhumay ka gatay isagoo niyadsan suuqa ama naado ku gatay, ama uu ka gatay qof ka ganacsada ceynkiisa, waxaa u bannaan in uu ka dalbo qofka ceshanaya sheygaas in uu siiyo qiimihii uu ka bixiyey.

## HAYSASHADDA LAGU HANTIYO MIRAHA

### Qodobka 785aad

1. Haystuhu wuxuu yeeshaa wixii uu qabsado oo mira ah hadduuba niyadsan yahay.

2. Miraha dabiiciga ah ama miraha warshadeed maalintey go'do ayaa loo qaadanayaa in la qabsaday, miraha madanigase waxaa loo qaadanayaa in loo qabsaday maalin-maalin.



### Qodobka 786aad

Haystaha niyadda-xumi isagoo mas'uul ka ah mirihii uu qabtay dhammaantood iyo tuu dayacay qabashadeeda laga billaabo markuu noqday mid niyadxun, hase yeeshee wixii uu ku baxshay soo saaridda mirahaas ayuu ceshan karaa.

## SOO CELINTA KHARAJYADA

### Qodobka 787aad

1. Qofkii loo celiyo hantidiisa waa inuu haystaha u gudaa wixii kaga baxay ee lagama maarmaanka ah.

2. Masruufaadka dheefta leh waxaa lagu dabaqayaa waxa ay qorayaan qodobbada 734 iyo 735.

3. Haddiise kharajka baxay yahay mid aan loo baahneyn oo qurxin ah ma dalbi karo haystuhu, hase yeeshee waxaa u bannaan in uu siibo waxa uu sameeyey, waxaase laga rabaa markaas inuu sheygii u celiyo sidii hore, haddii qofka milkiyadda leh uusan dooran in sheygu haysto, isagoo bixinaya qiimaha markii la jebin lahaa.

### Qoboka 788aad

Haddii qof ka helo haysashada hantiile ama hayste hore, sugana inuu siiyey wixii ka baxay ee masaariif ahaa, wuxuu ka dalbi karaa waxaas uu bixiyey kan ceshanaya.

### Qodobka 789aad

Haddii uu dalbo hantiiluhu, Garsooraha waxaa u bannaan in uu gooyo waxa ku habboon in lagu bixiyo masaariifta ay qorayaan labada qodob oo hore, waxaana u bannaan inuu gooyo in uu bixintu noqoto mid qeyb-qeybsan laguna gudo xilli, isagoo ku xeraya in la hormariyo dammaanad lagama maarmaan ah. Hantiiluhu wuxuu leeyahay inuu iska fur-furo waajibkaas oo uu hormariyo lacag le'eg qiimahii qeybahaas oo laga gooyey dulsaaradeedii taasoo lagu qiyaaso sicirka sharciga, ilaa iyo waqtiga laga yeelanayo.

## MAS'UULIYADDA MARKA SHEYGA UU DHUMO

### Qodobka 790aad

1. Haddii haystuhu niyadsan yahay kuna intifaaco sheygii isagoo u qaba inuu leeyahay, mas'uul kama aha in uu siiyo kan ay ku waajibtay inuu u soo celiyo sheygii magdhaw intifaacaas daraadiis.

2. Haystuhu mas'uul kama aha sheyga haddii uu dhumo ama halaabo, intii faa'iido ka soo gaarta dhumiddaas ama halaabidaas mooyee.

### Qodobka 791aad

Haddii haystuhu niyadxun yahay, isagaa ka mas'uul ah haddii sheygaasi hallaabo sababtu haba ahaatee mid ku timid si lama filaan ah, hadduusanba aannu sugin in sheygu dhumi lahaa ama hallaabi lahaa haba ku jiree gacanta kii xaqa u lahaa.

## BAABKA II

## XUQUUQDA KU DHISAN MILKIYADDA

## MADAXA I

## MANFACEYSI, KU DHAQAN IYO DEGID

## QEYBTA I

## MANFACEYSI

### Qodobka 792aad

1. Manfaca waxaa lagu helaa fal sharci ah ama gubasho.

2. Dad isku xiga waxaa loogu dardaarmi karaa manfaco haddii ay jiraan oo nool yihiin marka la dardaarmayo, idoo kale waxaa loo dardaarmi karaa ilmo uur ku jira.

### Qodobka 793aad

Waxaa la raacayaa markii la joogo xuquuqda uu leeyahay nafcasaduhu iyo waajibaadka saaranba, wixii uu ku dhisnaa oo u dhaliyey xaqa manfacada iyo waxa ay dhigayaan qodobada soo socda.



### Qodobka 794aad

Miraha ka baxa waxaa lagu intifaacayo waxaa leh nafacasadaha intey ka le'eg tahay muddada nafaceysiga, iyadoo la dhowrayo xubinta labaad ee qodogka 808.

### Qodobka 795aad

1. Nafacsaduhu wixii sidii loogu dhiibay waa inuu ugu dhaqmaa iyo waxa loo sameeyey, waana inuuna ku maamulaa maamul wanaagsan.

2. Hantiiluhuna waa is hortaagi karaa ku dhaqan kasta ee aan bannaaneyn ama khilaafsan sida dabeecadiisu sheyga tahay, haddii uu sugana inuu xuquuqdiisa khatar ku jidho wuxuu awoodi karaa in uu dalbo dammaanad. Hadduusan hormarin nafcasaduhu, ama si aan bannaaneyn ugu dhaqmo sheygii ama ku hagaagsaneyn dabeecadiisa in kasta oo uu is hortaagay hantiiluhu, Garsooraha markaas oo kale wuxuu ka qaadi ku intifaacidda sheyga, wuxuuna u dhiibi karaa qof kale oo maamula. Bal wuxuu awoodi karaa habda siduu xaalku khatar u yahay inuu xukumo in uu dhammaaday xaqa manfacada iyadoo la dhowrayo xuquuqda dadka kale.

### Qodobka 796aad

1. Nafacsaduhu intuu manfaceysanayo ceynta, isagaa laga rabaa kharajka caadiga ah ee koreysa ceyntaas, iyo kharajka kaga baxa shaqada ay dooneyso hagaajinteedu.

2. Kharajka aan caadiga ahaynse ama hagaajinta weyn oo aan ku imaan nafacsadaha gefkiisa, waxey koreysaa hantiilaha, waana in uu u gudaa nafacsaduhu hantiilaha faaiidada ka dhalatay wixii uu ku bixiyey ceynkaas. Haddiise nafacsaduhu isagu bixiyey kharajkaas, wuxuu leeyahay inuu soo ceshado raasumaalkii markii xaqa manfaceysugu dhammaado.

### Qodobka 797aad

1. Nafcasaduhu waa inuu dhowraa ceynta uu ku intifaacayo sidii qof caadi ah.

2. Isagaana ka mas'uul ah haddii ceyntu dhunto xataa sabab uusan lahayn awgeed, hadduuba kaddib dhacay in uu u u celiyo kii lahaa markuu dhammaaday ka manaafacaysigu.

Qodobka 798aad

Haddii uu sheyga baabo'o ama halaabo ee uu u baahdo hagaajin weyn oo waajib ku ah inuu hantiilahu xambaaro kharajkeeda, ama ay u baahato tallaabo looga celinayo khatar aan la fileyn waa in nafcasaduhu markaas dareensiiyaa hantiilaha, sidoo kale waa inuu dareensiiyaa haddii qof kale ku sheegto xaq ceyntii.

Qodobka799aad

1. Haddii uu yahay guurto xoolaha laga manaafacsanayo waa in la tiriyaa, waa inuuna dhigaa nafcasaduhu dammaanad, haddii aannu dhigin waxaa la gadayaa xoolahaas qiimahoodana waxaa lagu gadayaa saamiyo ka soo baxa dawladdu waxay leedahay (titoli pubblici) faa'iidada ka timaadana waxaa yeelanaya nafacsadaha.

2. Haddii nafacsaduhu dhigo dammaanadda wuxuu awoodi karaa inuu ku dhaqmo ceyntii baabi'i kartay hase yeeshee waa inuu u celiyaa beddelkeedii kolkuu dhammaado xaqiisa manaafaceysiga ah.

Wixii ka dhasha xoolaha nool isagaa yeelanaya kaddib markii uu baxsho magdhawga xoolaha asalka ah oo si lama filaan ah u luma (periti).

Qodobka 800aad

1. Wuxuu dhammaanayaa xaqa nafaceysigu markuu dhammaado waqtigii loo qabtay, haddiise aan loo qaban muddo, waxaa loo qaadanayaa in xaqaasu jirayo intuu nool yahay nafacsaduhu, xaqaasu wuxuu ku dhammaanayaa si kastaba ha ahaatee dhimashada nafacsadaha, haba ka horreeyee waqti la qabtay.

2. Haddii dhulka manaafaceysanaayey abuur ku yaal markey muddadii dhammaatay, ama nafacsaduhu dhintay, waxaa dhulka loo dhaafayaa nafacsadaha ama dhaxltooyadiisa ilaa uu ka go'o abuurku, hase yeeshee waa iney bixiyaan kiradii dhulka muddadaas.



Qodobka 801aad

1. Wuxuu ku dhammaadaa xaqa manfaceysigu ceyntii laga manaafacsanaayey ee dhunta, hase yeeshee wuxuu u gudarayaa sheygii loo keenay ceyntii hore beddelkeedii.

2. Haddii dhumidda sheygaas laga manaafacsanaayey aanuna keenin gefka hantiilaha, lagu khasbi maayo in ceyntii sidii ay ahayd uu u sooceliyo. Hase yeeshee haddii uu soo celiyo, waxaa u soo noqonaya nafcasadaha xaqii manfaceysiga, haddii uusan lug ku lahayn dhumiddaas, markaasna waxaa lagu dhaqmayaa qodobka 796 xubintiisa labaad.

Qodobka 802aad

Xaqa manaafacaysigu wuxuu ku dhammaanayaa inaan lagu dhaqmin sheyga shan iyo toban sannadood.

## QEYBTA II

## XAQA KU DHAQANKA IYO XAQA DEGIDDA

Qodobka 803aad

Xaqa ku dhaqanka iyo kan degidda intey le'eg yihiin waxaa lagu xadidayaa inta naftooda u baahan yahay, kan xaqaas leh iyo xaaskiisuba iyadoo aan laga tegin wuxuu qorayo waxa uu ku dhisan yahay (titolo) oo dhaliyey xaqaas.

Qodobka 804aad

Loogama tanaasuli karo qof saddexaad xaqa ku dhaqanka iyo kan degiddaba, haddii eysan jirin cudurdaar xoog leh, ama sharad ceynkaas oranaya oo cad.

Qodobka 805aad

Wixii ka baxsan qodobaddaas hore waxaa lagu dabaqayaa qodobada loo dejiyey xaqa manfaceysiga, kuwa ku dhaqanka iyo degidda haddeyanba ka hor imaaneyn dabeecadda ay leeyihiin labadaas xaq.

MADAXA II

## XAQA U ADEEGIDDA (SERVITU)

### Qodobka 806aad

U adeegiddu waa xaq xadidaya manfaco maguurto si uu uga faa'iideysto maguurto kale oo uu leeyahay qof kale, wuxuuna ku imaan karaa hanti guud, haddii uusan ka hor imaaneyn waxa loo suubiyey hantidaas in loogu dhaqmo.

### Qodobka 807aad

1. Xaqa adeegidda waxaa lagu yeeshaa fal sharci ah ama dhaxal.

2. xaqa gubashada waxaa lagu yeelan karaa oo keliya adeegidda muuqata iyadoo uu ku jiro xaqa marida.

### Qodobka 808aad

1. Xaqa adeegidda waxaa lagu dhisi karaa sida uu ku talagalo aabaha qosyka.

2. Ku talagalka aabaha qoyska wuxuu jiraa, haaddey caddaato si kastaba ha ahaatee in qof leh labo maguurto oo kala baxsan uu ka taago (sameeyo) dhexdooda calaamad muuqata sidaasna uu uga dhaliyey dhexdooda xiriir isdabajoog ah oo ku tuseysa in uu jiro xaqa adeegidda haddii labada maguurto ay kale lahaan lahayd hantiilayaal kala duwan.

Markaas haddii. labada maguurto u guuraan gacmo hantiilayaal kala duwan iyadoo xaaladoodu beddelmin waxaa loo qaadanayaa in xaqa adeegidda labada maguurto isku leeyihiin, haddii uusan halkaas jirin sharad cad oo khilaafsan ceynkaas.



### Qodobka 809aad

1. Heshiiska xadidaya xuriyadda hantiilaha maguurtada inuu kor u qaado dhisiddiisa tusaalo ahaanna inuusan dhisi karin ilaa heer aan dhaafsaneyn dhirir ahaan iyo ballaar ahaan in go'an, wuxuuna dhalinayaa xaqa adeegidda ee dulsaaran maguurtadaas si maslaxad u ah maguurtayaasha kale ee u dhaw dantoodana loo sameeyey, haddii uusan jirin heshiis sidaa ka duwan.

2. Ku xadgudub kasta ee xadidaadaas lagu sameeyo wuxuu keenayaa hagaajin dabiici ah, hase yeeshee waxaa lagu gaabsan karaa magdhaw khasaareed, haddii Maxkamaddu u aragto iney sidaas ku habboon tahy.

### Qodobka 810aad

Xuquuqda adeegidda waxay ku dhismeysaa wixii dhaliyey iyo caadada degaanka iyo axkaamta soo socota.

### Qodobka811aad

1. Qofka leh maguurtada adeegga lihi, wuxuu sameyn karaa hawlaha lagama maarmaanka u ah ku dhaqmidda xaqa adeegga iyo wixii lagu dhawri karo. Wuxuuna xaqaas ugu dhaqmi karaa si ayan ugu imaan dhib, maguurtadaas adeegeysa (Fondo servente).

2. Baahida cusboonaata maguurtada loo adeegayo si kastaba ha noqotee, ma u keeni karto culeys dhulka ay u adeegeyso.

### Qodobka 812aad

Hantiilaha leh maguurtada adeegeyso, waajib kuma aha inuu sameeyo hawlaha maslaxadda u ah maguurtada loo adeegayo, haddii eysan hawlahaasu u ahayn lagama maarmaan ku dhaqmidda caadiga ah ee adeeggii, haddii uusan jirin heshiis sidaas ka duwan.

## Qodobka 813aad

1. Qiimaha ku baxa hawlaha looga baahan yahay ku isticmaalka iyo dhowrista waxey dulsaaran yihiin hantiilaha maguurtada loo adeego, haddii uusan jirin heshiis sidaas ka duwan

2. Haddiise kan leh maguurtada uu yahay key waajib ku ahayd in uu sameeyo shaqooyinkaas. Bixiyana wixii ku baxa. wuxuu culeyskaas isaga reebi karaa. inuu uga tago maguurtadaas dhammaanteed ama qaarkeed kan leh maguurtada loo adeegayo

3 Haddii shaqadu sidoo kale wax u tareyso kan leh maguurtada adeegeyso, markaas kharajka ku baxa hagaajinta wuxuu dulsaaran yahay labada dhinac mid walba inta ay le'eg tahay faa'-iidada ugu timaada shaqadaas.

## Qodobka 814aad

1. Ma awooddi karo kan lihi maguurtada adeegeyso in uu sameeyo wax ka dhimi kara ku dhaqanka xaqa adeegidda ama culeys u keeni karo. Umana bannaana gaar ahaan in uu ka beddelo sidii wuxu ahaayeen, ama uu ka dhaqaajiyomeeshii asal ahaan loogu talagalay in loogu dhaqmo xaqa adeegidda.

2. Hase yeeshee, haddii meesha asal ahaan loogu talagalay ay noqotay mid kordhineysa culeyska xaqa adeegidda amase reebeysa in la hagaajiya maguurtada adeegeysa, hantiilaha leh maguurtadaas wuxuu weydiisan karaa in xaqa adeegidda loo wareejiyo dhinac kale oo ka mid ah maguurtadiisa ama maguurto kale oo u muuqata in uu isaga leeyahay ama qof saddexaad leeyahay oo oggolaaday, waxaase shardi ah ku dhaqanka xaqa adeegidda meesha cusub ha ahaato mid u sahlan hantiilaha dhulka loo adeegay inta ay u sahlaneyd halkiisii hore.

## Qodobka 815aad

1. Haddii maguurtada loo adeegaya la qeybiyo xaqa adeegidda, waxaa loo sameynayaa maslaxadda gabal kasta. Waxaase shardi ah in uu maguurtada adeegeysa culeyskeeda uusan kordhin.

2. Hase yeeshee haddaanu xaqa adeegidda runtii wax u tareyn gabal gabaladaas ka mid ah mooyee, wuxuu weydiisan karaa kan leh maguurtada adeegeysa, in laga suuliyo xaqaas qeybaha kale.



## Qodobka 816aad

1. Haddii la qeybiyo maguurtada adeegeyso, xaqa adeegidda wuxuu ku harayaa gabal walba oo ka mid ah.

2. Hase yeeshee, haddaan run ahaan gabaladaas qaarkood loogu dhaqmin xaqa adeegidda, ayaanna suurtoobin in loogu dhaqmo, qof kasta oo gabal ku leh, wuxuu dalbi karaa in laga suuliyo xaqaas gabalka uu leeyahay.

## Qodobka 817aad

Waxey ku dhammaataa xuquuqda adeegidda muddadii loo qabtay oo dhammaata, ama labadii maguurto oo adaeegidda isku leh ee baaba'da, ama labadii maguurto oo hantiile keli ah gacantiisa ku kulanta, hase yeeshee xaqa suulo kulankaasu suulimaad raadkeedu dib u noqonaayo, markaas xaqa adeegidda waa soo laabanayaa.

## Qodobka 818aad

1. Waxey ku dhammaaneysaa xuquuqda adeegidda haddaan lagu dhaqmin muddo dhan shan iyo toban sano. Haddiise xaqa adeegidda loo sameeyey ceyn (shey) la waqfay danteed muddadu markaas waa seddex iyo soddon sano. Sida ay u rido gubashada xaqa adeegidda, ayey sidoo kale ka beddeli kartaa sidii loogu dhaqmi jiray.

2. Haddii ay hantiyaan maguurtada xaqa adeegidda leh, wadaagayaal oo wax u kala sooceyn. Midkoodna kamanaafaceysto xaqaas, waxaa kala goynayo inta kale gubashada ku socotay, sidoo kale haddii gubashada ay joogsato, danta mid ka mid ah kuwaas wadaagayaasha ahaa gubashaddu waa u joogsanayaa inta kale danahood.

## Qodobka 819aad

1. Wuxuu ku dhammaanayaa xaqa gubashada haddii ceyntii u beddelanto si aan loogu dhaqmi karin xaqaas.

2. Xaqa adeegidda waa soo noqonayaa haddiise ceyntii u soo noqoto si lagu dhaqmi karo xaqaas, in xaqaasu ku dhacay mooyee ku dhaqan la'aan.

Qodobka 820aad

Qof leh maguurtada adeegeysa wuxuu leeyahay inuu iska furfuro xaqa adeegidda dhammaantiis ama qaarkiis, haddii uu faa'iidana u yeelan waayo maguurtadii loo adeegayey, amase uu yeelan waayo faa'iido yar mooyaane, oo aan ku habbooneyn marnaba culeysayada dulsaaran maguuratadaas lagu leeyahay xaqa adeegidda.

BUUGGA IV

XUQUUQDA CEYNTA AH EE RAACSAN

DAMMAANADYADA CEYNTA AH

BAABKA I

RAHAN

Qodobka 821aad

Rahmidda waa heshiis uu ku helayo deynluhu xaq ceyneed oo uu ku yeelanayo maguurto gooni looga dhigay in lagu bixiyo deynkiisa. Heshiiskaasoo siinaya in uu ka hormaro deynleyaasha caadiga ah iyo kuwa isaga ka dambeeya si uu uga helo xaqiisa qiimadda maguurtadaas gacan kasta oo ay ku jirto.

MADAXA I

DHISMAHA RAHANKA

Qodobka 822aad

1. Ma guntami karto rahmiddu in lagu sameeyo mooyaane qoraal rasmi ah.

2. Kharajka qoraalka wuxuu dulsaaran yahay rahmaha in lagu heshiiyo mooyee wax khilaafsan caynkaas.

Qodobka 823aad

1. Rahmuhu wuxuu noqon karaa deynqabaha qudhiisa, sidoo kalena waa noqon karaa qof kale oo u sameeyey rahmad deynsanaha dantiisa.

2. Labada siyoodba, rahmuhu waa inuu leeyahay maguurtada la rahmaayo iyo inuu leeyahay awood uu ku tasarufo.



Qodobka 824aad

Haddii aannu lahaynrahmuhu maguurtada la rahmay heshiis rahmiddu waa ansaxayaa haddii uu ku oggolaado kan runta u lihi warqad rasmi ah. Haddiise oggolaashadaasu la waayo, rahmiddu ku imaan meyso maguurtada waqtiga rahmuhu yeesho maguurtadaas mooyee.

2. Rahmidda xoolaha la yeelan doono waa baaba'a.

Qodobka 825aad

Haddii la baabi'iyo wixii uu u cuskanayey rahmahu lahaanshadiisa ama la fasakho ama la tuuro ama sabab kasta ha noqotee uu suulo rahmaddaasu waa u taagnaaneysaa danta deynlaha, hadduuba deynlahaasu wax loo rahmay niyadsamaa markuu geliyey heshiiska rahmidda.

Qodobka 826aad

1. Ma bannaana iney ku aroorto rahmadda maguurto mooyaane, haddaanu jirin qaanuun khilaafsan caynkaas.

2. Waa iney ahaataa maguurtadu rahman mid ku banaan ganacsi, laguna iibin karo naado waana iney tahay mid ceynteeda (qudheeda) lagu magacaabay si tifaftiran iyadoo la muujinayo dabeecaddeeda iyo meeshay ku taal oo laga helo waana iney ka muuqataa tilmaantaasu heshiiska rahmidda naftiisa, ama heshiis kale oo rasmi ah oo raacsan haddii kale rahmiddu waa baaba'eysaa,

Qodobka 827aad

Rahmidda maguurtadda waxaa gelaya waxa raacsan maguurtada la rahmay oo lagu tirinayo iney tahaymaguurto, si gaar ahaaneedna waxa u gelaya xuquuqda adeegidda iyo kuwa laga dhigay maguurto iyo waxyaalaha hagaajinta ah ama dhismaha oo faa'iido u keeneysa hantiilaha, haddaamba lagu heshiin wax ka duwan caynkaas iyadoo la dhowrayo mudnaashada lacagta ay yeeshaan qandaraaslayaasha dhismaha (imprenditori) iyo arkiteetiyaasha ku qoran qodobka 936.

Qodobka 828aad

Waxaa ka imaanaya diiwaangelinta ogeysiiska wareejinta hantida in la raaciyo maguurtada waxay dhasho oo miro ah iyo wixii laga helo muddadii ka dambeysay diiwaangelinta. Waxaa la raacayaa marka la qeybinayo mirahaas waxa loo raacayo qeybinta qiimadda maguurtada.

Qodobka 829aad

Waxaa u bannaan qofka leh dhismooyin ku yaal dhul dad kale leeyahay in uu rahmo. Markaasna deynlaha wax loo rahmay wuxuu yeelanayaa xaqa hormarinta in uu ka helo deyntiisa qiimadda lagu iibiyey wixii dumay, ama uu ka helo magdhaw uu bixinahayo qofka dhulka leh hadduu doorto in uu reebto dhismooyinkii sida ay qoreyso axkaamta gaarka u ah isku-dhegsanaanta.

Qodobka 830aad

1. Rahmiddda ay sameeyaan hantiilayaasha wadaagga dhammaantood, maguurto aan la qeybin, waa fuleysaa si kastaba ah noqoto waxa ka imaan doona qeybinta maguurtada ama iibinteeda.

2. Haddii wadaagayaasha midkood rahmado intiisa aan soocneyn oo uu ku lahaa maguurtada ama uu rahmo gabal soocan oo ka mid ah maguurtadaas, haddii intiisu markii la qaybiyey maguurtada ay ku dhacdo meelo kale waxey u guureysaa rahmiddii iyadoo leh darajadeedii qeybtiisa oo le'eg qiimadda maguurtada rahmaneyd hortii, qadarkaasna (intaasna) waxaa lagu muujinayaa ama Garsoore (ordinanza).

Deynlaha wax loo rahmay wuxuu sameynayaa diiwaangelin cusub oo lagu sheegayo qadarka inta ay u soo guurtay rahmiddu, sagaashan maalmood gudahood oo laga bilaabo markey dareensiiyaan diiwaangelinta qeybinta dadka danta ka lihi.

Dhibimeyso guuridda rahmiddaasu, rahmid ka soo baxday wadaagayaasha dhammaantood iyo mudnaashada kuwa qeybinta wax ka helay.



Qodobka 831aad

Waa u bannaan tahay rahmiddu inay noqoto mid dammaan u ah deyn ku xiran sharad ama deyn soo socota ama deyn imaan karta (eventuale), waxaa kale ay u noqon kartaa dammaan, deyn furan, ama mid loo furayo xisaab socota, waase in lagu muujiyaa heshiiska rahmidda naftiisa inta deynta la dammaantay le'eg tahay iyo inta ay gaari karto deyntaasu.

Qodobka 832aad

Qeyb walba oo ka mid ah maguurto, ama maguurtooyinka rahman, wuxuu dammaan ka yahay deyntii oo dhan, gabal walba oo deynta kamid ahna waxaa dammaan u ah maguurtadii ama maguurtooyinkii rahmanaa dhammaantood, haddaanu sharcigu ama heshiisku wax kale qoreyn.

Qodobka 833aad

1. Haddii uusan jirin axkaam sidaas ka duwan rahmidda kama soocna deynta ay damiinku u tahay taasoo uu ku xiran yahay ansixiddeeda iyo dhammaanshadeeda.

2. Haddii rahanka uu sameeyey qof ka duwan deynqabaha wuxuu isku difaacayo oo uu qabsanayo oo gaarka u ah ka sokow, wuxuu leeyahay in uu qabsado wixii uu qabsan lahaa deynqabuhu oo ishortaag ah oo ku saabsan deynta, xaqaasna waa u taagnaanayaa haba ka tanaasulee deynsanuhu.

MADAXA II

RAADADKA RAHMIDDA

QAYBTA I

RAADADKA XAGGA DHINACYADA RAHMIDDA SAMEEYA RAADADKA XAGGA DHISAHA

Qodobka 834aad

Rahmuhu waa uu ku tasarufi karaa maguurtadii rahmanayd hase yeeshee tasaruf kasta oo uu sameeyana wax u dhimi maayo xaqa deynlaha wax loo rahmay.

Qodobka 835aad

Rahmuhu wuxuu leeyayhay in uu maamulo maguurtadii rahmaneyd, qabsadana miraheeda ilaa goortii la raaciyey maguurtada (immobilizzazione).

Qodobka 836aad

1. Ijaarkuu sameeyey rahmuhu, ku fuli maayo deynlaha wax loo rahmay inuu yahay mid taariikhdiisu la sugay, ka hor intaan la diiwaangelin ogeysiiska la wareegidda hantida mooyee. Haddiise ijaarku yahay mid sidaas taariikhdiisa loo Sugin, amaseba la sameeyey diiwaangelinta ogeysiiska kaddib, lana hormarin kirada, ma noqonayo mid fulaya in laga dhigi karo mooyee mid loo qaadan karo in uu ku jiro shaqada maamulka wanaagsan.

2. Ijaarka ka horeeyey diiwaangelinta, kana badan sagaal sanadood, kuma fulaayo deynlaha wax loo rahmay, sagaal sanadood mooyee, intaan la qorin ka hor diiwaangelinta rahmidda.

Qodobka 837aad

1. Noqonmeyso mid ku fuli karta deynlaha wax loo rahmay bixinta kirada hore loo bixiyey muddo aan ka badnayn seddex sanadood, ama wareejinteedaba, iney tahay mid taariikhdeedu sugan tahay mooyee lana diiwaangeliyey ka hor, wareejinta hantida.

2. Haddiise wareejintu ama bixinta kiradu tahay muddo ka badan seddex sanadood, deynlaha wax loo rahmay ku fulimayso haddeyan ahayn mid la diiwaangeliyey ka hor intaan la diiwaangelin rahmidda. Haddii kale muddadii baa loo celinayaa seddex sanadood iyadoo la dhowrayo wixii axkaam ah oo ku soo arooray xubinta hore ee qodobkan.

Qodobka 838aad

Rahmuhu wuxuu damaanad qaadayaa ansaxidda rahmidda. Deynlaha wax loo rahmay wuxuu leeyahay in uu is-hortaago tasaruf kasta ama dayackasta oo wax weyn u dhimaayo damaanadda markey degdegsiinyo jiraanna wuxuu sameyn karaa tillaabooyinka dhowritaanka ah ee lagama maarmaanka ah, kharajkuna wuxuu dul saaran yahay rahmaha.



Qodobka 839aad

1. Haddii gaf uu sameeyey rahmuhu, maguurtada la rahmay ku dhunto ama ay ku hallaawdo, deynlaha loo rahmay wuxuu leeyahay in uu doorto in loo keeno damaan ku filan ama in uu helo bixinta deyntiisa isla markiiba.

2. Haddii lumidda ama hallaabidda uusan sabab ku lahayn deynqabaha, ama haddii deynluhu uusan oggolaan in deyntu ay ahaato damaanad la'aan deynqabuhu wuxuu dooran karaa inuu bixiyo damaanad ku filan ama uu bixiyo deynta ka hor inta ayan dhicin muddadeeda. Xaaladdaan dambe haddii deyntu ayan lahayn dulsaaro deynluhu wuxuu leeyahay oo keliya inuu gudsado in la'eg deynta oo laga jaray dulsaarad ee le'eg sicirka xeereed laga billaabo waqtiga bixinta ilaa waqtiga dhicidda deynta.

3. Si kastaba ha ahaatee, haddey maguurtadii rahamaneyd lagu sameeyo wax u keeney dhumid ama hallaabid amase ka dhigeysa mid aan ku fileyn damaanadii, deynluhu wuxuu leeyahay inuu ka codsado garsooraha in la joojiyo shaqadaas, qaadana tallaabo lagu reebayo in ay dhacdo dhibaato.

Qodobka 840aad

Haddii ay lunto ama ay halaawdo maguurtada la rahmay si kastaba ha ku timaadee, rahanka wixii u wareegaa isagoo sidiisa ah lacagta ka timid magdhowgii lumidda ama hallaabidda, magdhowga caymiska ah ama qiimaha wareejinta hantiida ee loo sameeyey danta guud awgeed.-

Qodobka 841aad

Hadduu yahay rahmuhu qof kale oo aan ahayn deynsanaha intuu rahmo mooyee xoolihiisa inta kale lama qaban karo

mana laha in uu ku doodo in marka hore la xayaayibiyo deynsanaha haddeyan jirin wax heshiis ah ee sidaas ka duwan.

Qodobka 842aad

1. Deynluhu markuu deynsanaha ku baraarujiyo kaddib in uu bixiyo wixii lagu lahaa, wuxuu leeyahay in lagu fuliyo xaqiisa maguurtada rahmaneyd, isagoo dalbaya gadiddeeda iyo wareejinteeda, si waafaqsan waqtiyada iyo hababka uu gooyey Xeerka Habka Madaniga.

2. Rahmuhu hadduu yahay qof aan ahayn deynsanaha, waxaa u bannaan in uu kaga baxsado fulinta qasabka ah in uu dhaafo maguurtadii rahmaneyd iyadoo la raacayo siyaalaha iyo axkaanta loo raacayo haystuhu markuu dhaafayo maguurtada.

Qodobka 843aad

1. Wuxuu noqonayaa baaba' heshiis kasta ee siinaya deynlaha markii deyntiisa la gudi waayo, kolkii la gaaro waqtiga deynta loo qabtay in lagu bixiyo, in uu hantiyayo maguurtadii rahmaneyd, kuna hantiyo qiimo la yaqaan inkasta ha ahaadee, ama in uu gado iyadoo aan la dhawrin habka uu qoraayo qaanuunku, haba la sameeyo heshiiskaas rahmidda kaddib.
2. Hase yeeshee, markii deynta ama qaarkeed la gaaro waqtiga loo qabtay kaddib waxaa u bannaan in uu uga tanaasulo deynsanuhu deynlaha, maguurtada rahmaneyd isagoo ku bixinaya deyntiisa.

QEYBTA II

RAADADKA RAHANKA XAGGA DADKA KALE

Qodobka 844aad

Ma saameyneyso rahmiddu xaqa dadka kale in la diiwaan geliyo heshiiska ama xukunka sugaya rahmidda ka hor intayan dad kale ku helin xaq ceyneed maguurtada mooyee, iyadoo aan la dhaafin axkaanta loo dejiyey masallafaadda (fallimento).

2. Wareejinta xaqa lagu damaanay, raahan la diiwaangeliyey ama galidda qof meesha daynlaha si xeer ah ama si heshiis ah ama ku wareejinta isla darajadii rahanka maslaxadda deynle kale laguma ishortaagi karo qof saddexaad haddii aanan lagu qorin geeska diiwaangelinta asalka ah.



Qodobka 845aad

Ku dhigidda rahanka cusbooneysiintiisa, tirtiriddiisa iyo baabi'inta tirtirideeda iyo raadka la xiriira waxaa lagu nidaamina yaa axkaanta xeereed ee ku saabsan faafinta maguurtada.

Qodobka 846aad

Kharajka diiwaangelinta rahmidda iyo cusbooneysiintiisa iyo tirtiriddiisa waxay saaran tahay rahmaha, haddaan lagu heshiin wax sidaas ka duwan.

XAQA HORMARINTA IYO XAQA RAACIDDA

Qodobka 847aad

Waxay ka qaadanayaan deynleyda wax loo rahmay xaqoodii ka hor deynleyda caadiga ah qiimaha maguurtada rahman, ama xoolihii galay meeshii maguurtadaas hadba si ay u kala horeysey diiwaangelintooda, xataa haddii diiwaangelinta la sameeyo isla maalin.

Qodobka 848aad

Darajada rahmidda waxaa laga xisaabaa goorta la diiwaangeliyo, haba noqotee deynta mid ku xiran sharad, ama ha ahaato mid soo socota ama mid maleawaaleed.

Qodobka 849aad

Diiwaangelinta rahmidda waxaa ka imanaya in kharajka heshiiska, diiwaangelinta iyo cusbooneysiintiisa la geliyo micne ahaan qaybinta iyo darajada rahmidda qudheeda.

### Qodobka 850

Deynlaha wax loo rahmay, wuxuu leeyahay in uu uga tanaasulo derejeda rahankiisa hadba intey deyntiisu le'egtahay deynle kale oo rahan la diiwaangeliyey ku leh maguurtada rahman, deynlahaas waxaa leysku hortaagi karaa, wax kasta oo laysku hortaagi karo deynlaha hore, waxa ku saabsan in uu dhamaaday xaqa deynlahaas hore mooyee, hadduu dhamaadku ka dambeeyo ka tanasulidda darajada.

### Qodobka 851

1. Deynlaha wax loo rahmay, kolkuu dhaco waqtiga deynta loo qabtay bixinteed, waxaa u bannaan in uu wareegsado maguurtada rahman, xagga qofka saddexaad ee haysta, haddii kan dambe uusan dooran bixinta deynta, ama uu dhaafo maguurtada, ama uu sii daayo maguurtadda.

2. Waxaa loo qaadanayaa haystaha maguurtada rahman, qof allaale qofkii ay u guurto hantida maguurtadaasu ama ku yeesho xaq ceyneed oo kale oo la rahmi karo isagoo naf ahaantiisa mas'uul uga ahayn deyntaas lagu damaantay rahmidda.

### Qodobka 852

Waxa u bannaan haystaha, markii waqtigu deynta lagu damaantay rahmidda soo galo, in uu bixiyo deynta iyo waxa soo raaca oo ay ku jiraan wixii ku baxay oo kharaj ah laga bilaabo goortii loo digay. Xaqaasna waa leeyahay ilaa iyo maalinta naadada la baaridiyey. Markaasna wuxuu leeyahay in uu ugu noqdo wuxuu bixiyey oo dhan deynsanaha iyo hantilihii hore ee maguurtada rahman, wuxuu kaloo leeyahay in uu galo meeshii deynlaha loo guday deynta, wixii uu lahaa oo xuquuq ah oo dhan inta ku saabsan mooyee dammaanadda uu bixiyey qof kale oo deynsanaha aan ahayn.

### Qodobka 853

Waa in haystuhu xafidaa diiwaangelintii uu ku galay meesha deynlaha, waana inuu cusbooneysiiyaa kolkii loo baahdo ilaa



iyo intaa laga tirtiro diiwaangelinta saarneyd maguurtada markii la diiwaangelinaayey wuxuu cuskanaayo haystahaasu mulkiyaddiisa (titolo).

### Qodobka 854aad

1. Waxaa u bannaan haystaha haddii uu diiwaangeliyo hantidiisa waxay ku taagan tahay (il suo titolo di proprieta') in uu ka xureeyo maguurtada rahamad kasta oo la diiwaangeliyey, intaan la diiwaangelin waxa uu u cuskanayo mulkiyaddiisa.

2. Xaqaasna wuxuu leeyahay in uu ku isticmaalo ka hor inta deynleyaasha wax loo rahmay ayna digniinta bixinta deynta deynlaha ama aan la siinin digniinta qofka saddexaad ee haystaha ah.

### Qodobka 855aad

Haystuhu hadduu doono in uu xoreeyo maguurtada, waa inuu u jeediyaa ogeysiisyo ka kooban tilmaamaha soo socda deynleyda xuquuqdoodu diiwaan gaashan tahay, uguna jeediyaa meelaha ay degan yihiin oo ay doorteen:

b) Koobid ku saabsan haystuhu waxa uu u cuskanayo hantidiisa laguna tilmaamayo keli ahaan dabiicadda iyo taariikhda tasarufka iyo tilmaanta hantiilahii hore, xaaladda iyo tilmaanta oo tifaftiran ee maguurtada, iyo haddii tasarufku yahay gadid, qiimaha iyo culeysyada ee dulsaaran maguurtada.

t ) Taariikhda diiwaangelinta hantida haystaha iyo lambarka diiwaangelintaas.

j ) Inta la qadiray qiimaha maguurtada, tasarufkuba ha noqdee gadid, lacagtaasi kama yaraan karto qiimaha loo gooyey xaaladda wareejinta mulkiyadda, kamana yaraan karto markastaba, qaybta qiimaha ee weli lagu leeyahay haystaha haddii tasarufka ku saabsan yahay gadid. Haddii qaybkasta ee ka mid ah maguurtada lagu cusleeyey rahan gaar ah waa in qeyb kasta loo qiimeeyey qaarkeed.

x ) Liis ay ku qoran tahay xuquuqda ku qoran maguurtadu ka hor intaan la diiwaangelin, haystuhu waxa uu u cuskana-

yo mulkiyadda (il titolo), kana kooban : taariikhda diiwaangelinadaas iyo intey tahay xuquuqdaasu iyo magacyada deynleyda.

Qodobka 856aad

Waa inuu haystuhu ku sheegaa ogeysiiska in uu diyaar u yahay in uu bixiyo deymankii wax loo rahmay in la eg inta lagu qiimeeyey maguurtada. Sharadna ma aha in uu raaciyo bandhigaas lacagtii oo naqdiya ee bandhigu, wuxuu ku siman yahay in uu caddeeyo in uu diyaar u yahay in uu bixiyo mablaq waajib tahay bixintiisu muddada dhicidda deynta wax loo rahmay goor kasta ha noqotee.

Qodobka 857aad

Dhammaan deynlayaasha oo xaqoodu diiwaangeliyey iyo damaanqaadayaasha oo kafiil u ah xaq la diiwaangeliyey waxaa u bannaan inay weydiiyaan gadidda maguurtadii la doonay in la xureeyo muddo soddon maalmood ah gudahood, laga bilaabo ogeysiiskii ugu dambeeyey oo lagu daray muddo aan ka badneyn soddon maalmood iyadoo la tixgelinaayo inta ay isu jiraan degnaashaha runta ah ee deynlaha iyo degnaashaha uu doortay.

Qodobka 858aad

1. Dalabka waxa lagu sameynayaa ogeysiis loo jeedinayo haystaha iyo hantiilaha hore, waxaana saxiixayaa kan dalbaya, ama kan uu wakiisho, Waana inuu dhigaa xafiiska Kaaliyaha Maxkamadda lacag ku filan kharajka naadada mana ceshan karo inta lacag ah oouu hormariyey kharaj ahaan, inkastoo uu helo sicir ka badan inta uu soo bandhigay haystuhu Dalabkuna waa baaba'a haddannu shuruudaas lagu dhameystirin.

2. Kama tanasuli karo kan weydiinayo weydiintaas iney ogolaadaan dhamman deynleydii xaqoodu diiwaangelisay iyo dhammaan damaana-qaadayaasha mooyee.

Qodobka 859aad

1. Haddii la dalbo in la gado maguurtada waa in la raa-



caa hababka loo diyaariyey la wareegidda khasabka ah. Gadidda waxaa lagu sameynayaa codsashada kii dan leh, ha ahaado hayste ama kan dalbay. Qofka weydiisanaya gadidda waa inuu ku tilmaamaa ogeysiiska gadidda qiimaha maguurtada.

2. Qofka lagu baaridiyey waxaa waajib ku ah, ka sokow, bixinta qiimaha baaridinta iyo kharajka xoreynta, in uu u celiyo haystaha saddexaad ee laga qaaday mulkiyadda kharajyada heshiiska, diiwaangelinta iyo ogeysiinta.

Qodobka 860aad

Haddaan qofna dalban in la gado maguurtada muddadii dhexdeeda iyo siyaalaha loo dejiyey hantida maguurtada waxaa yeelanaya haystaha iyadoo ka xoreysan xaq kasta oo la diiwaan geliyey, hadduuba bixiyo lacagtii uu ku qaymeyey maguurtada siiyana deynleydii derejadoodu u ogolaaneyso in xuquuqdooda ka qaataan, amase hadduu dhigo lacagtaas khasnadda Maxkamadda.

Qodobka 861aad

1. Dhaafidda maguurtada rahman waxay noqoneysaa mid lagu qoray caddeyn uu bixinayo haystuhu, una dhiibayo Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka ee awoodda u leh, waana in uu ku tilmaamaa sidaas dhinaca boga lagu diiwaangeliyey dareensiinta siibidda hantiida, waana in la ogeysiiyaa deynlaha dalbaya gadidda dhaafidda shan maalmood gudahood laga bilaabo waqtiga caddeynta dhaafidda.

2. Waxaa u bannaan qofkii dantiisu ku jirto in uu ka codsado garsooraha si degdeg ah in uu magacaabo xaraashaha, kaasoo loo gudbinaayo dhammaan tasarrufyada ku saabsan wareejinta mulkiyadda. Qofka saddexaad ee haystaha ah waxaa lagu magacaabi karaa codsashadiisa.

Qodobka 862aad

Haddaanu dooran haystuhu in uu gudo deymanka wax loo rahmay ama u ka xoreeyo maguurtada rahmidda ama aanu iska dhaafin maguurtadaas, deynlaha wax loo rahmay uma bannaana in uu u jeediyo waxyaalaha ku saabsan wareegidda hanti-

da iyadoo la raacayo axkaanta qaanuunka habka Madaniga in loogu digo in uu bixiyo deynta lagu yeeshay ama uu dhaafo maguurtada mooyee. Digniintuna waxay noqoneysaa kaddib markii lagu ogeysiiyey deynsanaha wareegidda hantida, ama iyadoo la jirta ogeysiiska iyagoo isku waqti ah.

Qodobka 863aad

Waxaa u bannaan haystaha diiwaangeliyey hantidiisa wuxuu u cuskanayo, aanna dhinac ka ahayn dacwadda lagu xukumay deysanaha in uu qabsado waxyaaluhu isku daafici lahaa deynsanuhu hadduuba ku xakumidda deyntu ka dambeyso diiwaangelinta wuxuu cuskanayo deynlahaa.

2. Waxaa u bannaan haystaha mar walba in uu qabsado is-hortaagyada uu weli isku difaaci karo deynsanuhu markii la xukumay deynta kaddib.

Qodobka 864

Waxaa u bannaan haystaha in uu soo dhexgalo naadada waxaase shardi ah in aanu soo bandhigin qiimo (il prezzo) ka yar inta weli ka hartay qiimaha ay tahay in laga bixiyo maguurtada la gadayo.

Qodobka 865aad

Haddii lala wareego hantida maguurtada rahman haba ahaatee kaddib markii la sameeyey hababkii lagu xoreyn lahaa ama lagu dhaafi lahaa iyo haddii qofka saddexaad ee haystaha ah uu yahay kan lagu baaridiyey waxaa loo qaadanayaa in uu yahay hantiilaha sida uu keenayo waxa uu u cuskanayo mulkiyadda (titolo originario). Maguurtada waxay ka xorooweysaa rahmid kasta, haddii isagu uu bixiyo qiimaha baaridinta iyo uu dhigo qiimahaas Maxkamadda.

Qodobka 866aad

Siyaabaha aynu soo sheegnay, haddii naadadu ku istaagto qof kale oo aan ahayn haystaha, qofkaasu xaqiisa wuxuu ka helayaa haystaha isagoo cuskanaya xukunka baaridinta,



Qodobka 867aad

Hadduu qiimaha ay ku istaagtay naadadu ka badato intey xaq u yeesheen deynleyda xuquuqdooda wax loo rahmay, inta dheeraadka ah waxaa yeelanaya haystaha, deynleyda xuquuqda wax loo rahmay waxay leeyihiin in ay xuquuqdooda ka qaataan dheeradkaas

Qodobka 868aad

Haystaha waxa u soo noqonaaya wixii uu lahaa ka hor inteyan u soo wareegin hantida maguurtada oo ah xuquuqda adeegidda iyo xuquuq ceyneed oo kale.

Qodobka 869aad

Haystuhu waa inuu celiyaa miraha maguurtada laga billaabo marka loogu digay in uu bixiyo ama dhaafo, haddiise la daayo dacwaddii la billaabay muddo saddex sanadood ah, celin maayo kolkaas mirahaas haddii aan loo jeedin digniin cusub.

Qodobka 870aad

1. Haystuhu wuxuu ugu noqonayaa dacwad damaanadeed hantiilihi hore intii uu ugu noqon lahaa dhaxluhu qofkii uu ka helay hantida, ha ahaato deeq ama isdhaafsasho.

2. Sidoo kale haystuhu wuxuu ugu noqonayaa deynsanaha wixii uu bixiyey sabab kasta ha ku bixiyo, siduu dhigayo hantidiisa waxa uu u cuskanayo oo lagu daray wixii lagu yeeshay in uu bixiyo heshiiska awgiisa. Wuxuuna gelayaa meesha deynleyda uu bixiyey xuquuqdooda, gaar ahaan wuxuu gelayaa meeshooda kana dhaxlayaa wixii ku saabsan damaanadaha uu hormariyey deynsanuhu, ayadoo laga reebayo damaanadaha qof saddexaad.

Qodobka 871aad

Haystuhu isagaa naf ahaantiisa mas'uul uga ah markuu horjoogo deynleyaasha, wixii gaara maguurtada oo hallaabid ah gafkiisana ku yimid,

## MADAXA III

## DHAMMAADKA RAHMIDDA

### Qodobka 872aad

Waxay ku dhamaatаa rahmidda dhammaanshaha deynta wax loo rahmay waxayna la soo noqoneysaa haddey suusho sababtey deyntu ku dhammaatay iyadoo wax loo dhibin xuquuqda uu helay qof kale oo niyadsan waqtiga u dhexeeyey dhammaadka xaqa iyo soo noqodkiisa.

### Qodobka 873aad

Haddii la maro hababka xoreynta maguurtada, waxaa dhammaanaya xaqa rahmidda, haba ku dhammaado sabab kasta xaqa hanti haystaha xareeyey maguurtada.

### Qodobka 874aad

Haddii la baaridiyo maguurtada rahman kuna timaado la wareegid khasab ah, ha ka horjeedo baaridinta hantiilaha maguurtada ama haystaha ama ilaaliyaha loo dhiibay maguurtada kolka la dhaafayo, xuquuqda rahmidda oo saaran maguurtadaas, waxay ku dhammaaneysaa markii la dhigo qiimaha (il prezzo) naadada lagu baariyey, ama la siiyo deynleyda la diiwaangeliyey xaqooda oo ay u oggoshahay derejadoodu in laga siiyo xuquuqdooda qiimadaas.

## BAABKA II

## XAQ GAAR AHAANEED (Diritti di assegnazione)

## MADAXA I

## DHISIDDA XAQA GAAR AHAANEEDKA

### Qodobka 875aad

1. Waxaa u bannaan deynle kasta ee gacanta ku haysta xukun in la fuliyaa waajib tahay, oo ku soo baxay dulucda dacwadda ee ku waajibinaya deynsanaha wax la yaqaan, in xaq gaar ahaaneed ku yeesho maguurtada deynsanihiisa, ra'sumaalka deynta dulsaarada iyo kharajyada.

2. Uma bannaana deynlaha markuu deynsanuhu dhinto ka dib, in uu ku yeesho xaq gaar ahaaneed maguurto ka mid ah dhaxalka.



### Qodobka 876aad

Xukun ka soo baxay Maxkamad shisheeye ama go'aan dhexdhexaadiyaal ka soo baxay laguma heli karo xaq gaar ahaaneed iney noqdaan kuwa waajib ay tahay in la fuliyo mooyee.

### Qodobka 877aad

Xukun sugaya sulux ama sugaya heshiis ay sameeyeen dhinacyo dacwadeed waa lagu yeelan karaa xaq gaar ahaaneed, hase yeeshee laguma yeelan karo xaq gaar ahaaneed xukun ku soo baxay ansaxidda saxiixa.

### Qodobka 878aad

Xaq gaar ahaaneed laguma yeelan karo waxa aan ahayn maguurto ama maguurtooyin la yaqaan oo uu leeyahay deynsanuhu marka la diiwaangelinaayo xaqaas, ayna bannaan tahay in lagu gado naado.

### Qodobka 879aad

1. Deynsanaha doonaya in uu ku yeesho xaq gaar ahaaneed maguurtooyinka deynsanihiisa waa inuu sidaas ku qoraa arji una u hormariyaa guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka oo ay ku taal maguurtadu gobolkiisu.

2. Arjigaasna waa inuu la socdaa nuqul rasmi ah laga soo qaaday xukunka ama marakac kaaliye oo uu ku qoran yahay dhawaaqa xukunka, waana inay ku yaalin waxyaalaha soo socda :

b. Magaca deynlaha oo seddexan, xirfaddiisa, degnaashahiisa runta ah iyo meesha uu u doortay degmo ahaan oo ku sheegayo magaalada ay ku taal Maxkamaddu;

t . Magaca deynqabaha oo saddexan, xirfaddiisa iyo mee-

sha uu deggan yahay;

j . Taariikhda xukunka iyo tilmaanta Maxkamadda ku dhawaaqday.

x. Inta ay la'egtahay deynta. Haddii qaddarka deynta uuna ku xadidneyn xukunka, guddoomiyaha Maxkamadda ayaa ku meel gaar ahaan u xadidayo isagoo goynayo tirada loo oggolyahay xaqa gaar ahaaneed.

kh. Tilmaan sax ah ee maguurtooyinka, habda sida uu noocooda yahay iyo meesha laga helo oo ay la socdaan dokumentooyinka (qoraallada) caddeynaya qiimaha.

Qodobka 880aad

1. Guddoomiyaha Maxkamadda ee awoodda leh wuxuu ku amrayaa xaqa gaar ahaaneedka geeska weydiinta.

2. Isagoo oggolaanaya xaqa gaar ahaaneedka waa inuu tixgeliyaa qaddarka amaahda iyo qiimaha qiyaasta ah ee maguurtooyinka la magacaabay, haddii loo baahdana ku koobo qayb ka mid ah maguurtooyinkaas ama qayb hal maguurta ah, haddii ay la noqoto in qaybtaasi ku filan tahay bixinta deynta ee ra'sumaalka dulsaarada iyo kaharjyada.

Qodobka 881aad

Waxaa kaaliyaha waajib ku ah inuu ogeysiiyo deynsanaha, amarka uu ku soo baxay xaqa gaar ahaaneed isla maalintuu soo baxay, sidoo kale waa inuu ku muujiyaa amarkaas nuqulka xukunka dushiisa ama marakaca ku lifaaqan arjiga lagu weydiistay xaqa gaar ahaaneed, waana inuu dareensiiyaa kaaliyaha Maxkamadda uu xukunkaasi ka soo baxay, si loogu tilmaamo caynkaas nuqul kasta dushiisa ama maragkac kale oo uu siinayo deynlaha.

Qodobka 882aad

1. Waxaa bannaan in la duro amarada uu ku soo baxay xaqa gaar ahaaneed ee la weydiistay iyadoo la raacayo siduu qorayo Xeerka Habka ee degsan.



2. Waana in lagu tilmaamaa buugga diiwaangelinta geeskiisa xukun kasta oo ku soo baxa duriddaas.

MADAXA II

**RAADADKA XAQA GAAR AHAANEED,**

**DHIMIDDIISA IYO DHAMMAADKIISA**

Qodobka 883aad

1. Waxaa u bannaan qof kasta oo dan ku leh in uu weydiisto in lagu soo gaabiyo xaqa gaar ahaaneed heer ku habboon haddey tahay maguurtooyinka lagu yeeshay xaqa gaar ahaaneed mid qiimaheedu ka badan yahay waxa ku filan damaanadda deynta.

2. Waxayna noqoneysaa ku soo gaabinta xaqa gaar ahaaneed mid lagu soo koobay gabal ka mid ah maguurtada ama maguurtooyinka lagu yeeshay xaqa gaar ahaaneed ama mid loo guuriyo maguurto kale oo qiimadeedu ku filan tahay deynta dammaanaddeeda.

3. Waxaa lagu yeelanayaa kharajka lagu sameeyey soo gaabinta, dhinaca weydiistay, haba oggolaadee deynluhu.

Qodobka 884aad

Wuxuu yeelanayaa deynlaha leh xaqa gaar ahaaneed waxa ku soo aroora rahmidda; Shaqa gaar ahaaneed waxa nidaaminaya isla axkaanta nidaaminaya xaqa rahmidda, gaar ahaan wixii ku saabsan qoridda, cusbooneynta, tirtiridda, qaybsami la'aanta xaqa, raadadkiisa iyo dhammaadkiisa, ayadoo sidooda ay u jiraan axkaanta gaarka ah.

## BAABKA III
## RAHMIDDA HAYSASHADA
## MADAXA I
## TIIRARKA RAHMIDDA HAYSASHADA

### Qodobka 885aad

Rahmidda haysashadu waa heshiis isku waajibinayo qof damaanad ahaan deyn lagu leeyahay darteed, amaba qof kale lagu leeyahay in uu u dhiibo deynlaha ama qof kale oo labada heshiiskaas sameeyey isla garteen, shey uu ku yeelanayo deynluhu xaq cayneed oo siinaya in uu ceshado sheygaas ilaa iyo inta la gudo deyntaas, kana hormarinaya deynleyda caadiga iyo deynleyda ku xigta derejada markuu xaqiisa ka qaadanayo qiimadda sheygaas gacan kasta oo ay ku jirto.

### Qodobka 886aad

Rahmidda haysashadu laguma sameyn karo wax aan lagu gadi karin naado si soocan ha ahaadeen guurto ama maguurto.

### Qodobka 887aad

Waxaa lagu dabaqayaa rahmidda haysashada axkaanta ay qorayaan qodobbada 824, 831, 833 oo ku saabsan rahmidda.

## MADAXA II

## RAADADKA RAHAMIDDA HAYSASHADA

## QAYBTA I

## RAADADKA LABA DHINAC
## WAAJIBAADKA RAHMAHA

### Qodobka 888aad

1. Waa in uu u dhiibaa rahmuhu sheyga deynlaha ama qofka ay labada heshiiyay isla garteen.
2. Waxaa loo raacayaa dhiibidda sheyga la rahmay Axkaanta ku saabsan dhiibidda sheyga la gadayo.

### Qodobka 889aad

Sheygii la rahmay haddii uu u noqdo rahmaha, waa dhammaaneysaa rahmiddu, haddii uusan sugin deynlaha loo rahmay in celisku looga dan lahayn in ay dhammaatay rahmiddu, intaas oo dhan, iyo iyadoo aan wax loo dhimin xuquuqda dadka kale.



### Qodobka 890aad

Wuxuu damaanad qaadayaa rahmuhu ansaxidda rahanka mana laha in uu ku kaco tasarruf kasta ee dabiicaddiisu tahay in ay wax u dhinto qiimaha sheyga, ama ka celinaya deynlaha in uu ugu dhaqmo xuquuqdiisa uu ka helay heshiiska, deynluhuna wuxuu leeyahay haddey degdegsiinyo timaado in uu sameeyo wax allaale wixii dhowraya sheyga rahman isagoo ugu noqonaya kharajka rahmadaha.

### Qodobka 891aad

1. Rahmuhu isagaa mas'uul ka ah, lumidda ama duugoobidda sheyga haddii gafkiisu sabab u ahaa ama xoog aan la celin karin.

2. Waxaa lagu dabaqayaa rahmidda haysashada Axkaanta qodobada 839 iyo 840 oo ku saabsan lumidda iyo duugoobidda maguurtada Rahman iyo u guuridda xaqa uu ku lahaa deynluhu ceynta rahman, ay u guureyso wixii galay meesheeda.

## WAAJIBAADKA DEYNLAHA WAX LOO RAHMAY

### Qodobka 892aad

Deynlaha waxaa waajib ku ah dhowritaanka iyo dayactirka sheyga loo dhiibay isagoo ku kacayo dadaalka aabaha qoyska ee wanaagsan (buon padre di famiglia).

Isaagaana mas'uul ka ah lumidda iyo duugoobidda sheyga haddii uusan sugin in taasu u noqoneyso sabab kale ee aanu isagu gacan ku lahayn.

### Qodobka 893aad

1. Deynlaha uma bannaana in uu ka helo sheyga rahman intifaac aan beddelaad lahayn.

2. Waxaana saaran in uu sheyga ka dhaliyo dhammaan miraha uu soo saari karo haddii uusan jirin heshiis sidaas ka duwan.

3. Faa'iidada saatiga ee uu helo iyo qiimaha ku isticmaalkooda waxaa lagu goynayaa lacagta la dammaantay xataa haddii weli ayna dhicin muddada. Waxaa marka hore la jarayaa kharajyada lagu bixiyey dhowritaanka iyo hagaajinta sheyga kaddibna kharajyada iyo dulsaarada, ugu dambeyntii ra'sumaalka deynta.

Qodobka 894aad

1. Haddii ay mira dhaleyso ama wax soo gelineyso caynta rahmani, labada dhinacna ku heshiiyaan in laysu tuuro dhammaan ama qaar ka mid ah dulsaarada, heshiiskaasu, waa fulayaa ilaa meesha ugu sareysa ee uu oggol yahay qaanuunku in uu gaaro dulsaarka heshiiska ah.

2. Haddeyan labada dhinac ku heshiin inay isu tuuraan miraha iyo dulsaarada, ayna goynin sicirka dulsaarada. waxaa lagu xisaabinayaa dulsaarka sicirka qaanuunka ah iyadoo aan laga saramarin qiimaha miraha. Haddii dhinacyada ayna ku heshiin taariikh ay ku dhacayso deynta la damaanay, deynlaha ma weydiisan karo bixinta deyntiisa haddii uusan jirin miraha iyadoo wax loo dhimin xaqa deynsanaha inuu bixiyo goortuu doono.

Qodobka 895aad

1. Deynluhu wax loo rahmay waa inuu ku maamulaa sheyga sida aabaha qoyska ee wanaagsan mana beddeli karo ka faa'iideysiga sheyga isagoon oggolaan rahmuhu waxaana waajib ku ah inuu ogeysiiyo rahmuhu wax kasta ee keeni kara soo dhexgelkiisa.

2. Haddii uu deynluhu si xun ugu dhaqmo xaqaas ama si xun uu u maamulo ceyntii, ama uu dayacaad weyn ku sameeyo, rahmaha waxaa u banaan kolkaas in uu dalbo in ceyntii ilaalin la geliyo, ama in uu soo ceshado bixiyana deynta. Marka dambe haddaan deynta (mablaqa) wax loo rahmay dulsaar ku socon, waqtigeeduna dhicin deynluhu ma yeelanayo wixii ka soo hara mooyee lacagtaas (mablaqaas) kolkii laga gooyey kaddib qiimadii dulsaarada oo laga qiyaasay sicirka xeereed laga billaabo maalinta bixinta iyo maalintey deynta waqtigeedu dhacay.



Qodobka 896aad

Deynluhu wuxuu u celinayaa ceyntii rahmaha kaddib kolkii loo gudo xaqiisa dhammaantiis, ayada iyo wixii raacsanaa oo la xiriiray iyo masruufaadkii iyo magdhowyadii.

Qodobka 897aad

Waxaa lagu dabaqayaa rahmidda haysashada Axkaanta qodobka 841 oo ku saabsan mas'uuliyadda rahmaha aan ahayn deynsanaha iyo axkaanta qodobka 843 oo ku saabsan shardiga yeelashada markii la bixin waayo deynta iyo gadida loo marin hababka loo gooyey.

## QAYBTA II

## RAADADKA XAGGA SADDEXAAD

Qodobka 898aad

1. Si rahmiddu u saameyso xaqa dadka kale waa in cayntu ku jirtaa gacanta deynlaha ama qof kale oo ay labada heshiiyey magacaabeen.

2. Sheyga rahmani damaan buu u noqon karaa deyman badan.

Qodobka 899aad

1. Rahmiddu xaq waxay u siineysaa deynlaha wax loo rahmay in uu ka ceshado dadkoo idil sheygii isagoo wax u dhimin xuquuqda dadka kale oo la diiwaangeliyey.

2. Haddii cayntii ka baxdo gacanta rahmaha isagoo dooneyn ogeyna wuxuu xaq u leeyahay in uu haysashadiisa ka soo ceshado dadka kale sida ay qabto axkaanta haysashada.

Qodobka 900aad

Kuma eka rahmidda haysashadu in ay dammaanato ra'sumaalka ee qudh ah ee waxay kaloo damaananeysaa iyagoo isku darejo ah waxa soo socda :

b. Kharajyada lagama maarmaanka ee lagu dhowray shayga.

t. Magdhowga ka yimaada ceebaha ay la timaado shayga.

j. Kharajyada heshiiska dhaliyey deynta iyo kharajkii heshiiska rahmidda iyo diiwaangelintiisa haddii loo baahdo.

x. Kharajyada loo galay fulinta rahmadda haysashada.

Kh. Dulsaaryada oo bislaaday oo dhan iyadoo la dhowrayo waxa ku yimid qodobka 227.

## MADAXA III

## DHAMAADKA RAHMIDDA HAYSASHADA

### Qodobka 901aad

Wuxuu ku dhammaadaa xaqa rahmidda haysashadu deyntii wax loo rahmay oo dhammaatay waana la soo noqonayaa haddey suusho sababta ay ku dhammaatay deyntu iyadoo aan wax loo dhimin xuquuqda uu sharci ku yeeshay dadka kale oo niyaddasan muddada u dhexeeysay markii xaqu dhammaaday iyo goortuu soo noqday.

### Qodobka 902aad

Xaqa rahmidda haysashadu wuxuu ku dhammaadaa oo kale sababaha soo socda :

b. Haddii deynlaha wax loo rahmay ka dego xaqaas uuna leeyahay awood xeer oo uu kaga dhoofi karo deynsanaha deynta. waxaa laga garan karaa loona qaadan karaa inuu ka tanaasulay, haddii isagu doorto in uu iska daayo cayntii rahmaneyd ama uu oggolaado in lagu tasarufo iyadoo shardi lagu xirin. Hase yeeshee sheyga la rahmay haddii lagu yeesho xaq cusleynaya oo dan u ah dad kale, tanaasulidda deynluhu saameynmeyso dadkaas iney oggolaadaan mooyee.

t. Haddii xaqa rahmidda haysashadu iyo xaqa hantidu ku wada kulmaan gacan qof keli ah.

j. Haddii cayntii baaba'do ama xaqey u rahmaneyd dhammaado.



## MADAXA IV

## NOOCYO KA MID AH RAHMIDDA HAYSASHADA

## QAYBTA I

## RAHMIDDA MAGUURTADA

### Qodobka 903aad

Waxaa loo baahan yahay oo shardi ah, si rahmidda maguurtadu u saameyso dadka kale iney haysashadu u guurto deynlaha ka sokow, in la diiwaangeliyo. Waxaa lagu dabaqayaa diiwaangelintaasna axkaanta u gaarka ah diiwaangelinta rahmidda.

### Qodobka 904aad

Waxaa u bannaan deynlaha loo rahmay maguurto in uu ka ijaaro maguurtada rahmaha iyadoo taasu is hortaageeynin xaqa dadka kale. Haddii laysku waafaqo ijaarka heshiiska rahmidda dhexdiisa, waa in lagu sheegaa caynkaas diiwaangelinta rahmidda qudheeda, haddiise lagu heshiiyo ijaarka rahmidda kaddib waa in lagu tilmaamaa diiwaangelinta bogga ay ku taal geeskiisa. Hase yeeshee tilmaantaasu waa laga maarmaa haddii la cusbooneysiiyo ijaarka si aamusnaan ah.

### Qodobka 905aad

1. Deynlaha loo rahmay maguurto waa inuu maguurtada hagaajiyaa kuna bixiyaa kharajkey u baahan tahay si loo dhowro. Wixii lagu yeesho sanad walba ee canshuur iyo takaaliif ah waa inuu baxshaa, hase yeeshee, waa inuu ka goostaa wixii uu bixiyey miraha uu helayo, ama qiimadda (il prezzo) maguurtada darajada uu sharcigu siinayo.

2. Wuxuuse isaga furfuri karaa waajibaadkaas oo u bannaan deynlaha inuu dhaafo xaqa rahanka

## QAYBTA II

## RAHMIDDA GUURTADA

### Qodobka 906aad

Si ay u saameyso rahmidda guurtada xaqa dadka kale waxa loo baahan yahay, in la wareejiyo haysashadii deynlaha ka sakow, in lagu dhigo heshiiska waraaq taariikhdeedu sugan tahay laguna caddeenayo inta lagu damaantay rahmidda iyo sheyga rahman si tifaftiran, taariikhdaas suganna waxay muujineysaa darajada deynlaha wax loo rahmay.

### Qodobka 907aad

1. Axkaanta ku saabsan raadadka ka imaanaya haysashada guurtada maadiga ah iyo waraaqaha la cuskado oo waxa ku yaal kan wataa leeyahay (titolo al portatore). Waxaa lagu dabaqayaa midda guurtada.

2. Si gaar ah deynlaha wax loo rahmay wuxuu leeyahay haddii uu niyadsan yahay in uu ku dodo xaqa rahmidda, xataa rahmuhu uusan awoodin in uu ku tasarufo ceyntii rahmaneyd.

### Qodobka 908aad

1. Haddii sheyga la rahmay laga baqo inuu lumo ama duugoobo (deterioramento) ama qiimihiisu yaraado uu ku filnaanwaayo dammaanad ahaan xaqii deynlaha, aanuna rahmuhu waydiisan in uu u soo celiyo si ugu keeno shey kale ee bedelkiisa. Waxaa u bannaan deynlaha ama rahmuhu in uu ka codsado garsooraha in uu u oggolaado in uu sheygii lagu gado sicirka suuqa naado ahaan.

2. Haddii la oggolaado gadidda garsooraha goynaya amarka ku saabsan in la dhigo qiimaha (il prezzo) markaasna xaqa deynluhu wuxuu ka guurayaa sheygii una guuraa qiimaha.

### Qodobka 909aad

Waxaa u bannaan rahmaha hadduu helo fursad uu ku gado sheygii la rahmay, gadiduna tahay mid faa'iido leh, in uu garsooraha weydiisto in uu u oggolaado gadida cayntaas haba ahaato taasu inta aynan dhicin deynta, Garsooruhuna isagoo caddeynaya markuu oggolaado shuruudda gadidda isagaana goynaya amarka dhigidda qiimaha.



### Qodobka 910aad

1. Waxaa u bannaan deynlaha haddaanu xaqiisa la siin in uu weydiisto garsooraha, in uu u oggolaado gadidda sheyga laguna gado sicirka suuqa naado ahaan.

2. Waxaa u bannaan oo kale in garsooruhu gooyo in uu hantisiiyo sheyga isagoo loogu gudayo deyntii, hase yeeshee waa in lagu xisaabiyaa ilaa iyo inta ay deynta la'eg tahay. Markaasoo kale qiimaha sheyga waxaa lagu goynayaa sida ay gartaan khubarada.

### Qodobka 911aad

Waxaa lagu dabaqayaa axkaanta hore inteyan isaga r imaanin Axkaanta qawaaniinta ganacsiga iyo axkaanta gaarka u ah guryaha loo aqoonsan yahay inay wax rahmaan ama sharciyada iyo xeer nidaamiyaasha ku saabsan xoolaha gaarka u ah rahmidda guurtada.

## QAYBTA III

## RAHMIDDA AMAAHDA

### Qodobka 912aad

1. Rahmidda deynta ma saameyneyso deynsanaha xaqiisa in la ogeysiiyo oo uu oggolaado mooyee siduu qorayo qodobka 302.

2. Laguma hor istaagi karo xaqa dadka kale haddeysan ahayn kaddib u dhiibidda deynlaha wixii deynta rahmaan loo cuskanayey (il titolo), waxaana laga billaabayaa derejada rahmidda taariikhda ku sugan ogeysiiska ama oggolaanshaha.

3. Haddii deynta la wareejin karin ama la xaraashi karin, ma bannaana rahmiddeedu.

### Qodobka 913aad

Waraaqaha la cuskado ee magacaaban (nominativo) iyo kuwa la idmo (titolo all'ordine) waxaa lagu rahmayaa sida gaarka ah ee sharcigu dhigayo si lagu wareejiyo, hase yeeshee waxaase shardi ah in la caddeeyaa in wareejinta loola jeedo rahmid, umana baahna ogeysiis.

Qodobka 914aad

Wuxuu xaq u leeyahay deynlaha wax loo rahmay in uu qaato dulsaaradii amaahda dhacday rahmidda kaddib, sidoo kale wuxuu xaq u leeyahay inuu qaato waxyaalihii laga heli lahaa amaahda Xilli-xilli, waxaase shardi ah in laga gooyaa wuxuu qaato hor ahaan kharajyada, kaddibna dulsaarada kaddibna raasumaalka wax loo rahmay haddii si ka duwan sidaas lagu heshiin.

2. Deynlaha wax loo rahmay waxaa waajib ku ah in uu dhowro amaahdii rahmaneyd inta uu xaq u leeyahay inuu urursado isagoo aanu soo dhexgelin rahmuhu waana inuu ku qaataa meeshii iyo goortii la caddeeyey in lagu guto xaqa, isla markiina u sheegaa rahmaha.

Qodobka 915aad

Waxaa u bannaan deynsanaha deynta rahman in uu qabsado deynlaha wax loo rahmay markuu horjoogo, ishortaagyada ku saabsan ansaxidda xaqa rahman iyo kuwa uu lahaa inuu isku difaaco deynlaha asalka ah hortiisa, inta deynsanaha la wareejiyay uu isku hortaagi karo ishortaagyada kan loo wareejiyay hortiisa.

Qodobka 916aad

1. Hadduu dhaco waqtiga deynta rahman, inteyan dhicin deynta wax loo rahmay, deynsanaha uma bannaana in uu bixiyo deynta rahmaha iyo kan wax loo rahmay iyagoo haddii eysan wada jirin, labaduna waxay weydiisan karaan in la dhigo wixii uu bixiyey deynsanaha, markaasna rahmidda waxay u guuraysaa wixii la dhigay.

2. Rahmaha iyo kan wax loo rahmay waa iney isla kaashadaan sida ay wax uga dhalin lahaayeen wixii uu bixiyey deynsanahu taasuna waa iney ahaataa sida ugu faa'iido badan rahanta iyadoo aan dhibaato ugu imaaneyn deynlaha wax loo rahmay iyadoo lagu dhaqsanayo in la sameeyo rahmid cusub oo loo sameeyo danta deynlahaas.



Qodobka 917aad

Haddey deynta rahman iyo tan wax loo rahmay noqdaan kuwo waajib ah in la bixiyo, waxaa u bannaan deynlaha wax loo rahmay haddaanu qaadan xaqiisa in uu deynta ka qaato inta uu yeesho ama in uu dalbo in la gado deyntaas ama uu hantiyo si waafaqsan qodobka 910 xubintiisa labaad.

## BAABKA IV

## XUQUUQDA HORUMARINTA

## MADAXA I

## AXKAAN GUUD

Qodobka 918aad

1. Horumarinta waa xaq uu sharciga siinaaya horumarin deynle la yaqaan isagoo lootixgelinaayo sababta uu ku mutaystay hormarinta.

2. Ma jirto amaah leh hormarin haddii uusan jirin qodob sharciyeed.

Qodobka 919aad

1. Darajada mudnaashada waxaa caddeynaya sharciga, haddii uusan si cad u tilmaamin darajada mudnaashada waxay ku dambeyneysaa mudnaashada kale ee ku soo arooray baabka kan.

2. Deynlayaasha mudani hormarin oo isku darajada ah, mid kasta waxaa wax lagu siinayaa qaybtiisu intey le'egtahay hadduuna jirin sharci sidaa ka duwan.

Qodobka 920aad

Xuquuqda homarinta guud waxaa lagu dabaqayaa xoolaha deynsanaha oo dhan, maguurto iyo guurtaba, hormarinta gaar ahaaneyd waxay ku kooban tahay guurtada ama maguurto la yaqaan.

Qodobka 921aad

1. Laguma hor istaagi karo hormarinta kan guurtada niyadsami ku haystay.

2. Waxaa loo qaadanayaa hayste sida qodobkaa ku tilmaaman kireestaha maguurtada marka loo eego guurtada ku jirta maguurtada la kireeyey ama kan hoteelka leh marka loo eego alaabta ay dhigteen hoteelka rukumada (clienti).

3. Hadduu ka baqo deynluhu asbaab caqliga gasha darteed in la baabi'iyo maguurtadii lagu lahaa hormarinta dantiisa awgeed, waxaa u bannaan inuu weydiisto in la ilaaliyo.

Qodobka 922aad

1. Waxaa lagu dabaqayaa xuquuqda hormarinta maguurtada Axkaanta rahmidda inteyan ka hor imaanin dabeecadda xaqaas. Si gaar ah waxaa la dabaqayaa axkaanta xoreyntaa diiwaangelinta, raadadka diiwaangelinta, cusbooneyntiisa iyo tirtiriddiisa.

2. Hase yeeshee, xaqa horumarinta guud haba ahaado meeshuu ku dhacayo maguurtee, looma baahna in loo raaco Xeerka Faafinta kumana sugnaado xaqa raacidda. Sidoo kale looma baahna in la faafiyo xuquuqda horumarinta maguurtada oo damiinaneysa lacagtey yeelato khasnadda dawladda. Xuquuqdaas horumarinta dhammaanteed wey ka horreysaa derejadeedu xaq kasta oo horumarin ah ee maguurto kale ama xaq kasta ee rahmid ah taariikhda diinwaangelintiisu goor kasta ha ahaatee, dhexdoodase, horumarinta damiinka u ah lacagtey yeelatay khasnadda dawladda, wey ka hor mareysaa xuquuqda horumarinta guud.

Qodobka 923aad

Waxaa lagu dabaqayaa xoolaha la cusleeyay xaqa hormarinta axkaanta ku saabsan lumidda iyo hallaabidda xoolaha la rahmay.

Qodobka 924aad

Wuxuu ku dhammaadaa xaqa hormarinta sida uu ku dhammaado xaqa rahmidda iyo kan haysashada haddeeyan jiriin sharci dhigaya wax khilaafsan sidaas.



MADAXA II

NOOCYO KA MID AH XAQA KALA HORMARINTA

Qodobka 925aad

Xuquuqda kala hormarinta oo ku qoran sharci gooni ah ka sokow xuquuqda ku dhisan qodobada soo socda waxay leeyihiin hormarin.

QAYBTA I

XUQUUQDA KALA HORMARINTA GUUD IYO XUQUUQDA KALA HORMARINTA GAARKA AH EE KU DHACDA GUURTADA

Qodobka 926aad

1. Kharajka garsooridda ee lagu bixiyey danaha deynleyda oo dhan si lagu dhowro xoolaha deynsanaha iyo gadidda waxaa laga hormarinayaa qiimaha xoolaha deynsanaha.

2. Kharajkaasna waxaa la bixinayaa ka hor dhammaan amaahda, xataa haddii ay yihiin kuwa leh xaqa kala hormarinta ama rahman yihiin iyagoo ku jiraan xuquuqda deynleyda loo bixiyey kharajka dantooda. Waa laga hormarinayaa kharajka lagu bixiyey gadidda xoolaha tan lagu bixiyey qaybinta.

Qodobka 927aad

1. Lacagaha ay yeelato khasnadda Dawladda oo ay ka mid yihiin canshuuraha iyo xuquuq kastoo kale waxay leeyihiin hormarin iyadoo la raacayo shuruudaha ay qorayaan sharciyada iyo Xeer nidaamiyayaasha ee nidaaminaya maadooyinkaas.

2. Waxaa laga qaadanayaa lacagtaas qiimada xoolaha uu saaran yahay culeyska, gacan kasta oo ay ku jiraan iyo xaq kastoo kale horti, haba ahaado mid leh hormarin ama wax loo rahmay iyadoo laga reebay kharajyada garsooridda.

Qodobka 928aad

1. Kharajyada lagu bixiyo dhowridda guurtada iyo waxyaalahay u baahan tahay oo hagaajin ah hormarin bey ku leeyihiin maguurtada nafteeda.

2. Kharajyadaas waxa laga jarayaa qiimaha (il prezzo) guurtada xaqa hormarinta saareyd markii laga gooyo kharajkii garsoorka iyo lacagtay yeelatay khasnadda Dawladda kaddib iyaga dhexdooda waxa loo kala hormarinayaa sidey taariikhda bixintoodu ukala dambeeysey.

## Qodobka 929aad

1. Amaahyada soo socda waxay ku leeyihiin mudnaan hormarin dhammaan xoolaha deynsanaha ha ahaadeen guurto ama maguurto.

b. Lacagta ay mutaystaan lixda bilood ee ugu dambeeysey shaqaalaha ha ahaadeen mushaharo ama abaalgudyo nooc kasta leh.

t. Lacgta lagu yeesho deynsanaha oo ku saabsan cunto iyo dhar isaga iyo dadka nafaqadoodu dul saaran tahay lixdii bilood ee ugu dambeysey.

j. Amaahyada masruufka ah uu mutaystay deynsanaha iyo qaraabadiisa lixdii bilood oo ugu dambeysey.

2. Amaahdaas loo bixiyey inta u dhiganta qof walba qaybta uu leeyahay kaddib markii la bixiyo kharajyada garsooridda iyo tey yeelato khasnadda Dawladda iyo kharajyada dhowridda iyo hagaajinta.

## Qodobka 930aad

1. Lacagta lagu bixiyo abuurka iyo bacrinta iyo waxyaabaha kale ee wax tara, iyo waxyaalaha lagula diriro cayayaanka iyo tan lagu bixiyo shaqada beeridda iyo gooyidda waxay dhammaantood ku leeyihiin waxa laga gooyo beerta horumarin, waana isku derejo.

2. Waxaa laga qaata lacagtaas qiimaha wixii beerta ka go'ay, kaddib markii laga jaro amaahda qodobada kor lagu soo sheegay.

3. Isla axkaantaas ayaa lagu dabaqayaa lacagta ku baxday qalabka beeridda, kuwaasoo leh isla darajo kuna leh horumarin qalabka naftiisa.



## Qodobka 931aad

1. Kirada dhismaha ama dhulka beeraha la mutaystay labo sano ama dhammaan inta u socdo heshiiska kirada haddii uu ka yar yahay laba sano iyo dhammaan waxa uu mutaysty kireeyuhu heshiiska kirada awgeed waxay hormarin ku leeyihiin guurtada la xaraashi karo ee ku jirta meesha la kireeyey iyo dhammaan wixii laga gooyey beerta ee uu leeyahay kireystaha.

2. Way ku sugnaaneysaa horumarinta ha lahaato guurtada afada kireystaha, ama dad kaleba ha lahaadeen, haddii ay sugnaato in uu ogaa kireeyuhu markii la gelinayey guurtayaasha in uu jiro xaq dad kale ku leeyahay isla guurtadaas iyadoo aan wax loo dhimin axkaamta ku saabsan guurtadu la xaday ama dhuntay.

3. Horumarinta waxaa lagu isticmaali karaa oo kale guurtada iyo miraha beereed ee uu leeyahay sii kireeystuhu hadduu kireeyuhu ku xiray ijaarka si cad in aan qof kale laga sii ijaari karin caynta.

Haddii sii kiraynta ayan reebneyn hormarintu laguma isticmaali karo ilaa iyo inta uu sii kiraystaha uu ku mutaystay kireeystaha goortii kireeyaha u sameeyey digniinta.

4. Amaahdaas hormarinta leh waxaa lagu bixinayaa qiimaha xoolaha lagu cusleeyey, kaddib amaahyada lagu soo sheegay qodobyada hore iyadoo laga reebaaya kuwa hormarinteeda aan laga hor istaagi karin kireeyaha maadaama uu yahay hayste niyadsami leh.

5. Haddii xoolihii lagu lahaa ay ka baxaan cayntii ijaarneyd xataa haddii kireeyuhu is hortaago hormarinta amaba uusan ogeyn iyo ceyntana ayan ku soo harin wax ku filan inay damaanta hormarinta leh xuquuqdii mudnayd, sideedii ayey u taagnaaneysaa hormarintii iyadoo waxba u dhimin dad kale xaqooda ee niyadsami leh. Xaqa hormarinta waa taagnaanayaa xataa haddii wax u dhimaayo xuquuqda dadka kale muddo seddex sanadood laga billaabo maalinta sheyga laga dhaqaajiyay, haddii kireeyuhu ku sameeyey xaraash xoolaha la dhaqaajiyey muddada sharciyeed dhexdeeda. Hase yeeshee kireeyuhu waa inuu u celiyaa qiimaha hantidaas qofka saddexaad ee si niyadsami ah uga gatay suuqa ama naada ahaan ama ka gatay ganacsade ka mushtara sheyaalkaas oo kale.

Qodobka 932aad

1. Lacagta uu yeesho qofk leh hoteelka oo uu ku yeesho dadka ku soo dega, oo ku saabsan seexashada iyo cuntada iyo wixii lagu bixiyey rukun, waxay hormarin ku leedahay alaabtuu watay oo uu dhigtay hoteelka ama wixii la xiriira.

2. Mudnaanshada waxaa lagu yeelanayaa alaabtuu watay xataa haddii uusan lahayn rukunka haddii kan leh hoteelka la sugin in uu ogaa markii la soo gelinayey in dad kale xaq ku lahaa alaabtaas, waa in ayan alaabtaasu mid la xaday ama dhuntay ahayn.

Hoteelka kan lihi waa diidi karaa in alaabta laga guuriyo hoteelka haddaan la siin xaqiisa, isagoo diidsan ama aan ogeyn haddii la guuriyo xaqa hormarinta waa taagnaanayaa iyadoo wax loo dhimin xuquuqda dadka kale ee si niyadsamidda ah ku helay.

3. Qofka leh hoteelka wuxuu leeyahay darajada ay leedahay hormarinta kireeyaha.

Laba xaq haddey isgarbiyaan waxaa la hormarinayaa kan taariikhdiisu horreyso, haddii midkood uusan is hortaagin kan kale.

Qodobka 933aad

1. Gadaha hantida guurtada wixii uu xaq uga yeesho qiimaha guurtada iyo wixii raacsanaa wuxuu yeelanayaa hormarin hantidaas qiimaheeda, hormarintaasi way taagnaaneysaa haddii sheygii la gaday sidiisii yahay oo u dhowrsan yahay iyadoo aan wax loo dhimin xuquuqda uu helay qof kale isagoo niyadsan iyo iyadoo la raacayo axkaanta gaarka u ah arrimaha ganacsiga.

2. Hormarintaasi waxay ku xigtaa xagga darejada inta la soo sheegay ee ah xuquuqda hormarinta ee saaran guurtada, hase yeeshee waa laysku hortaagi karaa kireeyuhu iyo kan hoteelka leh, haddii la sugo iney ogaayeen goorta sheyga la gaday la soo geliyay meesha la ijaaray ama hoteelka.

Qodobka 934aad

1. Dadka wadaaga hal guurto hormarin bey ku leeyihiin guurtada si loo badbaadiyo mid walba xaqiisa, in uu ugu noqdo kuwa kale qaybsashada darteed.

2. Hormarintaas waxay leedahay isla darajada tan gadaha haddii isgarbiyaanne waxaa la hormarinayaa kan taariikhdiisu ay horreysey.



QAYBTA II

## HORUMARINTA GAARKA AH EE DULSAARAN MAGUURTOOYINKA

Qodobka 935aad

1. Gadaha hal maguurto wixii uu xaq ugu yeesho qiimaha maguurtada iyo wixii raacsanaa, wuxuu hormarin ugu yeelanayaa maguurtadaas.

2. Waana in la diiwaangeliyaa hormarintaas xataa haddii gadidda la diiwaangeliyey darajadeeduna waxay ka bilaabaneysaa goorta la diiwaangeliyo.

Qodobka 936aad

Lacagtey yeeshaan qandaraasleyda iyo arkiteetayaasha wax dhisa, sii dhisa hagaajiya ama sameeya hawlaha dayactirka ama hawl kasta oo kale waxay ku leeyihiin horumarin hawlahaas ilaa iyo inta ay la eg tahay qiimaha dheeraadka ah ee ka yimid hawlaha waqtiga gadidda ee maguurtada.

2. Waana in la diiwaangeliyaa, horumarintaas darajadeeduna waxay bilaabaneysaa marka la diiwaangeliyo.

Qodobka 937aad

Dadka wadaaga hal maguurto waxay ku leeyihiin horumarin isla maguurtada si loo badbaadiyo mid walba xaqiisa ay siineyso qaybsashadu inuu ugu noqdo kuwa kale.

Waana in la diiwaangeliyaa hormarintaas darajadeeduna waxay billaabaneysaa goorta la diiwaangeliyo.

# BUUGGA V

# DHOWRIDDA XUQUUQDA IYO FAAFINTA

## BAABKA I

## DIIWAANGELIN

### MADAXA I

### DIIWAANGELINTA QORAALLADA HANTIDA MAGUURTOOYINKA

#### Qodobka 938aad

Dhammaan tasarufaadka dhisa, wareejiya ama wax ka beddela hantida ama xuquuqda kale ceyniga ah ee ku saabsan hantida maguurtooyinka, waa in lagu faafiyo diiwaangelin.

#### Qodobka 939aad

Waa in la diiwaangeliyo xataa qoraalada soo socda :

1. Xukunada, ama go'aannada Maxkamadaha ee kale oo dhisa, wareejiya ama wax ka beddela mid ka mid ah xuquuqda lagu tilmaamay qodobka 938.

2. Heshiisyada shirkadaha ee la isku siiyo manfacsiga (dheefsiga) maguurtooyinka waqti aan go'neyn, ama muddo ka sarreysa 9 sano.

3. Heshiisyada kirada maguurtooyinka ee muddadooda ka sarreysa 9 sano.

4. Diiwaangelinta dacwadaha ku saabsan xuquuqda lagu soo sheegay lambarada hore.

5. Dhammaan tasarufaadka sharci ahaan la amray in la diiwaangeliyo.

#### Qodobka 940aad

Yeelashada xuquuq cayni ah ee lagu leeyahay maguurtooyin ee ka dhalatay guur ama dhaxal waxaa loo diiwaangelinayaa si waafaqsan Xeerka Qoyska.

#### Qodobka 941aad

Diiwaangelintu waa caddeynta kaliya oo ansaxa ah, si loo yeesho xuquuqda ee ku tilmaaman qodobyada 938, iyo 939.



Tasarufaadka ku saabsan isla xuquuqdaas ee aan dhamneyn, laguna faafiyay diiwaangelin, saameynmeyso dadka kale xataa haddii lagu heshiiyey taariikh ka horeysa kuwa diiwaangashan.

#### Qodobka 942aad

Diiwaangelinada dambe ee tasaruf ku saabsan isla xaqaas; waxaa loo qaadanayaa sida ay u taxan yihiin.

Taxnaanta aan kala go'ayn ee diiwaangelinada dambe; kan ugu dambeeya ilaa kan asalka waa shardi lagama maarmaan u ah xoogooda.

#### Qodobka 943aad

Dacwadaha Maxkamadeed ee ku saabsan tasarufaadka ku tilmaaman qodobka 938, 939, 940 waa in la diiwaangeliyo qofka ku doodaaya garsooriddeeda.

#### Qodobka 944aad

Diiwaangelinta, waxa kaliya oo lagu sameyn karaa xukun, ama go'aan Maxkamadeed oo kale, qoraal rasmi ah ama qoraal gaar ahaaneed ee la sugay.

#### Qodobka 945aad

Dhinaca weydiisanaya diiwaangelinta waa inuu keenaa asalka ama nuqulka qoraalka ee la sugay, diiwaangeliyadu arjiyada Maxkamadeed, waxaa ku filan nuqul ay ku taal caddeynta gaarsiinta.

#### Qodobka 946aad

Waa inay wehliso qoraalka la doonayo in la diiwaangeliyo xusuus laba qoraal oo asal ah oo ay ku qoran yihiin :

1. Magacyada oo dhan iyo meesha ay deggan yihiin dhinacyada;

2. In la tilmaamo waxa la cuskanayo ee la doonayo in la diiwaangeliyo iyo taariikhdooda.

3. In la sheego sarkaalka guud ee qoray waxa la cuskanayo ama awoodda garsooreed ee ku dhawaaqday xukunka.

Qodobka 947aad

Diiwaangelintu waa in laga sameeyo Xafiiska buugaagga maguurtooyinka laga helo hantidaas.

Qodobka 948aad

Isla xafiiskaas waa in lagu kaydiyo waxa la cuskanaayo ee ku xusan qodobka 945. Waxaa ku qoran xusuusta lagu tilmaamay qodobka 946, waa in lagu qoro buugaagga u gaarka ah, labada xusuus midkood waa in loo celiyo qofka weydiistay ayadoo la xusaayo diiwaangelinta la sameeyey.

Qodobka 949aad

Sarkaalka guud «Nootaayaha» qabtay ama sugay qoraalka la diiwaangelinayo waa inuu diiwaangelinta u sameeyo muddo aan dhaafsiisneyn 15 casho gudahood laga billaabo taariikhda qoraalka.

## MADAXA II

## FAAFINTA BUUGAGGA MAGUURTOOYINKA

Qodobka 950aad

Eegidda buugagga maguurtooyinka waa loo oggol yahay qof kasta oo weydiista.

Weydiisashadaas waxaa lagu bixin karaa nuqullada diiwaangelinta ama caddeymo muujinaya inaysan jirin, ayadoo loo eegayo maguurto la ogyahay.

## MADAXA III

## DIIWAANGELINTA QORALLADA

## KU SAABSAN GUURTOOYINKA QAARKOOD

Qodobka 951aad

Waa in lagu faafiyo diiwaangelin, laguna qoro buugagga u gaarka ah, iyo qaababka ay dhigayaan sharciyada khaaska ah, qoraalada dhisa, wareejiya ama wax ka beddasha xuquuqda ku saabsan :

b. Maraakiib iyo sabeeyayaal;

t. Diyaarado;

j. Gawaari.



## BAABKA II

## DIIWAANGELINTA RAHANKA

## MADAXXA I

## QAABABKA DIIWAANGTLINTA CUSBOONEYNTA IYO TIRTIRIDDA RAHANKA

Qodobka 952aad

Rahanka waxaa lagu qoraa xafiiska buugagga maguurtooyinka meesha ay taal maguurtada. Rahanka waxay derejo qaadanaysaa laga billaabo taariikhda diiwaangelinteeda.

Qodobka 953aad

Si loo sameeyo diiwaangelinta weydiistaha waa inuu keeno waxa uu ku dhisaayo oo ay la socoto xusuus laba nuqul oo asal ah,kuna qoran yihiin :

1. Magacyada dhan iyo meesha ay deggan yihiin· deynsanaha iyo deynlaha.
2. In la sheego waxa loo cuskanayo (titolo) rahanka.
3. Tirada lacagta darteed loo sameynayo diiwaangelinta.
4. Dulsaarada iyo habka bixinta.
5. Muddada diiwaangelinta;
6. Sifada xoolaha u cusleyneyso rahanka.

Qodobka 954aad

Marka la sameeyo diiwaangelinta labada xusuus oo asalka ah, midkood ee lagu sheegay in diiwaangelinta ay dhammaatay, waa in loo celiyo deynlaha.

## BAABKA III

## DIIWAANNADA MAGUURTOOYINKA

## MADAXA I

## NOOCYADA DIIWAANNADA MAGUURTADA

Qodobka 955aad

Maxkamad kastoo rafcaan oo ku taal dalka Jamhuuriyadda waa in laga sameeyo xafiiska diiwaannada maguurtooyinka, si loogu diiwaangeliyo tasarufaadka lagu sheegay buugga V ee Xeerkan iyo diiwaangelinta rahanka sida ay qorayaan qodobka 845 iyo kuwa ku xiga ee X, Madaniga.

Qodobka 956aad

Xafiiska waxaa la geynayaa Kaaliye hawshiisu tahay xafidaha buugagga diiwaannada maguurtooyinka, kana mas'uul ah keydinta iyo nidaaminta buugaggaas.

Qodobka 957aad

Diiwaannada maguurtada waxay ka kooban yihiin :

1. Diiwaan guud ee taxan (d'ordine);

2. Diiwaan u gaar ah diiwaangelinta;

3. Diiwaan u gaar ah qoraallada;

Diiwaanka guud ee taxan waa in lagu xusaa wax kastoo la cuskanayo ee loo keenay diiwaangelin ama qoridda rahanka ayadoo la sheegayo taariikhda, dhinacyada iyo xoolaha uu qoraalka (titolo) tilmaamaya iyo qoraal kasta wuxuu qaadanayaa lambarka xiga ee tixanaha ah.

Diiwaanka u gaarka ah diiwaangelinta hab la mid ah waa in lagu qoro qoraalada loo keenay diiwaangelinta.

Diiwaanka u gaarka ah qoridda waa in lagu xuso, qoridda, cusbooneysiinada iyo tirtiridda rahanka.

Qodobka 958aad

Diiwaanka guud iyo diiwaanka gaarka ah waa inuu xaashi kasta saxiixa Garsoore ka tirsan Maxkamadda Rafcaanka ee fadhigeeda xaruna ku leeyahay, xafiiska diiwaannada maguurtooyinka.

Diiwaannada waa iney u qornaadaan si is-raacsan, iyadoo aan loo dhexeysiin meelo bannaan. xariiqooyin ama ku darid, maalin kasta dhammaadkeeda diiwaannada waa in la xiraa, saxiixaana xafidaha, kani, haddii uusan u hogaansamin xeerarka ku saabsan qabashada iyo keydinta diiwaannada, haddii falkaasi uusan ahayn dembi aad u culus, waxaa lagu ciqaabi karaa ganaax ilaa 500 Sh. So.

## TUSMO KOOBAN

### XEERKA MADANIGA

### BAABKA GOGOL DHIGGA AH

### QODOBBA GUUD AH

MADAXA I

Xeerarka iyo ku dhaqankooda Bogga 1

QAYBTA I

Xeerka iyo Xaqa » 1

QAYBTA II

Dabaqidda Xeerka. iska horimaaka
xeerka xagga waqtiga » 2

MADAXA II

QAYBTA I

Dadka (Persone Fisiche) » 9

MADAXA III

Qaybinta Mootka iyo Hantida » 22

QAYBTA I

Waajibaadka iyo Xuquuqda Shakhsiga ah » 23

BUUGGA I

Waajibaadka Guud ahaan » 23

BAABKA I

Ilaha waajibaadka » 23

MADAXA I

Heshiiska » 23

QAYBTA I

Tiirarka Heshiiska » 23

QAYBTA II

Waxyaabaha ka dhasha heshiiska » 37

QAYBTA III

Dhammaanshaha heshiiska » 40

MADAXA II

Rabidda dhinaca kaliyeedka ah » 41

MADAXA III

Falka xaaraanta ah » 42

QAYBTA I

Mas'uuliyadda Falka qof ahaaneed » 42

QAYBTA II

Mas'uuliyadda ka timaada fal qof kale » 45

QAYBTA III

Mas'uuliyadda xagga ashiyaa'da » 46

MADAXA IV

Yeelasho xoolo ee ku timaada sabab la'aan » 47

QAYBTA I

Bixinta aanan la muteysan » 47

QAYBTA II

Maamulid Macaamileed » 49

MADAXA V

Xeerka » 51

BAABKA II

Waxyaabaha ka dhasha Waajibaadka » 52

MADAXA I

Gudasho dabiici ah » 52

MADAXA II

Gudasho isu dhiganta » 56

MADAXA III

Jidadka lagu xaqiijinayo iyo kuwa lagu dammaanaya xuquuqda deynleyaasha » 61

QAYBTA I

Jidadka xaqiijinta » 61

QAYBTA II

Tallaabooyin dammaaneed xaqa ceshasada » 64

QAYBTA III

Awood la'aanta bixinta deynta » 65

BAABKA III

Habka waajibka » 70

MADAXA I

Shuruudo iyo Muddooyin » 70

QAYBTA I

Shuruudo » 70

QAYBTA II

Muddooyin » 72

QAYBTA III

Waajibaadka Ikhtiyaariga ah » 74

MADAXA III

Badnaanta dadka uu waajibka saaran yahay » 74

QAYBTA I

Isbahaysiga deynleyaasha ama deynqabayaalka » 74

BAABKA IV

Wareejinta Waajibka » 80

MADAXA I

Wareejinta Xaqa » 80

MADAXA II

Wareejinta deynta » 83

BAABKA V

Dhicidda waajibaadka » 85

MADAXA I

Gudashada » 85

QAYBTA I

Dhinacyyada gudashada » 85

QAYBTA II

Sheyga la gudaayo » 89

MADAXA II

Hababka dhicidda waajibka ee la midka ah gudidda » 91

QAYBTA I

Bixin wax u dhigma » 91

QAYBTA II

Cusbooneyn iyo wakiilashada » 92

QAYBTA III

Isu tuuridda Waajibka » 95

QAYBTA IV

Midoobidda deynlaha iyo deynqabaha » 97

MADAXA III

Waajibka oo dhamaada gudid la'aan » 97

QAYBTA I

Ka beri yeelidda » 97

QAYBTA II

Suuragalid la'aanta gudidda » 98

QAYBTA III

Gubashada ridda xaqa » 98

MADAXA I

Sugid qoraaleed » 103

MADAXA II

Sugitaanka Markhaatiyeed » 106

MADAXA III

U maleyn » 107

MADAXA IV

Qirashada » 108

MADAXA V

Dhaar » 109

BUUGGA II

Heshiisyada magacaaban » 110

MADAXA I

Gudid » 110

QAYBTA I

Gudidda guud ahaan » 110

QAYBTA II

Guddidda qaarkeed » 123

BAABKA II

Isku beddelasho alaabeed » 126

MADAXA III

Siismo » 126

MADAXA I

Tiirarka Siismada » 127

QAYBTA II

Siismada raadkeeda » 128

QAYBTA III

Ka noqoshada siismada » 130

MADAXA IV

Shirkadda » 132

MADAXA V

Amaah » 132

MADAXA VI

Sulux » 134

QAYBTA I

Tiirarka Suluxa » 134

QAYBTA II

Raadka suluxa » 135

QAYBTA III

Baabi'inta suluxa » 135

BAABKA II

Heshiisyada ku saabsan ku intifaacidda alaamta » 136

QAYBTA I

Kirada guud ahaa n » 136

QAYBTA II

Ijaarka dhulka Beeraha » 150

MADAXA II

Ergashada » 151

QAYBTA I

Waajibaadka laga ergadaha » 151

QAYBTA II

waajibaadka ergadaha » 152

QAYBTA III

Dhammaadka ergashada » 153

BAABKA III

Heshiisyada ku saabsan gudashada hawlaha » 154

MADAXA I

Heshiiska dhismaha iyo siismada hawlaha guud » 154

QAYBTA I

Heshiiska dhismaha » 154

MADAXA II

Heshiiska shaqada » 160

MADAXA III

Wakaaladda » 161

QAYBTA I

Tiirarka Wakaaladda » 161

QAYBTA II

Raadadka Wakaaladda » 162

QAYBTA III

Dhammaadka Wakaaladda » 165

MADAXA IV

Dhigasho » 166

QAYBTA I

Waajibaadka qof wax la ag dhiganaayo » 166

QAYBTA II

Waajibaadka qofka wax dhigtay » 167

MADAXA V

Xaraash » 168

BAABKA IV

Heshiisyada nasiibka » 170

MADAXA I

Ciyaarta iyo sharadka » 170

MADAXA II

Heshiiska ceymiska » 170

BAABKA V

Dammaanadda » 172

MADAXA I

Tiirarka dammaanadda » 172

MADAXA II

Raadadka dammaanadda » 174

QAYBTA I

Xiriirka u dhaxeeya qofka wax dammaanay iyo deynlaha » 174

QAYBTA II

Xuquuqda ceynta ah » 178

BUUGGA III

Xuquuqda ceyniga ee asalka ah » 178

BAABKA I

Xaqa lahaanshaha » 178

MADAXA I

Xaqa lahaanshada guud ahaan » 178

QAYBTA I

Ujeeddada xaqa » 178

QAYBTA II

Dhimidda xaqa lahaanshada » 179

QAYBTA III

Isla wadaag » 183

Madaxa II

Hababka lagu yeesho milkiyadda Bogga 190

QAYBTA I

Qabashada sheyaalka guurto ah oo cidna milkiya-dooda lahayn » 190

QAYBTA II

Dhaxalka iyo khaarijinta » 191

QAYBTA III

Dardaaranka » 191

QAYBTA IV

Ku darsamid maguurto » 192

QAYBTA V

Heshiis » 195

QAYBTA VI

Shufca » 196

QAYBTA VII

Heysashada » 199

BAABKA II

Xuquuqda ku dhdisan milkiyadda » 208

MADAXA I

Manafaceysi ku dhisan milkiyadda » 208

QAYBTA I

Manfaceysi » 208

QAYBTA II

Xaqa ku ddhaqanka iyo Xaqa degidda » 211

MADAXA II

Xaqa u adeegidda (servitu') » 212

BUUGGA IV

Xuquuqda ceynta ah ee raacsan dammanadyada ceynta ah » 216

BAABKA I

Rahan » 216

MADAXA I
Dhismaha Rahanka Bogga 216
MADAXA II
Raadadka Rahanka » 219
QAYBTA I
Raadadka Xagga dhinacyada Rahmidda » 219
QAYBTA II
Raadadka rahanka xagga dadka kale » 222
MADAXA III
Dhammaadka rahmidda » 230
BAABKA II
Xaq gaar ahaaneed » 230
MADAXA I
Dhisidda xaqa gaar ahaaneedka » 230
MADAXA II
Raadadka xaqa gaar ahaaneed, dhimiddiisa iyo dhammaadkiisa » 233
BAABKA III
Rahmidda haysashada » 234
MADAXA I
Tiirarka rahmidda haysashada » 234
MADAXA II
Raadadka rahamidda haysashda » 234
QAYBTA I
Raadadka laba dhinac, waajibaadka rahmaha » 234
QAYBTA II
Raadka xagga saddexaad » 237
MADAXA III
Dhammaadka rahmidda haysashada » 238
MADAXA IV
Noocyo ka mid ah rahmidda haysashada » 239
QAYBTA I
Rahmiddad maguurtada » 239
QAYBTA II
Rahmiddda guurtada » 240
QAYBTA III
Rahmidda amaahda » 241
BAABKA IV
Xuquuqda horumarinta » 243
MADAXA I
Axkaan guud » 243
MADAXA II
Noocyo ka mid ah xaqa kala hormarinta » 245
QAYBTA I
Xuquuqda kala hormarinta guud iyo xuquuqda kala hormarinta gaarka ah ee ku dhaca guurtada
QAYBTA II
Horumarinta gaarka ah ee dulsaaran maguurtada » 249
BUUGGA V
Dhowridd xuquuqda iyo faafinta » 250
BAABKA I
Diiwaangelin » 250
MADAXA I
Diiwaangelinta qoraallada hantida maguurtooyinka » 250
MADAXA II
Faafinta Buugagga maguurtooyinka » 252
MADAXA III
Diiwaangelinta qoraalada ku saabsan guurtooyinka qaarkood » 252
BAABKA II
Diiwaangelint rahanka » 253
MADAXA I
Qaababka diiwaangelinta cusbooneynta iyo tirtiridda rahanka » 253
BAABKA III
Diiwaannada maguurtooyinka » 253
MADAXA III
Noocyada diiwaangelinta maguurtada » 253